

Amaxaaro

Waxaa dhigay
Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Waxaa daabacday
Daaru Al Seerah
P.O. Box 200984 – Boston, MA 02120 – USA

Amxaaro

Waxaa dhigay
Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaa

Waxaa daabacday
Daaru Al Seerah
P.O. Box 200984 – Boston, MA 02120 – USA

Tusmada Kitaabka

Mawduuca

Bogga

1. Tusmada Kitaabka	3
2. Aarrata hore dhigaha kitaabka	6
3. Araarta labaad ee dhigaha kitaabkaan	12
3. Ilaahay ayaa arzaaqda qaybiya	13
4. Saboolnimada dawladaha krishanka ah	14
5. Kaydka khayraadka adduunka qaarkood	15
6. Kaydka batroolka adduunka	15
7. Kaydka gaaska dabiiciga ah	16
8. Kaydka dhuxusha	16
9. Kaydka phosphate rock	17
10. Kaydka macdanta nickel	17
11. Kaydka dahabka	17
12. Kaydka dahabka cad (platinum)	17
13. Kaydka qalinka	17
14. Kaydka macdanta birta	17
15. Kaydka macdanta tin	18
16. Beraha	18
17. Duminta dawladda islaamka	19
18. Krishtaanku waa beenayaal	20
19. Krishtaanku waa dayn ku nool	21
20. Takhtar, daawo iyo cunno la'aan	22
21. Jariimadaha	22
22. Burcadnimo iyo tuugo dawladeed	23
23. Isku dir	23
24. Batroolka	24
25. Sicirka fuustada batroolka ah	24
26. Faaiidada dawladaha fuustada soo gata	25
27. Maalka dawladaha batroolka leh	26
28. Habka dhaqaale ee dawladaha galbeed Kaydka batroolka adduunka	27
29. Kaydka batroolka adduunka	28
30. Koronto nuklearka lagu dhaliyo	30
31. Soomaaliya batroolkeeda iyo uraaniyumkeeda	30
32. Marriinka maraakiibta batroolka sida	31
33. Xisaarka jaziiradda Carabta saaran	32
34. Cabsida krishtaanka ee jizyo iyo addoonsi	33
35. Taagdarrada itaal iyo talo ee galbeedka	34
36. Israa'iil	35
37. Cadnaan iyo Bukhtanassar	38
38. Badeecadaha batroolka laga sameeyo	40
39. J. Carabta: Qorshaha colaadeed ee krishtaanka ee kaalinta amxaarada	40
40. Gaashaanbuursiga burtiqiiska iyo amxaarada: Al Xuwayrii	49
41. Amxaarada oo Nabiga, SCW, kusoo duushay	53
42. Amxaaro waa jilib qabiilka Ximyar	54

43. Kitaabka Al Ssayuudhii	55
45. Kitaabka Al Ilmaamu ee Al Maqriizii	59
45. Amxaarada	59
46. Kitaabka Abuu Al Fidaa'	75
48. Kitaabu Al Zzunuuji	76
49. Nasabka gaallada	100
50. Soomaalida oo gaallada kicisay	101
51. Midaynta dawladaha geeska Afrika	102
52. Dhul kala wareegid	104
53. Weeraridda xaqdarro ee Qarammada Midoobay Soomaaliya	106
54. Xeryaha qaxootiga Qarammada Midoobay	108
55. Taranka dadka ee dawladaha krishtaanka ah	108
56. Khaa'innimada dadka krishtaanka ah	110
57. Khaa'iinimada krishtaanka ee dagaalka weyn ee muslinka iyo krishtaanka ku dhex maraya arliga Falasdhiin	111
58. Ilaahay Tacaalaa waa naga reebay gargaarsiga krishtaanka	113
59. Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan iyo kuwa gaalada keenay	115
60. Afbakayle ee Sayyidka	115
61. Dardaaran ee Sayyidka	117
62. Maqashiiya uunka ee Sayyidka	119
63. Khayaanidda krishtaanka ee Falasdhiin	120
64. Caqiidada diinta krishtaanka ee dagaallada bariga dhexe	121
65. Heshiis nabadeed wuxuu kasoo horjeedaa caqiidadooda	124
66. Krishtaanku muslin iyo yuhuud toona Quddus uma oggola	125
67. Diinta krishtaanka	126
68. Kitaabka krishtaanka	128
69. Kasoo degidda Samada ee Nabi Ciise Calayhissalaamu	129
70. Guursashada, dhalidda, dhimashada iyo qabriga Nabi Ciise, CS	132
71. Diinta islaamka: intuu Nabi Ciise noolaanayo soo degasho kaddib	132
72. Kharaabidda hubka, isgaarsiinta, teknikada iyo qalabka zamankaan	133
73. Dagaalka Ciraaq	133
74. Kacdoonka iyo burburka Kenya	135
75. Amxaaro Muqdisho siiya	139
76. Weeraridda NATO iyo EU ee Soomaaliya	141
77. Daws, iyo boqorrda Roma, Masar iyo amxaarada	145
78. Boqorka roomaanka Justiiniyaanus	145
79. Thuu Nuwaas iyo muslimiinta	146
80. Daws iyo Justiiniyaanus	147
81. Koofil	149
82. Koofil walaashiis	150
83. Jaasuus	151
84. U magacaabidda Bishop Makkah Al Mukarramah	153
85. Xadiithka Asmaa'u ee amxaarada	153
86. Amxaaro arli soomaaliyeed hore uma soo gelin	154
87. Amxaar ayaa Xamzah, SCW, dilay	154
88. Amxaar ayaa Kacbada duminaya	155

89. Faca Hargaysa	155
90. Fiicnaanta soomaalida	157
91. Burburka Soomaaliya: Batroolka Soomaaliya	158
92. Taariikh nololeedka dhigaha kitaabkaan	159

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Araarta labaad ee dhigaha kitaabka

Al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina, wa al th-thanaa'u li Allaahi, wa Sallaa Allaahu Caalaa Sayyidinaa Muxammadin, wa calaa Aalihi wa Saxbihi, wa Sallam tasliiman kathiiran.

Kitaabkaan waxaan markaan ku daray in yar uu kusoo korortay arrimahaan hore uga hadlay oo aan u arkay inay qofka akhrista u faaiideynayaan. Inta badanna waxaan kororsiimadaas ku calaamadeeye Fiiro Gaar ah iyo mawduucyo aan kii hore ku jirin oo ku saabsan gaar ahaan caqiidada krishtaanka iyo Qudus iyo arliga Falasdhiin iyo waxay Diinta islaamku arrimahaas ka qabto iyo dalka dariska ah ee Kenya.

Waxaa soomaalida soo maray sanooyinkaan dambe waa looga horreeyey oo waxay wax taas la mid ah ku dheceen waayahaan dhow oo aan annaguba noolayn shacbiga Falasdhiin, midka Lubnaan, midka Afghanistan, Bosniya, Chechniya iyo kuwo kaleba. Horena ummado kale oo tegey ayay ugu daceen.

Waxaa qiyaas sanad ka hor Soomaaliya kusoo duulay ciidammada NATO iyo EU iyo amxaaro ay soo ijaarteen oo calooshood u shaqaystayaal ah, oo ciidda daahirka ah ee muslimiinta kusoo xad gudbay, soomaali badanna xasuuqay. Markaasaan waxaan is tusay inaan inta moogan ku baraarujiyo sababaha taariikhiga ah oo duullaankaas dhaliyay, ahna asbaab diini ah, kuwa dhaqaale iyo kuwa siyaasadeedba. Amxaaro weligeed arliga jamhuuriyadda Soomaaliya hore uma soo gelin, hadana awooddeeda kuma soo gelin. Dagalkii kun sagaal boqol toddoba iyo toddobaatanka soomalida iyo amxaarada dhex maray, amxaarada si xun ayaa loo jebiyay oo laga adkaaday, arliga soomaali galbeedna laga wada qabsaday oo laga xoreeyey, ayagoo xaqdarro ku haystay oo uu ingiriisku gacanta u geliyay. Wiilasha soomaaliyeedna waxayba gaareen Addis Ababa dusheeda, oo hadday doonaan ay qabsan kareen, inay galaanna Jaamacadda Carabta iyo dawlado kale ayaa ka celiyay iyo ayadoo ayan soomaalidu danba ka lahayn geliddeeda maadaama ayan arli soomaaliyeed oo laga xoreynayo ahayn. Amxaaradu waa fulayo, oo inta goobta dagaalka lagu dilay mooyee inta kale way carareen oo ay wiilasha soomaaliyeed dhabarka u jeediyeen.

Waxaan ka mid ahaa ragga ka qayb galay qado uu Madaxweyne ku xigeen Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, Allaha u naxariistee, oo ahaa nin wadani ah oo caqli badan oo macaan, beerta dawladda ee ku tiillay Afgooye ku siiyay ergay ay soo dirtay Jaamacadda Carabta. Ergaygaasu, oo uu soo diray Xoghayaha Guud ee Jaamacadda Carabta, arrimuhuu munaasabadaas kusoo qaaday, uuna noo sheegay inuu kala hadlay Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre iyo Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya, waxaa ka mid ahaa inay Jaamacadda Carabtu dawladda soomaaliyeed ka codsanayso inayan ciidammadeedu magaalada Addis Ababa gelin oo qabsan. Madaxweyne ku xigeen Xuseen Kulmiye Afraxna wuxuu ergaygaas u sheegay inayan taas qorshaha dawladda soomaaliyeedba ku jirin, maadaama ayan Addis Ababa arliga soomaaliyeed oo ay amxaaradu gumaysato ka mid ahayn.

Dagaalkaas waxaa hoggaaminayay Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre, Allaha u naxariistee, oo taariikhda soomaaliyeed baal dahab ah ka gelaya, siduu Axmad Guray uga galay oo kale, isagoo ahaa nin muslim ah oo waddani ah, amxaaradana jihaad ku qaaday oo ka adkaaday oo sanko ciidda u geliyay, siduu Axmad Gurey shan boqol oo sano ka hor yeelay oo kale. Amxaaradana waxaa markaanna usoo hiilliyay, siday waagaasba ugu hiilliyeen, dawlado krishtaan ah oo yurub iyo maraykanka ah.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu dhigay markii ugu horreysey afka soomaaliga, taasoo u suurtagelisay soomaalidoo idil inay waxay doonaan dhigaan. Hal sano ayaa dugsiyada dalkoo idil la wada xiray oo ay markaas ardada iyo macallimiinta iyo ciidammada qalabka sida iyo hay'adaha dawladda oo idili u jeesteen oo qaadeen ololaha wax barashada ee qaranka oo idil. Bar walba iyo geed walba wuxuu noqday dugsi wax lagu barto. Reer miyi iyo reer magaalaba waxay barteen sida afkooda loo dhigo.

Fikradda ay dawladda krishtaan ka galbeed yiraahdaan inay dadka dalalka qaarkood yihiin ummiyyiin aan wax dhigin waxna akhrin waa been aan sal lahayn, waxayna ku fadhidaa inayan dalalka qaarkood aqoon sida ingiriiska ama fransiiska iyo laatiinka loo dhigo. Laakiin waxay yaqaannaan sida Quraanka loo dhigo oo ay dhigaan oo akhriyaan farta Carabiga. Marka dadka soomaaliyeed sidoodaba waxna waa dhigaan waxna waa akhriyaan ayadoo cunug kasta oo soomaali ah markuu afar ama shan gaaro dugsi Quraan la geeyo oo uu barto sida Quraanka loo dhigo oo loo akhriyo, laakiin ay dhici karto inuusan markaas afafka roomaanka dhigi aqoon. Waana sidaas dalalka islaamka oo idili.

Labaatanka sano oo Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre xukunka soomaalida hayay, aniguna aan labaatankaas sanaba goob joog ka ahaa, awoodda Ilaahay Tacaalaa iyo nicmadiisa ayuu dalkoo idil ku beddelay. Markuu xukunka qabtay dadka soomaalied oo jaamacad galay ama ka baxay way tirsanaayee oo hebel iyo hebel ayay ahaayeen oo gacan fareheeda ayaa lagu tirin karay.

Labaatan sano gudeheeda waxay wiilasha iyo gabdhaha jaamacadaha Soomaaliya ka qalin jebiyay gaareen tobannaano kun oo dalku ku degay oo lagu noolaaday. Waxaa la dhisay jaamacadaha shareecada islaanka laga barto, takhtarnimada dadka iyo xoolaha, daawada, injneernimada, beeraha, dhaqaalaha, qaanuunka madaniga ah, afafka, akaadeemiyada militariga iyo kuwo kaloo fara badan. Kumanyaal wiilashaas iyo gabdhahaas ka mid ahna waxay u haajireen dalalka khaliijka oo ay shaqo iyo nolol fiican ka heleen, qoysaskooda ay dalka uga tageenna iyo dalkuba ku noolaaday.

Markay soomaalidu cilmiga heerkaas sare ka marayso, dawladda khaliijka iyo Yaman waxay ku nool yihiin mugdi iyo aqoon la'aan.

Tusaale ahaan Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre oo booqasho ku tegey arliga Qadhar ayuu boqorka Qadhar ee reer Aali Thaani wuxuu weydiistay inuu ragga la socda midkood uga tago si uu umuuraha dawladdiisa kala taliyo. Markaasuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu Dooxa ugu reebay nin ka mid ahaa wafdigiisa oo uu Danjirennimo halkaas ugu magacaabay, halkaasna ku reebay. Ninkaasu waa Danjire Cabdu Allaahi Xaaji Cabdu Al

Rraxmaan, wiilkuu awoowaha u yahay Sayyid Cabdulle Xasan, kaddibna noqday Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya. Isaga laftiisa ayaan iiga warramay siduu arrinkaasu ku dhacay mar aan Qadhar shaqo dawladeed ugu tegay. Sidoo kale Sheekh Zaa'id boqorkii hore ee dawladda Imaaraatka Carabta wuxuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre weydiistay inuu siiyo rag isaga laftiisa la taliya iyo kuwo kala shaqeeya dawladdiisa, iyo macallimiin iyo kuwo kaleba. Raggi siiyay waxaa ka mid ahaa Danjire Muxammad Sheekh oo noqday La Taliyaha boqorkaas, horena u ahaan jiray Danjiraha Soomaaliya ee Bonn, arliga Jarmanka. Aniga laftaydana macallin ayuu ii ahaan jiray, Allaha dambigiisa dhaafee, wuxuuna ahaa nin muslim ah oo fiican. Isaga laftiisa ayaana ii sheegay sidaas uu Sheekh Zayd Aali Nahyaan la taliyaha ugu noqday, sanadkiina mar ayuu Bonn takhtar ugu imaan jiray intaan aniguna Danjiraha ka ahaa.

Sidaasuu Madaxweyne Muxammas Siyaad Barre wuxuu dalalka khaliijka iyo Yaman ku siiyay macallimiin, takhtarro iyo farsamoyaqaanno iyo la taliyayaal. Dawladda Yaman ayaa waxay Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre soo weydiisatay inuu usoo raro cunno iyo waxyaalo kale ayadoo dalka laga waayay waxyaalo badan. Markaasaa waxaa Cadan loo saaray dayuurad ay saaran yihiin waxay soo weydiisteen, oo ay saabuunta lagu qubaysto ka mid tahay. Aniguna dayuuraddaas ayaan wax ka saarnaa, ahaydna dayuurad gaar ah oo ay lahayd Kuuba, sidayna wafdi dawladda soomaaliyeed oo aan ka mid ahaa una socday dalka Kuuba. Waxay ahayd bisha disembar 1973.

Markuu Madaxweyne Maxammad Siyaad xukunka la wareegay kun sagaal boqol sagaal iyo lixdanka ragga soomaalida ah ee xoolo lehna waxay ahaayeen xaaji hebel iyo xaaji hebel oo waxay ahaayeen rag faraha lagu tiriyo oo la yaqaan. Qoyska soomaaliyeed oo ugu dhaqaale fiican wuxuu ahaa midka maalintiiba laba ama saddex goor gurigooda dab laga shido oo cunno laga cuno. Labaatankaas sano gudeheedana dawladdu ganacsiga ayay furtay oo adduunka lala xiriiray oo dalka la maal geliyay oo uu maalku batay oo dalku cammirmay, maalkuna cid walba gaaray. Dawladdu waxay kaloo ka shaqaysay inay soomaalidu khaliijka shaqo ka hesho inta iskood u tagtayna lagu amni siiyo. Xoolahay dadkaasu shaqaysteenna dalkay ku cammireen oo qoysaskooda ku nafaqeeyeen, Allaha ka abaal mariyee. Faaiidada dawladdnimada laga helo iyo xooloheeduba waxay wada gaareen dadka iyo bulshada soomaaliyeed, si ayan dal kala ugu faafiin intaan anigu ka warqabo. Dawladdu shaqooyin ayay abuurtay oo shaqo laga helay oo lagu noolaaday, waxayna geesinnimo gelisay inay dadku ayaguna shaqaystaan ama wax soo saarid ama ganacsi. Waana la yeelay oo lagu noolaaday. Xamdiga iyo fadligana Ilaahay Tacaalaa ayaa iska leh mar walba.

Ciidan militari oo soomaaliyeed oo sidaas ahna ma jirin. Labaatankaas sano Soomaaliya way is beddeshay oo intaasoo dugsi iyo jaamacadood ayaa laga dhisay oo magaalo walba takhtar iyo kaaliso iyo dugsi iyo isbitaal iyo biyo iyo koronto la geeyey. Magaalo iyo tuulo walbana waxaa la geliyay biyo iyo ceelal iyo waro iyo waddooyin lagu tago iyo telefoon iyo isgaarsiin kaleba. Xoolaha waxaa loo diyaariyay takhtarro meel walba ugu taga oo daaweeya oo daawadooda iyo tallaalka xoolaha sida. Waxaa la dhisay warshado iyo beero

waawayn iyo mashaariic badda looga kalluumaysto. Beeraha xoog ayaa la saaray oo qalab iyo farsamaba loo diyaariyay, warshad bacrintana loo dhisay. Dawladdiisu soomaalida way il bixisay oo markaasuu maalku batay oo dalku cammirmay. Dawladdiisu waxay sugtay amniga dalka gudihisa oo uu qofka soomaalida ah iyo ajnabiguba ay amni ku heleen meel kasta oo jamhuuriyadda ka mid ah oo ay nolol fiican ku heleen ayagoo aan maalkooda iyo naftooda iyo dhiiggooda toona u cabsanayn. Caddaalad ayaa la sugay. Dawladdiisu waxay la xiriirtay oo ay wax is dhaafsadeen dawlada kale ee adduunkaan. Wuxuu dhisay ciidan xoog leh, xagga dhulka, cirka iyo badda oo ay xuduudaha wadanku amni helay oo aan lagu soo xad gubbi karin. Ciidanka soomaaliya waa laga baqay, oo wuxuu noqday midka Afrika ugu xoog badan marka Masar, amxaarada iyo Koofur Afrika laga reebo. Dayuuradda ciidanka cirka soomaaliyeed oo ka kacda Barbara waxay hawlo kasoo qaban kartay khaliijka oo idil oo soo laabanaysaa ayadoo aan baansiin kale u baahnayn. Taas ayay dawlada krishtaanku kahdeen oo ay soomaaliya u arkeen xoog kula tartamaya batrolka khaliijka. Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Fransiiska wuxuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre oo booqasho ku jooga dalka Fransa ku yiri markuu la kulmay: "ciidankiinnu waa "Froce de Frappe" oo ah waxa afka ingiriiska lagu yiraahdo "Task Force", oo ah ciidan diyaar dhan walba ka ah oo marka waajib la siiyo intuu durbadiiba ku kaco oo soo fuliyo hadana kasoo laabanaya. Waxaa inuu sidaas yiri ii sheegay Danjie soomaali ah oo Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre kulankaas kala qayb galay.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu kooxo la taliyayaal militari ah iyo tababaryaalba u diray dalal afrikaan ah oo gobannimadooda u halgamaya, ayna ka mid ahaayeen dalal ku yaalla galbeedka afrika sida Equatorial Guinea, Cape Verde iyo Angola iyo Muzambiik intaan ka xusuusto. Soomaaliya waxay ciidan kala dhex gala u dirtay oo sidaas amarka Ilaahay ku badbaadisay labada dalwladood ee Ugaanda oo uu madaxweyne u ahaa Idi Amiin iyo Tanzaaniya oo uu madaxweyne u ahaa wadaadkii krishtaanka ah muslimiinta necbaa gaar ahaan soomaalida ee Niyareere Alle uma naxariistee. Iidi Amiin wuxuu waagaas ku yiri Niyereeri: "haddaad haweeney ahaan lahayd waa ku guursan lahaa." Ilaahay ayaa Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre usoo diray oo ka celiyay.

Soomaaliya waxay noqotay labaatankaas sano xiddigta Afrika, Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu noqday odayga afrika oo ayan labo isku khilaafsanaayn oo laga wada dambeeyo isaga iyo dawladdiisa iyo dalkiisaba..

Markaasay dawlada krishtaanka ahi waxay bilaabeen inay dawlada Carabta ee Khaliijka oo Soomaaliya aad u taageray dhan walba, gaar ahaan xagga dhaqaalaha, Soomaaliya ka cabsi gelayaan xagga militariga iyo xagga siyaasadda hormariddaba ee Soomaaliya, ayna u tuseen inay Soomaaliya amnigooda iyo hab dhaqankoodaba khatar ku tahay, siduu ayaamahaan bishaan jannaayo ee sanadkaan laba kun iyo sideed Madaxweyne George Bush dawlada Carabta ee Khaliijka oo uu booqasho ku joogo ugu cabsiinayay dawladda iiraan oo uu u sheegay inay amnigooda khatar ku tahay oo kale. Halkaas ayayna krishtaanku dawr ka heleen ay khaliijka ka cayaaraan, ayna ka iibiyeen hub fara badan oo kumanyaal malaayiin jooga oo

dhaqaalaha galbeedka qayb wayn ka qaatay. Dawladahaas galbeed waxay Soomaaliya u arkeen inay tahay mid khatar ku ah danohooda dhaqaale, waxayna ka bageen inay ishaas dhaqaale ka awddo.

Markaasay dawladda galbeedku waxay goosteen in dawladda Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre ridaan, Soomaaliyana khariidhada dawladda laga saaro oo la tirtiro.

Maanta aan joogno dalalka Ciraaq, Kuwayt, Baxrayn , Imaaraatka iyo Qadhar waa mustacmaradu uu maraykany xoog militari ku haysto, mana ah dawlado madax bannaan oo aayohooda ka taliya oo siyaasaddooda iyo maalkooda u madax bannaan, wax wanaag ah oo laga fisho oo dadka Carabta ah u dan ah waa dhalanteed iyo habeenkii xalay ahaa oo tegey. Ilaahay ayaan u baryeynaa inuu ayagana isticmaarka ka xoreeyo, oo waa dad Carab oo muslin ah oo duntoodu fiican tahay, waana walaaleheen.

Dawladda khaliijku intay Soomaaliya tareen lama koobi karo, lagamana abaal gudi karo. Dawladda Sucuudiga keligeed ayaa waxay Soomaaliya ilaa laga soo gaaro kun sagaal boqol iyo sagaashanka deeq ahaan u siisay ama daymisay ku dhowaad toddoba boqol oo malyan oo doollar!!! Warkaasna waxaan ka helay 1992/3 warqad ay dawladda Sucuudigu u qaybisay Safaaradaha dawladda Jaamacadda Dawladda Carabta xubnaha ka ah, oo iigu timid xafiiskayga markaan ahaa Danjiraha Jaamacadda Carabta ee Qarammada Midoobay ee Vienna dalaka Austria, kaddib markuu nin siyaasi ah oo soomaali ah Jaamacadda Carabta uga hadlay inayan sucuudigu soomaaliya wax tarin. Sidoo kale waxay dawladda sucuudigu qaybisay warqad ay ku qoran yihiin kaalmaday u fidisay dawladda Suudaan.

Siyaasaddaas dawladda krishtaanka ayaa keentay inay askarta amxaarada soo ijaartaan si ay ceelasha batroolka oo ay qorshaysanayaan inay Soomaaliya ka qotaan u ilaaliyaan, oo aan dhulkana lahayn xaqna ku sheegan karin.

Rag soomaali ah oo Xamar ka yimid oo aan waraystay waxay ii sheegeen oo yiraahdeen: "askarta amxaaradu markay wiil soomaali ah arkaan way cararayaan oo waa fulayo, mana doonayaan inay dhintaan, waxayna yiraahdaan: "soomalidu dhimashada kama baqdo!" Waxaysanse ogayn inuu arliga Ilaahay iska leeyahay, Isaguna uu maamulo, cidduu doonana siiyo. Kitaabkaanu ma ah mid ka hadlaya taariikhda Soomaaliya ee waa dhawr bog oo aan ku doonayo inaan wax uga iraaqdo xiriirka ka dhexeeya soomaalida Carabta iyo muslinka ah iyo amxaarada krishtaanka ah iyo dawladda krishtaanka ah ee yurub iyo ameerika.

Siday soomaalidu hore u tirina "siday u indha la'dahay uma Alle la'a."

Waxay sheeko soomaaliyeed sheegtay inuusan diidiinku qolofa adag oo ku daboolan lahaan jirin. Markaasay bahallo u tashadeen inay cunaan. Markuu warkaasu gaaray ayuu diinku wuxuu yiri: "soo meesha la iigu tashanayay Ilaahay ma joogin?" Waxaa la yiri: "haa." Wuxuu yiri: "hadaba Ilaahay ayaa iga celinaya." Markaasuu Ilaahay Tacaalaa, siday sheekadu leedahay qolofaan ku daboolay oo uu ku badbaadiyay. Marka meesha soomaalida loogu tashanayay soo Ilaahay Tacaalaa ma joogin?

Adduunkaanna waxaa iska leh Ilaahay oo wax dhaca oo araggiisa iyo maqalkiisa iyo ogaalkiisa ka maqani ayan jirin, wuxuu sameeyana xikmad ayay ku dhisan tahay oo ay muslimiinta u dan tahay, haba ku dhibtoodaane. Waxaan Ilaahay Tacaalaa ka baryayaa inuu soomaalida iyo muslinkoo idil u naxariisto meel kastaba joogaane, inta nool iyo inta dhimatayba.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahiis faqiirka u ah,
Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan
Winchester, Virginia, USA
Maalin axad ah, ee shanta bisha Muxarram ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sagaal iyo labaatanka Hijriga, una dhigantah saddex iyo tobanka jannaayo laba kun iyo sideed Miilaadiga.

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Araarta koowaad ee dhigaha kitaabka

Al Xamdu Li Allaahi Rabbi al Caalamiina, Wa al Th-thanaa'u Li Allaahi, Wasallaa Allaahu Caalaa Sayyidinaa Muxammadin, wa Calaa Aalihi wa Saxbihi, wa Sallam tasliiman kathiiran. Waxaa qiyaas saddex bilood ka hor Soomaaliya kusoo duulay ciidammada NATO iyo EU iyo amxaaro ay soo ijaarteen, oo ciidda daahirka ah ee muslimiinta kusoo xad gudbay, soomaali badanna xasuuqay. Markaasaan waxaan is tusay inaan inta moogan ku baraarujiyo sababaha taariikhiga ah oo duullaankaas dhaliyay, ahna asbaab diini ah, kuwa dhaqaale iyo kuwa siyaasadeedba. Amxaaro weligeed arliga jamhuuriyadda Soomaaliya hore uma soo gelin, hadana awooddeeda kuma soo gelin.

Dadka soomaaliyeed ayayna jirtaa waxay taas ka yeeli lahaayeen, oo sida la yiraahdo "ceelna uma qodna cidna uma maqna."

Kutubbada aan kasoo qaatayna kitaabka dhexdiisaan ku sheegayaa.

Waxaanna Ilaahay ka baryayaa inuu iga aqbal, qofka akhristana uu ku anfac, ajarkiisana uu aniga iyo labadii i dhashay nasiyo. Kitaabkaani waa nicmuu Ilaahay igu galladeystay, waxa qalad ah oo ku jirana waxay ka yimaadeen aniga iyo shaydhaan.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahiis faqiirka u ah, Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

South Riding, Virginia, USA

Maalin jimce ah, ee lix iyo labaatan bisha Rabiicu Al Awwal ee sanadka kun iyo afar boqol iyo labaatan iyo labaatanka Hijriga, una dhigantah saddex iyo tobanka abriile laba kun iyo toddoba Miilaadiga.

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Ilaahay ayaa rizqiga qaybiya

Ilaahay Tacaala wuxuu Aayadda lixaad ee Suuratu Dhaahaa noogu sheegay inay ciidda hoosteeda khayraad ku jiraan uu Isagu iska leeyahay, wuxuuna yiri: **"LaHu maa fii Al Ssamaawaati wa maa fii al ardi wa maa baynahumaa wa maa taxta al th-tharaa."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Isagaana iska leh waxa Samaawaatka dhexdooda ku jira iyo waxa arliga dhexdiisa ku jira iyo inta labadoodaas dhexdooda ku jira iyo waxa ciidda hoosteeda ku jiraba."

Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadaha sagaalaad iyo tobanaad ee Suuratu Fussilat ku yiri: **"Qul a'innakum takfuruuna bi Allathii khalafa al arda fii yawmayni wa tajcaluuna laHu andaadan Thaalika Rabbu al caalamiina(9)Wa jacala fiihaa rawaasiya min fawqihaa wa baaraka fiihaa wa qaddara fiihaa aqwaatahaa fii arbacati ayaamin sawaa'an lilissaa'iliina(10)."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaad tiraahdaa: "ma waxaad ku gaaloobaysaan Midka ku abuuray arliga laba maalmood dhexdooda, oo ah axad iyo isniin, oo aad markaas u samynaysaan asnaam aad la caabudaan?"(9)Kaddibna arliga dhexdiisa dhigay buuro culus oo xasiliya oo arliga kor saaran, arliga dhexdiisana barakeeyey, kuna barakeeyey wuxuu ku abuuray dhexdeeda oo ah bado iyo wabiyo iyo geedo iyo miro. Markaas kaddibna quudadkeeda u qadaray. Al Xasan iyo Muqaatil waxay yiraahdeen: "wuxuu arliga u qaybiyay arzaaqda addoommadiisa iyo xoolahaba." Cikrimah iyo Al Ddaxxaak waxay ayaguna yiraahdeen: "wuxuu dal walba u qadaray oo siiyay rizqi uusan dal kale siinin, si ay u kala gataan oo isu dhaafsadaan oo u kala ganacsadaan, oo ay sidaas waxay ku noolaan lahaayeen ku kasbadaan, isagoo uu dalba waxa dalka kale yaalla ka gadanaya." Al Kalbii wuxuu yiri: "wuxuu Ilaahay dadka dal deggan u qadaray meseggo iyo gallay, kuwa dal kale degganna wuxuu u qadaray kalluun, oo sidaasoo kale ayuu quudadkooda u qadaray." Wuxuuna Tacaalaa quudadkaas dalalka kala duwan oo adduunkaan u qadaray oo siiyay oo uu u qaybiyay afar maalmood guduhooda. Afartaas maalmood macnohoodu waxaa weeyey: "wuxuu quudadka u qadaray laba maalmood oo kala ah maalinta talaadaad iyo maalinta arbacaad, oo marka lagu daro labada maalmood oo hore ee axadaad iyo isniin, isku noqonaya afar maalmood." Waana sidaas oo aan ziyaado iyo nuqsan toona lahayn, taasoo ah jawaabta qofka weydiiya inta arliga iyo aqwaatta lagu abuuray(10)." Markay ganacsato dalal kala duwan isu yimaadaan oo wax kala gadanayaan, ganacsiga ka sokow waxay ka wada hadlayaan umuurta dalalkooda iyo diimohoodaba, o sidaasay Diinta islaamku ku faaftay.

Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda laba iyo tobnaad ee Suuratu Al Shuuraa ku yiri: **"LaHu maqaaliidu Al Ssamaawaati wa al ardi yabsudhu al rrizqa liman yashaa'u wa yaqdiru innaHu bikulli shay'in caliimun(12)."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu leeyahay oo u sugnaaday furayaasha rizqiga ku sugan Samaawaatka iyo arligaba, markaasuu

cidduu doonana u waasaciyaa rizqiga oo uu wax badan ka siiyaa, cidduu doonana uu wax yar ka siiyaa. Isagu wax walba waa Midka ogsoon(12)."

Saboolnimada dawladaha Krishtaanka ah

Ilaahay rizqiga iyo maalka addoommaadiisa wuu ugu kala roonaaday, wuxuuna u roonaaday Carabta, oo uu siiyay maalka ugu badan ee adduunkaan. Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, markuu wiilkiisa Nabi Ismaaciil, Calayhissalaamu, oo ah aabaha Carabta dhalay, iyo hooyadiis Haajar Makkah Al Mukarramah dejiyay, wuu u Alle baryay, oo intuu xagga Kacbada, oo aan markaas dhisnayn, usoo jeestay, ayuu wuxuu yiri, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Ibraahiim noogu sheegay: "**Rabbanaa innii askantu min thurriyatii bi waadin ghayri thii zarcin cinda Baytika Al Muxarrami Rabbanaa li yuqiimu Al Ssalaata fa ijcal af-idatan mina al nnaasi tahwii ilayhim wa arzuqhum mina al th-thamaraati lacallahum yashkuruuna (37) "**.

Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rabbiyow, waxaan caruurteyda qaarkeed dejiyay tog aan beero lahayn oo ah Gurigaaga Xurmada leh agtiisa ah, Rabbiyow inay Salaadda u oogaan, ee ka yeel quluubta dadka tii ayaga xaggooda u iilata, kana arzuq miro, inay shukriyaan ayay mudanyihiine(37)."

Fiiro Gaar ah:

Kitaabka Encyclopaedia Wikipedia, oo laga helo inetnetka (en.wikipedia.org/wiki) markuu saboolnimada ameerika ka hadlayo wuxuu dhigay: "boqolkiiba toddoba iyo toban ee dadka ameerikaanku waxay ku noolaayeen saboolnimo inta u dhexeysay kun sagaal boqol sagaal iyo sagaashanka ilaa laba kun iyo labada, waana saboolnimada labaad ee ugu sarreysa dalalka dakhligoodu sarreeyo oo la yiraahdo COED. Guud ahaan maraykanku wuxuu ku jiraa meesha lix iyo tobnaad ee sbaonimada adduunka (the USA ranks 16th on the Human Poverty index), dalalkaasna waxaa un maraykanka ka saboolsan Irland iyo Talyaaniga. Sanad kasta laba iyo toban ilaa shan iyo toban ee dadweynaha maraykanku waa sabool. Markaas marka muddo toban sano ah la soo qaato boqolkiiba afartan ee dadka maraykanku waxay saboolnimo ku nool yihiin ugu yaraan hal sano. Dadkaas saboolka ahna waa dadka shaqeeya. Saboolnimaduna waxay ugu badan tahay dadka da'doodu ka yartahay toddoba iyo toban iyo sideed iyo toban sano. Sanadka laba kun iyo kow dhalinyarada maraykanka ah ee saboolka ah waxay ahaayeen kuwa ugu badan dalalka hormaray oo idil, waxayna ahaayeen boqolkiiba qiyaas shan iyo toban oo dadka da'daas ah oo dhan iyo boqolkiiba soddon dadka maraykanka ah madow oo ku nool inta ku nool ka hoos dakhliga saboolnimada lagu qiyaaso.

Heerka nolosha ee dadka ku nool boqolkiiba tobanka ugu hooseeya ee maraykany wuu ka hooseeyaa heerka nolosha ee dhammaan dalalka warshadaha ku hormaray intaan ka ahayn ingiriiska oo leh heerka ugu hooseeya ee caruurta saboolka ah. Sanadka laba kun iyo lix caruurta aan qaan

gaarin ee maraykanka ee saboolka ah waxay ahayd boqolkiiba laba iyo labaan, tanoo ah heerka ugu sarreeya ee dalalka hormaray."

Kaydka khayraadka adduunka qaarkood

Khayraadka kaydhooda waxaa haya Ilaahay Tacaalaa, agtiisayna yaallaan oo cidduu doono ayuu intuu doono ka siiya, siduu ku yiri Aayadda kow iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri: "**Wa in min shay'in illaa cindanaa khazaa'inuhu wa maa nunazziluhu illaa bi qadarin macluumin(21).**" Aayadda macneheedu waxaa weeye: "shayna ma jiro ee waa illaa midkuu kaydkiisu agteenna yahay, oo aan ahaysiinaynna oo maamulaynna, shaygaasna kama soo dejinno in la og yahay mooyee oo ku dhisan xikmada Ilaahay(21)."

Kitaabka maraykanka iyo Kanada lagu daabacay sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo sagaashanka ee Encyclopaedia Britannica, mujalladka sideedaad, erayga Mining wuxuu dhigay kaydka khayraadka dhulka ku jira oo lagala soo baxo qaarkood iyo siday dalalka ugu kala badan yihiin, wuxuuna yiri:

Kaydka batroolka adduunka

Kaydka batroolka oo dalalka adduunka ku kala jira, inta tan iyo hadda la og yahay waa sidatan:

Liibiya	2.3%
Ciraaq	10.0%
Kuwayt	9.5%
Sucuudiga	25.8%
Imaaraadka	9.8
Wadar	57.4%

Waxaan tiradaan ku jirin oo ka maqan batroolka ku jira Soomaaliya, Suudaan, Jazaa'ir, Yaman, Masar, Tuunis, Siiriya, Qadhar, Cummmaan, Baxrayn, oo intaasba ama hadda suuqaba lagu kala gato, ama aan weli lasoo saarin. Sidaasuu Ilaahay Tacaala wuxuu batroolkoo idilba, in yar mooyee, wuxuuba siiyay Carabta. Mar aan dalka Urdun tegay Badda Maydka ah, anigoo bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol afar iyo sagaashanka anigoo jooga caasimadda Urdun ee Cammaan taksii u qaatay inaan soo arko meesha lagu halligay qawmu Luudh oo ku taalla Badda Maydka ah, ayuu ninka taksiga wada wuxuu i tusay guri meel cidlaa ka dhisan oo jinka badda saaran wuxuuna ii sheegay inuu gurigaas leeyahay boqorka Urdun Xuseen walaalkiis Xasan, halkaasna laga helay batrool. Runtana Rabbi ayaa og. Marka tirakoobkaas lagu daro kaydka uu kitaabkaas ku sheegay dalal kaloo muslim ah waxaan arkaynnaa sidatan:

Nijeeria	1.7%
Indonesiya	1.1%
Iiraan	9.3%
Wadar	12.1%

Marka saddexdaan dal oo muslinka ah kaydhooda lagu daro kaydka la sheegay ee dalalka Carabta wadarta guud waa 69.5%. Waxaa tirakoobkaas ka muuqata inuu Ilaahay Tacaalaa batroolka adduunka o idil, in yar mooyee, uuba siiyay dalaka islaamka, gaar ahaan dalalka Carabta.

U.S.A.	2.6%
Yurub	0.4%

Gaaska dabiiciga ah (Natural Gas)

Aljeeriya	2.5%
Ciraaq	2.4%
Qadar	3.5%
Sucuudiga	3.9%
Imaaraatka	4.3%
Wadar	16.6
Iiraan	12.9
Wadar guud	29.5

Waxaa halkaas ka muuqata ayaduna inay dalalka Carabta iyo muslinkuba leeyihiin dalool kaydka gaaska dabiiciga ah oo la shito oo uu kitaabkaasu wariyay.

U.S.A.	3.6%
Netherlands	1.5%
Norway	1.7%
Romaniya	0.1%
Ingiriiska	0.4%

Yurub oo la isku daray waxaa ku jira 2.7% kaydka gaaska, maraykankana 3.6%.

Dhuxusha

Dhuxusha dhagaxa ah waxaa laga dhaliyaa xoogga korontada, warshada birtana waa lagu dhalaaliyaa, treennada iyo baabuurtaba shidaal ayaa looga dhigaa, guryahana waa lagu shita xilliga qaboobaha dalalka qabawga iyo barafka leh, oo dhankaas wuxuu beddel u yahay batroolka iyo gaaska dabiiciga ah.

Shiinaha	45.7%
U.S.A.	13.5%
Jarmanka	5.0%
Poland	2.5%
Ingiriiska	0.2%

Phosphate rock

Marookko	63.5%
Afrikada koofureed	7.5%
Urdun	1.4%
U.S.A.	13.1%
Yurub	00%

Macdanta Nickel

Kuuba	20.3%
Indoneesiya	11.4%
U.S.A.	2.2%
Yurub	00%

Dahabka

Afrikada koofureed	44.5%
U.S.A.	10.6%
Yurub	00%

Waxaan tirakoobkaan ku jirin dahabka ku duugan boqortooyada Sucuudiga, oo Al Shiikh Yamaani markuu ahaa Wasiirka batroolka boqortooyada Sucuudiga sideetanaadka wuxuu sheegay oo qalabka warbaahinta adduunka lagu baahiyay oo yiri: "waxaan leenahay buuro dahabka laga qodo, oo haddaan dahabkaas dibadda u dhofinno aan ka heleyno maal ka badan maalkaan ka helno batroolka aan hadda dhoofinno." Markaasay dawladda Israa'iil waxay tiri: "waa dahabkii Sulaymaan oo annagaa iska leh!"

Dahabka cad (platinum)

Afrikada koofureed	89.3%
--------------------	-------

Qalinka

U.S.A.	17.1%
--------	-------

Macdanta Birta

U.S.A.	5.9%
Afrikada koofureed	5.8%
Fransa	0.9%
Sweden	2.4%

Macdanta Tin

Malaysiya	18.2%
Indoneesiya	11.2%
Ingiriiska	1.5%
Burtuqaal	1.2%
U.S.A.	0.7%

Waxaa tirakoobyadaas kaaga muuqata saboolnimada dalalka krishtaanka ah, gaar ahaan yurub iyo ameerika, oo khayraadka la siiyay ay aad u yar yihiin. Gaar ahaan waxaa muuqata saboolnimada ingiriiska, kuna khasabtay inuu noqdo burcad adduunka dal walba inta weerara soo dhaca si uu caruurtiisa caano ugu helo. Waaba tuu dhaqaale yaqanka ingiriiskaba u dhashay oo jaa'izada Nobel Prize lagu siiyey John Maynard Keynes yiri: "ingiriisku waa jaziirad yar oo sabool ah! Marka waa inuu ingiriisku barto inay sidaas sabool u yihiin, uuna sida dad sabool ah u noolaado." Waxaa yurubta krishtaanka ah ugu roon xagga khayraadka dhulka ku jira dalka ruushka, oo isagu xoogaa batrool, iyo gaas iyo macaadin leh.

Beeraha

Dalalka krishtaanka ah ee yurub iyo ameerika waxay ku yaalliin qaybta waqooyi ee adduunka, dalalkooduna way qabaw yihiin, oo waxaa ka dhaca bilaha qaarkood baraf oo bilo dhulka yaalla iyo dabaylo qabaw. Taas ayaana u sabab ah inay cunnaday u baahan yihiin ku beeran karaan oo keli oo goosan karaan mar keli ah sanadkiiba, una badan xilliga jiilaalka. Cunnada arligooda ka baxdana way kooban tahay, waxaana ugu badan bataatada iyo qamadiga iyo gallyada, oo meelaha qaarkood lagu beero. Maantadaan aan joogno cunnada yurub iyo waqooyiga ameerika lagu cuno waxaa in badan looga keenaa dibadda, oo ayaga uma baxdo. Waxa cunnda lagu darsado oo macaaniya oo carfiyana dalalkooda kama baxaan. Fawaakihda la cunana inteeda badan dalalkooda qabow kama baxdo oo dibadda looga keenaa. Dharka la xirto in badan oo ka mid ah iyo kabahaba waxaa looga keenaa dibadda . Dal cunnada shacbigiisa aan soo saarin waa sabool.

Fiiro Gaar ah:

Daabacaddaa koowaad ee kitaabkaan oo hadda laga joogo qiyaas hal sano oo wax yar dhimman, qiimaha cunnada ee dalkaan maraykanka iyo yurubta galbeedba aad ayuu kor ugu kacay oo saliidda cunnada lagu darsado ee Olive Oil oo arliga talyaaniga laga keeno, tusaale ahaan, markaas qiyaas sideed doollar aan ka bixin jiray hadda waxaan ka bixiyaa qiyaas labaan doollar. Cunna kastana sidaas ayay u qaaliyowday oo qiimiheedu kor uga kacay, mudada sidaas u gaaban oo sand ka yar.

Duminta dawladda islaamka

Dawladaha krishtaanka ah ee reer galbeed waa dukaanley iyo gaddislay. Markuu Ilaahay Tacaalaa khayraadkiisa sidaas u qaybiyay, ayay dalalka saboolka ah ee yurub iyo ameerika waxay marka hore cilmiga ka qaateen dawladaha islaamka ah, oo ay ka barten culuumta, sida xisaabta, cilmiga xiddigaha, takhtarnimada, wax barashada, badaha iyo dhisidda doonyaha, saabuunta, iwm.

Markay arkeen siday muslimiintu uga hormareen iyo cilmigay leeyihiin, ayay waxay ku dadaaleen inay dawlladda islaamka dumiyaan, oo ay kala qaybiyaan, si ay khayraadkooda gacanta ugu dhigaan. Inta laga soo gaaray qarniga sagaal iyo tobnaad ee miilaadiga waxaa jirtay dawlad ay muslimiintu wada leeyihiin oo wadaagaan, caasimaddeeduna ahayd Istanbuul ee dalka turkiga, ahna dawladda cuthmaaniyiinta loo yaqaanno. Caasimadda dawladdu islaamku in badan oo ay guurtay, oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Abuu Bakar Al Ssiddiiqu iyo Cumar iyo Cuthmaan caasimaddoodu waxay ahayd Al Madiinah Al Munwaarah, Allaha ayada iyo Makkah Al Mukarramah sharaftoofa kordhiyee. Kaddib Amiiru Al Mu'miniina Al Imaamu Cali bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa wuxuu caasimad ka dhigtay magaalada Kuufah ee ku taalla dalka Ciraaq, taasoo ahayd caasimadda wiilkiisana Al Xasan bin Faadhimah, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuu Amiiru Al Mu'miniina ahaa. Isaga dabadiis Mucaawiyah bin Abii Sufyaan wuxuu caasimad ka dhigtay Dimishiq, ee dalka Suuriya, taasoo ahayd caasimadda islaamka intay talada hayeen boqorrada amawiyyiintu, oo ahayd boqol sano qiyaas. Kaddib Khulafada Cabbaasiyiintana waxaa ugu horreeyey Abuu Al Cabbaas Al Saffaax Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Cali bin **Cabdu Allaahu bin Al Cabbaas** bin Cabdu Al Mudha-dhalib bin Haashim oo khaliif ahaa inta u dhexeysay boqol iyo labo iyo soddon ila boqol iyo lix iyo soddon Hijriga una dhigantah toddoba boqol iyo konton ilaa toddoba boqol iyo afar iyo konton miilaadiga. Caasimadiisuna waxay ahayd magaalo uu isaga laftiisu dhisay uuna u bixiyey **Al Haashimiyyah**, una dhoweyd gobolka Al Anbaar ee Ciraaq. Walaalkiisa khaliifnimada isaga ku xigay oo ahaa Abuu Jacfar Al Mansuur ayaa magaalada Baghdaad dhisay, una bixiyey **Madiinatu Al Ssalaamu**, oo loogu bixiyey inay u dhawdahay wabiga Dijlah oo la oran jiray **Qasru Al Ssalaamu**, caasimadna ka dhigtay. Dhismaha Baghdaad waxaa la bilaabay sanadka boqol iyo shan iyo afartan, wuxuuna soo degay marka la dhammeeyey sanadka boqol iyo sagaal iyo afartan, una dhigantah sanadka toddoba boqol iyo lix iyo lixdanka miilaadiga ah. Sidasay caasimadda dawladda islaamka ahi u wareegi jirtay hadba meeshuu boqorka ka dhigto.

Markaasaa waxaa qarniga sagaal iyo tobnaad dalka Maghrib ama Morokko ku dhashay, siduu u qoray kitaabka la yiraahdo Al Rrajulu al Ssanamu, oo ah ninka sanamka ah, ninka la yiraahdo Kamaal Ataturk, oo ahaa yuhuudi wacal ah oo aan abihiis la aqoon, turkiga ku abtirsada, kana mid ahaa raaciyada dawladda islaamka. Markaasuu Kamaal Ataturk ciidammada dawladda islaamka qortay, uuna darajooyinkeeda kor u raacay ilaa uu ka noqday

taliyaha ciidammada qalabka sida. Markaasay dawladaha ingiriiska iyo fransiisku xoolo siiyeen inuu dalwdda islaamka dumiyo, uuna ku dhawaaqo inuu isagu mas'uul ka yahay oo keli dawladda turkiga oo uu isagu ka dhashay, caasimaddeedana uu joogo. Markaasuu boqorka dawladda islaamka ee cuthmaaniyiinta inqilaabay, inqilaab uusan dhiig ku daadan, oo uu xukunka kala wareegay. Markaasuu ku dhawaaqay inay dawladda turkigu ka baxday dawlad weynta islaamka, qolo walboo kalena ay dalkeeda ayadu mas'uul ka tahay. Markaasuu afka turkiga oo farta Carabiga tan iyo markaas lagu dhigi jiray beddelay, kuna dhigay xuruufta laatiiniga ah, wuxuuna soo celiyay oo uu magaalada bartameheeda dhigay sanam weer ah oo midabka boorka leh, oo ay turkigu islaamka hortiiis caabudi jireen. Markay sidaas dawladda islaamku ku burburtay, oo ay dawlado yaryar oo fara badani dhasheen, oo la kala yiraahdo Suuriya, Lubnaan, Falasdiin, Ciraaq iyo kuwa kaleba, ayay dawladaha krishtaanka ahi ee yurub dawladahaas yaryar kusoo duuleen oo ay gumaysteen. Sababta ay ugu soo duuleen una qabsadeenna waxay ahyd inay khayraadkooda Ilaahay siiyay gacanta ku dhigaan oo ay dalalkooda yurub usoo qaataan oo ay ku noolaadaan, ayagoo aan wax kale haysan. Weligood gaalada yurub waxay ahaayeen burcad, ku hadla hadal been ah oo aan macno lahayn. Waxay sheegaanna ayaga laftoodu kuma dhaqmaan.

Krishtaanku waa beenaalayaal

Krishtaanku waxay yiraahdeen Ilaahay wiil ayuu dhalay. Yuduuduna waxay tiri Ilaahay wiil ayuu dhalay. Ilaahayna, Cazza wa Jalla, wuxuu yiri waa beenlowyaal, wuxuuna Aayadda soddonaad ee Suuratu Tawbah ku yiri: **"Wa qaalati al yahuudu Cuzayrun ibnu Allaahi, wa qaalati al nasaaraa AI Masiixu ibnu Allaahi. Thaaliqa qawluhum bi afwaahihim. Yudaahi'uuna qawla allathiina kafaruu min qablu Qaatalahumu Allaahu annaa yu'fakuuna (30)."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Yuhuudna waxay tiri Cuzayr waa wiilka Ilaahay. Krishtaankuna waxay yirahdeen Al Masiixu Ciisaa waa wiilka Ilaahay. Oraahoodaasu waa hadalkooda ay afalkooda ka yiraahdeen, waxayna ku dayanayaan oo uu hadalkoodu la mid yahay kuwii ayaga hortood gaalobay hadalkooda. Ilaahay wuu lacnaday, siday xaqqa uga leexanayaan kadiib marka xujooyinka lagu soo oogay." Ilaahay Cazza wa Jalla wuxuu Aayadaha boqol iyo konton iyo kow iyo konto iyo labo ee Suuratu Al Saaffaati ku sheegay inay beenlowyaal yihiin: **"Alaa innahum min ifkihim la yaquuluuna(151)Walada Allaahu wa innahum la kaathibuuna(152)."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Taasi waa been abuurashadoodii ay oranayeen(151) Ilaahay waa dhalay, waana beenlowyaal." Wuxuu Ilaahay Cazza wa Jalla Aayadda boqol iyo shanaad ee Suuratu Al Naxli noogu sheegay inay gaaladu beenlowyaal yihiin, wuxuuna yiri: **"Innamaa yaftarii al kathiba allathiina laa yu'minuuna bi Aayaati Allaahi, wa uulaa'ika humu al kaathibuuna(105)."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxaa beenta abuura kuwa aan Aayaatka Ilaahay rumaynayn, kuwaas weeyana beenlowyaalku." Marka, muslimow, sidee baad u rumeysaneysaa qof Ilaahii abuurayba uu yiri waa beenlowyaal? Qofka

rumaysta wuu ku dagmayaa, kuna khasaarayaa.

Krishtaanku waa dayn ku nool

Dadka yurub iyo ameerika deggan waxay ku nool yihiin waa dayn, oo guryaha ay deggan yihiin, oo ay yiraahdaan annagaa iska leh, waxa iska leh bangiyada, oo korsaar ribo ah oo xoog leh saarta, oo gaartay heer inay bixiyaan korsaar ka badan qiimaha gurigaba, ayna ku bixiyaan ilaa soddon sano. Markay ribada iyo qiimaha gurigaas labaan ama sodoon sano ku bixiyaan ayuu bangigu ku wareejinayaa oo gurigaas ayagu yeelanayaan. Hadday bil walba bixin waayaan inta laga doonayo inay bixiyaanna, ayadoo shaqada laga saaray, ama bukoodayba, guriga waa lagala wareegayaa, isagana dariiqaa la dhigayaa. Gaadiidkay wataanna waa sidoo kale, oo waxaa iska leh bangiyada, oo hadduu lacagta bil walba loo qoondeeyey bixin waayo, gaadiidkaas waa lagala wareegayaa. Guryohooda alaabta taalla iyo maacuunka yaallaba sidoo kale waa dayn ay bangiyadu leeyihiin, oo hadday bixin waayaan waa lagala wareegayaa oo laga ceshanayaa. Dharka ay xiran yihiin iyo cunnada ay cunaanba iyo lacagta ay dugsiyada isaga bixiyaan oo wax ku bartaanba waa dayn korsaar saaran yahay. Waxaaba jira shirkado ku takhasusay kasoo celinta guryaha iyo gaadiidka iyo mataaca guryahaba dadka dayntaas bixin waaya.

Qof hodan ah, siday ku andacoodaan, dayn ma qaato ee lacatiisu wax ku gataa.

Fiiro Gaar ah:

Televisioonka maraykanka MSN.Money boggiisa internetka wuxuu bogga (U.S.Debt Help.com) toddoba iyo labaatanka Disambar ee sanadka laba kun iyo toddoba kasoo guuriyay oo dhigay: "qof kasta oo gobolka New Hampshire ee USA deggan waxaa lagu leeyahay lix iyo toban kun sideed boqol shan iyo afartan doollar oo dayn ah, gobolka Connecticut waa shan iyo toban kun saddex boqol afar iyo toban, Rhode Island waa afar iyo toban kun lix boqol saddex iyo afartan. Gobollada Mississipi iyo Washington DC iyo Okalhoma waxaa ayagana lagu kala leeyahay, waana kuwa ugu dayn yar, sideed kun afar boqol iyo labaan, iyo sideed kun lix boqol shan iyo konton iyo sideed kun sideed boqol saddex iyo labaan doollar oo dayn ah qofkiiba. Daymahaas oo idil waa kuwa lagu galay Credit Cards oo wax lagu gatay ama cunno ama dhar, iwm., kumana jiraan daymanka loo qaatay gadashada guryaha.

Da'da dadka daymanka qaatay iyo intay dayn qaateenna waa sidatan:

18-29 sano jir-----8.636,00 doollar.

30-39 sano jir-----16.298, 00 doollar.

40-49 sano jir-----18.659,00 doollar.

50-59 sano jir-----20.157,00 doollar.

60-69 sano jir-----15.964,00 doollar.

70 sano iyo ka badan----6.500,00 doollar.

Mudadaas sanadka ka yar oo kasoo wareegatay daabacaadda koowaad ee kitaabkaan, markay lacagta bil walba laga doonayay bixin waayeen, waxaa guryohooda lagala wareegay malaayiin maraykan ah, taasoo ayaduna dhaqaalaha dalka gilgishay.

TV-iiga CNN wuxuu lixda disambar laba kun iyo toddoba barnaamijkiisa "Your money" ku sheegay inay fallisaaddu sanadkaas marka kii ka horreeyey loo fiiriyo ay boqolkiiba afartan kor u kacday.

Takhtar iyo daawo iyo cunno la'aan

Tobanno malaayiin ee dadka dawladahaan yurub iyo ameerika, gaar ahaan ameerika, ma laha lacag ay takhtar siiyaan markay bukoodaan, oo sidaan ayaga iyo caruurtooduba sanooyin takhtar u arag, haddaay bukoodaan iyo haddii kaleba. Waxaa jira malaayiin qoysas oo aan guryohooda dab laga shidin, oo caruurtoodu ayan cunno kulul bilo cunin, sidaan u arkay Bob Kennedy, wiilka Robert Kennedy oo ahaan jiray walaalka madaxweyne John Kennedy, iyo wasiirkiisa arrimaha gudahaba oo sidaan oranaya. Bob Kennedy, oo isaga laftiisuba ahaan jiray xubin Congreeska, wuu ka baxay wuxuuna aasaasay hay'ad samafal oo dadka saboolka ah ka cawinta sidaan xilliga qaboobaha guryohooda batrool ay kululaystaan oo raqiis ah u heli lahaayeen. Wuxuu kaloo Boston ka aasaasay jiko dadka gaajoon cunno lagu siiyo, uuna sheegay inay jiraan kumanyaalo guryo ah oo aan dab laga shidan toddobaadyo, oo ayan caruurtoodu sidaan cunno kulul ku cunin, intooda badanna ay yihiin, ayuu yiri, dad caddaan ah. Waxaaba dhawr sano ka hor Tviiga maraykanka NBC uu keenay barnaamij taxane ah oo la yiraahdo "one pay check away from poverty" oo macnihiisu yahay "hal toddobaad oo mushaarka la seego ayaa saboolnimo ka xigta", uuna ka hadlay Madaxweyne Bill Clinton.

Fiiro Gaar ah:

Qiyaas afartan malyan oo maraykan ah kuma jiraan caymiska caafimaadka. Sagaal malyan iyo afar boqol oo kun (siduu Charles Gibson warka ABC uga sheegay markay taariikhdu ahayd toban bisha jannaayo ee sanadka laba kun iyo sideed) ayaguna ma laha caymis caafimaad.

Jariimadaha

Saboolnimadaasu waxay keentay inay dadka saboolka ahi wax dilaan, waxna dhacaan, waxna xadaan, si ay ku noolaadaan. Sidaasay jariimadaha dilka, tuukada, kufsiga, dhacu u bateen. Sidaasayna xabsiyadu u buuxsameen. Xabsiyada maraykanka oo keli ah waxaa ku jirta in ka badan laba malyan oo maxbuus. Intay shaqo la'aantu sii badatoba, maciishaduna qaali sii noqotaba, jariimadu way sii badanaysaa. Qiyaas sideed sano ayaa xabsiyada gobolka Massachusetts imaam ka ahaa oo arrinkaan waan u dhuun daloolaa.

Burcadnimo iyo tuugo dawladeed

Dawladahaas krishtaanka saboolka ahi waxay markaas goosteen inay khayraadka dalalka leh ku duulaan oo ay xoog iyo dagaal hubaysan ku qaadaan si ay khayraadkooda gacanta ugu dhigaan. Waa waxa isticmaar la yiraahdo. Maraykanka waxaa isticmaarka ugu horreeyey dawladaha yurub, markaasuu hadda doonayaa inuu xoog militari ayaga laftooda danohooda ay ku leeyihiin adduunka saddexaad kala wareego, sida Zaire dalka la oran jiray oo ay NATO iyo EU doonayaan inay kala goosgoostaan, Koofurta Afrika, Ruwanda iyo Burundi, Suudaan, Chad, Galbeedka Afrikada macaadinta hodanka ka ah. NATO iyo EU dan kama laha inay boqollaalo malaayiin oo dad ah dilaan, wayna yeelayaan sidaan Soomaaliya iyo meelo kaleba ugu aragnay, si ay khayraadkooda ugala wareegaan.

Isku dir

Hubabka waawayn oo dawladaha krishtaanka ahi isticmaalaan, waxaa ka mid ah isku diridda qaybaha kala duwan ee dalalka ay ku duulaan, oo ay qabiil isugu diraan, ama xagga diintaba sunni iyo shiico isugu diraan, ama waxay ayagu hindisteen aanse jirin oo dimuqraasiya iyo siyaasad la yiraahdo. Ninkaan Oakley la yiraahdo, soomaaliduna ay u bixisay "ugly" oo macneheedu yahay 'foolxume', isagoo ah nin akhlaaq xun oo fool xun, gaar ahaan waji fool xun leh, wuxuu ahaan jiray Danijiraha maraykanka ee Soomaalia kun iyo sagaal boqol iyo toddobaataneeyadii. Markaasuu soo fara geliyay arrimaha gudaha ee Soomaaliya, isagoo ku kacay inuu dad ka mid ah qabaa'ilka soomaaliyeed maal siiyo, uu qabaa'ilkana isku diro, uuna abaabulo inay dawladda ku kacaan, si uu dalka xasillooni darro uga rido. Ninkaas ayaa ka mid ahaa kuwa bilaabay oo abaabulay xasillooni darrada Soomaaliya ka dhacday. Markaasay dawladda soomaaliyeed tan maraykanka ka codsatay in la qaado oo lala noqdo danijirahaas. Markuu dalka maraykanka kusoo laabtayna waxaa loo magacaabay Agaasimaha Xafiiska la Dagaallanka Aragagixisada kuna yaalla Aqalka Cad ee Madaxweynaha Maraykanaku fadhiyo, isagoo sida dadka loo laayo, xasillooni darrana arliga loogu rido khabiir ku ah. Oakley wuxuu Soomaaliya kusoo laabtay isagoo ciidan wata oo xooggiisu soddon kun oo nin yahay." Waxaan la joogay madaxweyne Muxammad Siyaad Barre isagoo qaabilay danjiraha jarmanka, oo ahayd haweeney kaddibna noqotay madaxa habmaamuuska ee dawladda hoose ee Baarlin. Waxayaalahay madaxweynaha ku tiri ayaa waxaa ka mid ahaa: "soo ma aadan arag madaxweyne inaan run kuu sheegay oo ay SNM waqooyi galbeed kasoo gashay (Ethiopia) meeshaan kuu sheegay inay kasoo geli doonaan? Oo soo ma aadan aradag inay danjirayaalka maraykanka iyo ingiriisku run kuu sheegeen markay kuu sheegeen meeshay SSDF iyo USC kasoo geli doonaan xagga gobollada dhexe?" Markay intaas tiri ayay dhaagtay inaan aniguna joogo, markaasay isoo fiirisay, hadana xagga madaxweynaha u jeesatay. Meelahaas ay kasoo galeenna muslimiin soomaali ayaa ku dhimatay.

Isku dirkoodu wuxuu gaaray inay isku diraan walaalaha wada dhashay iyo wiilka iyo aabihiis iyo gabadha iyo aabeheed.

Batroomka

Markuu sanadku ahaa kun sagaal boqol afar iyo sagaashanka waxaan weli ahaa Danjiraha Jaamacadda Dawladaha Carabta ee Qarammada Midoobay ee Vienna, dalka Austria. Waagaas qalabka warbaahinta aduunku wuxuu ka hadli jiray daymanka lagu leeyahay Niijeeriya, Meksiko, Venezuela iyo kuwo kaleba oo isla markaasna ka tirsan Ururka Dawladaha Batroomka Dhoofiya ee OPEC. Waxaan is weydiiyay siday dawladahaas hodanka ahi, oo maalin walba ay khasnadohoda soo galaan boqollaalo milyan oo doollar, ayagoo dhoofiya malaayiin fuusto oo batroom ah, ay u noqon karaan hadana kuwa dayn lagu leeyahay oo dayntii iska bixin waayay, ayna dawladaha yurub iyo ameerika u samaynayaan qorshahay dayntaas isaga gudi lahaayeen. Xarunta OPEC waxay ku taalla Vienna, dalka Austria oo aan anigu markaas joogo. Markaasaan waxaan u tegay Dr. Sobroto, oo u dhashay dalka Indoneesiya, ahaana markaas Xogyaha Guud ee Ururka OPEC. Dr. Sobroto wuxuu hore u ahaan jiray wasiirka batroomka ee Indoneesiya, kaddibna markay xilkaas OPEC mudadiisu u dhammaatay wuxuu noqday guddoomiyaha jaamacadda labaad ee dalkiisa, kaddibna wasiirka dhaqaalaha ee dalkiisa. Dr. Sobroto waa nin muslim ah oo fiican, sahlan oo waji furan, ayna sahlantay in lala xiriiro, waxaanna isku barannay shirarka dhex mara Danijirayaalka Carabta iyo OPEC, ama guud ahaanba shirarka ay dibloomaasiyyintu isugu yimaadaan, iyo afurrada bisha Ramadaan ay danijirayaalka muslimka ahi guryohooda isugu imaan jireen, iyo isaga gurigiisaba. Waxaan Dr. Sobroto weydiiyay sababtay dawladahaas OPEC ka tirsan u dhici kartaa inay hadana daysan yihiin iyo meeshay lacagtay batroomka ka helaan geeyaan, wuxuuna i siiyay oo gacanta ii geliyay daraasad uu ururkiisu sameeyey, warbixinna afkuu iga siiyay. Wuxuu kaloo ii sheegay inay jirto daraasad labaad oo su'aashayda ka jawaabaysa, uusanse i siin karin, ayna u gaar tahay dawladaha xubinta ka ah OPEC oo keli ah, waxa ku qoranse qaarkood afkuu iiga sheegay. Daraasadda koowaad waxa ku dhigan waxaa ka mid ah inta soo socota.

Sicirka fuustada batroomka ah

Sicirka fuustada batroomka ahi wuxuu ka kooban yahay afar qaybood oo kala ah (Kow) soo saaridda dhulka laga soo saarayo kharajka ku baxa. Batroomka waxaa soo saara shirkado ay leeyihiin dawladaha krishtaanka ah ee galbeed, oo lacagteedana qaata, dadkeeduna uu shaqo ka helaa. (Laba) Qaadidda batroomka lasoo saaray laga qaado dalka laga soo saaray, laguna qaado maraakiib loogu talaya galay oo booyado ah, oo geeya dalalka iyo qaaradaha gatay. Maraakiibtaasna waxaa iska leh shirkado ay leeyihiin dalalkaas krishtaanka ah, oo sidaas ku qaata lacagteeda, dadkeeduna uu shaqo ka helo. (Saddex) Caymiska maraakiibtaas batroomka sida, oo caymis la'aan lama

dhaqaajin karo. Maraakiibtaas waxaa inta badan caymisa shirkadda ingiriiska ah ee Lloyd of London, oo lacagteeda qaadata, dadkeeduna uu shaqo ka helo. (Afar) Marka fuustada batroolka ah saddexdaas kharaj laga bixiyo waxaa soo haraya faa'iidada dalka batroolka iska leh. Markaas aan Dr. Sobroto xafiiskiisa la fadhiyo sicirka fuustada batroolka ahi waa qiyaas sideed iyo toban doollar maraykanka ah. Markaan xisaabiyayna waxaa, tusaale ahaan, dawladda Sucuudiga usoo hartay qiyaas shan doollar oo faa'iido ah. Dr. Sobroto xisaabtaas iguma diidin. Fuustada qiimaheeda intiisa kalena, oo ah saddex iyo toban doollar, waxaa qaatay dawladdaha krishtaanka ah ee galbeed, oo sidaasay dawladda batroolkaba iska leh waxay ku yeelatay qiyaas rubuc lacagta fuustada.

Fiiro Gaar ah:

Bishaan aan hadda ku jirno oo ah Muxarram ee sanadka kun afar boqol sagaal iyo labaatan Hijriga, una dhiganta bisha jannaayo laba kun iyo isdeed, ayna kasoo wareegatay in sanad ka yar daabicidda koowaad ee kitaabkaan, wuxuu qiimaha fuustada batroolka oo ceeriin kor u dhaafay boqol doollar oo maraykan ah. Unsada dahabka ahna waxay kor u dhaaftay boqol doollar oo maraykan ah.

Faa'iidada dawladdaha fuustadaas soo gatay

Fuustadaas uu sucuudigu ka helay shan doollar, marka dalka Sweden la keeno markay ahayd kun sagaal boqol saddex iyo toddobaatan, waxay dekaddeeda uga qaadatay batroolkaas ceerinka ah shan iyo toddobaatan doollar. Dawladda talyaaniguna waxay saaratay shan iyo lixdan doollar. Dawladda maraykankuna shan iyo afartan doollaar. Waxaa hubaal ah inay hadda canshuuraha ay dawladdahaasu qaataan wax badanna intaas ka badan yihiin. Lacagtaas canshuurta ah marka la isku daro waxaa laga sameeyaa miisaaniyadda dawladda dhexe ee dawladdahaas, oo sidaasaa fuustadaas looga maal geliyaa wasaaradaha dalkaas ee beeraha, waxbarashada, arrimaha dibadda, gaashaandhigga, is gaarsiinta iyo kuwa la midka ahba. Sidaasaa hormarka dawladdahaas iyo dadkoodaba waxaa laga masruufaa canshuurta fuustadaas uu sucuudigu shan doollar ka helay. Marka fuustadaas dekada dalka yurub iyo ameerika oo soo gatay laga soo bixiyo, oo booyado lagu soo qaado, waxaa canshuur ka qaadanaya gobolkay dekaddu ku taallo gaadiidkuna dhex marayo, shaqana ka helaya, oo sidaasaa fuustadaasu ka qayb qaadataa shaqaalaynta iyo miisaaniyadda gobolkaas. Marka fuustadaas la geeyo warshadda batroolka sifeysa, waxaa shaqo iyo canshuurba ka helaya gobolkaas iyo degmaday ku taallaba. Kaddib marka la soo nadiifiyay fuustadaas batroolka ah waxaa la keenaya kaltanka shidaalka, halkaasoo ay dawladda hoose ee degmadu cansuur ka qaadanayso, ka qayb qaadanaysa miisaaniyaddeeda. Canshuurahaas iyo canshuurta laga qaado shirkadaha batroolka iyo waxa ka yimaada ku nool iyo canshuuraha laga qaado shaqaalaha u shaqeeya ayayba miisaaniyadda dawladdaha dhexe ee dawladdaha

galbeedku ka samaysan yihiin. Haddii fuustadaas la waayana intaasoo idil waa la waayayaa. Madaxweynaha maraykanku, George W. Bush, wuxuu dhawr toddobaad ka hor ku dhawaaqay inay tahay inay maraykanku boqolkiiba labaatan dhimaan toban sano gudeheeda ilaa laba kun iyo toddoba iyo tobanka batroolka ay ku isticmaalaan. Taas macneheedu waxaa weeye inuu khalkhal wayn geli doono, hadday taas dhacdo, dhaqaalaha iyo nolol bulshadeedka maraykanka, oo khatarteeda leh.

Maalka dawladaha batroolka leh

Shanta doollar oo uu sucuudigu fuustada batroolka ka helay waxay isku noqoneysaa boqollaalo malyan oo doollar oo maalin walba ah, ayadoo uu sucuudigu soo saaro malaayiin fuusto maalin walba. Dawladaha OPEC waxay lacagtay ka helaan batroolka dhigtaan bangiyada dawladaha galbeed ee krishtaanka ah, gaar ahaan bangiyada maraykanka. Lacagtaas oo ah kumanyaal malaayiin oo doollar, banigiyada ay yaalliin waa laga amaahdaa, oo waxaa ka amaahda (kow) Dawladda dhexe ee maraykanka. (Laba) Dawladda maraykanku waxay ka amaahisaa dawladaha kale oo daynta soo waydiista, sida ruushka iyo kuwa kaloo badanba. (Saddex) Dawladda maraykanu waxay ka amaahisaa Bangiga Adduunka oo dawlado galbeed iyo bariba sii amaahiya, sida talyaaniga iyo kuwo kaleba. (Afar) Waxaa ka amaahda bangiyada kale ee maraykanka iyo dalal kaleba, oo sidaas ugu maal geliya dadkay macaamilada la leeyihiin, oo sidaas ku maal geliya mashaariicdooda dhaqaale, ha ahaadaan warshado iyo kuwo kaleba, ama ku gata guryo iyo gaadiid iyo waxay ku noolaan lahaayeenba, oo dul saar sii saarta, kana sii faa'iida. (Shan) Waxaa ka amaahda shirkadaha maraykanka, ha ahaadaan kuwa waawayn oo dayuuradaha, maraakiibta, baabuurta ama hubkaba sameeya, ama kuwa dhexe oo kompuutarka ama thallaajada wax qaboojisa, ama hooteellada, ama wadooyinka waawayn oo dalka isku xira dhisa, ama ha ahaadaan jaamacadaha wax laga bartaba. Sidaasuu dhaqaalaha dalalka krishtaanka ahi wuxuu ku dhisan yahay lacagta fuustadaas batroolka oo uu sucuudigu shanta doollar ka helay. Taas ayaa u sabab ah inaan indheheenna ku aragno maalin walba dalalkaas oo hormaraya, oo meel walba dhismo cusubi ka socdo, oo shaqo cusub la abuurayo, degmooyin cusubna la wada dhisayo. Dalalka batroolka leh oo laga keenayna, waxaan arkaynaa inuu dhaqaalohoodu ama meeshiisa sanooyin taagan yahay ama uuba hoos u dhacayo, oo ay guryaha iyo waddooyinkooduba usii duugoobayaan, una sii jajabayaan, dadkooduna uu sabool usii noqonayo! Wayba dhacday inay madax daladaha OPEC magaalada maraykanka ee New York yimaadeen inay lacagta bangiyadaas u tiillay wax uga qaataan ay doonayaan inay mashaariicda dalkooda ka so socota ku fuliyaan, oo lagu yiri inay lacagtoodu amaah ku maqan tahay, oo ay ayagoo fara maran dalkooda dib ugu laabteen. Intaas waxaa dheer inay dawladaha OPEC iyo raggooda maalka lehba ay shirkado iyo beero xoolo lagu dhaqdo ka iibsadaan dalalka galbeed ee krishtaanka ah oo ay sidaas hormarinta dhaqaalohooda dawr faccaal ah uga qaataan. Dawladaha OPEC oo daynta lagu lahaana waxay sababtu ahayd

(Kow) aydoo marka horeba mashaariicda loo samaynayo qiimohooda aad loo badiyo. (Laba) Ayadoo lacagta doollarka ay dawladda maraykanku markay xoogaa joogtaba qiimo tirta, oo qofkay boqol doollar bangiga u tiillay uu konton lahaado, wixii boqol doollar joogayna ay in ka badan laba boqol oo doollar gaarayaan, marka lagu daro sicir bararka lacagta oo sanadkiiba lagu qiyaaso afar ilaa shan boqolkiiba, oo uu qofku sidaas laba goor ku khasaarayo. (Saddex) Teknolojiyada mashaariicdaas oo la beddelo oo qaali sii noqta. (Afar) musuqmaasuq labada dhinacba ah.

Fiiro Gaar ah

Bishaan aan hadda ku jirno oo ah Muxarram ee sanadka kun afar boqol sagaal iyo labaan Hijriga, una dhiganta bisha jannaayo laba kun iyo isdeed, ayna kasoo wareegatay in sanad ka yar daabicidda koowaad ee kitaabkaan, qiimaha doollarka maraykanku aad ayuu hoos u dhacay, oo sanadkii lasoo dhaafay, tusaale ahaan, hal Euro wuxuu ahaa qiyaas hal doollar, maantana halkii Euro waa hal doollar iyo bar. Taasuu waxay keentay khalkhal dhaqaale oo adduunkoo idil saameeya, ayadoo lacagta doollarka wax lagu kala gato. Markaasuu mashruuca dal laga waday hadduu boqol joogay wuxuu hadda noqonayaa laba boqol oo sidaasuusan doollarku u goyn wuxuu sanadkii hore goyn jiray. Oo haddaan tusaale gaaban ku sheegno qofka baabuur kasoo gadanaya maraykanka iyo yurub wuxuu dawladahaasna u gadayaa ayagana baabuur. Taasu waxay kaloo keentay inay dawladaha batroolka leh iyo kuwa dollarka kaydsadayba sida shiinaha iyo ruushka oo kale, doollarku si dhakhso badan gacantooda uga soo baxo oo uu dawladaha galbeed usoo wareego, gaar ahaan maraykanka. Dhibaatadu waxay kaloo gaartay dadweynaha maraykanka laftiisa oo aan dibadda wax kasoo gadan karin ayadoo lacagtoodu qiimo beeshay, oo uu sidaas dadka saboolnimadu ku badatay. Waxay kaloo keentay inuu si aad kor u koco qiimaha wax kasta oo batrool salka ku haya, sida korontada, baansiinka, waxa warshaduhu farsameeyaan, wax beeraha kasoo go'a, dakhliga dadkuna uusan kordhin oo markaas halkaas dhibaato ka timaaddo.

Habka dhaqaale ee dawladaha galbeed

Shirkadaha dalalka galbeed in badan lacagtooda ay leeyihiin kuma shaqaystaan, ee intay lacagtaas bangi dammaanad ahaan u dhigaan ayay bangiga lacagtay ku shaqaysanayaan ka amaahdaan. Marka maalka dhaqaalaha dawladaha galbeed waa wada lacag ka dhalatay dayn laga qaatay bangiyada. Bangiyada lacagta taallana waxaa u badan lacagta dawladaha batroolka leh. Shirkaduhaasu ayaguna badeecadahay ka shaqeeyaan shirkadaha kalooy kasoo qaataan, waxay ayaguna ku shaqeeyaan amaah. Sidaasay hadday shirkadadi xumaato oo fallisto u noqoneysaa sida aqal udub dhexaadka laga siibay oo kale oo uu u dumayaa, ama tusbax furtay. Waxaa intaas u dheer tabarrucaat boqollaalo malyan oo doollar ah oo ay dawladaha Carabta ee batroolka lehi iyo ganacsatooduba ugu deeqaan hay'ado dalalka

reer galbeed, gaar ahaan jaamacadaha iyo hay'ado kala duwanba ilaa ay malaayiin siiyeen "Zoo" oo ah xeryaha ugaarta la daawado lagu xannaaneeyo. Sidoo kale bangiyada iyo warshadaha waawayn ee yurub iyo maraykanka waxaa wax ku leh ama wada leh oo sidaas dhaqaalaha dawladahaas u xoojiya dawlado ama maal qabeenno khaliija ka tirsan.

Kaydka batroolka adduunka

Batroolka adduunkaan waa dhammaanayaa, in kastoo uusan mar wada dhammaanayn, dalalkoo idilna uusan mar ka wada dhammaanayn. Dr. Sobroto wuxuu ii sheegay waxaa ka mid ah in inta u dhexeysa sanadyada laba kun labatan ilaa laba kun konton qiyaas uu batroolku dalalka qaarkood ka dhammaan doono, oo uu markaas shan iyo konton ilaa shan iyo lixdan batroolka adduunka o idil kusoo harayo sucuudiga oo keli ah. Taas macneheedu waxaa weeye in dhaqaalaha adduunkoo idili uu ku xirmi doono dhaqaalaha sucuudiga oo keli ah. Waxay kaloo taas keeneysaa inay dawlada reer galbeed ee krishtaanka ahi ciidammadooda militari sucuudiga si xoog leh u gayn doonaan, xukunkeedana ay gacanta ku dhigayaan si toos ah ama si dadbanba, ayagoo aan noloshooda ku aaminayn xattaa dawlad daba dhilif u ah, cabsi ay ka qabaan inay caruurtoodu caana waayaan. Dawladahaasu say batroolka ku helaan waxba la hari mayaan. Markuu batroolku yaraado waxaa ayaguna yaraanaya gaadiidka lagu safro, sida dayuuradaha, maraakiibta, baabuurta, treennada iyo waxa la midka ahba. Markaasay dawlada krishtaanka ahi waxay keeni doonaan, sidaan hadaba bilowgeeda u aragno, hab dadka safarka looga kala reebo, oo ku dhisan ama lacag, ama diin sida hadaba u socota oo muslimiinta dayuuradaha looga reebo ayagoo magacdooda lagu dhigay "no fly list" oo ah "liiska dadkaan loo oggolayn inay dayuuradaha raacaan". Sidaasuu safarka dalka gudihiiisa ama dalalka loo kala safro ama qaaradaha loo kala goosho u yaraanayaa, ayna dhiciba karto inay dayuuraduhu kaba joogsadaan inay u safraan dalal ama qaaradaha qaarkoodba. Toban sano gudohooda sicirka fuustada oo markaas sideed iyo toban doollar ahaa wuxuu kor u dhaafay toddobaatan doollar!

Fiiro Gaaro ah

Maanta waa isniin ay taarukhduna tahay lix iyo tobanka bisha Thuu Al Qacdah ee sanadka kun afar boqol iyo sideed iyo labaatanka Hijriga, una dhiganta lix iyo labaatanka bisha Nivembar laba kun iyo toddoba. Raadiyaha la yiraahdo WAMU oo ka hadla FM 88.5 (oo cinwaankiisa compiyuutarku yahay: "WAMU.ORG" dooda oo qoranna halkaas laga dalban karo ama 1800-871-7072) waxaa iska leh jaamacadda American University ee ku taalla Washington D.C. magaalo madaxda dalka maraykanka. Raadiyuhu wuxuu leeyahay barnaamij la yiraahdo Diana Rehm Shaw oo la sii daayo subax walba markay saacaddu tahay afar saac ee barqada ah 10:00 a.m. Barnaamijkaasu wuxuu keenaa oo ka dooda mawduuca laga hadlayo dad takhassuskoodu yahay iyo dadka oo telefoon usoo dira oo su'aalo waydiiyay

ama faallo ku dara. Maalinta isniinaad ee ay taarukhduna tahay lix iyo tobanka bisha Thuu Al Qacdah ee sanadka kun afar boqol iyo sideed iyo labaatanka Hijriga, una dhiganta lix iyo labaatanka bisha Nivembar laba kun iyo toddoba waxaan ka dhegeystay barnaamijkaas raadiyaha, mawduucuna wuxuu ahaa: "Oil production forecast: some industry experts are forecasting global oil production to plateau by 2012. We'll talk about oil supply and demand forecasts and their implications for both global security and climate change. Guests: (1) Matt Simmons, chair, Simmons & Co. International, a specialized energy investment banking firm and author of "Twilight in the Desert: The Coming Saudi Oil Shock and the World Economy." (2) David Kirsch, manager, market intelligence service, PFC, Energy, an energy consulting Firm. (3) Larry Chorn, chief economist, Platts, an energy and commodities information division of McGraw-Hill. (4) Mike Toman, director environment, energy, and economic development program at the Rand Corporation." Intaas macnohoodu waxaa weeye: "odorosid soo saarka saliidda. Qaar ka mid ah khubarada ku shaqo leh oo arrinkaan ku xeel dheer waxay odoroseen in tirada saliidda la soo saaro ay meesheeda ugu sarreysa gaari doonto sanadka laba kun laba iyo toban (waana mar ay hadda ka hareen shan sano), kaddibna ay hoos u dhici doonto oo ay sii yaraanayso. Waxaan ka hadlaynaa odorosidda soo saarka iyo baahida saliidda iyo siday u saameyn doonaan nabadgelyada adduunka iyo "environment" oo ay cimiladu ka mid tahay. Waxaa marti ah oo ka hadlaya (1) Matt Simmons, chair, Simmons & Co. International, a specialized energy investment banking firm and author of "Twilight in the Desert: The Coming Saudi Oil Shock and the World Economy." (2) David Kirsch, manager, market intelligence service, PFC, Energy, an energy consulting Firm. (3) Larry Chorn, chief economist, Platts, an energy and commodities information division of McGraw-Hill. (4) Mike Toman, director environment, energy, and economic development program at the Rand Corporation."

Waxay raggaasu yiraahdeen waxaa ka mid ah:

- Maanta waxaa lasoo saaraa shan iyo sideetan malyan oo fuusto maalin walba.
- Meesha ugu sarreysa soo saaridda oo la gaari doono waa boqol malyan oo fuusto maalin walba oo la gaari doono laba kun iyo laba iyo toban. Kaddibna halkaas ayay muddo ku sugnaanaysaa oo ay hadana hoos u dhacaysaa.
- Dalalka uu soo saarkooda saliiddu hoos u dhici doono waxaa ka mid ah maraykanka.
- Baahida saliidda loo qabana way sii kordhaysaa, gaar ahaan maraykanka Shiinaha, Mexico, Afrika.
- Soo saaridda korontada waxaa loo isticmaali karaa dhuxusha, dhuxusha oo saliid laga dhigana waa qaali cimiladana uma fiicna.
- Meesha ugu sarreysa ee saliidda la soo saaro hadda ayaaba la gaaray, kaddibna sii xoog leh oo qulqulato ah ayay hoos ugu dhacaysaa, taasoo sabab u noqon doonta inay nolosheennu si xoog leh oo dhib badan oo xad dhaaf ah oo qulqulato ah hoos ugu dhacdo oo u xumaato shan ilaa tobanka sano oo soo socda. Hadderba soo saaridda saliiddu hoos ayay u dhacday.

-Marka saliidda adduunka laga soo saaro saddex meelood loo qaybiyo laba qaybood waxay ku jirtaa oo laga soo saaraa dalal aan annaga saaxiib nala ahayn.

-Waxaa loo baahan yahay laba ilaa afar malyan oo fuusto ah oo maalin walba inta hadda lasoo saaro lagu daro.

-Dalka keli ah oo inta maqnaanaysa saliidda markuu soo saarku hoos u dhoco kabi karana waa Sucuudiga

-Soo saaridda saliiddu way badanaysay shan iyo tobanka sano oo u dambaysay, nolosha ceelashaasna waxay ku dhow dahay dhammaad.

-Markay meesha ugu sarreysa gaarto soo saariduu intee sanay meeshaas sarreysa ku sugnaanaysaa intayan hoos u dhicin?"

Warka khubaradaasu waxay taageereysa warkuu Madaxweynaha maraykanku sanadkaan laba kun iyo toddoba dhexdiisa ka yiri oo ah in toban sano gudeheeda, waana ilaa laba kun iyo toddoba iyo tobanka, saliidda gaadiidka loo isticmaalay boqolkiiba labaatan la dhimo. Warka khubaradaasu waa cad yahay inay nolosha marakanka iyo dalalka galbeedba ay aad u xumaanayso oo ay qulqulato geleyso shanta ilaa tobanka sano oo soo socota, markay saliidda la haysto yaraato oo hoos u dhacdo.

Korontada nuklearka lagu dhaliyo

Maadaama uu batroolku gabagabo yahay, ayay dawladda reer galbeed ee krishtaanka ahi waxay ayaamahaan bilaabeen, siday ugu dhawaaqeen dawladda maraykanka iyo ingiriisku, xoojinta dhismaha korontada lagu dhaliyo xoogga nuklearka. Isla markaasna waxay dawladdaasu si xoog leh u hortaagan yihiin oo u diidan yihiin inay dawladda kale xoogga nuklearka samaystaan oo ay sidaas koronto ku helaan!

Somaaliya iyo batroolka iyo uraaniumka ku jira

Dokumentiga ay ka mid yihiin "Report on General Survey of British Somaliland 1946" ayna daabacday British Military Administration, Somaliland Protectorate, 1946", laguna daabacay Cadan iyo "Somaliland, British Misc.Govt. Publications 1944-1957", Genealogies of the Tribes of British Somaliland and Majertein" ee 1944 ayna daabacday Military Government, Somaliland Protectorate iyo kuwo la xiriiraba waxaan ka helay ayagoo film lagu masawiray Department of Photoduplication of the University Of Chicago Library, Chicago, Illinois. Waxaan filimkaas ka dalbaday maktabada Jaamacadda Harvard Law School oo aan ka shaqayn jiray, waxayna iigu keentay habka interlibrary loan. Warbixinnadaas waa kuwa ay dawladda ingiriiska wakiilladeeda Hargeysa fadhayay uga direen dawladdooda London kana warbixineysa gobolladey Soomaaliya ka gumaysan jireen xagga dadka, khayraadka iyo biyahaba iyo daaqa iyo dhulka, qaarkoodna loo yaqaanno "Hunt Report" ayadoo uu dhigay Colonel John A. Hunt. Warbixinnadaasi waxay meelo badan uga hadleen batrool dhulka isaga soo butaacaya oo iska dureera aagga degmada Cerigaabo. Warbixintu waxay

bogga lixaad ku leedahay: "An Oil show at Subera..trapped oil accumulation" oo macneheedu yahay: "Saliid ayaa lagu arkay Subera (oo ka tirsan Canqor)..saliid ku aruurtay oo ku xabbisan." Bogga kow iyo tobnaad: "An Oil show at Subera (10 29' 46 06')", oo isla macnaha kore leh. Bogga laba iyo tobnaad: Subera: "Biyaa waxay kasoo daataan 30' ka kor meeshay saliiddu kasoo butaaco." Bogag kalena wuxuu ka warramayaa inay meesha la yiraahdo Canqor saliddu iska soo butaaco iyo inay lagama maarmaan tahay inay shirkadaha saliidda ka ganacsada loo yeero si ay u baaraan.

Degmooyinka Shiikh iyo Barbara dhexdooda, marka buurta Shiikh hoos looga dhaadhaco waxaa ku taalla bar la yiraahdo "Xidhka Saliidda" oo Biyo Gureay agteeda ah, Barbarana qiyaas soddon kiiloomitir u jirta ayadana saliiddu iska soo butaaco, oo mar aan halkaas maray ay dadka deggani ii sheegeen inay xoolohooda cadhada uga dhayi jireen. Bartaas deegaankeeda waxaa kasoo ura batroolka. Beelaha la yiraahdo Golol iyo Garacad ee gobolka Mudug oo ka mid ah degmooyinka Looboge ay degaan waxay aabayaalkeen noo sheegeen inay saliddu dhulka kasoo butaaci jirtay oo ay markaas xoolaha cadhada qaba ku dhayi jireen oo uga daaweyn jireen. Marka shaki kuma jiro oo la iskuma haysto inay Soomaaliya saliidi ku jirto iyo macaadin kaleba oo qiimo badan, oo la wada ogsoon yahay. Macdanta la yiraahdo Uranium oo badan ayaa ku jirta, laguna sheegay gobollada Buur Hakaba/Buur Haybe iyo Gal Guduud. Uraaniyumkana waxaa laga sameeyaa xoogga korontada iyo bambooyinka atoomikadaba. Dalalka reer galbeedna waxay ku dadaalaan inayan macdantaasu gelin gacanta cid aan ayaga ahayn.

Marriinka maraakiibta batroolka sida

Dhammaatka sandka kun sagaal boqol sagaal iyo sideetanka iyo sanadka ku xigay ee kun sagaal boqol sagaashan waxaan ahaa Agaasimaha Guud ee Waaxda Arrimaha Siyaasadda ee Ameerika iyo Yurubta Galbeed ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya. Subax walba Wasiirka Arrimaha Dibadda, ama Wasiiru Dawlaha ama Xogyaha Guud ee Wasaaraddu, intaan shaqada maalintaas la guda gelin wuxuu xafiiskiisa ku shirin jiray Agaasimayaalka Guud oo dhan, uuna warbixin ku siin jiray waxa adduunka ka dhacay maalinta iyo habeenka lasoo dhaafay, gaar ahaan dawladaaha aan xiriirka leenahay, iyo arrimahay dawladaahaasu danaynayaan oo ay danjirayaalkooda Muqdisho fadhiya danaynayaan. Shir aan xafiiska Wasiirka Arrimaha Dibadda sidaas isugu nimid, ayna goob joog ka ahaayeen saraakiil sare ka socda Wasaaradda Gaashaandhigga Soomaaliya, qodobbada uu nooga warramay waxaa ka mid ahaa inuu yiri: "maraakiibka waawayn oo batroolka qaada oo la yiraahdo "Supertankers", batroolkana kasoo qaada Gacanka Carbeed ma mari karaan gacanka Suwayz oo way ka waawayn yihiin. Badwayntana ku beegan Gacanka Cadmeed iyo Badweynta Hindiyaana ma mari karaan oo waxay khatar u yihiin inay kala jabaan. Marka waxay maraan xeebta Soomaaliya, oo uu qofka xeebta fadhiya indhihiisa ku arki karo. Marka, hadduu wiil yar oo Xaafuun fadhiya xabbad bazuuka ah ku tuuro, maraakiibtaas batroolka sida oo sida boolaboolada isu daba jooga, way

go'ayaan, sababtuna ay tahay shirkadda caymiska ee Lloyd of London ayaa qiimaha caymiska sare u qaadaysa. Markaasuu batroolka loo sido Ameerika iyo Yurub joogsanayaa. Dawladda maraykunkana arrinkaas way nagala hadashay iyo nabadgelyada maraakiibta batroolka u sida, annaguna waxaan u sheegnay inayan wax dhibaato ah la kulmi doonin. Adinkuna sidaas u sheega markaad danjirayaalkooda la kulnataan inay Dawladda Soomaaliya nabad gelyada maraakiibtaas kafaalo qaadayso."

In yar kaddib waxaan la kulmay oo Wasaaradda iigu yimid ninka safaaradda maraykanka u qaabilsan arrimaha siyaasadda, oo arrinka maraakiibta aan isku soo qaadnay, aniguna aan u sheegay inay dawladda Soomaaliyeed nabad gelyada maraakiibtaas kafaalo qaaday. Isaguna wuxuu yiri: "batroolkaasu waa nafteenna, adinkana nafteenna idinku aamino maynno." Goobta ay maraakiibtaasu maraan oo laga hadlayana waa gobolka hadda la baxay "Puntland". Tan iyo intay Qarammada Midoobay iyo Gaashaanbuurta dawlada reer galbeed Soomaaliya ku duuleen waxaa Puntland iyo xeebaha Soomaaliyaba ilaaliya maraakiibta dagaal ee dawladahaas. Xagga Puntland waxaa jooga maraakiibta dagaal ee maraykanka, xagga Badda Casna kuwa jarmanka oo dagaal usoo baxay markii ugu horreysay tan iyo siduu u dhammaaday dagaalka labaad ee adduunku sanadka kun sagaal boqol shan iyo afartanka looga adkaaday. Waxaa ayaguna jogga maraakiibta fransiiska.

Xisaarka Jaziiradda Carabta saaran

Wagtigaan aan hadda joogno ee sanadka laba kun iyo toddoba Jaziiradda Carabta waxaa saaran xisaar bir ah oo ku ceegsan sida dugaagad oo kale, oo dhan walba uga hareereysan. Dhanka gacanka Carbeed oo Jaziiradda iyo Iiraan u dhexeeya waxaa ku sugan maraakiibta dagaalka ee maraykanka iyo ingiriiska, ayna ka mid yihiin kuwa dayuuradaha xambaarsan. Dhanka koofureed ee Badda Cummaan iyo Cadan waxaa jooga maraakiibta dagaalka ee maraykanka iyo jarmanka. Dhanka Badda Cas waxaa jooga maraakiibta dagaalka ee maraykanka, jarmanka iyo fransiiska. Dhanka Badda Cad ee Mediterraneanka waxaa jooga maraakiibta dagaalka fransiiska, iyo talyaaniga, iyo spaanishka iyo griigga. Wabiyada Furaat iyo Dijlah waxaa ayaguna wareegayaa maraakiibta dagaalka ee maraykanka iyo ingiriiska oo wabiyada loogu tala galay. Maraakiibtaas dagaalku waxay joojinayaa markab kasta oo u socda xagga Jaziiradda Carabta iyo Soomaaliyaba, oo intay fuulaan baarayaan, ayagoo raadinaya hub ama lacag saaran, ama rag muslimiin ah oo gurmud u ah muslimiinta goobahaas lagu weeraray oo ay ka mid yihiin Soomaaliya, Ciraaq iyo Falasdhiiin. Ujeedadu waa cuna qabatayn buuxda, oo aan naxariis lahayn, ayna doonayaan inay dadkaasu gaajo u dhintaan.

Fiiro Gaar ah

Bogga internetka (www.globalresearch.ca) waxaa iska leh ninka la yiraahdo Professor Michael Chossudovsky oo ah Professor of Economics University of Ottawa, caasimadda arliga Kanada, wuxuuna yahay Agaasimaha The Center

for Research on Globalisation a nonprofit organization based in Montreal. Boggaasu waxaa maqaaladiisa tirsigeedu yahay 7693 dhigay Richard K. More, lana daabacay December 27, 2007.

Maqaaladaasu waxay ka hadlayso waxaa ka mid ah in markuu batroolku yaraaday ay dawladaha galbeed doonayaan inay gallyayda ka dhaliyaan alkohol "Ethanol" baansiin ahaan baabuurta shidaal looga dhigo. Taas ayaana u sabab ahayd inuu Madaxweyne Bush booqasho ku tegay arlida Brazil iyo dawlad kale oo koofurta Ameerika si uu ula saxiixdo heshiisyo ku saabsan gadashada gallyayda. Markaasaa Madaxweyne Bush markuu dalalkaas tegay lagu mudaaharaday oo loo sheegay inuu doonayo inuu cunnadooda kala wareego oo ay sidaas ayagu ku gaajoodaan. Wuxuu kaloo sheegay inay taas tahay xamlada wayn oo uu Gore, Madaxweyne ku xigeenkii hore ee maraykanku, qaaday oo uu ku daba dhuumanayo wuxuu ku magacaabay "Global warming". Richard K. More wuxuu bogga saddexaad ku yiri: "..In this context, the net consequence of a major biofuel agenda comes down to intentional genocide. In order to provide marginally more fuel to the over-consuming industrialized nation, untold millions will starve in the third world, in addition to those untold millions that are already starving. The marginal energy gain is so small by comparison, that we must accept that the biofuels agenda is *primarily* about genocide." Hadalkaas macnihiisu waxaa weeye: "natiijada ka dhalanaysa ajeendada waa qorshahee ah in badarka shidaal laga dhaliyo waxaa weeye inuu yahay genocide oo ah ummad dhan in la dilo oo la xasuuqo. Si in yar oo aan wax tar lahayn loogu helo dawladaha xagga warshadaha ku hormaray shidaal badarka laga sameeyey, waxaa gaajo u dhimanaya in aan la sheegi karin oo malaayiin dad ah oo adduunka saddexaad ku nool, oo ku darsamaya malaayiinta aan la sheegi karin oo hadda gaajo u dhimata. Shidaalka badarka laga helayo wuxuu u yar yahay aad. Marka waa inaan garannaa oo oggolaannaa inuu ajeendada laga leeyahay in badarka shidaal laga dhaliyo uu yahay qorshe genocide oo ummadu lagu xasuuqayo oo gaajo loo laayo." Waa intaas warkaan kasoo qaadannay.

Maantadaan aan joogno meel kastoo adduunkaan ka mid ah qiimaha cunnadu cirka ayuu isku shareeray, oo gaajo ayaaba adduunka ku faaftay, Allaha muslimiinta ka duwee.

Warbixin ay Qarammada Midoobay dhawr toddobaad ka hor soo saartay waxay ku sheegtay inay, tusaale ahaan, Ciraaq uga dhinteen gaajo iyo daddarro in ka badan inatay xabbadda dagaalku dishay! Dadka sidaas ku dhintayna waxaa ugu badan caruur, waayeel, haween iyo bukaan.

Cabsida krishtaanka ee jizyada iyo addoonsi

Dawladaha krishtaanka ahi waxay aad uga baqayaan waxaa ka mid ah laba waxyaalood oo kala ah (Kow) in dadka krishtaanka iyo yuhuudda ah ee dalalka Carbeed ku nool jizyo iyo addoonsi lagu soo rogo, sida Diinta islaamku qabto, oo ay bilowga islaamka u ahaan jirtay. (Laba) inuu islaam ku xoogaysto dawladaha reer galbeed ee krishtaanka ah, oo ay markaas xukunka kala wareegaan, oo ay markaas krishtaanka iyo yuhuudda deggan jizyo iyo

addoonsi kusoo rogaan. Cabsidaas iyo walwalkaas siyaasiyiinta iyo madaxda reer galbeed way ku dhawaaqeen, qalabkooda warbaahintuna wuu faafiyay. Intaan bilowga kun sagaal boqol iyo sagaashanka baare shareecada islaamka ka ahaa Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge, gobolka Massachusetts ee maraykanaka ayaa waxaa xafiiskayga iigu timid gabar yuhuudiyad maraykan ah oo iga waresatay meeshay baariddaan ku wadnay mascruuca aan ka shaqaynayay marayso iyo goorta natiijada baariddaas kitaab ahaan loo daabacayo, ayadoo doonaysay inay kitaabkaas nuskhad ka hesho. Mashruucaasna waxaa maal geliyay bangiga ganacsiga sucuudiga, oo jaamacaddaas weydiistay inay u baarto saamiyada shirkadaha reer galbeed, laguna kala gato New York Stock Exchange, oo shareecada islaamka waafaqsan oo ay maalqabeennada muslinka ahi lacagtooda gashan karaan. Natiijada baaristaas waxaa loo daabacay kitaab ahaan, lana yiraahdo "Islamic Law and Finance", anigana inaan baare u ahaa lagu xusay boggiisa xv, laguna daabacay Kluwer Law international, The Hague, London, Boston, kun sagaal boqol sideed iyo sagaashan. Kitaabkana waxaa dhigay Frank E. Vogel, oo Kitaabu Al Bayci ka dhigay Harvard Law School, isla markaasna ah Agaasimaha Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School, iyo Samuel L. Hayes, III oo macallin ka ahaa Harvard Business School, dhigi jirayna Investment Banking, hadana dhintay. Gabdhaasu waxay ii sheegtay inay dhigayso thesiskeeda, oo ah hawsha shahaadada qalin jebinta wax barashada sare oo cinwaankiisu ku saabsan yahay jizyada iyo addoonsiga krishtaanka iyo yuhuudda ay muslimiintu doonayaan inay ehelu kitaabka kusoo rogaan oo soo cusbooneysiyaan, siday ayadu tiri. Waxayna dooneysay inay ogaato inaan kitabakaan dhigaynno arrinkaas wax ka dhigay si ay hawsha dibloomkeeda ugu darsato. Gabadhaasu waxay dhigaynaysay jaamacadda Ivy League ka mid ah oo ay kasoo baxaan madaxda dalkaan maraykanku, kuna taalla New Haven, ee gobolka Connecticut, ee dalka maraykanka, lana yiraahdo Yale.

Fiiro Gaar ah:

Xaasidnimada dadka krishtaanka ah ku jirta oo ay u qabaan Carabta muslimiinta ah oo ayan qarsan karinba waxaa kaloo ka mid ah inaan dalalka Carabta batroolka leh ayan jirin canshuur dadka dakhligood ama badeecadahaba laga qaado, ayna kuba hadleen in samayn doonaan wax kasta si dalalkaasna canshuur loogu soo rogo. Dakhliga dawladaha galbeed wuxuu ka kooban yahay canshuurta dadka dakhligooda iyo badeecaha laga qaado, dalalka qaarkoodna, gaar ahaan yurub canshuurto way ka badan tahay boqolkiiba konton inta qofka soo gasha.

Taagdarrada itaalka iyo talada dawladaha galbeed

Dawladaha krishtaanka ah ee maanta ka dhisan galbeedka ma laha hoggaamiyayaal aragti dheer leh iyo geesinnimo iyo kelyo adayg ay ku fuliyaan siyaasaddooda ku foorarta islaamka iyo khayraadkuu Ilaahay

Tacaalaa siiyay. Madaxdooda kuma jiro nin kartidaas leh iyo geesinnimadaasba. Markaasay waxay isu uruursadeen si gaashaan buur ah oo ayan xubneheedu isku ujeedaba ahayn, isku tabarna ahayn, quluubtooduna ay kala jeedo. Waxayna ku gabbanayaan erayo aan wax macna ah lahayn, sida "argagixiso", "dimuqraadiyah" "global warming ama cilimo" (ujeedada ka dambaysana ay middaan tahay inayan dawladaha kale oo khayraatku dhulkooda ku jiro samaysan warshado ay dhaqaalohooda ku hor mariyaan, hadday samaystaan yaa badeecadooda ayaga ka gadanaya?), "dib u dhisid" (oo ah in dhaqaalaha iyo guryaha iyo warshadaha, iyo meelaha korontada laga dhaliyo iyo warshadaha biyaha iyo isbitaallada iyo dugsiyada iyo darbi kasta oo taagan iyo waddooyinka dawladaahas ay ku duuleen inay burburiyaan) "askartoodana u bixiyay "kuwa nabadda ilaaliya", "Xasilin" oo kale. Sidaas ayayna gaaladu weligeed ahayd tan iyo zamanka duullaanka Al Axzaabu, oo ah gaashaanbuur, ee sanadka shanaad ee Hijrada, markay qabaa'ilka kala duwan ee gaalada Carbeed iyo yuhuuddu isu gaashaanbuursadeen colaadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna Al Madiinah Al Munawwarah kasoo gaddomeen, siduu Ilaahay Tacaalaa noogu sheegay Suuratu Al Axzaabi ayagoo caraysan oo aan ujeedadooda gaarin, wuxuuna yiri: **"Waradda Allaahu allathiina kafaruu bighaythihim lam yanaaluu khayran wa kafa Allaahu al mu'miniina al qitaala wa kaana Allaahu Qawiyyan Caziizan(25)Wa anzala allathiina thaaharuuhum mmin ahli al kitaabi min sayaasiihim wa qathafa fii quluubihimu al rrucba fariiqan taqtuluuna wa ta'siruuna fariiqan(26)."** Aayadda macneheedu waxaa weeyey: "Ilaahayna meeshay ka yimaadeen ayuu u celiyay kuwa gaaloobay oo axzaabta gaashaanbuurta ah oo Al Madiinah soo weeraray ayagoo caradooda qaba oo heli waayey waxay doonayeen, waana Quraysh iyo Ghadhafaan. Ilaahay ayaana mu'miniinta uga filnaaday dagaalka, Ilaahayna waa xoog badan yahay oo waa Caziiz lagama adkaade ah(25)." Waaba tuu Ilaahay Tacaalaa ku yiri Suuratu Al Xashri: **Laa yuqaatiluunakum jamiican illaa fi quran muxassanatin aw min waraa'i juduri ba'suhum baynahum shadiidun taxsabuhum jamiican wa quluubuhum shattaa thaalika bi annahum qawmun Ilaa yacqiluuna(14)** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "idinlama dagaallamayaan ayagoo dhan, oo idiin soo bannan bixi mayaana, balse waxay gelayaan tuulooyin darbi ku wareegsan yahay oo qalcado ah, ama ayagoo darbi gadaashiis jooga mooyee. Ayaga dhexdooda ayaa waxaa taalla colaad iyo cadaawad xoog leh oo way is neceb yihiin. Waxaad mooddaa inay isla jiraan, quluubtooduna way kala tagsan tahay, maxaa yeelay waa dad aan caqli lahayn(14)."

Sidaasayan ugu jirin dawladaha krishtaanka ah mid keligeed soo fool saari karta dawlad Carab ah, Soomaaliya oo maanta ugu tabar daranba ha ahaatee.

Israa'iil

Dadka maanta yuhuudda loo yaqaanno waa dhashay Nabi Yacquub, ina Nabi Isxaaq ina Nabi Ibraahiim ayaga iyo Nabigeennaba Calayhimussalaatu Wa Al Ssalaamu. Carabtuna waa dhasha Yacquub adeerkiis Nabi Ismaaciil ina Nabi

Ibraahiim, Calayhimussalaamu. Carabta iyo yuhuuddu gobolkaas arliga Falasdhiin ayay nabad ugu wada noolaayeen kumanyaal sano, ayagoo ah ubadka nin iyo wiil uu adeer u yahay, iyo siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sharciyeeyey ugana dardaarmayba. Markay dawladaha krishtaanka ah ee yurub Baytu Al Maqdis qabsadeen sanadka kun sagaal iyo sagaashanka miilaadiga ah, ayay yuhuudda degganaayd laayeen, intayan dilinna ay caraareen. Krishtaanku wuxuu Quddus haystay in ku dhow boqol sano, kaddibna waxaa sanadka kun boqol toddoba iyo sideetan ka saaray Suldaanka Salaaxu Al Ddiini Al Ayyuubi. Krishtaanku waxay u neceb yihiin yuhuudda nacayb ka badan oo ka qoto dheer midkay muslimiinta u hayaan, sababtuna ay tahay inay aaminsan yihiin inay yuhuuddu dishay ninkay ilaaha ahaan krishtaanku u caabudaan, oo ah Ciise inay Maryama Rasuulka Ilaahay, Calayhissalaamu. Ilaa kun sagaal boqol shan iyo lixdanka waxaa salaaddau axadda tukadaan krishtaanku ka mid ahayd in khudbadda la akhrinayo yuhuudda lagu habaaro! Sidaasaa waxaa krishtaanka iyo yuhuudda ku dhex yaalla colaad iyo nacayb aan weligood go'ayn. Yuhuuddu waxay lahaayeen inta u dhexeysay Nabi Muuse iyo Nabi Sulaymaan ina Daauid, Calayhimussalaamu, boqortooyo iyo dawlad xoog leh iyo Kitaab iyo Nabiyo iyo Rusul iyo boqorro. Markaasay Sulaymaan dabadiis Diinta islaamka ka baxeen oo gaalobeen, uuna markaas Ilaahay Tacaalaa boqortooyadoodu dumiyay oo burburiyay. Weligood dambena yuhuudda boqortooyo u soo noqon mayso. Dalalka galbeed iyo maraykanaba yuhuuddu kuma laha nufuud iyo awood siyaasadeed iyo dhaqaale toona, waxaase u taalla colaad iyo nacayb ay krishtaanku qalbiga ugu wada sidaan. Manntase waxaa jirta boqortooyada krishtaanka. Waxaana u daliil ah inuu Ilaahay Tacaala Suuratu Al Israa'i noogu sheegay in kaddib markay gaalo noqdeen asnaamta caabuda: **"Wa qadaynaa ilaa Banii Israa'iila fii Al Kitaabi latufsidunna fii al ardi marratayni walataclunna culuwwan kabiiran(4)Fa ithaa jaa'a wacdu uulaahumaa bacathnaa calaykum cibaadan lanaa uulii ba'sin shadiidin fa jaasuu khilaala al ddiyaari wa kaana wacdan mafcuulan(5)."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaan Banii Israa'iil u xukminnay Kitaabka dhexdiisa, ahna Al Lawxu Al Maxfuuthu, waxaad macaasi ku fasaadineysaan arliga dhexdiisa laba goor, markaasaad kibreysaan dadkana dulmineysaan, iskibirin weyn(4)Markuuna yimaado labadaas goor tooda koowaad oo horreysa waxaan idinku soo direynnaa addoommo aan leennahay oo xoog badan oo idinku soo duulaya oo idin laynaya ilaa ay guryihiinna dhexdooda idiinku soo galaan oo idinku laayaan. Waana yabooh ahaanaya oo dhaboobaya(5)." Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu kusoo diray Bukhtanassar, boqorka Baabil ee Ciraaq oo sidaan ku falay. Al Madiinah Al Munawwaraha waxaa soo degay, waana waa hore oo hadda ma deggana, qabaa'il yuhuud ah oo kasoo cararay boqorka Baabil ee Bukhtanassar, markuu inta boqortooyada reer Bani Israa'iil iyo tan Yuhudda ka adkaaday, waana Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu markuu dhintay dabadeed (Wuxuuna dhintay kun iyo boqol iyo saddex iyo sagaashan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) dumiyay, dadkiina addoonnimo arligiisa Baabil ugu kaxaystay. Ciqaabtaan ku dhacday waa

midday nooga warrantay Aayadaha kariimka ah ee afaraad iyo shanaad ee Suuratu Al Israa'i, Qabaa'il kaloo reer Israa'iil ahna waxay ayaguna soo degeen marar kale, oo qaarkood intay soo xajjiyeen ayay Al Madiinah waxay ku arkeen tilmaameheeda ku dhignaa kitaabkooda Tawraadda, iyo inay tahay meeshuu usoo haajiri doono Nabiga aakhiru zamanka.

Al Imaamu Caashuur ee reer Tuunis wuxuu tafsiirkiisa Al Taxriir wa Al Tanwiir ku yiri: "Marka koowaad waxay ahaayeen dhacdooyin isku xigxiga oo taariikhda loo yaqaanno "qafaalka Baabil", oo uu boqorka Baabil Bukhtunassar iyo Ashuur kusoo duulay arliga Uur Shaliim (Quddus). Duullaanka koowaad wuxuu ahaa sanadka lix boqol iyo lix Ciise hortiis, oo uu jamaacaad badan oo yuhuud ah qafaalay, waana tan loo yaqaanno "qafaalka koowaad". Markaasuu hadana mar labaad kusoo duulay ahna tan loo yaqaanno "qafaalka labaad", kii horena ka wayn, ahaana sanadka shan boqol sideed iyo sagaashan Ciise hortiis, uuna ku qafaalay boqorka boqortooyada Yahuuthaa iyi jamac badan oo israa'iiliyiin ah, qaatayna ahabka yiillay haykalka Sulaymaan (masjidka) iyo waxa qaaliga ah oo dhexdiisa yiillayba. Qafaalka saddexaad wuxuu ahaa sanadka shan boqol sideed iyo sideetanka Ciise hortiis, oo u Bukhtunassar kusoo duulay oo uu shacbiga yuhuudda oo idil qafaashay, hayklaka Sulaymaanna gubay, oo ay Quddus kharaabtay."

Markaasey degeen ayagoo Nabigaas Calayhissalaatu wa Al Ssalaamu sugaya. Qaarkoodna waxay usoo carareen oo usoo guureen markuu boqorka Rooma boqortooyada Bani Israa'iil ka adkaaday oo uu dalka iyo Baytu Al Maqdis burburiyay lix boqol iyo afar iyo soddon sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waana marka labaad ayna noo sheegtay Aayadda toddobaad oo isla Suuratu Al Israa'i: **"Fa ithaa jaa'a wacdu al aakhirati liyasuu'uu wujuuhakum wa li yadkhuluu Al Masjida kama dakhaluuhu awwala marratin wa liyutabbiruu maa calaw tatbiiran (7)."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Markuu yimaado marka dambena, waana markay damceen inay Nabi Ciise Calahissalaamu dilaan, waxaan idinku soo direynnaa addoomadeenna xoogga leh, oo ah Rooma iyo Furus oo markaas wajiyadiinna doorinaya oo foolxumeynaya, kuna foolxumaynaya tiiraanyo iyo calool xumo kaddib marka la laayey oo guryohooda laga saaray oo la qafaashay, iyo inay soo galaan Baytu Al Maqdis iyo hareerihisa siday usoo galeen markii hore, ayna halaagaan intay ka adkaadeen oo idil halaagid dhab ah(7)." Al Imaamu Caashuur wuxuu yiri: "Markay yuhuuddu Baabil kasoo noqotay, ayadoo ay furustu Baabil ka adkaatay oo burburisay, ayna Quddus dib u dhiseen ayay waxay noqdeen mustacmarad roomaanka. Markaasay roomaanka ku keceen. Markaasuu boqorka roomaanku wuxuu usoo diray ciidan uu wato taliyaha magaciisu yahay Siisyaanuus iyo wiilkiisa Dhiidhuus, sanadka afartanaad ee Ciise ka horreysey. Markaasay Qyuduus burburiyeen, masjidkana gubeen, uuna Dhiidhuus qafaalay ilaa boqol kun oo yuhuud ah, yuhuudana dagaalladaas looga dilay ilaa hal malyan oo qof. Markaasay hadana magaalada dib u dhiseen, markaasuu boqorka roomaanku Adriyaanus kusoo duulay oo uu burburiyay, uuna arligeeda ku daadiyay cusbo badan si ayan beero dambe uga bixin, taasna ay dhacday sanadka boqol shan iyo soddon miilaadiga. Sidaasay amarka yuhuuddu ku dhammaaday."

Cadnaan iyo Bukhtunassar

Bukhtunassar wuxuu ahaa Boqor cajan ah oo Baabil u taliyay, caasimaddiisuna ay ahayd **Niinawaa**, magaaladii **Nabi Yuunus bin Mattaa**, Calayhissalaamu, oo Waqooyiga Ciraaq ku taalla. Kaddibna wuxuu caasimad ka dhigtay, markuu Boqorkeedii ka adkaaday, **Baabil** (macnaha Baabil waa Baabu oo ah albaabka iyo Iil oo ah Ilaahay, sida Quddus loo yiraahdo oo kale Baytu Iil oo ah Guriga Ilaahay), oo ayaduna dalka Ciraaq ku taalla. Bukhtunassar wuxuu Boqor ahaa inta u dhexeysay kun iyo boqol iyo lix iyo konton sano ilaa kun iyo boqol iyo sideed iyo soddon sano ka hor dhalashada Nabi Muaxammad, Sallallahu Calayhi Wasallam. Zamankiisaas waxaa Boqortooyada Nabdhiiyinta Boqor u ahaa Cadnaan bin Udd, oo ah faraca Nabi Ismaaciil, iyo awoowaha labaatanaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam. Bukhtunassar wuxuu kusoo duulay oo uu burburiyay, sidaan hore u soo sheegnay, Dawladdii Yuhuudda, kaddibna wuxuu usoo baxay la dagaallanka Carabta uu Cadnaan madaxa u ahaa. Cadnaan iyo Bukhtunassar waxay isaga horyimaadeen meesha la yiraahdo **Xasuuraa'** ee arliga Falasdiin, baddana ay ka xigaan Cakkah iyo Xayfah, (waa saadka shiinka ku xiga). Intuusan xarbiga u bixin, Cadnaan wuxuu labadiisii wiil oo uu dhalay oo kala ahaa **Macadd**, oo markaas laba iyo toban sano jira ahna awoowaha sagaal iyo tobnaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, iyo **Cakk**, u diray arliga awoowayaalkiisu ka yimaadeen ee Makkata Al Mukarramati. Dagaalkaas khasaaroooyin ayaa laba dhinacba gaaray, wayna kala adkaan waayeen. Markaasuu Boqor walba dalkiisa dib ugu laabtay, isagoo aan guul iyo jebin midna wadin. Bukhtunassar Carab wuu ka adkaan waayey siduu yuhuudda uga adkaaday oo kale. Al Zarqaanii wuxuu isagoo Al Qasdhalaaanii sharxaya yiri: "Ibnu abii al Dunyaa wuxuu wariyay oo yiri: "Bukhtunassar, oo ahaa Boqorka Baabil, kaddibna yuhuudda inta soo weerara jebinaya, Masjidka Al Quddusna dabka qabadiinaya, siday nooga warrameen Aayadaha shanaad iyo lixaad ee Suuratu Al Israa', wuxuu tababaray laba libaax, markaasuu god ku tuuray sida ceel guray oo kale ah. Markaasuu (Nabi) Daaniyeel inta keenay uu ku kor tuuray, ayanna libaaxyadu wax dhibaato ah u geysan, sida Xadiithka kusoo aroortay. Al Bayhaqii wuxuu wariyay in: "**Anna Daaniyeel dhurixa fii al jubbi wa ulqiyat calayhi al sibaacu, fa jacalat taxlusuhu wa tabasbasu ilayhi, wa arsala Allahu lahu malakan bi dhacaamin**", oo macneheedu yahay: "Daaniyeel waxaa lagu riday ceel, waxaana korkiisa lagu tuuray dugaagga dadka cuna. Markaasey markay u tagtay carrabyadeeda Daaniyeel jacayl ay u qabto ku leefleeftay, farax daraadiisna ay saymahooda u dhaqdhaqaaqiyeen. Ilaahayna wuxuu usoo diray malag cunno u keenay." Ibnu abii al Dunyaa wuxuu wariyay Xadiithkaan: "**Anna al malika allathii kaana Daaniyeel fii suldhaanihi qaala lahu munajjimuhu: "Yuuladu laylata kathaa wa kathaa ghulaamun yufsidu mulkaka". Fa amara bi qatli man yuuladu tilka al laylata. Falammaa walada Daaniyeel alqathu ummuhu fii ajmati asadin. Fa baata al asadu wa labwatuhu yaxlusaanuhau wa najjaahu Allahu**", oo macneheedu yahay: "Boqorka uu Daaniyeel

Dawladdiisa ku dhex noolaa ayay waxay raggiisa xidigaha ku faaliya ku yiraahdeen: "Habeenka sidaas iyo sidaas ah waxaa dhalan doona wiil boqornimadaada fasaadinaya oo boqortooyadaada duminaya. Markaasuu wuxuu boqorku amar ku bixiyay in wiilasha habeenkaas dhasha la dilo. Markuu Daaniyeel habeenkaas dhashay ayay waxay hooyadiis ku tuurtay jiq uu libaax deggan yahay. Markaasuu aarkii iyo gooshiiba -oo ah libaaxadda dheddigga ah- ay Daaniyeel carrabkooda ku leefleefeen jeceyl ay u qabaan daraadiis, Ilaahayna wuu badbaadiyay".

Dawladda Israa'iil maanta la yiraahdo oo arliga Falasdhiiin ka dhisan waxay ka kooban tahay qaxooti yuhuud ah oo uu ingiriisku ka kala keenay dalkiisa, jarmanka, Polanda, ruushka iyo dalka kaloo yurub, iyo qaar kasoo guuray dalalka Carabtaba iyo maraykankaba. Dadkaasuu waa dhawr malyan oo qaxooti ah, oo sabool ah, oo aan isku af ku hadlin, isku diin ahayn, is neceb oo Mashington DC laga maamulo. Dawladdoona waxay ku jirtaa gacanta qaxootiga kasoo qaxay yurub iyo ameerika, oo kuma jiro mid kali ah oo yuhuudda dalalka Carabta oo kale ama Falasdhiiin degta. Kumana jiro nin Carab ah oo Falasdhiiin u dhashay! Wasiir koowaadna wuxuu mar walba ka yimaadaa yurub. Carabtuna waa laba boqol oo malyan, oo isku af ah oo isku Diin ah, isku Nabi iyo Kitaab iyo isku Qiblo ah. Waaba tuu Xasan Aadan Samatar marka Muqdisho lagu qabtay shirka madaxweynayaasha dawladdaha Afrika kun sagaal boqol afar iyo toddobaatanka uu heeskiisa ka mid ahaa "waa boqol yuhuudiyoo/Rag baa baaninayoo/Baarka u firayee/Barqo laguma gaareen." Maalkay yuhuuddu ku nooshahayna waxaa bixisa dawladda maraykanka, oo Israa'iil waa xiddigta kow iyo kontonaad oo aan calanka maraykanka ku oollin, waana qodax uu galbeedku u haysto inuu ugu goodiyo Carabta oo ku cabsiiyo, kuna diro markuu doonayo inuu arliga Carabta meel ka mid ah weeraro, taasoo uga raqiisi san intuu dalkiisa kasoo duuli lahaa, siyaasiyanna uga asturan, siday markay duqaysay xarunta xoogga korontada ka dhalisa atoomikada oo markaas ay dalwadda Ciraaq dhisanaysay, ama ay dhowaanba Lubnaan u weerareen. Israa'iil waa fariisin militari oo uu maraykanku ku leeyahay bariga dhexe, bartamaha dalalka Carabta. Yuhuuddu ha joogaan Israa'iil ama meel kaleba waa sabool, siduu Ilaahay Tacaalaa noogu sheegay Aayadda kow iyo lixdanaad ee Suuratu Al Baqarah: "**Wa duribat calayhimu al th-thillatu wa al maskanatu (61)**", oo macneheedu yahay: "waxaana lagu qadaray oo lagu xukumay dulli, oo ah in la laayo siduu Hitler u laayay oo kale, ama ka horba ama ka dambeba, iyo xabbisid iyo dulli kasta, iyo msikiinnimo." Wuxuu kaloo Tacaalaa Aayadda boqol laba iyo toban ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: "**Duribat calayhimu al th-thillatu ayna maa thuqifuu illaa bi xablin mmina Allaahi wa xablin mmina al nnaasi wa baa'uu bi ghadabin mmina Allaahi wa duribat calayhimu al maskanatu thaalika bi annahum kaanuu yakfuruuna bi Aayaati Allaahi wa yaqtuluuna Al Anbiyaa'a bi ghayri xaqqin thaalika bimaa casaw wa kaanu yactaduuna(112).**" Aayadda macneheedu waxaa weeyey: "Waxaana lagu xukumay korkooda dullinnimo meel kastoo ay joogaanba, inay xarigga Ilaahay iyo xarigga dadka haystaan mooyee, siday maanta dawladdaha galbeedka xariggooda u haystaan mooyee. Waxayna la noqdeen carada

Ilaahay. Waxaana korkooda lagu xukumay miskiinnimo iyo saboolnimo, sababtuna ay tahay inay ku gaaloobeen Aayaadka Ilaahay, ayna xaq darro ku dileen Anbiyada Ilaahay, ayna ugu wacan tahay caasinnimadooda iyo siday u xad gudbaan(112)."

Waxa ka socda Falasdhiin, oo afar ama ka badan malyuun oo falasdhiniyyiinna ah loogu diiday inay dalkooda dib ugu noqdaan, kuwa degganna laga soo saarayo si xoog ah, ama guryohooda oo lacag badan looga gadanayo, ujeedooyinka ay dawladaha krishtaanku ka leeyihiin waxaa ka mid ah inayan Carabta Muslimiinta ahi tarmin oo ayana yuhuudda ka fara badan, iyo ayagoo doonaya inay qabsadaan magaalada Muqaddaska ah ee Quddus, ayagoo aan dagaal toos ah u gelin oo aan ciidammo gayn, askarna uga dhiman. Waxay rabaan inay ku galaan ayagoo is huwinaya magaca heshiisiinta yuhuudda iyo muslimiinta, ama xiranba dharka Qarammada Midoobay. Waxay doonayaa inay Quddus ku galaan ayagoo labbisan dharka ciidammada qarammada midoobay, ayagoo leh waxaan kala dhex geleyntaa yuhuudda iyo Carabta, oo ay sidaas ciidammadooda ku geliyaan, kaddibna ayba fara maroorsadaan. Waxay kaloo doonayaa inay Masjidu Al Aqsa kaniisad ka dhigaan oo ay krishto suraan, halkaasna, markay ku xoogeystaan, ay Makkah Al Mukarramah iyo Al Madiinah Al Munawwarah uga duulaan, Kacbadana ay dumiyaan, siday hadda ka horba isugu dayeen, ayse ku khasaareen. Carabtuna ma mooga waxay dawladaha krishtaanka ahi abaabulayaan, ayaguna qorshe la'aan ma aha, Ilaahayna, Tabaaraka wa Tacaalaa, muslimiinta ayuu la jiraa.

Badeecadaha batroolka laga sameeyo

Batroolka marka la nadiifiyo oo la sifeeyo wuxu shidaal u noqdaa gaadiidka cirka, badda iyo dhulkaba. Waxaa kaloo laga dhaliyaa xoogga korontada. Marka batroolka la nadiifiyo gufarka kasoo hara waaxaa ka mid ah laamiga waddooyinka lagu kabbiso. Waxaa kaloo laga sameeyaa blastikada, ladu dhiso guryaha, gaddiidka cirka, badda iyo dhulka, qalabka guryaha iyo maacuunkaba, dhar, kabo iyo waxyaalo kaloo badan oo maalin walba ka qayb qaata nolol maalmeedkeenna. Haddii batrool la waayo warshadaha waxaas sameeya ayagana waa la xirayaa, shaqaalohoodana ay shaqo waayayaan, ayaga iyo inta ganacsato oo ka mushtari jirtayba.

Jaamacadda Carabta: Qorshaha colaadeed ee krishtaanka iyo kaalinta amxaarada

Jaamacadda Dawladaha Carabtu waxay daabacday kitaab la yiraahdo Intishaaru Al Islaami wa Al Curuubah fiimaa Yalii Al Ssaxraa'a Al Kubraa, ayna ku dhigan yihiin duruus uu Doktor Xasan Ibraahiim Xasan ka jeediyay Machadu Al Daraasaati Al Carabiyyah Al Culaa ee al Qaahirah, arliga Masar ku yaalla. Dr. Xasan wuxuu bogga boqol toddoba iyo toban ku yiri: "kaniisadda amxaarada waxay raacsanayd kaniisadda Al Iskandariyyah. Wadaadada xabashaduna waxay u arkayeen inay wadaadada krishtaanka ah ee

Al Iskandariyyah yihiin khulafada iyo kuwa dhaxlay xawaariyiinta ahaa asxaabta Al Masiixu (Ciise) Calayhissalaamu. Markaasay madaxda kaniisadda Al Iskandariyyah waxay magacaabaan wadaado haysta math-habka (krishtaanka) Al Yacquubiyyah, kuwaasoo u quma ka meel marinta umuuraha shareecada ee arliga xabashada. Magacaabiddoodaas waxay ku timaaddaa markuu boqorka Masar u xilsaaro, kaddib markuu isaguna codsi uga yimaado boqorka amxaarada. Madaxda diinta krishtaanka addunku waxay lahayd afar kursi oo kala yaalla afar xarumood oo kala ah (Kow) Kursi math-habka Milkaaniyiinta, kursigiisuna yiillay Rooma, caasimadda talyaaniga. (Laba) Kursi yaalla xarunta labaad (ee krishtaanimada), ahna math-habka Yacquubiyyah oo Al Iskandariyyah, dalka Masar, yaalla. (Saddex) Kursiga saddexaad wuxuu yiillay Indhaakiyah, arliga Suuriya. (Afar) Kursiga afaraad wuxuu yiillay Baytu Al Maqdis, ee arliga Falasdhiiin.

Krishtaanka xabashada, kuwa nuubiyiinta iyo kuwa suudaanba waxay raacsanayeen kursiga Al Iskandariyyah. Madaxa kursiga Al Iskandariyyah ayaa boqri jiray oo caleemo saari jiray, ama cazili jiray boqorrada amxaarada. Ninkaan ayaana magacaabi jiray wadaadadooda (oo darajooyin kala duwan leh sida al midhaarinah, al qissiissiina iyo al shumaamisatu iyo ghayrkoodba) ee ragga diinta oo u quma maamulka cibaadooyiinka iyo salaadda arliga amxaarada. Dadka al axabashah deggan in badan oo ka mid ah waxay galeen Diinta islaamka, waxayna beledkooda ka dhiseen masaajidyo lagu meel mariyo shacaa'irtooda diiniga ah. Markaasaa waxaa muslimiinta kasoo dhex baxay in badan oo culummo ah iyo fuqaha iyo zuhaad, kuna taagan math-habka xanafiiga. Qaarkoodna waxay ku taagnaayeen caqiidada shiicada. Al Xabashah waxay quruunta dhexe u qaybsanayad toddoba qaybood oo uu mid walboo ka mid ahi boqor xukumo oo kala ah (Kow) Wafaat, (Laba) Dawaaruu, (Saddex) Araabiini, (Afar) Hadyah, (Shan) Sharxaa, (Lix) Baali, (Toddoba) Daarah. Toddobadaan boqortooyo boqornimadu waxay ahayd mid la kala dhaxlo. Mid boqorradaas ka mid ahna xukunka uma madax bannaanaan karo inuu suldaanka amxaaradu boqro mooyee. Sidaasay boqorradaasu waxay ku ahaayeen kuwo suldaankaas wakiillo uga ah xukunka boqortooyooyinkooda. Al Qalqashandii (waana Axmad bin Cali bin Axmad Al Fazaariyyi Al Qalqashandii, una dhashay dalka Masar ahna taariikh yaqaan, oo kitaabkiisa Subxu Al Acshaa fii Qawaaniina Al Inshaa, oo afar iyo toban mujallad ah) wuxuu sifeeyey boqortooyinkaas wuxuuna yiri: "toddobadaas boqortooyana dhismohoodu wuu tabar daran yahay, maalkoduna yar yahay, kuwaasoo ku yimid tayada dalkooda iyo yaraanta khayraadka arligooda. Markaasuu suldaanka amxaaradu ka adkaaday oo uu xukumay, in kastoo ay dhexdooda colaadi taallo, dagaallana ay dhex yaallaan krishtaanka iyo muslimiinta. Sidaasoo ay tahay, hadana muslimiinta toddobada boqortooyo taladoodu way kala firirsantahay, oo ma midaysna, xiriirka dhex yaallana wuu xun yahay." Boqorrada boqortooyinkaasna waxay sanad walba u keenaan boqorka amxaarada dharka dibadda uga yimaada iyo xariir, iyo dharka kattaanka ah ee Masar lagu sameeyo iyo Yaman iyo Ciraaq. Boqorku wuxuu madaxa ku duubtaa maro xariir ah, inta dhexe ee madaxiisuna ay bannaantahay. Amiirraduna waxay madaxa ku duubtaan dhar dun laga

sameeyey. Fuqahaduna waxay duubtaan cimaamado, caammaduna waxay madaxa saartaan koofiyado cadcad. Suldaanka iyo askartuna waxay dhexda ku xirtaan hoos gunti aan la tolin. Markaasuu dhexdana maro ku xirtaa, maro kalena uu guntadaa. Waxay kaloo labbistaan surweello. Ayaga ghayrkoodna waxaa keli ah oo ay dhexda ku xirtaan maro, mid kalena ay guntadaan, surweellose ma xirtaan. Fuqahada iyo rag ka mid ah ragga dawladduna waxay labbistaan qamiisyo. Hubkoodana waxaa u badan warammada iyo fallaaraha. Waxaa toddobadaas boqortooyo wehliyay jaziiradda Dahlak, oo Badda Cas ku taalla, kuna taalla dariiqa musaafirka ka baxa (magaalada) Ciithaab una socda Yaman. Waxaa kaloo dheeri ku ahayd ayaduna boqortooyada Cawaan oo xeebta Badda Cas ku taalla oo kasoo hor jeedda (gobolka Jaziiradda Carabta oo ay Makkah iyo Al Madiinah ku yaallaan) Tihaamah ee Gacanka Cadmeed. Waxaa kaloo ka mid ahayd Muqdisho oo Badweynta Hindiya ku taalla, uuna maro wabi wayn oo Badweynta Hindiya ku biyo dara, Muqdisho agteeda ah.

Qarniyada saddex iyo toban ilaa shan iyo tobanaad

Boqorka amxaarada ayaa ka adkaaday boqortooyinkaas qarniga sideedaad ee Hijrada, una dhigma qarniga afar iyo tobnaad ee miilaadiga, oo burburiyay, dadkeedana laayay, intii Kitaab Quraan ah oo tiillayna gubay, intooda badanna inay krishtaanka galaan ku khasbay. Ugama harin boqorradaas daacadda boqorka amxaarada waxaan ka ahayn ibnu Simaar oo ay boqortooyadiisu kasoo hor jeeddo Dahlak. Suldaanka Sacaadu Al Ddiini, boqorka Zaylac iyo dhulka xigaba, wuxuu ka baxay daacadda boqorka amxaarada, ayna dagaallo dhex mareen, uuna libta ku helay suldaankaan (amxaarada).

Qarniga saddex iyo tobnaad ayuu nin ka mid ah ducaada ragga dadka islaamka ugu yeera oo diinta fidiya wuxuu dhex jeexay arliga xabashada, uuna islaamka dadkooda ugu yeeray, waxaana u suurtoowday hanuuninta laba boqol oo kun, oo intuu ciidan ahaan u watay ku weeraray boqorka amxaarada oo ay dagaallo badani dhex mareen. Sir Thomas Arnold (oo kitaabkiisa loo tarjumay afka Carabiga la yiraahdo Al Dacwatu ilaa Al Islaami) wuxuu yiri: "qarniga saddex iyo tobnaad dhammaatkiisa waxaa arliga xabashada ka kacay dagaallo sokeeye, oo dhaliyay wareer iyo cabsi, kuwaasoo u sahlay qabiillo Carab ah oo kala duwan inay degaan xeebta badda dhererkeeda oo idil, amxaaradana u eryay dalka gudihisa." Jamaacaat, waa kooxee, Carab ahna waxay hoos yimaadeen boqorka xabashada, waxayna degeen Masawac ayago ayaga xukunkooda ku hoos jira, in badan oo ka mid ahna waxay ka mid noqdeen shaqaala boqorka, uuna qaarkood u dhiibay jagooyin muhim ah ee dawladda. Gobollada ay muslimiintu degaanna, oo ku fidsan laga bilaabo Badda Cas ilaa Sinaar xagga galbeed iyo xagga koofureed iyo koofur/bari, waxay boqorka amxaarada siin jireen jizyo. Markaasay ganacsatada iyo kuwa Diinta fidiya ee muslimiintu ay dalkaan imaan jireen, ayagoo u dhowaanaya madaxda xabashada. Xiriirkaasna wuxuu lagama maarmaan ka dhigay inuu raad ku reebo oo saameeyo xagga bulshada markay la xididaan oo ay xabashada ka guursadaan, xabashaduna ay Carabta ka guursato. Isla waqtigaasna waxaa

bilawday inuu xukunka turkigu saameeyey arliga Yaman iyo jiirta biyomareenka Baabu Al Mandab iyo bariga Afrikaba. Waxaa ayaduna jirtay inay burtuqiisku doonayeen inay xilfi iyo gaashaanbuur la noqdaan amxaarada, si ay u gabagabeeyaan oo ay xididdada ugu siibaan islaamka ku sugan Badda Cas. Markaasay turkigu waxay qabsadeen Zaylac, waxayna dhiseen oo abaabuleen ciidan badda iyo maraakiibtiisaba oo xoog leh, oo ku sugan Badda Cas, waxayna ka shaqeeyeen inay burburiyaan oo xididdada u siibaan gaashaan buurta burtuqiiska iyo amxaarada. Markaasay waxay heshiis la galeen boqortooyada Harar oo islaamka ah, una dhow xuduudda amxaarada, waxayna siiyeen amiirkooda Axmad Gurey hub (qoryo, saanad, madaafiic, iwm), waxayna ku boorriyeen inuu amxaarada ku duulo. Waxaana ciidanka Axmad Gurey oo guuleystay kusoo biiray oo ka mid noqday in badan oo madaxda amxaarada ah iyo dadkii ayagaas raacsanaaba. Sidoo kale waxaa usoo gurmaday (Axmad Gurey) Ashraafta Makkah iyo in badan oo mujaahidiin naftood hurayaal ah oo Carab ah. Markaasay Axmad Gurey iyo ciidankiisa reer Harar waxay ku duuleen amxaarada dalkooda iyo shacbiga Gaalladaba iyo Wahr iyo Aksuum. Dagaalka Axmad Gurey wuxuu socday shan iyo toban sano (kun shan boqol sideed iyo labaatan ilaa kun shan boqol saddex iyo afartan)(Axmad Gurey waxaa la dilay kow iyo labaatanka bisha Febraayo sanadka kun shan boqol saddex iyo afartan, waxaana dilay ninka la yiraahdo John the Galician oo ka mid ahaa ciidammada burtuqiiska oo amxaarada usoo gurmaday sanadka kun shan boqol afartan, oo laabta uga dhuftay rasaas dishay, waxaana sidaas dhigay Encyclopedia of Islam and The Muslim World, Editor in chief Richard C. Martin, ayna daabacday McMillan Reference USA Thmpson-Gale, oo kasoo guuriyay kitaabka The Portuguese Expedition to Abyssinia uuna dhigay R.S. Whiteway, bogga hordhaca Ixxi.). Duullaankaanu wuxuu arliga xabashada ku yeeshay raad wayn, oo Sir Thomas Arnold wuxuu, isagoo kasoo guuriyay Kitaabka Carab Faqiih ee Futuuxaatu Al Xabashah, yiri: "sidaasaa dad, gaar ahaan madaxda muslimiinta oo hore uga mid noqday shaqaalaha boqorka amxaarada, iyo kuwa waagaas hore Diinta islaamka ka noqdayba, ayaa markuu ciidanka muslimiintu guulaystay waxay awood u heleen inay isla markiiba tuuraan diinta krishtaanka, ayna ka haraana daacadday u ahaayeen boqorka krishtaanka ah, ayna soo bannaan bixiyaan oo muujiyeen, mar kale, muslinnimadooda." Islaamkuna wuxuu kala kulmay guul weyn qabaa'ilka Gaallada oo arliga amxaarada degay. Qabaa'ilkaas soo guurayna waxay u qayb sanaayeen toddoba qabiil oo la yiraahdo Walluujaa, ahna jinsigay ku abtirsadaan. Muslimiinta inta badani waxay deggan yihiin koofurta arliga xabashada. Qabaa'ilka qaarkoodna waxay islaamka soo galeen qiyaas qarniga shan iyo tobnaad ee miilaadiga. Diinta islaamkuna waxay ka heshay dhulalka siman (oo aan buuraalayda ahayn) guul weyn, waxaana fidiyay rag Diinta dadka ugu yeera iyo ganacsatada. Waxayna kala kulmeen arliga Gaallada soo dhoweyn kulul, ayagoo halkaasna ka helay suuq khayraadka dalka oo la dhaafsado badeecooyin dibadda lagu soo sameeyey oo laga keenay. Ganacsatadaasu waxay ka faa'iideysatay safarkooda ay xeebaha ku yimaadaan sanadkiiba mar ama labadii sanaba mar inay Diinta islaamka ku dhex faafiyaan dadka

beledkaas deggan. Sidaasaa waxaa Diinta islaamka muddo gaaban kusoo galay dad fara badan. Gaalada krishtaanka fidiyana way khasaareen oo wax dheg u dhiga ma ayan helin oo krishtaan noqda, kuwa islaamka dadka ugu yeerayana waxay heleen guul jooqto ah, waxayna dariiqyada usii jeexeen xagga iyo koofur. Diinta islaamkuna waxay kusoo shubmaysay dadka Carabta ah oo halkaas ku noolaa, si muuqata oo cad iyo si qarsoodi ahba. Waxaase dhacday inay boqorrada krishtaanka ahi ee amxaaradu awoodeen inay xukunkooda soo ceshadaan laga bilaabo kun shan boqol sagaal iyo sideetan.

Qarniyada lix iyo tobnaad ilaa sagaal iyo tobnaad

Waxaase dhacday inay xasilloni darrada haleeshay beledkaas dhammaatka qarniga lix iyo tobnaad iyo qarniga toddoba iyo tobnaad dhexdiisa, iyo dagaallada dhex maray ragga kaniisadaha dhexdooda, ayaa waxay makaniyeen oo suurto geliyeen inuu islaamku ku xasilo oo xidideysto oo haro. Soo dhex gelidda burtuqiiska katoolika ah (oo ah math-hab diinta krishtaanka ka mid ah oo ay amxaaradu aad neceb tahay, ahna midda xarunteedu tahay Rooma dalka talyaaniga, uuna madax u yahay Papaha Roma. Ninka sanadkaan u taliya kaniisadda Rooma ee katoolika ah, lana baxay Pope Benedict XVI, wuxuu u dhashay jarman, magaciisuna waa Ratzinger, waana nin, Allaha lacnadee, aan qarsan karin oo ku khudbeeya nacaybka uu u qabo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo islaamkaba. Ninkaanu wuxuu isagoo afar iyo toban jira ku biiray ururka dhallinyarada Hitler, markuu lix iyo toban jirsadayna wuxuu ku biiray ciidammada Hitler oo lidka ku ah ciidammada cirka, wuxuuna ka qortay magaalada Muenchen. Waxaana qafaalay askarta maraykanka oo jarmanka jebisay, laguna xabbisay xerada Bad Aibling oo u dhow magaalada New Ulm, halkaasoo uu kala xabbisnaa qoraaga jarmanka ah oo caanka ah Guenther Grass. Waxaa xabsiga laga soo daayay sagaal iyo toban bisha juunyo ee sanadka kun sagaal boqol shan iyo afartanka. Waxaana soo qafaalay nin maraykan ah oo deggan gobolka maraykanka ee Rhode Island, oo aan ku aragnay isaga iyo ninkaas oo dharka askarta Hitler labbisan maalintuu soo qabtay oo isla masawiran), oo diintaas fidinaya, soona fara geliyay umuuraha madaniga ah iyo siyaasadda dalka amxaarada, waxay dhalisay inay kasoo hor hjeestaan oo ay la dagaallamaan krishtaanka amxaaradu, ilaa heer ay qaar madaxdooda ka mid ahi caddeeyeen inay ayaga u khayr badan tahay inay xukunka muslimiinta hoos yimaadaan intay burtuqiiska gaashaan buur la noqon lahaayeen. Kacdoonkaas qawmiga ahi wuxuu dhalay oo ku dhammaaday in sanadka kun lix boqol laba iyo soddon burtuqiiska la eryo, krishtaanka ajaanibta ah oo idilna arliga amxaarada laga saaro. Waxaa fursadaas ka faa'iidaystay qabaa'ilka gaallada oo soo aaday oo soo degay bartamaha iyo qalbiga dalka, oo beelahay degeen ilaa maanta ay sideedii tahay. Nin dalmareen ah oo noolaa qarniga toddoba iyo tobnaad wuxuu sheegay inay muslimiintu degmooyinka arliga xabashada oo idil ku badan yihiin, ayna yihiin dalool dadka arliga xanashada.

Sir Thomas Arnold wuxuu isaguna sheegay inay tirada muslimiintu sii korortay qarniga kaas ku xigay (oo ah qarniga sideed iyo tobnaad). Waxaa ayaduna jirtay inay kuwo ka mid ah muslimiintaasu ay muujiyeen inay krishtaameen, si ay madaxda dalka uga mid noqdaan. Asbaabta ugu weyn oo guusha Diinta islaamka dhaliyay waxaa ka mid ahaa fadliga ay muslimiintu gaareen inay xagga dhaqanka uga sare mareen amxaarada krishtaanka ah. Islaamku uguma faafin arliga xabashada jihaad keli ah, balse wuxuu sidoo kale ugu faafay dariiqa ganacsiga. Ganacsatada musliinku waxay imaan jireen dalkaan, oo ay markaas dadku Diinta islaamka soo gelayeen. Waxaa kaloo ayaguna imaanayay wufuud rag Carab ah oo dadka Diinta islaamka ugu yeerayay, sanad walbana ay boqollaalo imaanayeen. Markaasay waxay ku faafeen Soomaaliya iyo al xabashah, ayagoo dadka Diintaan ugu yeeraya. Raggaanna intiisa badan waxay ka imaanayeen Xadramuut. Fadligase weyn oo islaamka ku faafiyay arliga xabashada xagga dariiqa ganacsiga wuxuu ka socday koox ganacsato muslimiin ah oo ka dhashay magaalada Qaws ee arliga Masar. Kooxdaanna waxay ka koobnayd muhaajiriin reer tigray ah iyo hunuud iyo Carab. Kooxdaasuna waxay la baxday magaca Al Kaarimiyah ama Al Kaanimiyah oo loo nisbeeyey beledka Al Kaanim. Kooxdaanu waxay ka ganacsan jirtay badeecadaha la yiraahdo al tawaabil, oo ah waxa cunnada lagu darsado, sida sonkorta, haylka qorfaha, filfisha, zanjabiisha, busbaaska, cadarka, cuudka iyo wixii la mid ahba. Muddo yar gudeheeda ayay ku xoogeysteen oo ay awoodoodu badatay, maalkooduna uu laablaabmay, ayna kusoo biireen ganacsatada muslimiinta ee dalkoo idil. Ganacsatadaas kaarimiyiinta ahi waxay si weyn ugu sifoobeen Alle ka cabsi iyo taqwo, waxayna isku xilsaareen faafinta Diinta islaamka, oo ay dhinac socoto ganacsigoodu. Raggaasna waxaa ka mid ahaa fuqaho, iyo rag xadiithka ku xeel dheer, iyo kuwa Quraanka xafidsan dadkana bara, waxayna ganacsiga ka dhigteen xirfaddooda ay ka shaqaystaan. Raggaasu waxay arliga xabashada kusoo galeen ayagoo hagoogan sifadooda ganacsato, waxayna kala kulmeen amiirrada iyo ragga xukunkaba haya soo dhoweyn weyn, sababtuna ay tahay firfircoonidooda dhaqaale oo weyn, iyo inay ka shaqaynayeen ganacsiga addoommada oo ay boqorrada amxaarada laftooda taageero uga helayeen. Raggasu waxay ganacsiga ka dhigteen wasiilo ay ku faafiyaan Diinta islaamka, waxaana hawshoodaas gacan ka siiyay dheeranta mudaday joogeen beledkaas, iyo siday u dhex galeen dadkeeda iyo aqoonta ay u leeyihiin caadooyinkooda iyo dhaqankoodaba. Markaasaa waxaa hortooda ku islaamay dad badan oo xabashada ka mid ah. Waxaa kaloo raggaas Diinta islaamka fidiya taageertay inay arliga xabashada qarniga toddoba iyo tobnaad u qayb santay imaaraad, kuba sigtay inay madax bannaadaadaan, ayanna ka dhexeyn waxaan ahayn khilaafaad mathaahibta krishtaanka oo kala duwan iyo xarbiyo ay iskala hor yimaadaan mooyee. Dabaqooyinka hoose ee krishtaanka ah, oo ay madaxdooduna yasaan oo yaraystaan, canshuur badanna la dul saaray oo nolosha ciriiri uga dhigay, ayay ahaayeen kuwa ugu badan oo islaamka soo gala. Markaas ay krishtaanka dagaalladaas iyo khilaafaadkaasi dhex yaallaanna, muslimiintu waxay ku nool yihiin oo leeyihiin makaan bulshadeed oo sarreeya iyo xorriyo ballaaran ee cilmi barasho, oo wax u dhigma ayan

jirin. Dalmareenka Rupell markuu booqday arliga xabashada wuxuu sheegay in markay boqorradu doonayaan inay helaan nin wada leh amaano iyo in lagu kalsoonaan karo, waxay ka dhex dooran jireen muslimiinta, ayagoo dadka ugu firfircoonaan, uguna karti badnaa. Isla markaasna waxay ahaayeen madaxda ganacsiga, ayagoo gacantooda ku hayay nolosha dhaqaale ee dalka. Faafinta Diinta islaamka way gaabisay qarniyada sideed iyo tobnaad iyo sagaal iyo tobnaad dhexdooda. Sidaasoo ay tahayna, ragga kaniisaduhu waxay ku sifoobeen dhaqdhaqaaq la'aan iyo jumuud, oo ay madaxdooda dagaallo dhex mareen, ayadoo ay xaaladdaasu saamaysay, oo ay dhalisay inuu cilmiga islaamku ku faafo si ku dhisan xorriyad iyo xasillooni.

In kastoo ay boqorrada krishtaanka ahi ku dadaaleen inay muslimiinta ka eryaan hawlaha waawayn ee dawladda, hadana faafidda Diinta islaamku kama joogsan arliga amxaarada, balse waxay dhex gashay safafka madaxda amxaarada laftooda. Boqorrada wakiillada ka ahaa suldaanka amxaarada (oo dawladohhooda boqorro u ahaa) qarniga sagaal iyo tobnaad, magaciisuna yahay "Al Ra'su Calii" (Raas Calii) wuxuu tusaale nool u ahaa siday Diinta islaamku u dhex gashay dabaqada dalka xukunta, oo intuu xukunka hayay ayay nus dadka deggan gobollada dhexe ee arliga xabashadu wuxuu galay Diinta islaamka. In kastoo ay colaadi ka dhexeysay amxaarada iyo Masar qarniga sagaal iyo tobnaad, ayna xarbiyo dhex mareen laga bilaabo kun sideed boqol shan iyo toddobaatan ilaa kun sided boqol laba iyo sideetan, kana dhashay khilaaf xuduudda ku saabsan, hadana faafidda Diinta islaamku waxay ku socotay sidaan usoo sheegnay. Waxyaalka caawinay xasilidda umuurta muslimiinta arliga xabashada waxaa ka mid ahaa inay Masar ka hartay damacay ka qabtay (gumaysiga) geeska Afrika, kaddib marka la cazilay Ismaaciil (oo ahaa xaakimka Masar) iyo kacdoonka Caraabii iyo kacaanka Al Mahdii ee arliga Suudaan. Waxaana bilaabatay inuu dhaqdhaqaaqa mahdiga Suudaan ee Al Mahdiyyah daneeyso faafinta islaamka ee arliga amxaarada dhexdiisa, waxayna ka dhigatay magaalada Al Qalaabaan oo ku taalla qorrax kasoo baxda Suudaan xarun ay ka faafiso islaamka arliga amxaarada dhexdiisa. Amxaaraduna way dareemeen khatarta diinta krishtaanka uga imaanaysa dhaqdhaqaaqaas islaamka dadka ugu yeeraya. Markaasay waxay isku dayeen inay qabsadaan magaalada Al Qalaabaan, iyo inay dacwada Al Mahdiyah xididdada u siibaan arligooda dhexdiisa. Colaaddaasu waxay saameysay oo ay amxaaradu u carootay muslimiinta ku nool arliga xabashada, dawladda amxaaraduna ay bilawday inay muslimiinta xoog saarto si ay dacwada islaamka loogu yeerayo u wiiqiso. Laakiin dadaalkoodaas waxaa qaaday oo uu raacay dabaysha, gaar ahaan zamanka xukunka Menelik, oo xukunkiisu gaaray arliga xabashada oo idil, kaddib dhimashada boqorka Juun sanadka kun sideed boqol sagaal iyo sideetan, oo ay markaas diinta krishtaanku kusoo laabatay inay tahay diinta rasmiga ah ee walaayada Kaafaa. Sir Thomas Arnold wuxuu yiri: "laakiin tillaabooyinkaas xoogga leh oo loo qaaday xoojinta diinta krishtaanku way kari wayday inay joojiyaan korriinka iyo badashada Diinta islaamka ee qarniga sagaal iyo tobnaad, oo ay qabaa'il wada dhan wada islaameen, oo hore krishtaan u ahaan jiray.

Lijj Iyaasuu

Markuu boqor noqday Lijj Iyaasuu, oo uu Menelik awoowe u yahay (erayga Menelik macnihiisu waxaa weeyey oo uu ka yimid ibnu al malik, oo af Carabi ah, macneheeduna yahay "wiilka boqorka" oo boqorrada amxaaradu waxay leeyihiin oo aamin san yihiin inay yihiin dhasha wiil wacal ah oo uu Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu, xaashaa li Allaahi, ka dhalay boqorrada muslinka ah ee Saba', ee arliga Yaman oo muslinkuna magaceeda ku sheego inuu yahay Bilqiis, amxaaraduna ay tiraahdo waa Makeda, siduu u qoray kitaabka Atlas of the Bible. Oo sidaasay diinta krishtaanka amxaaradu uga wada duwan tahay diimaha krishtaanka kale, oo ay ka kooban tahay diinta yuhuudda iyo diinta krishtaanka oo la isku qasay. Taas ayaana u sabab ah inuu boqorka amxaaradu u yiraahdo inuu yahay oo ay calaamadiisa calankiisa ku dhiganna u tahay Lion of Juda oo ah "libaaxa yahuuthaa." Yuhuuddu waxay aaminsan yihiin inuu Sulaymaan boqor ahaa oo uusan Nabi iyo Rasuul midna ahayn, oo halkaasay ibnu al malik ka timid), wuu ka baxay diinta krishtaanka, wuxuuna sheegay inuu yahay dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna labbistay dharka muslimiinta, calanka amxaaradana wuxuu ku dhigay **laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.** Wuxuuna ku dhawaaqay jihaad krishtaanka lagu qaado iyo in la gabagabeeyo oo xididdadaba loo siibo. Wuxuu sidaas ku diyaariyay ciidan wayn oo baaqaas lagu meel mariyo, wuxuuna sanadka kun sagaal boqol lix iyo toban soo saaray go'aan inuu arliga amxaaradu raacsan yahay xagga umuurta Diinta dalka turkiga. Markaasay dawlada yurub soo dhex galeen, ayna ku khasbeen inuu carshiga ka dego, oo uu boqornimada iska cazilo. Kuwa isagaas xukunka uga dambeeyeyna waxay la dagaallameen islaamka iyo faafiddiisaba."

J. Spencer Trimingham wuxuu kitaabkiisa Islam in Ethiopia (ayna daabacday Frank Cass & Co.Ltd. 1965) bogga boqol iyo soddon ku yiri: "markuu Menelik curyaan noqday, waa paralized, sanadka kun sagaal boqol iyo toddoba, wuxuu boqornimada u magacaabay isaga dabadiis Lijj Iyaasuu (oo dhashay kun sideed boqol sideed iyo sagaashan, oo sidaas markaas ku jira sagaal sano). Waxaa taasna si rasmi ah loogu dhawaaqay kun sagaal boqol iyo sagaalka. Maadaama uu da' yaraa waxaa boqor ku sii sime ah loo magacaabay Ras Tasamma, iyo inuu wiilka xilkiisa hayo. Markuu Ras Tasamma dhintay kun sagaal boqol kow iyo toban Lijj Iyaasuu aabihiis Miikaa'iil ayaa xukunka uga xoog batay, oo markuu Menelik dhintay kun sagaal boqol saddex iyo toban wuxuu helay awood buuxda. Lijj Iyaasuu wuxuu dhammaan bariga Abyssinia soo hoos geliyay xukunka aabihiis oo uu u caleemo saaray boqorka Wallo iyo Tigrai kun sagaal boqo afar iyo toban. Sanadka ku xigana wuxuu xukunkiisa soo hoos geliyay Beegamder iyo Gojaam. Waqtigay xasillooni darradu jirtay oo ka horreysay dhimashada Menelik, Lijj Iyaasuu wuxuu bilaabay hawsha u horseedi doonta inuu Diinta islaamka galo oo uu muslim noqdo. Markuu dagaalka yurub kun sagaal boqol afar iyo toban dillaacay (waana xarbiga koowaad ee adduunka midka loo yaqaanno) iilashadiisaas Diinta islaamka uu u iishay waxaa sii geesinnimo geliyay dibloomasiyiin jarman iyo turki ah. Markaasuu wuxuu fuqahada ka codsaday oo ay ayaguna u

sameeyeen silsilad nasabkiisa gelisay, waana dhanka aabihiis, Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam. Boqorku waqtiyo dhaadheer ayuu joogi jiray magaalada Harar, halkaasoo uu dharka muslimiinta ku xirtay, dhaqanka muslimiintana qaatay. Wuxuu kaloo furay haweentiisa krishtaanka ahayd Romaanee-Warq, wuxuuna bilaabay inuu haween badan guursado, isagoo guursaday gabdhaha madaxda Cafarta iyo Gaallada, ayna ka mid tahay gabadha uu dhalay iyo midduu adeerka u yahay Abba Jifar ee Jimma. Wuxuu masaajid ka dhisay Dirir Dhabe iyo Jigjiga. Markaasuu sanadka kun sagaal boqol lix iyo toban wuxuu si rasmi ah Abyssinia u hoos geeyey xagga Diinta turkiga. Wuxuuna qunsulka Guud ee turkiga u diray calanka Abyssinia oo lagu daabacay bil nuskeed iyo ashahaadada islaamka. Calammo kuwaas la mid ahna wuxuu u diray madaxda dawladdiisa muslinka ah, wuxuuna ballan qaaday inuu jihaad qaadi doono. Wuxuu waanwaan la galay Sayyid Muxammad Cabdulle Xasan, mahdiga Ogaadeeniya, wuxuuna u diray qoryo iyo saanad. Kaddibna wuxuu baaq u diray soomaalida oo idil oo qaarkood uba haysteen inuu isagu yahay mahdiga, inay u raacaan jihaadka uu la gelayo krishtaanka. Wuxuuna tegey Jigjiga inuu ciidan ka abaabulo." Wuxuu kaloo yiri: "Krishtaanku waxayu arkeen boqornimada Lijj Iyaasuu inay tahay biloga boqortooyo la kala dhaxlo ee Gaalla iyo muslimiinta ah." Wuxuu yiri: "waxaa la cazilay toddoba iyo labaatnka bisha septembar ee sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo toban. Wadaadka krishtaanka amxaarada u madax ah ee Abuunaa wuxuu u magacaabay gabadha Menelik Zawdiituu boqorad, ayadoo uu Ras Tafari, wiilka Raas Makonnen, u yahay sii haye iyo kan boqornimada ayada uga dambeynaya." Wuxuu kaloo yiri: "Lijj Iyaasuu wuxuu u cararay arliga Cafarta, warkiisa dambena lama maqal ilaa kun sagaal boqol kow iyo labaan, markaasoo lagu arkay Tigrai, halkaasoo uu Raas yar oo la yiraahdo Raas Gugsu Ar'aya uu boqoradda gacanta ka saaray." Rag soomaali ah oo galbeed ku dhashay waxay ii sheegeen inay soomalidu marka la sheegay inuu Lijj Iyaasuu islaamay ay diideen islaanimadiisa oo ay gabayo ka tiriyeen, waxayna iiga sheegeen tixdaan: "Ilyaas yimid oo abeed (waa eray afka amxaarada oo macnihiisu yahay ayay yiraahdeen "waawaray" oo kale) ma jirtee/amxaarka uraya amlayda daraay."

Dawladda amxaarada ee zamankaan

Dhismaha dawladda amxaarada ee zamankaan aan hadda ku jirno wuxuu bilowday markuu boqor noqday Tiyaaduur, oo itaalkiisu xoogaystay qiyaas markay ahayd kun sideed boqol afartan. Afar iyo toban sano kaddibna (ahna kun sideed boqo afar iyo konton miilaadiga) wuxuu awood u helay inuu ku dhawaaqo inuu yahay imbeeraatoorka (waana boqor dalal kala duwan xukuma) amxaarada, in kastoo uu awoodi waayey inuu xukunkiisa kusoo darsado boqortooyada Shawa oo xooga badan. Khilaafka dhex maray amxaarada iyo ingiriiska ciribta xun oo ka dhalatay waxaa ka mid ah inay sanadka kun sideed boqol toddoba iyo lixdan uu ingiriisku soo diray ciidan uu u taliyo Robert Napier, oo la jebiyay, oo uu markaas taliyuhu isagu is dilay. Kaddib waxay ciidammada ingiriisku soo laabteen bisha maajo ee sanadka

kaas ku xigay. Sanadka kun sideed boqol toddobaatan wuxuu dalka talyaanigu gatay dekada Casab ee ku taalla koofurta meesha Badda Cas laga soo galo. Kaddibna wuxuu qabsaday talyaanigu dekada Bayluul. Markuu talyaanigu qabsaday Musawac (sanadka kun sideed boqol shan iyo sideetan) amxaaradu way caroodeen, waxayna weerareen ciidan talyaani ah oo shan boqol oo nin ah, ayna ka dileen afar boqol. Markuu sanadka kun sideed boqol sagaal iyo sideetan boqorka Yuuxanna dhintay, ayay boqortooyadu usoo wareegtay xukunka Menelik kan koowaad, boqorka Shawa. Kaddib waxaa dhacay dagaalkay la galeen talyaaniga, oo marka hore guusha helay, kaddibna la jebiyay (sanadka kun sideed boqol lix iyo sagaashan), aqoonsadayna istiqlaalka amxaarada bisha oktoobar ee isla sanadkaas. Kaddibna waxay amxaaradu xubin ka noqotay Ururka Dalalka sanadka kun sagaal boqol saddex iyo labaatanka (oo ah urur ka horreeyey Ururka Qarammada Midoobay). Bisha agoosto ee sanadka kun sagaal boqol shan iyo soddon waxaa mar labaad dagaal dhex maray amxaarada iyo talyaaniga, uuna talyaanigu qabsaday arliga amxaarad ilaa Addis Ababa oo u gacanta ku dhigay, calankiisana saaray misha maajo kun sagaal boqol lix iyo soddon. Boqorka amxaarada Xayla Selassiyee wuxuu u cararay arliga ingiriiska, boqorka talyaaniguna wuxuu ku dhawaaqay inuu yahay boqorka amxaarada. Xayle Selassiyee wuxuu beledkiisa kusoo noqday bisha jannaayo kun sagaal boqol kow iyo afartanka, halkaasoo ay ciidammada amxaarada iyo kuwa ingiriisku bilaabeen la dagaallanka ciidammada talyaaniga, kuwaanoo la jebiyay, uuna markaas Xayle Selassiyee Addis Ababa kusoo noqday." Waxaa intaas ku eg intaan kasoo qaadannay kitaabka Jaamacadda Dawladaha Carabta ah.

Gaashaanbuursiga burtuqiiska iyo amxaarada: Al Xuwayrii

Kitaabka la yirahdo Saaxilu Sharqi Ifriiqiyah min Fajri al Islaami xattaa al Ghazwu al Burtuqaalii, oo macnihiisu yahay "xeebta bariga Afrika laga bilaabo waabariga bilowga islaamka ilaa weerarka burtuqiiska", waxaa dhigay Doktor Muxammad Maxmuud Al Xuwayrii, waxaana daabacday Daru Al Macaarif ee dalka Masar sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo sideetanka oo u dhiganta kun afar boqol iyo lix Hijriga. Dr. Muxammad wuxuu bogga lix iyo lixdan ku yiri: "bilowga imaatinka burtuqiiska xeebta bari ee Afrika waxay la xiriirtaa dhacdooyinka ku ahaaday dawladda muslimiinta ee Al Andalus (waana dalalka maanta la kala yiraahdo Spain iyo Burtuqaal). Intay dhacdooyinkaasu socdeen ayay dawladda burtuqiisku dhalatay, taasoo awood u heshay jebinta foosha xun ee muwaxxidiinta muslinka ah lagu jebiyay dagaalka meesha la yiraahdo Al Cuqaabu sanadka kun laba boqol laba iyo toban ka dhacay, iyo waxa ka dambeeyey oo jabkaas la xiriiray oo ay xukunka muslimiinta ee arliga Al Andalus ka dhisnaa ku burburiyeen, ayna awood u heshay inay qarniyo yar dhexdooda ku baa'bisoo xarumaha islaamka ee gobolka galbeed ee Al Andalus (oo ah dalka maanta la yiraahdo burtuqaal). Intaan laba gaarin nuska qarniga saddex iyo tobnaad ayay burtuqaal waxay si kama dambays ah ka tirtirtay muslimiinta dhanka galbeed ee shubho

jaziiradda Iberia, kaddibna ay is xoojisay, ayna isku diyaarisay qorsheheeda gumaysi. Isla waqtigaas dawladda wayn ee dariskeeda ah ee Spaanya oo krishtaanka ahi waxay laba qarni oo kale ku jirtay dagaalkay kula jirtay spaanyada muslinka ah, oo ayan kasoo jeesan wax ka horreeya dhammaatka qarniga shan iyo tobnaad (kun sagaal boqol laba iyo sagaashan)." Wuxuu kaloo isla boggaas ku yiri: "laba arrimood ayaa u sabab ahaa inay burtuqiisku xagga galbeed, oo ah Badwaynta Atlantika iyo galkbeedka Afrika, iyo Aasiya u jeestaan oo daneeyaan, ayadoo ay xagga bari ka jiraan buuraaley u dhexeysa ayaga iyo Spaanya, waa sababo diini iyo dhaqaale. Sababta diiniga ahi waxay ahayd dagaalka krishtaanka iyo muslimiinta ka dhexeeyey ee Spaanya dhexdeeda ahaa. Sababta dhaqaalena waxay ahayd yaraanta waxa burtuqaal dibadda uga imaanayay oo badeecado ah, iyo saboolnimadooda." Wuxuu kaloo yiri: "waxaana maraakiib iyo ciidan diray, oo ahaa aabaha gumaysiga burtuqiiska boqorkooda Yuuxanna kan koowaad (kun saddex boqol saddex iyo sideetan ilaa kun afar boqol saddex iyo soddon), oo ahaa mid krishtada u dagaallama, ahaana kuwa diinta islaamka neceb oo doonayey inuu xarumaha muslinka soo weeraro. Waxaana taas u daliil ah inay boqoradda haweentiisa ahi ka warisay inuu yiri inay ugu filantahay dambi dhaafid iyo tawbad keen oo ay dambiyadiisa ka rogeyso "inuu labadiisa gacnood dhiigga muslimiinta ku dhaqdo". Zamankiisa ayayna gaareen xeebta galbeed ee Afrika." Wuxuu kaloo isla boggaas ku yiri: "waxaa xusid mudan inay fikradda dagaallada saliibiga ah oo muslimiinta lagu qaadayo qarniga shan iyo tobnaad uu iska beddelay siduu hore u ahaan jiray, oo uu hormar gaaray, oo meesha waagii hore muslimiinta looga hor imaan jiray xarbi dhiig ku daato oo ay ku jabaan qarniyada laba iyo tobnaad iyo saddex iyo tobnaad, markaan qarniga shan iyo tobnaad waa la ballaariyay dagaalkaas habkiisa, ayadoo qorshuhu noqday in muslimiinta looga yimaado xagga hore (oo ah Badda Cad iyo Falasdhiin iyo Shaam) iyo xagga koofureed (geeska Afrika), oo sidaas la isu qabto. Dariiqa xagga koofureed looga imaan lahaase tan iyo markaas yurubtu ma ayan aqoon, oo weiligeedba dhankaas adduunka ma ayan imaan. Markaasaa badmarenno soo ogaada la soo diray. Sidaasay bad mareennada zamannada dhexe oo ay yurub ku baratay dalalka kale waxaa ka dambeeyey qorshe diinta krishtaanka iyo la dagaallanka islaamka ku salaysan iyo gumaysiba.

Wuxuu kaloo bogga kow iyo toddobaatan ku yiri: "safarka dalmareenka baaridda iyo iyo barashada ee Bartholomeo Diaz wuxuu bilaabay sanadka kun afar boqol toddoba iyo sideetanka, awaamiirta uu boqorkiisa Yuxannas kan labaad (kun afar boqol kow iyo sideetan ilaa kun afar boqol shan iyo sagaashan) siiyayna waxaa ka mid ahaa inuu gaaro oo tago boqortooyada wadaadka krishtaanka ah ee Prester John." Boqorkaan krishtaanka ah iyo boqortooyadiisuba waxay yurub ku ahaayeen sheeko sheeko, iyo dhalanteed zamannada dhexe ee ma ahayn wax la ogyahay." Wuxuu hadana bogga laba iyo toddobaatan ku yiri: "sidaasoo ay tahayn, boqortooyadaas krishtaanka ah ee Prester John waxay ku xirantay caqiidadooda diiniga ahna saliibiga krishtaanka ah oo ay burtuqiisku u abuurteen kasoo hor jeedidda iyo colaadda muslimiinta. Sababtuna ay tahay inay u arkeen boqortooyadaas krishtaanka ahi tahay boqortooyada keli ah oo ku taalla yurub meel aan ahayn iyo yurub

dibaddeeda, ayna tahay midda lala kaashan karo in muslimiinta xagga hore iyo xagga dambe looga wada yimaado, oo la isu qabto." Wuxuu isla boggaas ku yiri: "amiirka Henry Al Mallaax (badmareenka) ayaa ahaa kan ugu horreeyey oo daneeya raadinta Prester John, si uu xaliif ula noqdo oo ay isu gaashaanbuursadaan. Danayntiisa Prester John waxay gaartay ilaa heer uu markuu Antao Goncalves u dirayay xeebta Afrikada galbeed uu la hadlay oo uu ku yiri: "gudashada xilkaan waxaad iigu qabanaysaa adeeg iyo dan wayn, oo anigu ma jeceli oo ma doonayo oo keli ah inaan ogaado xeebtaan oo keli ah iyo dhulka ka dambeeyaba, waxaanse doonayaa Hindiya iyo arliga wadaadka krishtaanka ah ee Prester John."

Waxaa xusid mudan inuu Henry helay khariidhooyin juqraafi ah oo tilmaamaya inay boqortooyada wadaadka Prester John ku taallo Afrika. Waxayna u badan tahay inay ergada amxaarada ah oo dalkiisa burtuqaal booqatay sanadka kun afar boqol laba iyo konton ay sidaas u sugtay." Wuxuu hadana bogga saddex iyo toddobaatan ku yiri: "amarku si kastaba ha ahaadee, boqorka Yuxaannaa kan labaad wuxuu u xil saaray Badru De Koofilhaan iyo saaxiibkiis Alfonso De Bayfaa arrinka raadinta Prester John, iyo inay soo arkaan beelaha ay wax ka baxaan ee hodanka ah ee ku yaalla Hindiya, ayagoo maraya xagga Badda Cad (oo yurub iyo Carabta u dhexeysa). Markaasay labada nini waxay kasoo baxeen Lishboona oo ay Naaboli soo aadeen, arliga talyaaniga, toddobada maajo ee sanadka kun afar boqol toddoba iyo sideetan. Naabolina waxay uga gudbeen jaziiradda Rhodes (oo maanta grigga ka tirsan), halkaasoo ay ka gateen shixnad malab ah, si ay ula safraan, si loo moodo laba nin oo ganacsato ah, siday kula taliyeen xubnaha ururka Al istibaar oo burtuqaal ku yaalla. Markaasay waxay raaceen doon u socota Al Iskandariyyah, ee arliga Masar, waxayna halkaas uga sii gudbeen Al Qaahirah. Markay Al Qaahirah tageen ayay waxay ku biireen safar morokkaan ah oo muslimiin ah, oo ay markay ahayd bisha Rabiic ee sanadka kun afar boqol sideed iyo sideetanka doon ula raaceen oo Cadan tageen, ayagoo maray Sawaakin. Markay Cadan tageen ayay labada nin kala leexdeen, oo uu Bayfaa aaday arliga amxaarada. Saaxiibkiis Koofilhaan wuxuu raacay doon geysay Kaanaanuur, halkaasoo uu uga sii gudbay Kalkattaa, arliga Hindiya, halkaasoo uu ku arkay tiro aad u badan oo tawaabil ah (waxa cunnada lagu darsado oo aan hore uso sheegnay). Wuxuu kaloo ogaaday inuu ganacsiga dibadda ee badeecadahaas ku jiro gacanta ganacsatada muslimiinta ah. Kaddibna Kalkatta wuxuu uga gudbay Jaawaa, ee arliga Indoneesiya, halkaasoo uu hadana dib uga soo laabtay oo uu uga gudbay Hormuz, oo ah xarunta ugu muhimsan ee Gacanka Carbeed. Kaddib, dhammaadka sanadka kun afar boqol sagaal iyo sideetanka wuxuu gooyey Badweynta Hindiya, uuna tegey Muzambiiq ee xeebta bari ee Afrika, halkaasoo uu ku arkay inay deggan yihiin dad badan oo Carab ah oo ka ganacsada dahabka dalkaas gudhiisa laga keeno. Kaddib wuxuu kusoo noqday Cadan bisha oktoobar ee sanadka kun afar boqol iyo sagaashan, wuxuuna uga sii gudbay Al Qaahirah. Sidaasaa waxaa ku go'day afar sano markuu burtuqaal kasoo bixitimay. Markuu Al Qaahirah yimid ayuu wuxuu go'aansaday inuu dalkiisa dib ugu laabto, kaddib markuu kasoo jeestay

hawshii loo xil saaray. Wuxuuna filanayay inuu saaxiibkiis Bayfaa la kulmi doono, wuxuuse ogaaday inuu dhintay. Si kastaba ha ahaatee, Koofilhaan wuxuu Al Qaahira kula kulmay laba nin oo yuhuud ah oo uu soo diray boqorka burtuqaal, sidayna warqad ku amraysa inuu dalkiisa dib ugu soo laabto, hadduu xilkii loo dhiibay gutay oo kasoo jeestay. Koofilhaanse wuxuu mid labada yuhuudi ka mid ah u dhiibay warbixin qoraal ah oo dheer, uuna boqorkiisa u dirayo, uuna uga warramayo meeluhuu tegey iyo wuxuu arkay. Kaddibna wuxuu soo aaday Jiddah, uuna uga sii gudbay Makkah, wuxuuna xirtay dharka cadcad ee xujayda, madaxana wuu xiirtay. Kaddibna Makkah wuxuu uga sii gudbay Al Madiinah Al Munawwarah, ayadana uga sii gudbay Siinaay, halkaasoo uu booqday Dayru Santa Katrina, oo ah kaniisad ay wadaddada krishtaanka ahi ku cibaadaystaan oo ku go'doomaan. Ugu Dambaystii wuxuu doon u raacay kun afar boqol saddex iyo sagaashanka arliga amxaarada, halkaasoo uu degay. Waxaa Koofilhaan loo haystaa inuu yahay ninka burtuqiis u dhashay oo ugu horreeyey oo labadiisa cagood arliga Hindiya saaray. Wuxuuna isagu u arkay inay boqortooyada wadaadka Prester John tahay al xabashah, midday yurub magac ahaan oo keli ah u tiqiin. Isagaasaa loo nisbeeyaa fadliga inuu u gogol xaaray gumaysiga burtuqiiska ee afrikada bari." Warkaan wuxuu Al Xuwayrii kasoo qaatay kitaabka uu dhigay Prestage Edgar lana yiraahdo The Portuguese Pioneers-London kun sagaal boqol saddex iyo soddon. Wuxuu kaloo bogga afar iyo sagaashan ku wariyay inuu boqorka burtuqiisku soo diray Tristao Da Cunha lixda maarso kun shan boqol iyo lix, uuna ku amray inuu tago jaziiradda Soqodhra (oo xeebta Soomaaliya ku taalla) oo u dhexeysa Gacanka Carbeed iyo Badda Cas, uuna halkaas ka dhiso qalcad, si uu donyaha islaamka uga celiyo inay galaan ama kasoo baxaan Badda Cas, ayna saldhig badeed burtuqiiska ugu noqoto."Waxaa intaas ku eg kitaabka Al Xuwayrii.

Wuxuu Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl bogga labaatanaad ee kitaabkiisa hoos ku xusan ku yiri: "xiriirka siyaasadeed ee laba shacbi ee Carabta iyo amxaarada waxaa la filayay inuu xasilo, waana qarniga lixaad rubuciisu markuu gudbay, haddayan ahaan lahayn damaca ay amxaaradu ka qabto inay gacanta ku dhigto ganacsiga mara Badda Cas oo dalalka Carabta mara, taas ayaana u sabab ahayd inay labadaas shacbi dagaallo dhex maro in mar ka badan. Laakiin dhacdada dhex martay sanadka shan boqol shan iyo labataan miilaadiga waxay yeelatay dabeecad uusan gobolku hore u aqoon, kuna saabsan kicinta dareenka diiniga ah, markaasoo ay amxaardu diinta ugu isticmaaleen inay hagoogtaan oo isku qariyaan oo ku daba dhuuntaan, si ay ku gaaraan bar tilmaameedyo diini ah, iyo kuwa kale oo siyaasi ah iyo kuwo saddexaad oo dhaqaale." Wuxuu kaloo bogga kow iyo labaatanaad ku yiri: "roomaanku waxay doonayeen oo damac ka qabeen inay gaaraan dalalka Carabta, ayagoo leh ujeedooyin diini iyo siyaasi iyo dhaqaale leh, waxaana u gogol xaaray gubidda nasaarada Najraan la gubay sanadka shan boqol laba iyo labataan, uu suurto gelisay inay Carabta kasoo weeraraan xagga koofureed ayagoo amxaarada adeegsanaya."

Amxaarada oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku duushay

Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl wuxuu bogga laba iyo labaatanaad ee kitaabkiisa hoos ku xusan ku yiri: "Markuu Al Najaashiyyu kii muslinka ahaa dhintay, waxaa xukunka qabtay boqor kale oo aan dariiqii Asmaxah (kan dhintay oo muslinka ahaa) qaadin inta ku saabsan inuu ilaaliyo xiriirka siyaasadeed ee wanaagsan ee ayaga iyo muslimiinta ka dhexeeya. Waxaadna mooddaa inuu xukunkiisa u baqay hadduu qalbi jileec u muujiyo islaamka siduu boqorkii horreeyey yeelay oo kale. Markaasuu wuxuu goostay inuu diididdiisa diintaan islaamka uu diidan yahay ku muujiyo si wax ku ool ah oo loo jeedo ee colaadeed. Markaasuu wuxuu soo diray maraakiib kusoo duusha Jiddah. Markaasay dadka Al Shucaybiyah (oo ahayd dekadda Makkah ee Jiddah ka horreysey) iyo dadka Jiddaba waxay arkeen maraakiibta amxaarada. Markaasuu warku wuxuu gaaray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo markaas uu soo diray Calqamah bin Mujazziz (Calqamah bin Mujazziz bin Al Acwar ibnu Jacdah bin Mucaath bin Ctwaarah bin Camr bin Mudlij Al Kinaanii) Al Mudlijyyi, oo wata ciidan ka kooban saddex boqol oo dagaal yahan, si uu uga hortago maraakiibtaas, kana hor istaago inay weeraraan dadka Jiddah deggan, ayna xeebta Al Xijaaz hadidaan. Markaasuu Calqamah xeebta yimid, uuna ciidankiisa badda la qaaday ilaa ay ka yimaadaan jaziirad badda ku taalla. Markaasay amxaaradu markay dareemeen imaatinka muslimiinta carareen oo ay dalkooda u noqdeen, ayadoo uusan dagaal dhex marin ayaga iyo ciidanka Calqamah. In kastoo uu duullaankaan xagga badda ah ee amxaardu uusan ku guulaysan wuxuu doonayay, waxay isla markaas muujisay colaadday amxaaradu u hayso islaanka iyo muslimiintaba. Muslimiinta horena way garteen colaaddaas, waxaana qanciyay waxa dhacay inuu arrinku yahay siday u garteen, waxay malaynayeenna uu dhacay. Zamanka Cumar bin Al Khadh-dhaabna, Allaha raalli ka noqdee, amxaaradu waxay kusoo duushay xeebta bari ee Badda Cas ee arliga muslimiinta. Markaasuu Cumar wuxuu usoo diray Calqamah bin Mujazziz Al Mudlijyyi inuu ku duulo arliga amxaarada sanadka labaatanaad ee Hijriga. Markaasuu ciidankaas wada dhintay, oo badda galeen. Markaasuu Cumar wuxuu goostay inuusan ciidan dambe badda u dirin, oo ayan sidaas muslimiintu ku dhiman." Al Doktooraah Saamiyah waxay bogga saddex iyo soddonaad ku tiri: "Duullaankaasu wuxuu muujiyay ruuxa colaadeed oo ay amxaaradu uurkeeda ugu hayso islaamka iyo muslimiintaba. Waxaadna mooddaa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isaguna sidaas oo kale u haystay. Taas ayaana u sabab ah inay axaadiith-tiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu muslimiinta uga digayo ay ka mid tahay: **"Utrukuu al xabashah maa tarakuukum"**, oo macnihiisu yahay: "iska daaya amxaarada intay ayaguna iska kiin daynayaan." Waxaa ayaduna dhacday duullaan colaadeed oo ay amxaaradu kusoo qaadeen beelaha islaamka ee Makkah, oofsashada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadeed iyo zamanka Khalifada Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, ayadoo ay amxaaradu soo weerartay xeebta bari ee Badda Cas, oo uu

markaas ibnu Al Khadh-dhaab u diray oo ku celiyay ciidan badda oo uu u diray arliga amxaarada sanadka labaatanaad ee Hijrada, una dhiganta sandka lix boqol iyo afartan, uuna taliye u yahay Calqamah Mujazziz Al Mudlijiyyi." Carabta Libiya oo ka mid ahaa askarta uu Mussooliiniga talyaaniga ahi ku qabsaday Addis Ababa iyo arliga amxaarada waxay reebeen war maahmaah noqday, oo markay xumaanta amxaarada iyo nacaybkeeda muslimiinta iyo dhaqan xumadooda arkeen waxay yiraahdeen: "amxaaro aragtayaa faranji (oo ah krishtaanka yurub) xaajji".

Amxaaro waa jilib qabiilka Carbeed ee Ximyar

Kitaabka la yiraahdo General History of Africa II, Ancient Civilizations of Africa, boogga saddex boqol iyo saddex iyo lixdan , ayna daabacday UNESCO International Scientific Committee for the Drafting of a General History of Africa ee Qarammada Midoobay wuxuu yiri: "Al Xabashah waxaa la oran jiray boqortooyo ku tiillay Waqooyi/Bariga Afrika oo dhulkeedu ahaa qiyaas saddex boqol oo kiiloomitir oo dhererka ah iyo boqol iyo lixdan ballaca ah. Qiyaas laba boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa waxaa kula jabay xeebtaas Badda Cas markab uu wax ka saarnaa ninka Suuriya u dhashay oo magaciisu ahaa Frumentius, ahaana krishtaan. Frumentius, oo kaniisadda amxaarada laga yiraahdo Abba Selama ama Kessate Brhan, oo macneheedu yahay aabaha nabadda, wuxuu noqday la taliyaha iyo khasnajiga boqorka dalkaas oo lagu wado inuu magaciisu ahaa Ella Amida, aabaha dhalay boqorka Ezana. Frumentius wuxuu kaloo macallin u noqday wiilka uu boqorku dhalay. Sidaas ayay diinta krishtaanku kusoo gashay gobolkaas." Kaddib waxaa gobolkaas daris la noqday boqortooyin toddoba ah oo muslimiinta deggantahay, oo ay qaarkood boqorro u yihiin rag u dhashay reer Bani Haashim iyo reer Bani Makhzuum iyo kuwo kaleba. Dawladdaasi markay krishtaanka noqotay waxay gaashaanbuur la noqotay dawladdaha krishtaanka ah ee qaaradda yurub ku yaalla, ayada dawladda wuxuu noqday, ilaa maantana yahay, la dagaallanka Diinta Islaamka iyo Muslimiintaba, Kacbadana, siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay waxaa aakhiru zamanka dumin doona nin ayaga ka dhashay. Kaddibna boqortooyadaasi way fidday, oo ay boqortooyooyinkii kale iyo qawmiyadihii kale leqday. Markay Muhaajiriinta asxaabta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arligaas imaanayaan, si ay rag muslimiin ah ee dalkaas u dhashay ii sheegeen, magaalo madaxda boqortooyadaasi uuna Al Najaashiyyu degganaa waxay ahayd magaalada la yiraahdo **Cadigrat**, oo ilaa dhawr kiiloomitir u jirta Aksuum, buuraha dushoodana ku taalla ee arliga Tigray. Dadka Muslimiinta ah ee dawladdaas degganaana waxaa la oran jiray Jabarti, sidaan annagu dadkaan muslinka ahayn gaalo u niraahno oo kale. Jabarti waxaa loogu bixiyay inay degi jireen magaalo arligaas ku taalla oo Jabarta (maantana la yiraahdo Harar) la oran jiray, kuna tiillay Bariga gobolka Shawa, siduu Mordechai Abir ugu wariyay Ethiopia and the Red Sea boogga kow iyo toban; J. Spencer Trimingham sidaas ayuu isaguna ku wariyay kitaabkiisa Islam in

Ethiopia, oo lagu daabacay Frank Cass & CO. Ltd. Oxford University Press ee dalka Ingiriiska, kun sagaal boqol shan iyo lixdan. bogga boqol iyo konton, uuna ku yiri: " .. the Muslim historians spoke of the territory of Zaila as the land of Jabarta; then the term was extended to all the Muslim Kingdoms of Southern Ethiopia, and, finally to all Ethiopian Muslims. It must be clearly understood that in no sense is it the ethnic name of a people", oo macneheedu yahay: "Mu' arrikhiinta muslimiinta ahi waxay ku tilmaameen beledka Zaylac inuu yahay beledka, ama waddanka, Jabarta; Markaas kaddib ayaa eraygaas waxaa loogu yeeri jiray muslimiinta Boqortooyinka ku yiillay koofurta Ethiopia, kaddibna looguba yeeri jiray muslimiinta Ethiopia oo idil. Waa in si caddaan ah loo gartaa inuusan eraygaani sina u ahayn magaca qabiil.". Sidoo kale fiiri Enrico Cerulli "Gli Emiri di Harar dal secolo XVI alla conquista Egiziana (1875)", laguna daabacay Roma-La Libreria dello Stato-1942-XX, kuna dhigan afka Carabiga iyo talyaanigaba, kana koobanba kow ama dhawr iyo labaatan warqadood. Afka Dawladda Islaamka ah ee Hararna Guddoomiyaha Gobolka waxaa la oran jiray Garaad, kan Degmadana Malaaq.

Kitaabka Al Sayuudhii: Amxaarada

Al Sayuudhii wuxuu kitaabkiisa Rafcu Sha'ni Al Xubshaani, oo Jaamacadda Al Azhar ay daabacday, uuna hubiyey Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl oo macallin ka ah Jaamacadda Al Azhar ee Al Qaahirah, bogga kow iyo lixdanaad wuxuu Samurah bin Jundub ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Saam abuu Al Carabi wa Yaafith abuu Al Ruumi wa Xaam abuu Al Xabash."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Saam (waa ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay Carabta, Yaafith (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay roomaanka, Xaamna (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay xabshada (oo ah dadka madow oo dhan, ayagoo dhammantood isaga ku abtirsada)." Waxaa wariyay Al Tarmathii, yirina waa Xadiith Xasan Waxaa kaloo wariyay Ibnu Sacad, ibnu Kathiir oo Al Bidaayah iyo Nihaayah ku wariyay, iyo Imaam Axmad iyo Al Dhabarii iyo kuwo kaleba. Al Sayuudhii wuxuu kaloo bogga afar iyo lixnaad ee isla kitaabkiisaas Abuu Hurayrah uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Walada Nuuxun Saam wa Xaam wa Yaafith. Fa walada Saam Al Carab wa Faaris wa Al Ruum wa al khayru fiihim. Wa walada Yaafith Ya'juuj wa Ma'juuj wa al turka wa al Saqaalibata wa laa khayra fiihim. Wa walada li Xaamin Al Qibdhu wa al Barbaru wa Al Suudaanu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Nuux wuxuu dhalay Saam iyo Xaam iyo Yaafith. Markaasuu Saam wuxuu dhalay Carabta iyo Faaris (oo ah iiraaniyiinta) iyo Roomaanka, khayrkuna ayaguu ku jiraa. Yaafithna wuxuu dhalay Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Saqaalibah, khayrma ma laha, Xaamna waxaa loo dhalay Al Qibdhu (oo Masar degah) iyo Barbarta iyo dadka madow." Xadiithka waxaa kaloo uu Ibnu Xajar Al Casqalaanii ku wariyay Fatxu Al Baarii, kaddibna ku daray oo yiri: "sililaddiisana taag darro ayaa ku sugan." Waxaa kaloo wariyay ibnu

Kathiir (Al Bidaayah wa al Nihaayah).

Al Mascuudii wuxuu Muruuju Al Th-thahabi ku sheegay inayan dadka wax baara isku khilaafsanyan inuu Yaafith ina Nuux yahay kan ugu yar ee wiilasha Nuux, iyo inay dhashiisa ka mid yihiin Al Afranjah (oo ah dadka Yurub degah qaarkood) iyo al Saqaalibah iyo Al Nuukubard iyo Al Ashbaan iyo Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Khazar (oo ah dadka degah dhulka Bari iyo Waqooyi ka xigah dalka Turgiga oo buuraaleyda Al Qawqaaz kasii dambeeya iyo Badda Caspian, ayna magaalo madax u ahaan jirtay Itiil, lehna indhaha yar sida shiinaha, siduu Lisaanu Al Carab u yiri). Al Saqaalibah waa dhasha Maar bin Yaafith bin Nuux isagayna ka farcameen dhammaan jinsiga Saqaalibada, waxayna degaan Al Judaa ilaa ay kala xiriiraan Al Maghrib, waana jinsiyo kala duwan oo ay dagaallo dhex yaallaan, qaarkoodna ay Nasraaniyada ka diin yeeshaan, qaaraana ayan Kitaab lahayn." (Muruuju Al Thahab 2/32-34)

Ibnu Kathiir wuxuu Al Bidaayah wa Al Nihaayah (2/110) ku yiri: "Yaafith ayaa dhalay Turkiga. Ya'juuj iyo Ma'juuj waa qayb turkiga ka mid ah waana dadka la yiraahdo Maghuul (oo hadda la yiraahdo Mongol oo shiinaha la dariska ah, ama kaba tirsan). Turkigana waxaa magacoodaan ah turki loogu bixiyay ayadoo markuu Thuu Al Qarnayn biyo xireenka dhisay, uuna Ya'juuj iyo M'ajuuj uu gadaashiisa ku takooray waxaa ka hartay koox aan fasaadkooda oo kale gaarin, markaasay ka tageen, markaasaa turki lagu magacaabay, oo ah kuwa laga tegey."

Quudh bin Xaam wuxuu guursaday gabadha la yiraahdo Bukht uuna dhalay Bitawiil, markaasey waxay u dhashay wiil uu u bixiyay Qibdh, oo ay Masaaridu ka farcamdeen. Wiilka kale ee Xaam, magaciisuna yahay Kanaan wuxuu guursaday Bukht ina Bitawiil walaasheed magaceedu yahay Artiil, markaasey waxay u dhashay wiilasha ay dadka madow oo idil ku abtirsadaan, ayna ka mid yihiin Nuubah (oo ah aabaha dadka Suudaan degah oo Nuubiyiinta la yiraahdo) iyo Fazaan.

Al Xabashah waa Carabta jaziiradda ka guurtay

Kitaabka la yiraahdo Rafcu sha'ni al xubshaani waxaa allifay Al Imaamu al xaafitu Jalaalu Al ddiini Cabdu Al Rrraxmaan Al Ssayuudhii (oo dhintay sanadka sagaal boqol iyo kow iyo toban ee Hijrada), ahna mid ka mid ah labada nin oo alliftay kitaabka tafsiirka ee Tafsiiru Al Jalaalayni. Kitaabkaanna waxaa lagu daabacay Masar sanadka kun afar boqol iyo kow iyo toban, una dhiganta kun iyo sagaal boqol kow iyo sagaashan miilaadiga ah, waxaana sharxay Al Doktor Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl oo kaaliye macallin ku ah taariikhda islaamka ee Kulliyada afka Carabiga ee Al Qaahirah ee Jaamacada Al Azhar. "Erayga Al Xabashah", ayuu Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl yiri, isagoo sharxay kitaabkaan "waa eray Carabi ah oo macnihiisu yahay jinsiyado isku darsamay." Taasi waxaa weeye dad kala qabiil iyo jinsi ah oo dal ku wada nool oo sidaan isugu darsamay. Dr. Muxammad wuxuu yiri: "Waxay bilaabatay in dalkaas magacaas loo bixiyay oo loogu yeeri jiray tan iyo waagay bilaabatay inay si is daba joog dalkaas ugu guuraan dad Carab ah oo ka haajaray Jaziiradda

Carabta guud ahaan, gaar ahaanna Yaman ka guuray qarniga tobanaad (waa kun sano ka hor) dhalashada Nabi Ciise. Bilawga arrinkana waxaa xabashah la oran jiray oo magacaas loogu yeeli jiray Carabtaas guurtay. Markayse dalkaas ku bateen, wax ku oolnimadooduna ay korortay, ayna ka kor mareen oo ay ka gacan sarraadeen dadkii arligaas hore u degganaa, ayaa erayga "Al Xabashah" waxaa loo bixiyay gobolkaas oo idil. Sidaas ayay dadkii arligaas u hijrooday oo asalkooduna Saam ku abtirsan jiray waxay ku qasmeen oo ay is dhex galeen kuwii Xaam ku abtirsanayey. Arliga Xabashadana waxaa loo yaqaanna dhulka maanta la yiraahdo "Beesha Geeska Afrika."

Al Sayuudhii wuxuu boogga saddex boqol iyo shan ee isla kitaabkiisa ku dhigay: "Waxaa arliga xabashada Nabiga, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, uga yimid oo asxaabtiisa ka mid noqday (ragga la kala yiraahdo) Thuu Mikhbar, iyo Thuu Duujan iyo Thuu Manaaxib waxaa kaloo la yiraahdaa Thuu Mataadix. Markaasuu Nabigu, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: "**Intasabuu**", oo macneheedu yahay: "Nasabkiinna sheega, ama abtirsada". Markaasuu Thuu Mihdam wuxuu gabay ku yiri:

1. Zamankii Thuu Al Qarnayn seefeheenu waxay ahaayeen kuwo af badan birta xooga lehna kala dhanbala
2. Huudna (waa Nabi Huud) waa aabeheen, aabaha dadkoo idil Zamanka Al Axqaaf (kuna xusan Suuratu Al Axqaaf), xoog iyo ammaanba
3. Qofka aabihiis ka indha la' oo moog yeelkiise annagu waxaan leenahay aabe cizsi iyo xusid leh.

Intaas kore waa warka Al Sayuudhii. Dr Muxammad oo baytka labaad ee qasiidadaa sharxayana wuxuu yiri: "Gabaygaanna wuxuu ayyidayaa abtirsiga ay qabaa'ilka amxaarada ee arliga xabashada ay ku abtirsadaan qabiilada Ximyar Al Qaxdhaaniyyah (oo Qaxdhaan ku abtirsata) oo degtah koofurta Jaziirada Carabta, ayadoo ay Boqortooyada Ximyar koobi jirtay (Yaman iyo) arliga xabashada marka Baabu Al Mandab laga tillaabo (waana si la mid ah dalka Masar oo ku kala yaalla qaaradda afrika iyo Aasiya oo Siinaay ku taallo). Taasina waxay noo cilleyneysaa oo ay noo sheegeysaa sababta xiriirka dhabiiciga ah ee xoogga badan ee ka dhexeeya Jaziirada Carabta iyo xabshada, iyo xiriirka adag oo faca wayn oo tan iyo waayihii hore iyo burburka biyo xireenka Ma'rib." Al Xaafith ibnu Xajar Al Casqalaanii wuxuu kitaabkiisa taraajimta ah ee Tahthiibu Al Tahthiib markuu ka warramayo ninka xabashada u dhashay oo magaciisu yahay Mamdhuur abuu Salaam Al Xabashii yiri: "Waxaa al Xabash loo yiri ayadoo loo nisbeeyey jilib qabiil Ximyar ka mid ah" (Ximyar waa qabiilka Carbeed oo Yaman degah, waana qabiilka boqorka Tubbac oo Quraanka ku xusan). Wuxuu kaloo ibnu Xajar yiri: "Abuu Nasr ibnu Maakuulaa wuxuu yiri: "uma uusan dhalan (arliga) al xabashah, waxaase loo nisbeeyey jilib ka mid ah Ximyar; waxaana sidaas xusay ibnu Maciin iyo abuu Cubayd." Sidaas ayaa waxaa ku jira qabiil Carbeed oo Xabash la yiraahdo. Sidoo kale Al Sayuudhii markuu kitaabkiisa Rafcu Sha'ni Al Xubshaani, bogga saddex boqol iyo saddex iyo afartan ka warramayo isla ninkaas Mamdhuur Abuu Salaam Al Xabashii wuxuu yiri: "Kama uusan dhalan Al Xabashah (oo Afrika degah) waxaase loo nisbeeyey

Xabsh oo ah badhn (jilib, ama laan) ka mid ah Ximyar.” Waa intaas kitaabk Al Ssayuudhii.

Al Doktorah Saamiyah Cabdu Al Caziiz Junaysii, oo oo doktooraah ku samaysay taariikhda islaamka waxay kitaabkeeda Islaamu Najaashii Al Xabashah oo sanadka kun afar boqol kow iyo labaat, una dhiganta laba kun iyo kow lagu daabacay Daaru Al Fikri Al Carabii ee Al Qaahirah arliga Masar, waxay bogga kow iyo tobnaad ku tiri: "erayga ethiopia waa magac fac wayn oo lagu xusay kutubbada griigga horreeyey iyo ghayrkoodba ee kutubbada taariikhda iyo diintaba, macnihiisuna afka grigga waa "midka wajiga guban" -oo macnihiisu yahay midka midabkiisu madow yahay. Kutubbada maraajicda ah qaarkood ee horreeyey, uuna ugu horreeyo "Al Cahdu Al Qadiimu" (ahna Old Testament, kitaabka krishtaanku haysto) wuxuu magacaas ugu yeeri jireen boqortooyinka Nuubiyiinta ah (Suudaan iyo koofurta Masar) oo saameeyey xadaarada Masar ee horreysey. Qaarkoodna waxayba magacaas ugu yeereen dhammaan dadka qaaradda Afrika deggan oo idil, inta saxrada ka hooseysa iyo dhanka kore ee wabiga Niil." Waa intaas warkeedu. Sidaasayan ethiopia macneheedu wuxuu u dhigmaa afrikaan ama madow, ku ahayna amxaarada.

Encyclopaedia Britannica: "The Tigre are descendants of Semitic conquerors who crossed the Red Sea from southern Arabia between the 6th century BC and the first century AD. These people mingled with the already-present Cushitic population and founded the Christian Kingdom of Aksum, which had its capital in the Tigray highlands.. A Christian people who make their living by farming, they are culturally similar to their southern neighbours, the Amhara", oo macneheedu yahay: "dadka Tigre waa dhasha dad ka yimid koofurta jaziiradda Carabta, kaddib markay kasoo tillaabeen Badda Cas, oo qabsaday dhulkaas inta u dhexeysay qarniga lixaad ee ka horreysay dhalashada Ciise ilaa qarniga koowaad ee ka dambeeyay dhalashadiisa. Dadkaasu waxay ku qasmeen dadka kushiitiga ah ee halkaas degganaa, waxayna aasaaseen boqortooyada Aksuum, oo caasimadeedu ku taalla buuraaleyda Tigray. Waana dad krishtaan ah oo beeraalay ah, iskuna dhaqan ay yihiin dariskooda amxaarada ah."

Encyclopediya Britannica wuxuu yiri: "Amhara: "As descendants of a southward movement of ancient Semitic conquerors who mingled with the indogenous Cushitic peoples, they inhabit much of the central and western parts of present-day Ethiopia." Warkaas macnihiisu waxaa weeyey: "amxaaradu waa dhasha dad ah dhasha Saam (bin Nuux, waana Carabta) oo qabsaday, kaddib markay Badda Cas kasoo tillaabeen, oo markaas ku qasmay dadkii bartaas degganaa oo ahaa dhasha Kuush (dhasha Xaam bin Nuux). Waxayna deggan yihiin inta badan bartamaha iyo galbeedka dhulka maanta Ethiopia la yiraahdo." Wuxuu kaloo yiri: "In the mid 15th century Ethiopia resumed contact with the christian world when ethiopian monks attended an ecumenical council in Florence. European christians believed that they had found the legendary kingdom of Prester John, a powerful christian sovereign created in the minds of Europeans during the crusades as a potential ally against islam", oo macnihiisu yahay: "bartamaha qarniga shan iyo tobnaad

Ethiopia waxay soo celisay xiriirkay la lahayd caalamka krishtaanka ah markay wadaadooda krishtaanka ahi ka qayb galeen shirka diineed ee lagu qabtay Firenze (dalka talyaaniga). Krishtaanka yurub waxay aaminsanaayeen inay amxaaradu tahay oo ay sidaas ku heleen boqortooyada laga sheekeeynayay ee Prester John, oo ku abuurmay maskaxda krishtaanka intay socdeen dagaallada saliibiyiintu, una arkayeen xulafadooda iyo gaashaanbuurtooda la dagallaanka diinta islaamka."

Kitaabka Al Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami

Amxaarada

Kitaabka la yiraahdo **Al Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami** waxaa allifay Abuu Al Cabbaas **Al Xusaynii** Al Cubaydii Axmad bin Calii bin Cabdu Al Qaadir ibnu Muxammad Taqiyyu Al Ddiini **Al Maqriizii**, taariikh yahanka arliga Masar, asalkiisuna uu yahay gobolka Bacalbak ee Lubnaan, looma nisbeeyey tuulada Al Maqaarizah, siduu Al Zereklee wariyay. Wuxuu ku dhashay, wax ku bartay kuna dhintay Al Qaahirah, arliga Masar, halkaasoo uu xilal badan oo diini ah ka qabtay, sida Imaamnimada, Khadhiibnimada iyo kuwo kaleba. Sanadka sideed boqol iyo toban wuxuu tegey Dimishiq isagoo uu la socdo wiilkiisa Al Naasir, halkaasoo loogu soo jeediyey inuu Qaallinnimada Dimishiq qabto, uuna diiday. Wuxuu noolaa inta u dhexeysa toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatanka ilaa sideed boqol iyo shan iyo afartanka Hijriga ah, una dhigantah kun iyo saddex boqol iyo shan iyo lixdan ilaa kun iyo afar boqol iyo kow iyo afartan miiladiga. Ilaa laba boqol oo kutub ayuuna allifay. Al Maqriizii waa dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo ku abtirsada Al Xusayn bin Faadhimah, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam. Kitaabkaan waxaa lagu daabacay sanadka miiladiga ah ee kun iyo sideed boqol iyo shan iyo sagaashan madbacada Madhbcatu Al Ta'liif ee Al Qaahirah, arliga Masar, waana kitaab yar oo ka kooban toddoba iyo labaatan bog. Al Maqriizii wuxuu kitaabkaas ku yiri: "Arliga xabashada xuduudkisa bari ee waqooyiga xiga waa Badda Hindiya ee marta Baabu Al Mandab ee Yaman (waana Badda Cas). Xagga galbeedkana xadkiisu waa arliga Al Takruur ee xigta arliga Yaman (waana Tigrai). Dhulkeeda waxaa ugu horreeya (Waana marka xagga Makkah Al Mukarramah laga yimaado) lama degaan ku yaalla meel la yiraahdo Waadi Barakah oo loo maro si loo tago Saxrat oo hore u ahaan jirtay magaalo madaxda boqortooyada, waxaana kaloo la yiraahdaa Akhsharam (Aksuum miyaa?), waxaana kaloo la yiraahdaa Nahru Furtaa oo ahayd fadhiga boqorka. Waxaa ku xiga gobolka la yiraahdo Amxaaraa (Oo ah gabol gobollada ka mid ah) oo ay hadda caasimada boqortooyadu ku taallo, oo kaloo lagu magacaabo Marcadii. Kaddibna gobolka Shaawah, kaddibna gobolka Daamuut, kaddibna gobolka Al Zinji, kaddibna gobolka Cadal Al Umaraa', kaddibna gobolka Xamaasaa, kaddibna gobolka Baariyaa, kaddibna gobolka muslimiinta ee la yiraahdo Zaylac.

Gobol kasta ee laba iyo tobankaas gobol ka mid ahi wuxuu leeyahay oo u taliya boqorkeeda. Dhammaantoodna boqorradaasu waxay hoos yimaadaan Al Xadhiyyu oo afka Carabiga macnihiisu ku yahay Suldaanka, oo ay hoostiisa yimaadaan sagaal iyo sagaashan boqor oo isagu boqolka ku buuxiyo. Boqorradaas-se dalalkoodu annaga agteenna caan la yaqaano kama aha. Arliga xabashadoo idil waxay wax ku beertaan roobka, sanadkiiba laba jeer, markaasey sanadkiiba laba goor beerta miro ka goostaan. Waxaana ku badan agtooda roobka usoo da'a, iyo biriqda soo dhacda. Waxayna leeyihiin geedo fara badan, ayna ka mid yihiin kuwo midkoodba ay hoostiisa harsan karaan laba boqol o fardooley ah. Geedhooda waxaa ka mid ah geedka Al Abnuus, waxayna leeyahiin al qinaa oo laba nooc ah mid buuxa iyo mid gudaha ka maran. Waxayna leeyihiin dhir aan dalka Masar iyo Shaam midna laga aqoon iyo Ciraaq toona. Waxayna leeyihiin macdanta birta, iyo macdanta dahabka , beledkooda meelo ka mid ahna waxaa laga helaa macdanta qalinka. Abeesooyinkoodu way waaweyn yihiin, ilaa heer ay abeesadu ku istaageyso buurta dhaladeeda oo ay hawada ku noqneyso sida qaansada quzax oo kale xagga weynaanteed ama xagga midabkeeda. Nin aan ku kalsoonahay wuxuu ii sheegay inuu taas indhihiisa ku arkay, waxayna leeyihiin saaxiriin dabaysha joojinaya. Markaasuu suldaanku wuxuu amraa in la garaaco saaxiriintaas, markaasaa la garaacaa ilaa ay dabaysho mar kale ka socoto. Waxayna leeyihiin digaagga xabashada kuna nool barriga, waxayna leeyihiin digaag biyaha ku nool, waana al badh-dhah ama boolada kuna nool biyaha fadhiya ee gobolka Hadyah ee beledka Zaylac, wuxuuna ka dhashaa biyahaan.

Diinta amxaarada

Amxaaradu waa inay wadaad krishtaan ah leeyihiin, uuna magacaabo Badhriiqa, waana wadaadka weyn ee krishtaanka math-habkiisu yahay Al Yacquubiyyaah ee deggan Masar. Badhriiqa Masar, kaddib markuu suldaanka amxaaradu weydiisto suldaanka Masar, uuna u dhigo warqad uu ergay ugu dhiibo ayna la socoto hadiyad. Markaasuu madaxa kaniisadda Masar wadaad usoo magacaabaa dalka Masar u dhashay. Amxaaraduna waa dad diinta krishtaanka ka diin yeesha tan iyo waa sii horresay. Amxaaradu waxay haystaan math-habka Al Yacquubiyah waxayna diintoodu ku yihiin mutacassibiin si xad dhaaf ah, wayna colaadiyaan inta khilaafta diintooda o idil, diin kasta ha lahaadaane, colaadin xoog badan. Waxayna colaadiyaan firqada krishtaanka ah ee Al Malakiyyah (waana midda boqorka roomaanka raacsan ee Rooma fadhiya, oo malik waa boqor). Wuxuuba nin haysta Al Malakiyyah oo dalka amxaarada galay ii sheegay inuu muujiyay inuu yahay Yacquubii cabsi uu ka qabo in la dilo hadday ogaadaan inuu malakii yahay. (Maantana diinta amxaarada waa krishtaanka orthodox la yiraahdo, waxayna raacsan tahay kaniisadda Al Iskandariyyah ku taalla ee dalka Masar, uuna madax u yahay, waana markii dhawr sano ka hor warkooda iigu dambeysey, ninka Masar u dhashay ee la yiraahdo Papa Shanuuda Kan Saddexaad. Sidaas ayaa diinta amxaarada waxa looga xukumaa dalka Masar. Laanta krishtaanka oo ay haystaanna waxaa la yiraahdaa monophysite oo macnihiisu yahay inay

aaminsan yihiin inuusan Ciise ina Maryama Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, dad bashar ahayne uuse yahay Ilaah.).

Amxaaradu waxay xuntaa hilibaha ceeriin

Amxaaradu waxay deggan tahay guryo qoryo iyo caws ka samysan xaarka lo'da lagu salaaxay. Waxayna cunaan hilibaha ceeriin, oo wuxuuba ii sheegay nin goob joog ka ahaa oo indhihiisa kusoo arkay boqorkooda Daauud bin Sayf Arcad oo cunaya kirishka lo'da, oo ah caloosha iyo xiidmaha, sac oo ceeriin, kuna cunaya waxa ku dhex jira oo ku haray oo uuska ah oo kasoo dareeraya qalkiisa iyo afkiisaba. Wuxuu kaloo ninkaasu indhihiisa ku arkay nin digaagad cunaya ayadoo weli nool oo qaylineysa.

Qaawanaanta amxaarada

Amxaaradu way qaawan yihiin, mana yaqaannaan dharka la tolayba, dharkase way garbo saartaan ama ay dhexda ku xirtaan.

Nidaamdarrada dawladda amxaarada

Suldaanku diiwaan maba laha arrimaha boqortooyada lagu diiwaan geliyo, oo markuu xarbi aadayo wuxuu askartiisa amraa inuu nin walba dhagax qaato oo uu meel uu u tilmaamay dhigo. Markaasaa markuu ciidanku dagaalka kasoo laabto ayuu askari walba hal dhagax meeshaas ka qaataa. Tirada dhagaxda soo harta ayay ku ogaadaan inta nin oo laga soo dilay.

Masar ayaa amxaarada hub u sameysay

Markaasuu markuu boqor noqday Daauud bin Sayf Arcad sanadka sideed boqol iyo laba iyo toban ayaa waxaa dabadiis la boqray wiilkiisa Theodorus, kanoo dhakhsaba dhintay, laguna beddelay walaalkiis Isxaaq bin Daauud ibnu Sayf Arcad, oo aan arkay kuwo leh waxaa la yiraahdaa Abram. Markaasuu amarkiisu weynaaday, ayna u sabab ahayd inuu nin ka mid ah mamaalikta Al Juraakisah ee Zarkaash ee arliga Masar u yimid boqorka oo uu la degay, una sameeyey hub xoog leh oo ka kooban qalabka dagaalka sida seefaha, warammada iyo waxa la midka ahba. Horena hubkoodu wuxuu ahaa hootada oo ay gani jireen oo keli ah.

Masar ayaa amxaarada siisay hub casri ah, bartayna xeel dagaal, nidaam dawladeed iyo diiwaanna u dejisay

Kaddibna waxaa dawladda Masar uga yimid nin la yiraahdo Dhanbaqaa oo ciidankiisa baray isticmaalka hubka sida seefaha wax loogu dilo iyo nishaabkaba iyo fardo fuulka iyo ganidda waranka iyo xeeladaha dagaalkaba. . Waxaa kaloo Masar uga yimid nin krishtaan ah oo la yiraahdo Fakhru Al Dawlah, markaasuu boqortooyada u nidaamiyay, uuna habka canshuurta

maalka lagu soo aruuriyo u dejiyay oo uu sidaas maal ku helay, diiwaanna wuu u dejiyay. Markaasuu wuxuu noqday boqor awood leh iyo diiwaanba, kaddib markay boqortooyadiisu iyo tan iyo aabayaalkiisba ay ahayd mid aan nidaam lahayn iyo diiwaan iyo qaanuun toona. Markaasey umuurtu u hagaageen, uuna raaciyadiisa uga soocmay isagoo xirtay dhar qurxoon, kaddib markuu usoo bixi jiray raaciyadiisa isagoo qaawan, madaxana ku xirtay maro cagaaran. Markaasuu Isxaaq wuxuu soo mari jiray isagoo daabad saaran daabado badanna ay la socdaan oo haybad leh. Nin arkayna wuxuba ii sheegay inuu arkay isagoo maraya isagoo faraskiisa saaran oo fardana la socdaan gacanta midigna ku haysta krishto yaaquut guduudan laga sameeyey oo uu la saaray bawdadiisa ayadoo ay labada daraf ee krishtadu gacantiisa si cad oo weyn uga muuqdaan. Markaasey markay dawladdiisu ay ilbaxday, xoogna uu yeeshay, ayay shayaadiintiisu waxay ku waswaasiyeen oo u sheegeen inuu boqortooyooyinka islaamka qaato. Markaasuu weeraray intooda gacantiisa hoostiisa ku jirta oo boqorrada al xabashah ka mid ah ee muslimiinta ah, kuna dhigay waxyaalo fool xun oo muddo dheer socoday, uuna dad kasoo qafaalay, uuna dad badan oo tiradooda Ilaahayga abuuray Subxaanahu oo keli uu og yahay ka addoonsaday. Markaasay dawladda muslimiintu halkaas ka baa'ba'day oo zuushay, siduu warkeedu noogu imaan doono inshaa'aAllaahu Tacaalaa. Kaddibna wuxuu waraaqo u dhigay boqorrada gaalada yurub isagoo ku boorrinaya inay isaga kula kulmaan oo ay iska kaashadaan zuulinta iyo tirtiridda dawladda islaamka. Taas ayuuna kula heshiiyey. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa aargoosigiisa usoo dedejiyay, uuna dilay markaas dabadeed bisha Thii Al Xijjah ee sanadka sideed boqol iyo saddex iyo soddon.

Waxaa amxaarada lagu salliday boqorka Jamaalu Al Dini bin Sacdu Al Diini , kaasoo dhibaato waawyn u geystey amxaarada iyo boqorkoodaas, ummaddoodana ka laayey, kana qafaashay ummad dhan oo buuxisay arliga xagga Yaman iyo Hindiya iyo Xijaaz iyo Masar iyo Shaam iyo Rooma, oo addoonnimo loogu gatay.

Isxaaqaas aan soo sheegnay dabadiis waxaa la caleemo saaray wiilkiisa Andraawus, oo dhintay afar bilood kaddib caleemo saarkiisa. Kaddibna waxaa la caleemo saaray adeerkiis Xarbanaai bin Daaud bin Sayf Arcad, kanoo uusan xukunkiisu dheeraan, isagoo dhintay bisha Ramadaan ee sanadka afar iyo soddon. Markaasaa waxaa beddelkiisa la boqray Salmuun bin Isxaaq bin Daaud, kanoo isaguna degdeg u dhintay. Sidaasey amxaaradu waxay ku yeelatay sanad gudihiisa ama in ku simanba afar boqor. Dagaalanka muslimiintuna wuu ku sii socday, ayagoo la dilayo, la qafaalayo, la addoonsanayo, la gubayo, laga ghaniimeysanayana. Markaasaa waxaa ku faafay dalka amxaarada daacuun xun sanadka sideed boqol iyo sagaal iyo soddon uuna suldaanku ku dhintay iyo khalqi weynba, ilaa heer laga yiraahdo inuu dalku maran yahay ayadoo uu dadkiisu wada dhintay. Arligana Ilaahay ayaa dhaxlaya iyo inta korkiisa ku suganba Isagaana ugu khayr badan inta wax dhaxasha.

Warka dalka Zaylac

Arliga Zaylac dhererkiisu xagga barriga iyo baddaba waxaa loo kala socdaa laba bilood, ballaciisana in ka badan laba bilood. Dhulkeeda intiisa badanna waa saxra lama degaan ah. Inta la deggan yahayna dhererkeeda waxaa loo kala socdaa saddex iyo afartan maalmood, balleceedana afartan maalmood. Arliga Zaylac waxay u qaybsantahay toddoba boqortooyo, o kala ah: **(Kow)**Boqortooyada **Ufaaat** oo dhererkeeda shan iyo labaatan maalmood loo kala socdo, balleceedana labaatan maalmood, waana la wada deggan yahay, oo waxaa ku wada yaalla tuulooyin. Ascaartuna waa rakhiis, waxaana sidaas ii sheegay Al Shaykhu al mucammar al adiib al shaacir Shihaabu Al Diini Axmad bin Cabdu Al Khaaliq bin Muxammad Khalaf bin Muxammad Al Mujaasii Al Maghribii, midka dalmareenka ah, Allaha u naxariistee oo yiri: "Waxaan magaalada Ufaaat ku arkay waaga la degganaa mooska oo lagu gadayo laantiiba rubuc Dirham, ayna ku yaalliin qiyaas boqol moos. Waxaanna arkay hilibka oo lagu gadayo daabiq walba ahna soddon rodol hal Dirham iyo nus. Boqorka Ufaaat ayaa Zaylac xukuma. Dadka deggan intiisa badani waxay ku taagan yihiin math-habka shaaficiga. Zamankeennana waxaa ku batay math-habka Al Xanafiyah. Dadkeeduna wuxuu ku hadlaa afka xaabshada, waxay kaloona ku hadlaan Carabiga. Boqortooyadaani waxay leedahay magaalooyin badan, boqorkeeduna wuxuu ku fariistaa kursi, wuxuuna daabadda fuulaa isagoo ay dad badani la socdaan muusikana lagu hortumayo. Waxay leeyihiin fawaakih iyo qasabka sokorta iyo dhir aan laga aqoon Masar iyo Shaam uuna ka mid yahay geed la yiraahdo Jaat oo aan miro dhalin, waxaana la cuna caleentiisa oo u eg caleenta geedka naarajiinta, Geedkaasu wuxuu badiyaa fahmada, waxaana marka la cuno lasoo xusuustaa waxyaalihi la halmaamay, waana la farxaa, wuxuuna yareeyey rabidda cunnada iyo gogol galka. Hurdaduna way yaraataa. Dadka baladkaan degganna aad ayay u jecel yihiin cunidda geedkaan, gaar ahaan culummada. Ufaaat waxaa dahabka looga keenaa Daamuu iyo Suxaam oo ah laba meelood oo macdanta laga qodo oo arliga xabashada ku yaalla, waxayna wax ku kala gataan dahabka." **(Laba)** Boqortooyada **Dawaaraa** oo dhererkeedu yahay shan maalin socod, ballaceeduna laba maalin socod. Dadkeedu waxay ku taagan yihiin math-habka Al Xanafiyah. Lacagata ay wax ku kala gataanna waa lacag macdanta birta laga sameeyey, waxaana la yiraahdaa Xanukah, oo dhererkeedu la mid yahay cirbadda ballaceeduna saddex cirbadood. Sacii waxaa lagu gataa shan kun oo xanukah, neefka ariga ahna saddex kun oo xanukah. Boqortooyadaan waxay daris la tahay Ufaaat. **(Saddex)** Boqortooyada **Araabiinii**, oo dhererkeedu yahay afar maalmood ballaceeduna sidoo kale. Dadkeeduna waxay haystaan math-habka Al Xanafiyah. Waxayna ku xigtaa Dawaaraa, dadkeeduna waa sidaa kuwaasoo kale xagga mucaamalada, waa wax kala gadashadee, iyo ghayrkeedba. **(Afar)** Boqortooyada **Hadyah**, oo dhererkeedu yahay sideed maalmood, ballaceeduna sagaal maalmood. Boqorkeeda ayaana dhammaantood ugu askar badan. Waxayna u labbistaan sida dadka Arabiini, wax kala gadashaba ha ahaatee. Boqortooyadaan ayaa la keena ragga addoommada ah oo la

dhufaanay oo arliga Masar looga yaqanno al dhawaashiyah oo midkoodba la yiraahdo dhawaashii. Boqorka amxaaradu wuxuu mamnuucay dhufaanidda addoomadda, si xoog leh ayuuna u diiday. Markaasey tuugadu waxay keenaan magaalada Washluu oo dadkeedu ay doqommo aan diin lahayn yihiin. Markaasaa halkaas addoommada lagu dhufaanay, ayaadoo ayan magaalo kale oo arliga xabashada taas oggolayn. Markaasaa ragga la dhufaanay waxaa loo qaada boqortooyada Hadyah oo markaas mar kale mindi loo qaataa oo kaadi mareenka loo furaa ayadoo ay malaxi xirtay. Markaasaa la daaweeyaa ilaa ay ka bogsoodaan oo ay dhasha dadka deggan Hadyah sidaas baarri ugu noqdaan. Waxaana yar inta raggaas la dhufaanay ka noolaataa, ayadoo Hadyah loo soo qaado ayagoo aan la daaweyn. **(Shan)** Boqortooyada **Sharkhaa** oo dhererkeedu yahay sodoon maalmood, ballaceduna afar maalmood. Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah. **(Lix)** Boqortooyada **Baalii**, oo dhererkeedu yahay labaatan maalmood, balleceduna lix maalmood, ayadaana arliga Zaylac ugu barwaaqo badan. Waxayna wax ku kala gataan badeecado la is dhaafsado sida ariga iyo lo'da oo dhar la dhaafsado, iyo wax la mid ah. Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah. **(Toddoba)** Boqortooyada **Daarah**, oo dhererkeedu yahay saddex maalmood, balleceduna saddex maalmood. Ayadaana ugu taag daran boqortooyinka ka jira arliga Zaylac. . Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah. Ayaguna waxay wax ku kala gataan badeecadaha. Dhammaan boqorrada boqortooyinkaan waxay Nuwaab (ku xigeen, wakiil) ka yihiin Al Xadhiyyu (oo ah boqorka amxaarada krishtaanka ah). Beledyadaan waxa daris la ah Naasic iyo Sawaakin iyo Dahlak oo dadkooduna waa muslimiin. Afafka ay dadka boqortooyinka Zaylac ku hadlaanna way kala duwan yihiin, waana ka badan yihiin konto af, o dhammaantoodna waxay wax ku dhigaan farta xabashada. Waxayna u dhigaan ayagoo midig ka bilaaba oo xagga bidix u socda (waana sida afka Carabiga oo kale). Fartaanna xuruufteedu waa lix iyo toban xaraf oo uu xaraf walba leeyahay toddoba farac oo ka baxa, o sidaasay wadarta xuruufu waxay ku yihiin boqol iyo laba iyo toban xaraf, ayanna ku jirin xuruuf kale oo iskood u taagan, oo aan u baahnayn xaraf ka mid ah xuruufta lasoo sheegay, ayna isku xiraan xarakaat is haysta oo isku xiga oo aan ka go'nayn. Sidas ayuu ahaa siduu arligaani isugu xigo. Waxaana ka mid ah kuwo haray. Waxaana ka mid ah kuwo zuulay, kaddib markay zuushay dawladdi ayna dhalatay dawlad kale, taaso ah sunnada Ilaahay ee ummadihii hore oo gudbay, una heli maysid sunnada Ilaahay beddelid, una heli maysid sunnada Ilaahay beddelaad.

Dawladda Awfaat/Jabarta/Harar iyo boqorkeeda Cumar Walashmac

Waana warinta dawladda ku dhisan la jihaadka krishtaanka amxaarada. Waxaad ogaataa inay dawladdaan ay dhiseen rag Quraysh ah, oo la yiri waxay u dhasheen Bani Cabdu Al Ddaar, lana yiri oo kale inay u dhasheen Bani Haashim, kana sii yihiin dhasha Caqiil bin Abii Dhaalib. Kooda ugu horreeyey wuxuu ka yimid Al Xjaaz waxayna degeen arliga Jabarah oo maanta loo yaqanno Jabarta, kana mid ah arliga Zaylac. Halkaas ayay degeen

oo ku xasileen, waxayna degeen magaalada Awfaat. Waxaana jamaaco ka mid ah lagu aqooday khayr, waxayna caan ku noqdeen suubanaan. Waxaana ka mid ahaa ninka la yiraahdo Cumar, waana midka la yiraahdo Walashmac (oo kaloo la yiri waa Wali Asma') oo uu al Xadhiyyu u xilsaaray magaalada Awfaat iyo tuulooyinka la xiriira. Markaasuu wuxuu xukumay muddo dheer, wuxuuna ku yeeshay xoog iyo itaal ciidamneed. Siiradiisuna waxay ahayd mid la mahdiyo ilaa uu ka dhinto. Wuxuuna ka tegey afar ama shan wiil oo uu dhalay oo Awfaat boqorro u wada noqday isaga dabadiis, oo uu mid walba kan kale dabadiis boqor noqday. Wiilashaasna waxaa ka mid ahaa Bazau iyo Xaqqu Al Ddiin Kan Koowaad, waxaana ugu dambeeyey Sabru Al Ddiini Muxammad bin Naxwii (ama Lakhwii) bin Mansuur bin Cumar Walashmac, oo Awfaat boqor u noqday qiyaas sanadka toddoba boqol ee Hijriga mudadu xukunka hayeyna way dheereyd.

Calii bin Sabr Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac

Markaasaa markuu dhintay waxaa dabadiis la boqray wiilkiisa Calii bin Sabr Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac oo magaciisu dalalka ku caan baxay, kana baxay daacada suldaanka amxaarada. Kaddibna wuu usoo noqday sababtoo ah dadkiisu kuma waafaqin, bal wayba ku khilaafeen. Markaasuu suldaanka Sayf Arcad wuxuu boqray wiilkiisa Axmad oo loo yaqaanno Xarbi Arcad bin Calii bin Sabr Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac uuna u dhiibay xilka magaalada Awfaat iyo tuulooyinkeedaba. Markaasuu suldaanka amxaaradu wuxuu soo qabtay Calii wuxuuna dejiyay agtiisa uuna siiyay makaan isaga iyo caruurtiisaba. Sidaasuu Calii Sabru Al Ddiini suldaanka agtiisa ugu sugnaa qiyaas sideed sano. Markaas kaddib ayuu suldaanku raalli ka noqday, uuna boqortooyadiisa u celiyay uu ku lahaa magaalada Awfaat. Markaasuu wiilkiisa Axmad bin Calii raadiyay oo uu Caliina boqor uga dhigay Awfaat mar labaad. Wiilkiisa Axmad Xarb Arcad wuxuu u tegey suldaanka amxaarada, kanoo ku amray inuu albaabkiisa laazimo. Markaasuu u shaqeynayey oo ay halkaasna ugu dhasheen saddex wiil oo uu ka mid yahay Sacadu Al Ddiini Muxammad. Kaddibna suldaanku raalli ayuu ka noqday wuxuuna u dhigay warqad uu aabihiis ku amrayo inuu xil uga dhiibo meel ka mid ah tuulooyinka Jabarta. Markaasuu ka yeelay uuna u dhiibay tuulo ka mid ah tuulooyinkiisa. Markaasuu halkaas aaday oo hawshaas hayey muddo ilaa looga dilo mid ka mid ah dagaallada racyadiisa. Markaasaa xilkiisa waxaa qabtay walaalkiis Abuu Bakar bin Calii.

Xaqqu Al Ddini bin Axmad bin Calii bin Sabru Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac

Axmad Xarb Arcad wuxuu magaalada Awfaat uga tegey wiil la yiraahdo Xaqqu Al Ddini oo cilmiga barashadiisa ku mashquulay, wuxuuna noqday mid meel dhinac la dhigay oo aan la tirsan sababtuna ay tahay inuu awoowihiiis Calii Sabru Al Ddiini isaga ka jeestay, uuna gooyey, adeerkiisna Mulaa Asfax bin Calii wuxuu u colaadiyay colaadin xun, uuna u nacay nacid

xoog leh. Kaddibna wuxuu ka saaray magaalada Awfaat uuna geeyey tuulo ka mid tuulooyinkeeda, wuxuuna guddoomiyaha tuuladaas ku amray inuu layliyo oo uu ku shaqaysto. Markaasuu guddoomiyahaasu wuxuu u diray inuu kasoo uruuriyo maal beelaha tuuladaas. Markaasuu markuu halkaas tegey ayuu amarkiisa dabbirtay, hawshiisana maareeyey, dadkuna ay wada adeceen oo wada raaceen. Markaasuu xoogeystay. Markaasuu wuxuu soo ban dhigay siduu u khilaafsan yahay guddoomiyaha, uuna la xarbiyay. Markaasuu Xaqqu Al Ddiini ka adkaaday oo dilay, wuxuu lahaana ghaniimaystay, dadka la jirayna uu la wareegay oo ay isaga ku biireen dagaal yahannadiisu. Wuxuuna dagaal yahannadaas siiyey maal. Markaasaa waxaa istaagtay qiyaamaha adeerkiis Mulaa Asfax oo suldaanka amxaarada u dhigay isagoo khabarka waxa dhacay u sheegaya, weydiisanayana gurmada iyo gargaar si uu ula dagaallamo. Markaasuu suldaanka Sayfu Arcad wuxuu ugu soo gurmaday askar, la yiri inay tiradoodu ahaayeen soddon kun. Markasuu Xaqqu Al Ddiini ciidankaas la kulamy uuna si xoog leh ula dagaallamay ayadoo uu Ilaahayna ku ayyiday korkooda. Markaasuu wuxuu ka dilay khalqi fara badan, xoolohoodana uu ghaniimaystay, adeerkiisna uu jebiyay oo dagaalka ka qayb galay. Markaasuu jabkiisa suldaanka ula tegey. Markaasuu suldaanku ciidan aad u weyn soo siiyay. Markaasuu Xaqqu Al Ddiini ciidankaas la kulmay, uuna la dagaallamay, uuna adeerkiis Mulaa Asfax bin Calii ibnu Sabru Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac dilay. Markaasuu Xaqqu Al Ddiini ciidanka cadawga xididdada u siibay oo wuu laayey, kamana ayan baxsan in yar mooyee, wuxuuna ghaniimaystay waxay wateen. Markaasuu wuxuu tegey magaalada Awfaat, halkaasoo uu boqor ka ahaa awoowihis Calii bin Sabru Al Ddiini oo aad uga tiiraanyooday dilidda wiilkiisa Mulaa Asfax, oo ahaa midkuu wiilashiisa ugu jecel yahay, una xil saarnaa oo u qumi jiray umuurta dawladda iyo maareynta umuurta. Taasna waxay sii kordhisay xanaaqqa iyo nacaybka u qabo Xaqqu Al Ddiini. Dantaase waxay hadda tiri inuu ka haro, isagoo aan awoodin inuu iska celiyo. Markaasuu Xaqqu Al Ddiini ka edeb yeeshay awoowihis, uuna u daayey boqornimadiisa Awfaat, wuxuuna siiyay oo ku xoojiyay maal uu usoo qaaday. Sidaasuu Xaqqu Al Ddiini wuxuu ka mid noqday ragga awoowihis la jooga. Kaddibna wuxuu watay dadkii la socday iyo dadka magaalada oo ciyaalkooda wata, wuxuuna degay arliga Showah, halkaasoo uu ka dhisay magaalo uu u bixiyey Waxl, halkaasna uu dejiyay dadka Awfaat. Wuxuu magaaladaas ka dhigay caasimadda boqortooyadiisa. Markaas laga bilaabo ayay magaalada Awfaat hoos u dhacday ilaa ay ka kharaabto. Ninkaan Xaqqu Al Ddiini wuxuu ahaa kan ugu horreeyey oo qoyskiisa ka mid ah oo suldaanka khilaafa, boqorka amxaarada gaalada ah, oo daacaddiisana ka baxa. Wuxuuna ahaa kan ugu horreeyey oo xukunka xoog uga qabsada amxaarada, kuna haysta. Wuxuuna ahaa kan la xarbiya suldaanka iyo askartiisa, kana qafaasha, ka ghaniimaysta ilaa uu suldaanka Sayf Arcad ka dhinto. Dabadiisna waxaa amxaarada boqor u noqday wiilkiisa suldaan Daawayd, waana Daauud bin Sayf Arcad. Markaasuu Xaqqu Al Ddiini sii waday la dagallankiisa, ayadoo uu Ilaahay ayyidayo oo uu amxaarada guusha ka siinayo. Isaga iyo amxaaradu waxay dagaal isaga hor yimaadeen dhawr iyo labaatan goobood sagaal sano

dhexdooda. Dhacdada ugu dambeysana waxay ahayd inuu isagu ayaga aaday, uuna dagaal xoog leh la dagaalay sanadka toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatan, ayna isaga hor yimadeen arliga Showah. Ragga la dilayna lagama dhex helin. Boqornimadiisu waxay socotay qiyaas toban sano, wuxuuna ahaa geesi dagaalka saf hore ka dagaallama una degdega, lagana baqdo.

Sacaadu Al Diini Abuu Al Barakaati

Isaga dabadiis waxaa boqor noqday walaalkiis **Sacaadu Al Diini** Abuu Al Barakaati Muxammad bin Cali ibnu Sabru Al Ddiini Muxammad Walakhwii bin Mansuur bin Cumar Walashmac, oo habka walaalkiis Xaqqu Al Ddiini ku socday xagga jihaadka amxaarada gaalada ah. Wuxuuse ku dhaqmay hab saaxiibnimo iyo siyaasad wanaagsan. Markaasey askartiisu bateen oo duullaannadiisu bateen, boqortooyadiisuna ay ballaaratay. Markaasuu mar wuxuu la dagaallamay laba iyo toddobaatan fardooley ah, oo u jebiyay. Markaas kaddib ayuu cadawgu uga adkaaday meel la yiraahdo Abhazah. Markaasey xarig ku xireen oo ay boqorokooda u wadeen. Markaasaa waxaa ka daba tegey oo gaaray nin fardooleydiisa ka mid ah oo la dagaallamay kuwa waday oo gacantooda kasoo bixiyey, faraskiisana wax kasoo saaray, una celiyay asxaabtiisa, ay kulmisay jeceelka jihaadka amxaarada. Markaasuu wuxuu la kulmay Amano Harfaa oo ka mid ah amiirrada suldaanka amxaarada, wuuna jebiyay, inta la socotayna wuu qafaalay, waxaana labadii addoonba lagu gaday tafsiil. Isla markiiba wuu sii socday wuxuuna tegey Zallaan, beledkaasna wuu ka adkaaday oo uu islaamka u furay, maalkoodana uu ghaniimaystay. Markaasey sahamka suldaanka u gooniga ahi waxay gaartay afartan kun oo sac, uuna u qaybiyay dhammantood fuqarada iyo masaakiinta iyo askarta. Dhammaan wuu qaybiyay ilaa uu ka waayo wuxuu cuno. Waxaana cunno siisay mid haweenkiisa kamid ah. Sulaym bin Cabbaan oo gabadhiisa qabana wuxuu helay laba iyo toban kun oo sac. Markaasuu wuxuu amray inuu zakadeeda ka bixiyo. Markaasuu diiday. Markaasuu xaalkiisuba is beddelay oo Ilaahay Tacaalaa ayaa wuxuu kusoo diray gaalada oo ka qaatay wuxuu watay oo idil, kamana uusan baxsan waxaan ahayn haweenkiisa oo ah inanta Sacaadu Al Ddiini, uguna baxsatay xeelad uu Ilaahay siiyay, uguna naxariistay. Wuxuu kaloo ku duulay beled la yiraahdo Zamduuh isagoo wata afartan fardooley ah, ayna halkaas ku sugan yihiin gaalo aan la tirin karin. Markaasuu dagaal weyn dhex maray, uuna Ilaahay isaga guusha siiyay, uuna ghaniimaystay maal aan la tirin karin. Kaddibna wuxuu ku duulay Baalii iyo Amxarah isagoo wata toban amiir, amiir kastana ay la socdaan toban kun oo askari, isaguna uu wato konton fardooley ah, inta la socotoo idilna ayan gaarin inta amiir umaradiisa ka mid ah la socota. Markaasuu markay labada ciidan iska hor yimaadeen ayay weyseesteen isaga iyo asxaabtiisuba, ayna laba rakco tukadeen, uuna Ilaahay Tacaalaa gargaar weydiistay iyo inuu ka adkaato, ayadoo ay asxaabtiisuna aamiin leeyihiin. Markaasay isaga iyo inta la socotaba fardhooda fuuleen oo uu la dagaallamay, uuna Ilaahay jebiyay, ayagana uga gargaaray oo uu libta siiyey.

Markaasuu gaalada ka laayey, uuna ka qafaashay in aan la tirin karin, oo madaxdooda la gooyey waxay buuxisay arliga, uusanna qofka meeshaas maraya heleyn meel uu ka maro inuu ayaga dul maro mooyee. Goobtaas iyo beledkiisana waxaa u dhexeysey masaafu laba iyo toban maalmood ah. Markaasuu soo laabtay isagoo soo guuleystay, soo ghaniimaystay. Asxaabtiisa soo noqotay waxaa ka mid ahaa nin la yiraahdo Asad oo afartan fardooley ah wata. Markaasuu wuxuu la kulmay amiir ka mid ah amiirrada suldaanka amxaarada oo la yiraahdo Zalan Xash oo wata konton fardooley ah oo laabisan dharka xarbiga, ayna la socdaan askarta fuushan fardaha. Wuxuuna caan ku ahaa xoogga iyo geesinnimada. Markaasey labada kooxood dagaallameen dagaal weyn. Markaasuu Ilaahay dilay laciinka guushana uu siiyey muslimiinta, oo ghaniimaystay ghaniimo aad u weyn. Markaasuu suldaanka amxaaradu wuxuu uruuriyay amxaarada oo uu beledka muslimiinta kusoo duulay. Markaasaa waxaa la kulmay amiir la yiraahdo Muxammad oo la socda lix fardooley ah iyo kun lugeyneysa. Markaasey dagaal xoog leh dagaallameen uuna amiir Muxammad ku shahiiday iyo inta la soctayba. Waxaana ka badbaaday nin fardooley ah. Markaasuu suldaanka amxaaradu wuxuu diray ciidan uu wato amiir la yiraahdo Baarwaa. Markaasaa waxaa ka hor yimid Sacaadu Al Ddiini laftiisa oo ay la socdaan culummada iyo fuqarada iyo beeraaleyda iyo dhammaan dadka beledka deggan, oo geeri isku dhaarsaday. Markaasaa waxaa labadooda dhex maray dagaal culus ayna uga shahiideen odayada saalixiinta ah afar boqol oo sheekh oo uu mid walba ul wato, uuna wado tiro weyn oo fuqarada iyo masaakiinta ah. Markaasay laynta muslimiintu socotay ilaa ay intooda badani dhintaan, inta hartayna ay jabaan. Sacaadu Al Ddiini hortiiisuu u socday, ayadoo ay amxaaraduna raadkiisa hayso, wuuna socday ilaa uu ka galo jaziiradda Zaylac (Waana jaziiradda Zaylac horteeda ku taalla oo laba yiraahdo Sacaadu Al Ddiin maanta) oo bartamaha badda ku taalla. Markaasey hareereeyeen, ayna biyaha ka gooyeen. Markaasey jaziiradda ugu galeen habeennimo kuwo aan Ilaahay ka baqayn. Markaasay markay u tageen uu la dagaallamay. Markaasaa waxaa lagu dhuftay wajiga, saddex maalmood kaddib markuu biyo waayay. Markaasuu dhulka ku dhacay. Markaasey waran geliyeen oo dileen, uuna dhintay Allaha u naxariistee, isagoo ashahaadanaya oo qoslaya. Taasna waxay ahayd sanadka sideed boqol iyo shan, wuxuuna boqor ahaa qiyaas soddon sano. Wuxuuna ahaa nin saalix ah. Intaas uu boqorka ahaa waxaa dhintay awoowihis Cali bin Sabru Al Ddiini, kuna dhintay xabbiska suldaanka amxaarada, kaddib markuu u xirnaa qiyaas soddon sano. Marka Sacaadu Al Ddiini la dilay ayay muslimiintu daciifeen, uuna suldaanka amxaarada iyo amxaaradu ay dalka xukunkiisa la wareegeen, ayna degeen oo ay kaniisoyin ka dhiseen, masaajidyadana ay dumiyeen, muslimiintana ay ku dhigeen dhacdooyin xun oo ay dilen, qafaasheen, addoonsadeen, si aan laga sheekeyn karin, ayna sidaas ahaayeen ilaa labaan sano.

Sabrud Al Ddiini Calii

Wiilashad Sacaadu Al Ddiini waxay u carareen barriga Carabta , waxayna ahaayeen toban uu ugu weyn yahay Sabru Al Ddiini Calii. Markaasuu boqorka Yaman Boqor Al Naasir Axmad bin Al Ashraf Ismaaciil karaameeyey, uuna dejiyay. Kaddibna wuu u qalab uruuriyay, uuna siiyey lix faras, wuuna waday ilaa ay tageen meel la yiraahdo Sabaarah, halkaasoo ay ku sugnaayeen ilaa uu Ilaahay guul ka siiyey, uuna uga geeyey askarta aabohood. Markaasaa waxaa madax u noqday oo amarkooda u istaagay Sabru Al Ddiini Calii wuxuuna ku duulay amxaarada isagoo wata toddoba fardooley ah iyo inta lugeyneysa. Wuxuuna kula dagaallamay meel la yirahdo Thikru Amxarah, kuwaanna ay yihiin sideetan fardooley ah. Markaasuu jebiyay, meeshaasna uu qabsaday. Kaddibna wuxuu tegey Sarjaan. Halkaasuu kula dagaallamay, uuna jebiyay, kaniisooyinkoodana uu gubay iyo guryohoodaba. Wuxuuna ghaniimaystay dahab iyo ghayrkiisba waxaan la tirin karin. Sidaasuu ku waday la dagaallanka amxaarada, uuna uga guuleysanayey. Markaasey amxaaradu isu uruursatay ayna isu keenay toban amiir oo uu mid walba xukumo in ka badan labaatan kun oo nin. Markaasay arliga muslimiinta soo weerareen, ayadoo uu ugu horreeyo amiirka Najt Bekel. Markaasey beledyada muslimiinta gacanta ku dhigeen, ayna hal sano ku nagaadeen, ayagoo ay Sabru Al Ddiini iyo inta la socota ay beledba beled kale uga cararayaan, ayagoo ay haleeshay gaajo iyo harraad iyo daal aan la sifeeyn karin. Markaas kaddib ayuu Ilaahay u gargaaray oo xoojiyay oo uu markaas walaalkiis Muxammad u diray uuna la socdo Xarb Juush iyo ghayrkiisba oo madaxda ka mid ah oo wata labaatan fardooley ah beled la yirahdo Radhwaa. Markaasay halkaas amxaaro kula dagaallameen dagaal xoog leh, laguna dilay horjooggooda iyo in ka mid amiirrada suldaanka amxaarada. Askartoodana wuxuu ka dilay in aan la tirin karin, inta soo hartayna way jebiyeen, waxayna ghaniimaysteen ghanaa'im badan. Beledkana gacantay ku dhigeen oo ay boqorro u noqdeen, xukumeenna zaman. Kaddibna Sabru Al Ddiini laftiisa ayaa soo kacay, wuxuuna weeraray guriga boqorka amxaarada, wuxuuna amxaarada la dagaallamay dagaal xoog leh, wuxuuna dilay amiir weyn, guriga boqorkana wuu gubay, wuxuuna badiyay dilidda inta halkaas joogtay. Kaddibna wuu soo laabtay. Kaddibna wuxuu walaalkiis u diray qalcada Baroot, oo uu si nabadeed ku furtay, uuna dib u noqday isagoo guuleystay. Kaddibna wuxuu diray amiir la yiraahdo Cumar, ayna la socdaan lix fardooley ah, una diray arliga Lajab (ama al Jubba) iyo Amxarah, watana ciidan tiradiisa aad ayax moodid. Markaasaa waxaa dhex martay dhacdo aad u weyn, ayna muslimiintu ku dagaallameen dagaal xoog leh, ilaa ay dhammaantood ka dhintaan, ayadoo ay warammadu ugu soo hoobanayeen sida roobka oo kale tiro badnidooda, kaddibna seefo lagu googooyey, Allaaha u wada naxariistee. Sabdu Al Ddiini mar ayuu wuxuu goob joog ka ahaa dhacdo uu ku sigtay inuu cadawgu gacantiisa ku qabsado. Markaasuu faraskiisa ugala badbaaday. Markaasuu wuxuu ku yimid tog ballaciisu yahay qiyaas toban diraac. Markaasu faraskiisa kala booday oo uu gooyey, Ilaahayna uu ka reebay. Sidaasuu talada muslimiinta u hayey ilaa uu gogoshiisa uga dhinto, isagoo

caloosha ka baxaya, markay kasoo wareegteen sideed sano. Wuxuuna dhintay qiyaas sanadka sideed boqol iyo labaatan. Siiradiisuna waxay ahayd mid la mahdiyo.

Mansuur bin Sacdu Al Ddiini

Isaga dabadiis waxaa xukunka u kacay walaalkiis Mansuur bin Sacd Al Ddiini, uuna taageerayo walaalkiis Muxammad. Markaasuu ku duulay Jadaayah (Jedayam?) ahna caasimadda boqorka amxaarada, halkaasna uu deggan yahay xididka boqorka. Markaasuu la dagaallamay oo uu laftiisaba qafaalay oo uu dilay, uuna la dilay rag fara badan. Markaasey qiyaas soddon kun waxay ku carareen oo galeen buur la yiraahdo Munxaa. Markaasuu hareereeyey oo uu ku hareereysnaa in ka badan laba bilood, uuna la dagaalamayo maalin walba, ilaa ay ka gaajoodaan, ayna harraadeen. Markaasuu u dhawaaqay una sheegay inay kala doortaan inay Diinta islaamka galaan iyo inay dadkooda u tagaan. Markaasaa waxaa ka islaamay ilaa toban kun , buurtana uga soo degay inta u dhexeysa waabariga ilaa ay qorraxdu ka dhacdo. Maalinta ku xigtayna intooda hartay waxay aadeen beledkooda. Markaasu wuxuu ghaniimaystay laba boqol oo faras oo Carabiyaad ah. Wuxuuna halkaas ku sugnaaday toban maalmood. Amxaarduna way is aruursatay, ayna ugu yimaadeen tirada ayaxa faafsan oo kale intay badnaan ka qabaan. Markaasuu dagaal xoog leh la dagaalay ilaa ay fardooleyda iyo farduhuba harraad dilay. Amiirrada muslimiintana waxaa laga dilay toban. Markaasey Mansuur iyo walaalkiis Muxammad gacanta u galeen suldaanka amxaarada Isxaaq kan la yiraahdo Abraha bin Daauud bin Sayf Arcad, kanoo farax la duuli lahaa. Markaasuu xabbisay. Taasna waxay ahayd sanadka sideed boqol sideed iyo labaatan, markay laba sano kasoo wareegeen xukunka Mansuur. Markaasey amxaarada gaalada ahi beledka qabsatay.

Jamaalu Al Ddiini Muxammad

Markuu Mansuur dhintay waxaa xukunka la wareegay isla markiiba walaalkiis Jamaalu Al Ddiini Muxammad bin Sacd Al Ddiini, wuuna taag darnaa. Waxaana amiirrada kala haray Xarb Juush, kana mid ahaan jiray amiirrada suldaanka amxaarada, kaddibna wuu islamay ayaamaha Sacaadu Al Ddiini oo uu u yimid. Markaasuu wuxuu ka mid noqday amiirrada waaweyn, xooggiisa iyo geesinnimadiisa iyo tira badnida dadka raacsan daraadood. Markaasaa waxaa Jamaalu Al Ddiini ku kacay Barbaryiinta (Soomaalida) markaasuu wuxuu u diray Xarb Juush oo usoo jeediyay heshiis nabadeed, ayagoo u diyaariyay ciidan xoog leh oo ay ku jiraan toddoba kun oo qaanso iyo seefood. Markaasey diideen waxaan ahayn la dagallankiisa, isagoo la joogay oo la hadlayey subixii ilaa duhurkii.. Markaasuu la dagaallamay dagaal kulul ilaa uu Ilaahay ka jebiyo oo ay xagga guryohooda u carareen. Markaasuu ka daba tegey oo ay markaas amarkiisa u hoggaan sameen, ayna daacaddiisa galeen, ayna u dhiibeen zakada maalalkooda. Markaasuu dib u noqday isagoo la ayyiday oo guuleystay. Kaddibna wuxuu Xarb Juush u diray

beledka Baalii isagoo wata labaatan fardooley. Markaasuu la kulmay amxaaro aad u fara badan, oo ayan intaasoo kale hore isu uruursan. Markaasuu dagaalka ugu kulul la dagaallamay, uuna ka guuleystay, kaddibna uu dib u laabtay. Markaasuu suldaanka amxaardu wuxuu uruuriyay askar aad u fara badan, wuxuuna soo degay Jadaayah. Markaasuu Jamaalu Al Ddiini ku duulay, uuna la dagaallamay, uuna dib usoo noqday isagoo soo guuleystay. Markaasey amxaaradu waxay aaday Bajrah (ama Yajzah), halkaasoo uu muddoo joogay, wuxuuna isu keenay boqol amiir wuxuuna goostay inuusan arliga amxaarada nin muslim ah ku harin. Sidaasuu goostay, kuna dhawaaqay! Markaasaa waxaa kusoo duulay Jamaalu Al Ddiini oo wata shan bqool oo fardooley ah. Suldaanka amxaaraduna wuxuu isu keenay fardooley aan la tirin karin badnidooda. Markaasaa waxaa laba kooxood dhex martay dhacdo weyn. Markaasuu Ilaahay amxaarada layey, uuna jebiyay intooda soo hartayna ay carareen. Markaasuu Jamaalu Al Ddiini raadkooda ku joogsaday oo uu eryoonayey saddex maalmood, uuna intaas dilayo oo qafaalayo, ilaa ay arligaaba maydkoodu ka buuxsamay. Kaniisadohoodana wuu gubay iyo guryohoodaba, haweenka iyo caruurtoodana wuu addoonasaday, maalalkoodana wuu ghaniimaystay. Fardaha kooreysan oo rakuubku saaran yahay oo la ghaniimaystay waxay ka bateen boqol faras, fardaha aan kooreysneenna lamaba tirin karo badnideeda. Duullaankaas wuxuu ku jiray saddex bilood. Kaddibna wuxuu Xarb Juush u diray Baalii, halkaasoo uu ku laayey, uuna soo qafaalay, addoonnimana usoo kaxaystay haweenkooda iyo ubadkooda. Wuxuuna ghaniimaystay maal fara badan, ilaa heer uu faqiir walba ka siiyey saddex madax oo addoon ah. Tira badnida addoommada waxaa lagu gatay madixiiba rabdhah qalin ah iyo hal faragashi. Wuxuuna soo noqday isagoo guuleystay, soona ghaniimaystay. Markaasuu Jamaalu Al Ddiini laftiisu amxaaro ku duulay isagoo ciidan weyn wata, ayan mid la mid ah aabayaalkiis isugu imaan. Wuxuuna watay kun fardooley ah. Markaasuu laayey oo qafaalay, haweenka iyo caruurtana addoonnimo usoo kaxaystay, uuna ghaniimaystay. Intaasna suldaanka amxaarada iyo inta la socotaba way ka cararayaan, isaguna uu eryoonayaa. Wuxuuna eryoonayay shan bilood ilaa uu ka gaaro. Markaasuu suldaanka amxaaradu ka hor imaan waayey oo uu ka cararay, una cararay Ra'su Baxru Al Niil. Markaasuu Jamaalu Al Ddiini lasoo noqday ghaniimo aan la tirin karin oo aan xadba lahayn. Kaddib wuxuu diray walaalkiis Axmad iyo amiirka Xarb Juush, una diray Dawaaraa. Markaasey amxaarada weerareen ayna ku dhigeen dhacdooyin badan, ayna kasoo qafaaleen saddex amiir, ayna ghaniimaysteen lixdan faras iyo ghanaa'im fara badan. Waxayna soo laabteen ayagoo cizzi iyo guul wada.

Kaddibna isaga laftiisa ayuu Jamaalu Al Ddiini duulay, isagoo laynaya cadawga, soona qafaalaya, ilaa meel loo socdo labaatan maalmood. Markaasey amxaaradu waxay ku kala qaybsameen saddex meelood ayagoo doonaya inay beledka Jamaalu Al Ddiini qaataan iyo ciyaalkiisaba. Markaasuu soo noqday, isagoo donaya inuu la dagaallamo, wuxuuna masaafada labaatanka maalmood loo socdo kusoo gooyey toddoba maalmood. Markaasuu wuxuu kula kulmay beled la yirahdo Harjaay (ama Harjah), ayadoo ay isaga iyo asxaabtiisuba aad u daaleen, cadawguna uu raaxo iyo nasasho ku

jiro. Markaasaa waxaa dhex martay dhacdo weyn, oo badnida ciidammada iyo kulaylka dagaalka daraadood uu dadku is dhex galay oo isku qasmay. Markaasuusan axadna ka aqoon saaxiibkiis cadawgiisa. Markaasuu Ilaahay gargaarkiisa kusoo dejiyay muslimiinta oo ay markaas amxaarada dhinac ka goosteen oo ay guuleysteen. Amxaaraduna ayaduna way guuleysatay oo muslimiintay dhinac ka goosteen. Dhan walbana wuxuu ghaniimaystay intuu gaaray.

Kaddib waxaa Jamaalu Al Ddiini ku kacay ilmo adeerradiis oo xasday oo dilay bisha Jamaadu Al Aakhirah ee sanadka sideed boqol iyo shan iyo soddon. Wuxuu markaas boqor ahaa toddoba sano. Wuxuuna ahaa kan ugu khayr badan boqorrada zamankiisa xagga Diinta iyo cilmigiisa iyo xooggiisa iyo geesinnimadiisa iyo haybaddiisa iyo sida looga baqo iyo jihaadkiisa cadawda Ilaahay Tacaalaa. Wuxuuna boqor u noqday in badan oo ka mid ah arliga boqorka amxaarada iyo degmooyinkiisa, ayna jamaacaad badan oo amiirrada iyo guddoomiyayaalka gobollada iyo degmooyinka iyo shaqaalaha suldaankaas amxaarada ay isaga daacaddiisa soo galeen. Wuxuuna ka dilay kana qafaalay amxaarada gaalada ah in aan tiro lagu koobi karin, ilaa heer ay addoommada uu kasoo qafaalay amxaarada duullaannadiisa ay buuxiyeen arliga Hindiya, iyo Yaman, iyo Hurmuz, iyo Xijaaz iyo Masar iyo Al Shaam iyo arliga roomaanka iyo Ciraaq iyo Faaris. Intaasoo idilna wuxuu ahaa mid uu Ilaahay Tacaalaa taageero, uuna libta ka siiyo cadawda Ilaahay. Ilaahayna wuxuu ku gunaanaday noloshiisa tan wanaagsan, wuxuuna u dhigay shahiidnimo. Wuxuu saaxiib la ahaa oo la joogi jiray fuqahada cullumada ah iyo fuqarada salixiinta ah. Boqortooyadiisana wuxuu ku xukumi jiray caddaalad, xattaa qoyskiisa iyo caruurtiisa. Caadilnimadiisu waxay gaartay inuu wiil yar oo uu dhalay oo wiilashiisa ka mid ah uu la cayaaray wiil ay isku fac yihiin. Markaasuu garaacay mid yar oo uu gacan ka jebiyay. Warkaasna ma uusan gaarin Jamaalu Al Ddiini markay muddoo kasoo wareegatay mooyee. Markaasuu wuxuu si xoog leh taas ugu diiday khaadimiintiisa inayan u sheegin. Markaasuu wuxuu u yeeray waalidiinta wiilka gacanta laga jebiyay, wuxuuna ku canaantay inay ayaguna taas ka qariyeen. Markaasuu wuxuu shiray madaxda dawladdiisa, wuxuuna u yeeray wiilkiisa dambiga galay si uu uga qisaaso gacantuu jebiyay. Markaasey madaxda dawladdu iyo amiirradooduba hortiiisa istaageen, ayna isku jejebiyeen kana dalbeen inuu iska cafiyo, ayaguna ay kan gacanta laga jebiyay ehelkiisa raalli gelinayaan. Markaasu ka diiday, wuxuuna diiday waxaan ahayn in wiilkiisa yar la keeno mooyee. Markaasaa la keenay. Markaasaa markuu u kacay inuu u qisaaso ayay dadka dhammaantood booyeen, ayna wiilka gacanta laga jebiyay ehelkiisu istaageen oo ay cafiyeen. Markaasuusan cidna u aabo yeelin. Markaasuu gacanta wiilkiisa qabtay oo uu dhagax kor saaray oo uu markaas bir ku dhuftay oo uu jebiyay isagoo qaylinaya. Markaasuu wiilku suuxay. Codadka dadkuna iyo boohintooduba cirkay ku dhigeen, naxariis ay cunuggaas yar u qabaan. Wuxuuna ahaa amar laga baqo. Intaasoo idilna Jamaalu Al Ddiini wuu sugan yahay oo xasilan yahay, wiilkiisana ku leeyahay: "u dhedhemi sidaas cunugga dadku dhalay u dhedhensiisay." Waxaa khabarkaan ii sheegay rag lagu kalsoon yahay oo goobtaas goob joog ka ahaa

oo Jamaalu Al Ddini hor fadhiyay oo dhacdadaas indhohooda ku arkay. Markaas kaddib axad dawladda ka mid kuma dhicin inuu maalka axad kale gacantiisa u taago si xaq darro ah. Markaas kaddibna ma uusan awoodin mid weyn iyo mid yarba inuu axad kale ku xad gudbo . Sida looga haybeysto oo looga baqdana waxaa ka mid ahaa in markuu shay amar ka bixiyo ama uuba ka reebo inuusan axad amiirradiisa ka mid ah uusan amarkaas ku xad gudbi jirin, oo dhaammaantood way dhawri jireen amarkiisa iyo wuxuu reebaba, dhammaan arliga boqortooyadiisa, cabsi ay cadaaladdiisa ka qabaaan iyo ilaalin ay iska ilaalinayaan ciqaabtiisa. Manaaqibtiisu way fara badan tahay, Ilaahyna dawladdiisa wuxuu cizzi iyo xoog ugu yeelay islaamka iyo muslimiinta. Waxaana ka mid ahaa waxyaalka farax geliyay inuu Ilaahay Tacaalaa ayaamihiisa dawladdiisa dilay keligiis tashada gaalnimada suldaanka amxaarada Isxaaq bin Daaud ibnu Sayf Arcad bisha Thii Al Qacdah ee sanadka sideed boqol iyo saddex iyo soddon. Gaalkaas weyn dabadiis waxaa la boqray Andraaws bin Isxaaq, oo dhintay markuu afar bilood xilka hayay. Markaasaa waxaa amxaaro boqor u noqday adeerkiisa Xarbanaay bin Daaud bin Sayf Arcad, oo dhintay bisha Ramadaan ee sanadka afar iyo soddon, dhawr bilood kaddib markuu xilka qabtay. Isgaas dabadiisna waxaa boqor noqday Saloomoon ibnu Isxaaq bin Daaud bin Sayf Arcad. Sidaasaa waxaa xukunka isaga dambeeyey afar boqor hal sano gudeheed. Intaasoo idilna guulaha Jamaalu Al Ddini way is daba socdeen, iyo dhacdoodiyinka waaweyn oo uu dhigay, waxaana batay arliga boqortooyadiisa iyo ragga xilalka u hayaba, iyo ghaniimooyinkiisa, iyo qafaalkiisa, iyo layntiisa gaalada iyo addoonsigooda, taasoo uu u suurto geliyay Ilaahay Tacaalaa, uuna ku taageeray hiilkiisa . Guulahaas ka sokow, waxaa gacantiisa ku islaamay khalqi amxaaro ah oo aan badnidooda la tirin karin, oo uu Ilaahay isaga ku soo hanuuniyay, naartana uga badbaadiyay dawladdiisa. Kaasna waa deeq Ilaahay bixiyo uuna siiyo cidduu doono. Ilaahay wuxuu leeyahay deeq weyn.

Shihaabu Al Ddiini Axmad Badlaay

Markuu Jamaalu Al Ddiini shahiiday waxaa amarka muslimiinta u kacay oo la boqray walaalkiis Shihaabu Al Ddiini Axmad Badlaay, kuna dadaalay inuu gacanta ku dhigo ninka walaalkiis Jamaalu Al Ddiini dilay, wuuna helay oo uu dilay. Isaguna wuxuu ku socday sunnada walaalkiis tan ku saabsan weeraridda iyo ku duulidda amxaarada, wuxuuna arligooda islaamka u furay gobollo badan. Wuxuuna dilay koox ka mid amiirradooda, arligoodana wuu gubay, wuuna ghaniimaystay, uuna laayey, uuna qafaalay, uuna addoonsaday khalqi aad u fara badan. Waxaa sidaas ku batay maalka dahabka ah iyo qalinka, iyo dharka iyo duruucda dagaalka, oo gacanta u galay jamaacadiisa, lana wareegeen shaqooyin aan la tirin karin. Wuxuuna burburiyay lix kaniiso iyo dhawr tuulo. Markaasuu wuxuu boqortooyada Baalii kasoo ceshaday gacanta krishtaanka, wuxuuna u celiyay kun guri oo muslimiinta ka mid ah. Ayaamaha xukunkiisa, sanadka sagaal iyo soddon, waxaa dhacay daacuun weyn ayna ku dhinteen muslimiin iyo krishtaanba khalqi fara badan, waxaana dhintay suldaanka amxaarada, waxayna dabadiis boqreen wiil yar. Intaasuba

waxay dheceen isagoo boqorka Badlaay uu ku sugan yahay beledka Dakar (oo Fiyaambiro agteeda inay ku tiillay loo maleeyo, siduu Cerulli u yiri), walaalkiis Khayru Al Ddiini-na uu ku sugan yahay beledka Raklah. Badlaay wuxuu muujiyay siirada caadilnimada uu ku dhaqay boqortooyadiisa. Markaasey dariiqooyinku rumeeyeen iyo dadkuba, waana askarta iyo ghayrkoodba, uu dulmiga ka haray, ascaartuna ay rakhiiseen ayaamaha xukunkiisa. Wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa Muxammadin wa Calaa Aalihi wa Saxbihi Ajmaciina wa Sallam.

Barbara

Ibnu Saciid wuxuu yiri: "Magaalada Barabara waa magaalo madaxda Al Baraabir. Intooda badanna way islaameen, taas ayaana u sabab ah inaan ayagoo addoommo ah laga helin beledyada islaamka. (Al Baraabirah waana dadka maanta soomaalida la yiraahdo).

Muqdisho

Muqdisho waxay ku taalla Badda Hindiya, dadkeeduna waa muslimiin. Waxayna leedahay wabi weyn oo u eg wabiga Niil ee Masar, oo gu'ga biyihisu bataan. Wuxuuna xusay inuu lasoo dhasho isagoo walaalkiis ah Niilka Masar, ayna kasoo baxaan bad yarada Kuuraa. Wuxuuna ku biyo shubaa Badda Hindiya meel aan Muqdisho ka fogayn, waxaana sidaas ku yiri Abuu Al Majd Al Muusilii kitaabka Maziili Al Irtiyaabi. Muqdisho waa magaalo weyn, una dhexeysa arliga amxaarada iyo kan zinjiga (oo ah dadka madmadow oo Afrika dega).

Waxaa intaas ku eg kitaabka Al Ilmaamu ee Al Maqriizii.

Thikru al jaanibi al junuubii mina al ardi wa huwa bilaadu al Ssudaani

Abuu Al Fidaa' Cimaadu Al Ddini Ismaaciil bin Muxammad bin Cumar loona yaqaan **Abuu Al Fidaa' Saaxibu Xaamah**, lana oofsaday sanadka toddoba boqol iyo labo iyo soddon Hijrada, ahna imaamka dhigay **Taqwiimu Al Buldaani** wuxuu kaloo dhigay kitaab yar oo dhawr bog ah lana yiraahdo "Thikru al jaanibi al junuubii mina al ardi wa huwa bilaadu al Ssudaani", kuna lammaansan kitaabka Al Maqriizii ee Al Ilmaamu, wuxuuna tilmaamo ka bixiyey dhawr magaalo oo aan badankoodu halkaan muhim ku ahayn, waxayna kala yihiin: (Kow) Magaalada Gaana, ee galbeedka Afrika. (Labo) Magaalada Bariisaa oo ayaduna galbeedka Afrika ku taalla. (Kuukuu) oo ayaduna halkaas ku taalla. (Saddex) Sufaalaha, oo ku beegan waxa laga bilaabo Tanzania ilaa Muzambiik. (Afar) Zaghaawah, oo Suudaan agagaarkeeda ah. (Shan) Danqalah magaalada Nuubah. (Lix) Jarmii, oo arliga amxaarada ka mid ah, caasimaddoodana ahaan jirtay. (Toddoba) Zaylac. Ibnu Saciid wuxuu yiri: "Zaylac waa magaalo caan ah oo ka mid ah magaalooyinka xabashada, dadkeeduna waa muslimiin, badda ayayna ku taallaa. Kulaylkeeduna aad ayuu u badan yahay, biyeheeduna waa macaan ceelal laga qodo. Mana ayan laha

beero, mana yaqaanniin fawaakihda. Kitaabka Al Qaanuun wuxuu ku yiri: "Zaylac waa furdada amxaarada, waxayna ku taalla xagga arliga Yaman. Nin arkay wuxuu sheegay inay tahay magaalo yar oo la mid ah Ciithaab, waxayna ku taalla xeebta badda, waxaan xukuma shuyuukh, ayagayna ganacsatadu ku degaan, oo marti geliya, waxna kala gataan. (Sideed) Bilaadu Saxartaa, oo qabiil amxaarada ka mid ah. (Sagaal) Wafaat, oo ah Jabarta oo uu nin socdaal ku tegey ii sheegay in la yiraahdoo kale Jabarta, waxayna ka mid tahay magaalooyinka ugu waaweyn xabashada. Ayada iyo Zaylacna waxay isku jiraan labataan marxaladood, oo labataan habeen ayaa looga dhaxaa. Wafaat waa caasimadda boqortooyada waxayna ku taalla buur korkeed, qalcaduna waxay ku taalla buur korkeed, baddana aad ayay uga fogtahay, Zaylacna waxay ka xigtaa xagga qorrax u dhac, waxaana laga helaa moos iyo qasabka sokorta, dadkeeduna waa muslimiin, waxayna ku taalla dhul dhulka intiisa kale ka sarreeya, waxayna leedahay waadi uu wabi yar ku yaallo. Inta badanna habeenkii ayuu roob badan u da'aa. (Toban) Jiimii oo Suudaan ka mid ah. Tobankaas qodob waxay isku noqonayaan qiyaas laba bog. Waana intaas warka Abuu Al Fidaa', Allaha u naxariistee.

Masaaliki Al Absaari fii Mamaaliki Al Amsaari: Al Cumarii

Ibnu Fadlu Allaahi Axmad bin Yaxyaa bin Fadku Allaahi Al Cumarii, oo dhashay sanadka toddoba boqol ee Hijriga lana oofsaday sanadka Hijriga ah ee toddoba boqol iyo sagaal iyo afartanka, una dhiganta kun saddex boqol iyo kow ilaa kun saddex boqol sagaal iyo afartan miilaadiga ah, wuxuu kitaabkiisa Masaaliki Al Absaari fii Mamaaliki Al Amsaari, uuna hubiyay, faallana ku daray Al Doktor Musdhafaa Abuu Dayf Axmad, ku yiri:

Boqortooyada muslimiinta ee ku taalla al xabashah

Waana toddoba qaybood oo aan uga kala hadlaynno: (Kow) Boqortooyada Awfaat. (Laba) Boqortooyada Dawaaruu. (Saddex) Boqortooyada Araabiinii. (Afar) Boqortooyada Hadyah. (Shan) Boqortooyada Sharxaa. (Lix) Boqortooyada Baalii. (Toddoba) Boqortooyada Daarah. Toddobadaan boqortooyo waxay ku jiraan gacanta toddoba boqor, dhismohooduna uu taag daran yahay, kana timid taag darrada nidaamka dadkeeda iyo yaraanta waxa dalka laga helo. Waxaana awood ku yesshay korkooda boqorka boqorrada oo ah boqorka amxaarada, in kastoo ay ka dhexeyso colaad diineed, iyo colaadda krishtaanka iyo muslimiinta ka dhexeysa. Sidaasoo ay tahay, hadana toddobadaas boqor oo muslinka ahi ma midaysna, mawqifkooduna wuu kala tagsan yahay, dhexdoodana waxaa yaalla fasaad iyo xiriir xun. Wuxuu ii sheegay Al Shaykhu Cabdu Allaahi Al Zaylaci iyo koox ka mid ah fuqahada dalalkaas in hadday toddobadaasu mawqifkoodu mid ahaan lahaa oo ay kalimadoodu mid ahaan lahayd, xiriir fiicanna ay dhexdooda lahaan lahaayeen, waxay awoodi lahaayeen inay is difaacaan, dalalkoodana ay gacanta ku hayn lahaayeen. Waxaase jirta inay taag darrada ay ku sugan yihiin iyo kala dhanbalnaanta kalimadooda, ay ugu darsantay tartan dhexdooda ah.

Waxaana ku jira qaar u iishay boqorka amxaarada xagga dhaqanka oo xiriir la leh. Markaasay in kastoo ay dulli iyo miskiinnimo ku sugan yihiin, ayay hadana waxay sanad walba boqorka amxaarada u qaadaan oo u geeyaan koodhi, oo ah canshuur oo ah dhar xariir ah iyo dhar kattaan ah oo looga keeno Masara iyo Yaman iyo Ciraaq. Faqiiha la yiraahdo Cabdu Allaahi Al Zaylaci wuxuu in badan usoo degdegay albaabka suldaanka Masar markay suldaanka u yimaadaan ergada boqorka amxaarada uu uga codsanayo inuu usoo magacaabo oo usoo diro wadaad krishtaan ah, wuxuuna suldaanka Masar weydiistaa inuu u sheego madaxda kaniisaddiisa krishtaanka ah inuu warqadduu ugu magacaabay wadadka uu boqorka amxaarada ugu sheego inuu dhibkuu ku hayo ka qaado musulimiinta ku nool dalkiisa, uuna ka haro qaadashada haweenkooda uu qaadanayo. Markaasuu madaxa kaniisadda Masar sidaas boqorka amxaarada ugu dhigay, una dhigay warqad aad u cad, uuna ku diidayo wuxuu muslimiinta dalkiisa ku sameynayo, taasoo uu ka xaaraantimeeyey inay ku kacaan. Taas ayaa waxay daliil u tahay oo ku tusaysa siday xaaladdu tahay, ayadoo tifaftiranna meesheeda ayaan ku sheegeynna." (markaasuu toddobada dawladdood mid mid uga hadlay, dhan kasta) Wuxuu yiri oo kale:

Boqorkood ugu horreeyey wuxuu u dhashay Tigrai

Waxaa la sheegay inuu arligooda ugu horreeyo, waana xagga qorrax kasoo bax oo u janjeerta xagga waqooyi, Badda Hindiya iyo Yaman. Waxaana mara wabiga biyaha macaan oo la yiraahdo Sayxuun oo kusoo biyo dara wabiga Niilka Masar oo (xag Alle ka) ilaalsan. Dhanka qorrax u dhacna waxaa ka xiga dalka Tigre oo xiga xagga Yaman. Waxaana ugu horreeya lama degaan hore loo oran jiray Tigray, ahaanna jirtay magaalo madaxda gobolkaan ee boqortooyada zamankaas, laguna yiraahdo Axasram (malaha waa Aksuum) afka kale oo afalkooda ka mid ah. Waxaana kaloo la yiraahdaa Zaraftaa. Al Najaashiyu kii ugu horreeyey ayaduu degganaa oo boqor ka ahaa, isagoo beledkoo idilna boqor u ahaa. Kaddib waxaa ku xiga dalka Amxarah, kanoo ay hadda ku taallo caasimadda boqortooyadu, afkoodana lagu yiraahdo Marcadii. Kaddib waxaa ku xiga dalka Shaawah. Kaddibna dalka Daamuut. Kaddibna dalka Laamnaa. Kaddibna dalka Alsiihuu. Kaddibna dalka Al Zalj. Kaddibna dalka Cadal Al Umaraa'a. Kaddibna dalka Xamaasaa. Kaddibna dalka Islaamka oo ka mid ah dalalka al xabashah, boqorradiisuna ay todooba yihiin, sidaan tafaasiishooda hore dal dal ugu soo aragnay, ayadoona uu dal walba oo kuwaas ka mid ahi leeyahay boqor iyo ciidan sidaan ayadana hore ugu soo aragnay.

Waa intaas warkaan kasoo qaadannay Al Cumarii.

Kitaabu Al Zzunuuji

Ninka talyaaniga u dhashay oo la oran jiray Enrico Cerulli, ahaana guddoomiyaha Soomaaliya intay ahayd mustacmarad talyaani, Soomaaliyana joogay markay ku jirtay gumaysiga talyaaniga, wuxuu dhigay kitaabka la

yiraahdo "**Somalia, scritti vari editi ed inediti, Storia della Somalia, l'Islam in Somalia, Il Libro dei Zengi**, primo volume, a cura dell'Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalia", laguna daabacay Istituto Poligrafico dello Stato P.V. Roma kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo konto. Cerulli wuxuu bogga laba boqol iyo kow soddon ee kitaabkiisaas ku sheegay inuu gacantiisa soo galay kitaabka la yiraahdo **Kitaabu Al Zunuuji**. Cerulli wuxuu sheegay inay kitaabkaas laba nuskho ama namuunad ka jiraan oo kala ah mid uu Qaalliga degmada Kismayo ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo labaan lahaa, oo uu isaga laftiisu nuskhad ka helay Madaxa Qaalliyada degmada Muqdisho oo magaciisu ahaa Sheekh Abuu Bakar ibnu Muxyiddiin Mukarram. Nuskhadda labaad waxaa haysay, ayuu yiri, "Professor Alice Werner o igala soo socodsiisay, iina soo marisay Ergada ingiriiska ee Ethiopia...Warka nuskhada kitaabkaan ku dhiganna wuxuu la mid yahay warka aan kutubbada kale ka helnay." Intaas waxaa ku eg warkii Cerulli. Kitaabkaan ah Kitaabu Al Zunuuji, o afka Carabiga ku dhigan, wuxuu koobayaa taariikhda Soomaalida, meeshay ka yimaadeen, Carabnimadooda iyo siday Soomaaliya kusoo degeen, dadkii degganaan jirayna ay uga kiciyeen. Kitaabu Al Zunuuji oo aan la magacaabin ninka dhigay, kana kooban sideed iyo toban bog, kuna dhigan afka Carabiga waa kanaa.

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi Isagaanna la kaashanaynaa kitaabkaan Kitaabu Al Zunuuji iyo akhbaartooda ee xeebta galbeed ee Badda Hindiga. Al xamdu li Allaahi Al Khaaliqi Al Baari'i Al Waduudi Thuu Al Fadli wa Al Karami wa Al Juudi Midka khalqigiisa midabyo u yeelay ee caddaan iyo guduud iyo madaw, qaarkoodna qaarka kale wax dheereysiyeey uguna kor mariyay inuu ka dhigay madax iyo hoggaamiyayaal, iyo dhererka iyo nolosha fiican, kuna xukumay midkuu aabihiis habaaray inuu wajigiisu madoobaado dhashiisuna ay u noqoto dhasha labadiisa wiil oo kale addoommo. Wa Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu calaa Al Musdhafaa Al Maxmuudi wa calaa Aalihi wa Asxaabihi kuwa ah ehelka rukuuca iyo sujuudda. Intaas kaddibna. Waxaan soo gaabinnay akhbaarta zunuuja, (zinji waa jiil ka mid ah dadka madow, oo ah dadka madow oo qaaradda Afrika degah oo sananka bagafsan iyo timahana adag oo jareerta ah leh, siduu Al Rraazii u yiri) ee ku nool daanta galbeed ee Badda Hindiya iyo diillinta adduunka kala barta, oo ah Eqwaatoraha, annagoo caddeyneynna wuxuu Ilaahay ku abuuray oo zunuuja ah oo ku noolaa Jubba oo afka Carabiga ah oo asliga ah Kashuur lagu yiraahdo, afka sawaaxiligana lagu yiraahdo Wanyika. Sidoo kale akhbaarta Carabta yimid beledka zunuuja, oo beledka camiray oo degay iyo degmooyinka iyo tuulooyinkaba, degeyna laga soo bilaabo zamanka jaahiliyada, kuna yimid talada boqorka Tubbac Al Ximyarri Al Akbar. Sidoo kale akhbaarta Banuu Qays Caylaan (oo hore loo oran jiray Galla, hadana la yiraahdo Oromo) oo yimid beledka zunuuja, kana yimid arliga Carabta, kuna yimid sababta qisada ku jirta Abraha Al Ashram amiirka al najaashii al xabashii sanadka maroodiga. Markaasey waxay degeen meel la yiraahdo Jubba. Iyo akhbaarta ka guuridda zunuuja ay Jubba uga guureen, una guureen meel la yiraahdo Ghariyaamaa oo ku xigta Muughiya. Waxayna halkaas uga guureen Qays Caylaan daraadood oo ay ka carareen, oo sidaas daraadeed

loogu bixiyey Kashuur. Sidoo kale akhbaarta kuwa dega Al Bakuum, dhinaca wabiga la yiraahdo hadda Mutu Taana. Sidoo kale akhbaarta Carabta ka timid Cumaan ugana timid dagaallada dalkaas ka socda badnidooda, oo halkaan uga raaxaystay dagaalladaas, degeyna arliga Aamu. Sidoo kale akhbaarta Carabta ayaguna Cumaan ka yimid, yimidna Mumbaasah, una yimid ganacsi wax gadasho iyo wax iibsi ah, xeeladaysanayana oo eegaya siday dariiqyada Mumbaasah lagu galo sanadka hortii. Sidoo kale akhbaarta xarbiga iyo ka bixidda Mumbaasah ee burtuqiiska. Iyo akhbaarta mudaday Carabtu Mumbaasah degganaayeen, ayna madax u ahaayeen Al Mazaaric qoyska la yiraahdo iyo siday isaga cazileen oo uga baxeen, taasoo ahayd taariikhda kun laba boqol afar iyo konton. Sidoo kale akhbaarta Saciid bin Suldhaan iyo Mazruuciyiinta iyo xarbigooda iyo waxa ku dhacay oromada iyo sida suuqa loogu gatay. Iyo umuur kaloo intaasba ka duwan oo dhacay. Marka waxaan leeyahay, Tawfiiqduna Ilaahay ayay ka timaaddaa, inuu Xaam wiilka Nabiga Ilaahay Nuux ibnu Lamik Calayhi Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu, isaagana ah aabaha dhalay dadka madow, saddexda wiil ee Nuuxna ugu yar. Xaam wuxuu lahaa afar wiil oo kala ah Misr iyo Kancaan iyo Kuush iyo Quudh. Al xabashah, waxay ka mid yihiin dhashay Kuush bin Xaam. Al Nuubah iyo al zinji waxay ayagu ka mid yihiin dhashay Kancaan bin Xaam. Xaam wuxuu ahaa nin qurxoon oo wajigiisu kaahayo. Markaasuu Ilaahay wuxuu beddelay midabkiisa iyo midabka dhashiisaba, kuna beddelay habaar uu aabihiis habaaray, kuna habaaray inuu wajigiisu madoobaado iyo wajiyada dhashiisuba iyo inay dhashiisu addoommo u noqdaan dhasha wiilashiisa kale Saam iyo Yaafith. Markaasuu Ilaahay badiyay oo ay tarmeen, qisadooduna waxay ku taallaa kutubbada taariikhda ayadoo tifaftiran, siduu ugu xusay kitaabka Sabaa'iku Al Th-thahabi. Markaasuu markuu Nabiga Ilaahay Nuux arliga wiilashiisa u qaybiyay ayay Afrika ku beegantay Xaam, oo ay wiilashiisu caruur madmadow dhaleen, o ayan timohoodu dhegohooda dhaafin, sidaan hadda u aragnaba. Markaasay arliga ku faafeen oo ay buuxiyeen oo ay degeen. Markaasey qawm ayagaas ka mid ahi waxay degeen daanta galbeed ee Badda Hindiga, diillinta arliga kala barta ee Equaatoraha (waxayna martaa tuulada Zunguuni ee koofurta Soomaaliya ku taalla, kana fogayn wabiga Jubba) dhexdeeda iyo Jubba. Equaatorahana waxaa afka kashuurta lagu yiraahdaa Waamaa. Qawmkaasna waxaa afka Carabiga lagu yiraahdaa Al Kashuur xagga macnaha, haddana waxaa la yiraahdaa Wa-Nyiika. Zamankaasna ummad kale oo aan ayaga ahayn halkaas ma degganayn. Laba iyo toban maalin socodna marka halkaas laga tago waxaa la gelayaa arliga xabashada. Al Kashuur waxay ahaayeen xoolo dhaqato waxayna dhaqan jireen ari iyo lo' iyo digaag, waxayna beeran jireen gallyada iyo digirta iyo mesaggada, mana ayan lahay fawaakih aan ahayn (mooska, Al Buubar, Al Qalc). (Cerulli wuxuu yiri: "Zamankaasu wuxu ku aadan yahay shan iyo labaatanka sano oo ugu horreeya qarniga toddoba iyo tobnaad, waana kun lix boqol shan iyo labaatanka Miilaadiga ah). Magaaladooda ugu caan san waxaa la oran jiray Shungwaayah. Ninka madaxda u ahna waxaa la oran jiray Mze Shaaghawambe Mkawmaa, caasimaddooduna waxay ahayd Shugwaayah, sharciyadooduna caan ayay ahaayeen. Caadada Al Kashuur

waxay ahayd in markay abaareystaan oo gaajoodaan oo ay baahdaan inuu ninku gabadhiisa rahmo ama walaashiis ama haweentiisa oo uu wax la isla og yahay soo dhaafsado, dayntaasna ay ahaato muddoo la isla ogyahay oo ay markaas gabadha ama ghayrkeeda la rahmay ay soo noqoneyso. Hadduu daynta gudi waayana gabadhaasu waxay noqoneysa addoon la leeyahay oo ayan doodi ka imaan karin. Waxaaba dhici karta in gabadha ama haweenta kaloo la rahmay suuqa lagu gato haduu aabeheed ama walaalkeed ama ninkeedu daysan yahay oo uusan daynta gudi karin. Ninku wuxuu haweenta u guursan jiray inay u adeegto ayadoo aan muddo la ogyahay ku xirnayn. Waagi horese ragga aan haysan waxay meher u bixiyaan waxay ku guursan jireen inay u adeegto toddoba sano. Al Kashuurtuna haddeer waxay isku guursadaan adeegga. Ninka qaba haween uusan meher siin oo uusan u hayn hadday gabar u dhasho oo ay qaan gaarto oo ay guursato meherkeeda waxaa qaadanaya aabaha dhalay gabadha hooyadeed, ama waxaa qaadanaya aabeheed hadduu hooyadeed hore meher u siiyey, siduu la isku waafaq sanyahay. Taasaa waxay ahaaneysaa oofin meherka lagu lahaa oo uu ku guursaday. Adeegga uu adeegayna waxay faaiido u noqoneysaa aabaha haweenta dhalay. Markuu ninku dhinto uuna hanti iyo haween ka tago ninka walaalkiis ayaa dhaxlaya haweenta, wiilkiisuna wuxuu dhaxlayaa hantida, sida la isku waafaq sanyahay. Xukunkoodu wuxuu ugu adag yahay tuugga oo tuuggu hadduu saddex goor wax xado waa dilayaan.

Al Kashuur

Al Kashuur waa laba iyo toban qabiil: (Kow)Mdbighu, (Laba) Mshamba, (Saddex) Mluughu, (Afar) Msiifii. Afartaasu wuu kuwa ka carary Shugwaayah marka hore markay arkeen inay Al Ghaylaanu ku cathaabayaan anwaac kala duwan oo cathaab ah. Waxayna u carareen cabsi ay ayagaas ka qabaan. Waxaa kaloo cabsi ay ka qabaan u cararay (Shan) Mghirayaamaa, (Lix) Mshuunii, (Toddoba) Mkamba, (Sideed) Mriibi, (Sagaal) Mjibaana, (Toban) Mtiita, (Kow iyo toban) Mkathiyaaru, (Laba iyo toban) Mdaara. Laba iyo tobankaas dhammaantoodna waxay degganaayeen jiinka wabiga Jubba iyo hareerhiisa iyo dushiisaba tan iyo maalintuu Ilaahay Tacaalaa abuuray.

Hijrada Carabta Tubbac Al Ximyarrii

Markaasey markay Carabtu ka timid Sancada Yaman ku taalla, waana qawmka boqorka Tubbac Al Ximyarrii, taasoo ahayd zamanka jaahiliyada siduu tafsiirkiisa ugu xusay Qataadah ee Aayadda: "**Ahum khayrun ama qawmu Tubbacin**" ahan Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Al Dukhaan oo macneheedu yahay: "Ma ayagaa khayr badan ama qawmka Tubbac?" ayuu Qataadah wuxuu yiri: "Waa Tubbac Al Ximyarrii", oo ciidammadiisa watay socdayna ilaa uu ka kharaabiyo oo burburiyo Al Xiirah (oo ku taalla Ciraaq), uuna ka dhisay Samarqand. Wuxuuna ka mid ahaa boqorrada Yaman. Abuu Xaatim wuxuu Al Rafaashii ka wariyay inuu yiri: "Wuxuu Abuu Kalb Ascadii Al Ximyarrii ka mid ahaa Tubaabicada boqorrada

Yaman, wuuna aaminay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, wuxuuna boqor ahaa konton sano sida ugu xusan kitaabka Sabaa'iku Al Th-thahabi. Aayaddu waxaa daliil u tahay inuu Tubbac Al Ximyarrii noolaa zamanka Nabi Muuse Calayhissalaamu, waxaana u daliil ah Aayadda taas aan soo sheegnay oo Tubbac xusaysa ka horreysa oraneysana: **"Wa laqad najjaynaa Bani Israa'iila mina al cathaabi al muhiini(30) min Fircawna innahu kaana caaliyan mmina al musrifiina(31) wa laqad ikhtarnaahum calaa al caalamiina(32)."** Waana Aayadaha soddon ilaa laba iyo soddon ee Suuratu Al Dukhaan oo macnehoodu yahay: "Waxaan reer Bani Israa'iil ka badbaadinnay cathaab wax dulleeya(30)Waxaan ka korinnay Fircoon, wuxuuna ahaa mid isla weyn oo kuwa xad gudba ka mid ah(31)Banii Israa'iilna waxaan ka doorannay dadka waqtigooda joogay annagoo u cilmi leh(32)". Waxaana hubaal inaan doorannay macneheedu waxaa weeye "Waxaan doorannay Muuse iyo Banii Israa'iil." Waxayna degeen oo cammireen Muqdisho reer Tubbac, waana magaalada ugu horreysey oo ay degaan. Kaddibna waxay degeen Busaasah, oo asalkeedu Carab yahay, looguna bixiyey Busaasah ayadoo ay dadka degah ka yimaadeen Al Xijaaz, laguna khasbay inay dalkooda kasoo tagaan. Markaasey Kuniyada Makkah Al Mukarramah u bixiyeen, siduu shaacirku u yiri: "Busaasah hiya kuniyyatu Ummi Al Quraa samma bihaa ahla Al Xijaazi muqaaman" oo macneheedu yahay: "Busaasah waa kuniyada, waana koofaarta, Ummu Al Quraa, oo ah Makkah Al Mukarramah, waxaana ku magacaabay dadka Xijaaz ka yimid oo degay."

Tubbac Al Ximyarrii wuxuu kaloo dhisay Kilwaa, kaddibna Patee iyo Siiwii, Aamu iyo Ghaamaa. Ghaamaa waxay ahayd magaalo ku taalla jaziirad u dhexeysa Kilifi iyo wabiga Taana, hadana waxaa la yiraahdaa Ghamiini. Waxayna ahaan jirtay jaziirad camiran oo dhsimaha guryeheedu adag yahay laguna adkeeyey dhagax iyo nuuriyad. Badda ayaana burburisay oo xoogaa xoogaa uga goosatay. Markaasey dadkeeda biyuhu ka go'een. Markaasey waxay u guureen Ozi. Markaasey guryeheedu badda galeen, haddana waxaa baddaas loo yaqaanna Badda Ghaamaa lehna hirar aad u waaweyn oo laga cabsado. Qofka doon saaranna hadday halkaas la timaaddo wuu arkayaa dhismaha guryaha darbiyadooda iyo darbiga ku wareegsanba. Markaasuu dhagaxdeeda halkaas ka gurtaa si uu ugu gato suuqyada Maliindi iyo Mambruy markay tahay waqtiga Al Artab oo ah markay socoto dabayshi munsuunka waqooyi/bari. Tubbac Al Ximyarrii wuxuu doonayey wuxuu ahaa dahab. Markaasuu dahab qoday, wuxuuna helay wuxuu helay. Kaddibna Carabtu way faaftay oo kala tageen ayna degeen inta u dhexeysa Muqdisho iyo Mumbaasah, Markah iyo Baraawe. Markaasey markay Carabtu gaartay Jubba, ayna zunuuju ka carareen ayay kuwaas carary waxay ku magacaabeen Kashuur oo macnihiisu yahay kan cararay. Kaddibna Carabtu waxay ku dadaaleen la kulankooda, waxayna la kulmeen laba bilood kaddib. Markaasey u arra tireen ayna wax la bixiyo oo kala duwan siiyeen. Markaasey cabsiday qabeen ka tagtay ayna dhexdooda ka abuurantay xiriir wanaagsan. Markaasey zunuuju Carabta jeclaadeen jeceyl aan ilaa haddeer ka tegin. Carabtuna markaas waxay ahaayeen gaalo oo axkaamta zunuuju kama ayan hor imaan.

Kaddibna waxay Carbtu degtay inta u dhexeysa Jubba iyo Mumbaasah iyo Kisimaayo oo dadkeedu Masar ka yimid beled la yiraahdo Baanah, waana Baajuunta. Kaddibna Carabtu waxay degeen Faazah iyo Siiwi oo dadkeedu Cumaan ka yimaadeen. Waxaana halkaas ku yaalla gacan ilaa maantana ay ku taallo magaalo la yiraahdo Siiwi dadkeeduna yahay Banuu Sacd. Kaddibna waxay degeen Patee, waxaana degay dad ka yimid Al Shaam. Aamu waxaa degay dad ka yimidi Ciraaq, gaar ahaan Al Kuufah. Sidoo kale dadka dega Malindi waxay ayaguna ka yimaadeen Al Kuufah ee Ciraaq. Degmada Yuumbu ayaduna waa Carabiyad sababtuna tahay inay dadka deggani Yaman ka yimaadeen degmada Yuum ee Yaman ku taalla. Degmada Kilfii magaceedu waa magaca qabiil ku abtirsata Caamir bin Al Xaarith. Degmada Al Madhaafii waxaa degay dad ka yimid Al Dhaa'if. Dadka Mumbaasah degana waxay ka yimaadeen Al Xijaaz sidaan hore usoo sheegnay, qaarkoodna waxay ka yimaadeen Cumaan una dhasheen qabiilka Julandaanii, waana kuwa la yiraahdo sida qalad weyn ah kilindiini, ayagoo ah dhasha Julandu bin Karkarah oo ay ku abtirsadaan Julandaanii qabiil Cumaan degta oo ilaa haddeer jooga. Dadka Mumbaasah degah qaarkoodna waxay ka yimaadeen Yaman iyo Al Jawf, waana Al Taghmaa qabiil ka tirsan Mahrah ibnu Xaydaan, qofka ku abtirsadana la yiraahdo Al Taghmaawii oo khilaaf la'aan Carab ah. Al Jawf waxaa la yiraahdaa gobolka u dhexeeya Casiir iyo Sancaa' ee arliga Yaman, kumana gooni ah qabiil keligiis ee waa qabaa'il kala duwan. Degmada Dhiiwii waa Carabiyad asalkeedu, dadka degana waxay ka yimaadeen Dhiiwii iyo Fanj ee arliga Cumaan. Degmada Waasiin ayaduna waa Carabiyad asalka macneheeduna waa "kuwa tiiraanyeyaan" ayadoo uu dadka dega Fanj ay halkaas dadka ku xabbisi jireen.

Markaasaa waxaa arligaas ka dhacay daacuun iyo cudurro kala duwan. Markaasaa waxaa kharaabay oo burburay magaalooyinka iyo tuulooyinka iyo degmooyinka qaarkood. Inta kalena ilaa maanta ayay jiraan. Carabtuna waxay degeen xeebta Badda Hindiga, waxayna badankoodu ku imaan jireen doonyo, qaar kalena barriga. Carabtuna waxay u imaan jireen sababta xarbiyada, kana imaan jireen xagga Sawaakin iyo Barbarah. Markaasay xiddiga Al Qudhb xagga koofureed usoo raacaan ayagoo dhabarradoodana xijinaya waqooyiga. Markaasey hoos ugu degayaan Muqdisho iyo ghayrkeedba. Caadada zinjigu waxay waayahaas ahayd inay muraadkooda ka dhammaystaan abaankooda, oo zinji walba wuxuu lahaa abaan zinji ah, oo abaanku waa ninka kan kale magan geliya oo uu geeskiisa magaalada ku daaqa. Markaasuu markuu nin Carab ahi magaalada zinjiga yimaado wuxuu ku hoos jirayaa magan gelyada iyo ilaalinta abaankiisa iyo qabiilka abaankiisa hadduu axad kale oo zinji ah wax la doono. Sidoo kalena Carabtu waxay zinjiga ka magan gelin jireen oo ka ilaalin jireen umuurta xarbiga iyo ghayrkoodba. Hadduu Carabku dayn ka qaato kashuurka, uuna ka maqnaado, zinjigu wuxuu ka qaadan jiray maalka nin kaloo Carab ah, uuna u sheegayaa: "hebel ina hebel ayaa halkaan joogay wuuna naga safray, waxaana lagu leeyahay intaas iyo intaas. Marka maalkaagaanu wuxuu ku xiran ninkaas. Marka ninka noo soo celi si aan maalka lagu leeyahay uga oofsanno, oo aan adiga sidaas kuula wadaagno."

Asxaabu Al Fiili

Sancada Yaman waxaa ayadana ka dhacay umuur, ahna inuu Abraha al ashram -oo ah can, faruur, san jeex, oo intaasuu waran lagu tuuray ka jeexay-al xabashii amiirka al najaashiyyu markuu Yaman boqor u noqday, uuna amiirku arkay ciidammo is daba socda sida hirarka oo kale ayyaamaha mauusinka xajka iyo bisha Thii Al Xajjah una wada socda Kacbada, ayuu amiir Abraha wuxuu boqorrada Yaman ku yiri: "waxaan idiin dhisi doonaa daar idiin beddesha Kacbada." Markaasuu boqor ka mid ah boqorrada Carabtu wuxuu ku yiri: "Bal noo dhis, annaguna dhammaanteen waxaad naga rajayneysid raalli ayaan ku nahay si aan khilaafi ku jirin." Markaasuu Abraha wuxuu dhisay kaniisad weyn. Markaasuu markuu dhismeheeda kasoo jeestay oo uu goglay, nalalna geliyay oo uu dhulkeedana labin dhigay oo dhalaaliyay ayuu nin u dhashay ehelka Makkah habeennimo dab qabadsiiyey (riwaayad kalena ay sheegtay inuu dhexdeeda ku xaaray), uuna xagga Makkah u gaddoomay. Markaasuu markuu waabariistay amiirku maqlay waxa kaniisada ku dhacay oo uu markaas reer Makkah aad ugu carooday uuna yiri: "Hadday reer Makkah gurigaan aan dhisay sidaas ugu carooden oo ay markaas faleen waxay faleen, markaas aniguna waxaan u duminayaa Gurigooda dhagax dhagax." Markaasuu ciidan diyaariyay watana maroodi la yiraahdo Maxmuud. Markaasey markay tageen Makkah agteeda ayuu maroodigu diiday inuu hore u socdo. Markaasey markay ahayd casarkii ayaa waxaa yimid shinbiro is daba socda oo dhagax la dhacday, dhagax dhoobo naarta lagu soo shiilay ah markaasey ka yeeleen sida beer gallay oo la shafay oo kale, ayna dhammaantood dhinteen. Waxaana ka haray nin keli ah oo u cararay xagga Abraha al ashram, ugana warramay wuxuu indhihiisa ku arkay ee amarka shinbiraha ah. Isagoo aan weli hadalkiisa dhammayn ayaaba waxaa dul yimid shinbirihi oo dhagax kusoo riday oo uu isaguna meeshiiba ku dhintay. Markaasuu amiirka al najaashiyyu arrinkaas aad ula yaabay. Markaas kaddib ayay amxaaradu waxay dib ugu noqdeen arligooda, waxaana raacay Carabta u dhalatay Ximyar iyo Qays Caylaan oo amxaarada dalkooda kula noolaa sideetan sano. Markaasey Carabtu markay ajashoodu gashay dhindhinteen, waxaana halkaas ku haray caruurtooda arligaas amxaarada ku dhashay oo ku hadlaya afka amxaarada, aanna ku hadlayn afka Carabiga sababtuna ay tahay siday amxaarada isugu qasmeen iyo yaraanta Carabta iyo badnida amxaarada. Markaasey markay taariikhdu ahayd kow iyo afartanka sandka Hijrada zamanka Amiiru Al Mu'iniina sayyidkeenna Cumar bin Al Khadh-dhaab ayay Carabtoo idil muslimiin noqdeen. Carabtii u dhalatay Banuu Qays bin Caylaan oo xabashada soo raacdayna waxay noqdeen intay arliga amxaarada jooheen krishtaan, ayagoo markooda hore asnaamta caabudi jiray. Markaasay Banuu Qays bin Caylaan, oo dhammantood krishtaan noqday, markay maqleen islaamidda Carabta, waxay ka sheekeysteen zamannadii lasoo dhaafay iyo umuurtii Carabta oo horreysey, ayna ku sheekeysteen ayagoo ay amxaaradu maqleyso. Markaasey xabashadu ka carootay waxay Carabtu ku wada hadlayaan iyo siday uga shallaayeen inayan ka mid ahayn waxa dhacay oo ah inay Carabtu muslimiin wada noqdeen. Markaasay amxaaradu waxa ku

tiri: "Carabtu waxay ka tageen diinta aabayaalkood iyo awwowayaalkood oo waxay galeen diinta islaamka. Waxaanna ogaannay inaydnaan ballanka oofin markaad heshiis gashaan, oo sidaasaan idiin rumaysanayn inaad krishtaan tihiin." Markaasey ayaga iyo xabashadu arriinkaas isku khilaafeen, oo ay arliga amxaarada kaba haajireen, ayna u guureen arliga Jubba. Markaasay oromadu waxay ku heshiiyeen inayan islaamin xattaa hadduu midkood krishtaanimada ka baxo. Waxayna noqdeen gaalo asnaamta caabudda sida aabayaalkood iyo awooyayaalkood. Waxay kaloo ku heshiiyeen in kooda nin amxaaro ah arka inuu dilo oo qooraha iyo thakarka ka gooyo uuna haweentiisa meher uga dhigo, ayna sidaas u yeeleen caro ay amxaarada u qabaan, oo dhexdooda waxaa yiillay colaad weyn ilaa maantaan, waxa ka dhexeeyana ay noqdaan hub iyo silsilado ayanna la heshiin. Sidaasuu iimaankoodu u fiyoobaaday intaan amxaarada ahayn, ayaga dhexdoodana uu u fiyoobaaday. Sidaasay isku dhaarsadeen. Markaasay markay kashuurta dilaan ayay qoorhooda iyo thakarkooda ka gooyaan si ay dhaartay amxaarada isugu dhaarsadeen taam u noqoto, oo ay markaas kashuurtana kula dhaceen. Sidaasay caado u noqotay oromada in markuu midkood nin dilo qabiilkuu doono ha u dhashee inay qooraha iyo thakarka ka gooyaan, intaan ayaga dhexdooda ahayn. Arligaas Jubba waxaa ku noolaa Al Kashuur oo dhulkaas asal u lahaa. Markaasaa waxaa dhexdooda ka dhalatay cadaawad iyo is nacayb. Oromadu way dili jireen kashuurta maalin iyo habeen walba. Markaasay kashuurtu dhammaantood carareen, waana inta jinka wabiga Jubba degganayd. Waxaana halkaas ku haray kashuurta deggan Waamo iyo Shungwaayah. Markaasay markay gaareen wabiga Tanna, oo erayga Tanna waa eray Carabi ah oo macnihiisu yahay "Dhagaxa kasoo baxay wabiga dhexdiisa oo socodkiisa awday, waana buur ay indheheeda biyuhu dhex maraan, kuna socdaan min dhanka hoose ilaa dhanka kore", oo sidaasaa loo yiri wabiga Tanna. Hadana waxaa afka sawaaxiliga lagu yiraahdaa Mutu Taana. Markaasay markay kashuurtu wabiga Taana gaareen, ayna arkeen inuu yahay wabi aad u weyn ayay waxay quluubtooda iska yiraahdeen: "Oromadu ma dilaan qofka qafaalka u ah, oo waxay cadawdooda ka gooyaan qooraha iyo thakarka, mase gooyaan qooraha iyo thakarka qafaalkooda." Markaasay tashadeen waxayna isku raaceen hal talo oo ay go'aansadeen. Markaasey waxay oromada u direen Pokomo oo ah malaha madaxdooda, inay ku yiraahdaan: "Annagu waxaan raalli ku nahay waxaad adinkuna raalli ku tihiin, hana noo arkina cadawgiinna, ee waxaad naga dhigataan shaqaalihinna iyo addoommadiinna aad adinku u talisaan, annaguna waan idin adeecaynaa. Marka warammadiinna naga dul qaada, noona ahaada kuwo na wanaajiya." Sidaas ayayna ku yiraahdeen. Markaasay oromadu waxay yiraahdeen: "Kuwiinnaan adeecidda la ordayayow, hadda ma ihidin badeeco ee naftiinna wanaag u sheega, indhihiinuna ha qabawsadaan. Annagana noo noqda addoommo noo shaqeeya, amarkeenana waa idin qabtaa oo waa inaad fulisaan. Wa al ssalaamu." Markaasey halkaas degeen. Labada qabiil ee Wasifii iyo Wariigh ama Waringu waxay u carareen xagga Dhiwaa iyo Fanj iyo Dhabaj, halkaasoo ay ilaa hadda joogaan. Kashuurta inta ku hartayse Shugwaayah iyo Waamaa way haren waxaana ayaga iyo oromada dhex

maray dagaal, waxayna u carareen dusha Busaasah (waana Mumbaasah), arliga la yiraahdo Jiryaamaa. Markaasay kashuurtu markay gaareen arliga Jiryaamaa ayay waxay isku xoojiyeen nin la yiraahdo Khuzaan oo wuxuu baray fallaaraha birta ah, oo markooda hore fallaaraha kashuurtu waxay ahaayeen qoryo keli ah. Markaasay markay halkaas tageen oo degeen ayay beledkooda dhisteen la yiraahdo Kaayah. Markaasay oromadu kashuurta wax ka tari waayeen, ayadoo ay kashuurtuu xoogeysteen, mar walbana adkaada. Ilaa maantana kama ayan tegin degmadaas ayna ku gashay yididiilada inay mar walba halkaas oromada uga adkaanayaan. Halkaasay degeen oo ay ku caruur dhaleen, ayna la saaxiibeen dad, gaar ahaan dadka Busaasah. Sidaasay qabiil walba ee zunuuja ka mid ahi waxay la saaxiibtay qabiil Carabta ka mid ah oo Busaasah degta. Sidaasay qabiilka zinjiga ah ee Jiryaamaa waxay la saaxiibtay qabiilka Carbeed ee Jilindaanii ahna kuwa la yiraahdo Al Kilindiini. Qabiilka zinjiga ah ee Mshuuni waxay la saaxiibtay qabiilka Carbeed ee dadka Al Dhaa'if dega oo hadda la yiraahdo Al Madhaafii oo loo nisbeeyey tuuladooda Madhaayaaf. Hadalkuna wuu dheeranayaa haddii la sii wado oo ilaa hadda way og yihiin oo waxay qabiil kasta oo zinji ah u gooyaan qabiil Carab ah. Ilaahay ayaana waxaan leeyahay ka marag ah. Qabaa'ilka kale ee Mdigo iyo Msifi iyo Mkamba iyo Mlungo waa kuwa ugu soo hormaray meeshay ilaa hadda deggan yihiin, mana aha wax qarsoon. Kuwaanna waxay ahaayeen kuwa degganaa oo xarumohoodu ahaayeen hareeraha wabiga Jubba, waxayna ka tageen ka hor dadka Shungwaayaa. Markaasay kashuurtu dalka ku tarmeen oo ay markaas zunuuji kale ka carareen, siday u carareen oo kale Watuusii ilaa iyo maanta. Baajuuntuna waxay degeen xeebta badda xagga Shugwaayah. Oromaduna waxay degeen barriga ku beegan. Ayaga iyo baajuuntana waxaa dhex maray xiriir fiican oo aan weligiis go'in. Oromadu waxay baajuunta qooraha iyo thakarka uga goyn jireen oo keli ah dagaal dhexdiis. Markay la dagaallamaana xoog ayay ula dagaallamayeen, kaddibna way heshiin jireen. Sidaas ayayna ahayd ilaa ay soomaalidu ka yimaadaan arliga Jubba, ayna halkaas ka go'een oromadu oo laga eryay. Markaasay baajuuntu oromada ka raaxaysatay.

Cabdu Al Malik bin Marwaan iyo Abuu Jacfar Al Mansuur

Markay taariikhdu ahayd shan iyo toddobaatan Hijrada ayay Carabi ka timid Shaam (riwaayad kalena waxay tiri: "Waxaa yimid waaliga Carabta ah, waana guddoomiyaha gobolka, lana yiraahdo Cumar ama Camr bin Al Caas), waana askarta Amiiru Al Mu'miniina Cabdu Al Malik bin Marwaan, ayagoo u socda xeebta Badda Hindiya, waxayna soo gaareen Muqdisho iyo Kilwaa, waxayna doonayeen kharaajka dadka beledka lagu leeyahay, dadka degganna way bixiyeen oo u dhiibeen. Ciidankaasu waxaa u taliyay amiir la yiraahdo Muusaa bin Zubayr Al Khathcamii, oo dadka baray Quraanka akhrintiisa iyo diinta. Wuxuuna Kilwaa ka dhisay qalcad uuna dhexdiisa dhigay hub. Markaasay dadka beledka deggani u wada hoggaansameen kooda ugu horreeya ilaa kooda ugu dambeeya, ilaa ay Dimishiq uga burburto dawladda Bani Umayyah. Magaca dawladdasuna wuxuu ku haray Al Andalus oo keli

ah (oo ah dalka maanta la yiraahdo Spain). Waxaana ugu dambeeyey dawladdaas Banii Umayyah Muxammad bin Cabdu Al Rraxmaan. Markay taariikhdu ahayd sanadka boqol iyo sagaal iyo afartan Hijriga ayuu ergayga dawladda Al Cabbaasiyyah Salaadiinta ugu yimid Muqdisho iyo Munda oo ilaa iyo hadda la yiraahdo Manda, iyo Patee iyo Aamu iyo Ozi iyo Kilifi iyo Busaasah iyo Zanjibaar iyo Kilwa iyo Wibu. Markaasuu ergaygaasu wuxuu mid kasta oo ka mid ah ku yiri wuxuu qalbiga qofka maqlaa ku farxo macaanka hadalka wasiirka. Wasiirkana waxaa la oran jiray Yaxyaa bin Cumar Al Canzii, wuxuuna suldaannadaas ka helay wuxuu doonayey, wuxuuna khayr kula soo noqday Baghdaad, uuna Amiiru Al Mu'miniina - waana kii labaad ee khulafada Cabbaasiyiinta- Abuu Jacfar Cabdu Allaahi Al Mansuur u sheegay inay dadka beledkeennu hoggaan san yihiin ayna adeecayaan, taasna uusan shaki ku jirin. Wuxuuna usoo bixiyay kharaajkuu kasoo qaaday, taasoo uu Abuu Jacfar Cabdu Allaahi ku farxay farax wayn. Markay taariikhdu ahayd boqol iyo sagaal iyo sideetan Hijrada Amiiru Al Mu'miniina Abuu Cabdu Allaahi Haaruun Al Rrashiidu wuxuu ku sugnaa Baghdaad, zunuujtuna way khayaaneen, umana ay dhiibin kharaaj. Markaasuu askartiisa u diray arliga zunuuja, wuxuuna gobolladaas guddoomiyayaal uga dhigay rag aan Carab ahayn, iyo tuulo kasta iyo magaalo kasta guddoomiye, gaar ahaan jaziiradaha sida Kiwaayu iyo Mumbaasah iyo jaziiradda cagaaran (oo maanta la yiraahdo Pemba) iyo Kilwaa. Sanooyin kaddibna waxay khayaaneen dadka beledyada zamanka Abuu Al Cabbaas Cabdu Allaahi Al Ma'muun markay taariikhdu ahayd laba boqol iyo sagaal Hijrada. Markaasay markay ahayd taariikhda laba boqol iyo laba iyo toban Hijrada ayaa waxaa soo bannaan baxay oraaqda abuuridda Quraanka oo ay markaas fitnadu istaagtay Baghdaad dhexdeeda. Markaasuu amarka Al Ma'muunu ku taag darraaday arliga zinjiga tas daraaded, ayna khilaafeen. Markaasuu Al Ma'muunu wuxuu u diray ciidan ka kooban konton kun oo askari oo soo gaaray Malindi, waxayna jebiyeen inta ku sugnayd degmooyinka iyo tuulooyinka iyo magaalooyinkaba, oo ay dadkoodu markaas raalli ku noqdeen wuxuu khaliifku raalli ku yahay, kharaajka sanooyinkii lasoo dhaafayna bixiyeen ayagoo Amiiru Al Mu'miniina ka edebeysanaya. Dadkuna wuxuu ciidankaas adeecay isagoo aan la dagaallaminba. Markaasay dadka Mumbaasah iyo hareereheeda deggani waxay isugu yimaadeen Mumbaasah oo ay halkaas buuxiyeen. Markaasaa waxaa haleeshay dadka deggan gaajo. Markaasuu dadka barriga deggani wuxuu yiri: "Dalalkeennaan ku noqoneynnaa, haddii kale waan dhimanaynnaa." Markaasey waxay ku yiraahdeen: "Suga intuu dagaalku ka caddaado." Taas daraadeed ayaa loo yiri: "Mviita Xizi." Markaasaa Busaasah waxaa lagu magacaabay Mvita. Asliga magaceeduna afka sawaaxiliga waa Kuuji Wiya, afka Carabigana waa Busaasah. Waxaana loo rogay Mumbaasah oo loogu magac daray krishtaankii burtuqiiska ahaa oo xukamayay. Mviita macneheeduna waa xarbi, waana xarbiga ka yimid Baghdaad markay taariikhdu ahayd sanadka laba boqol iyo afar iyo toban Hijriga. Kaddibna waxaa Baghdaad galay turkiga, kaasoo ka hor istaagay khulafada Baghdaad ku sugan umuurta beledkeenna, kuna yiri: "Dadkaasu waa muslimiin caabuda Rabbiga caalamiinta. Marka sideebaad uga

qaadanaaysaan maalkooda, adinkoo aan haweenkooda garoobada ah iyo saboolkooda hadana wax siinayn? Jid uma lihidin inaad taas sameysaan, oo waxaabaad samayneysaan xaqdarro." Turkigu wuxuu sidaas ugu yiri daacad iyo naseexo kama ahayn ee waxay ka ahyd xeelad. Markaasay turkigu laba markab ku yimaadeen waxayna soo gaareen Munda iyo Patee iyo Siiwaa. Halkaas ayayna ku tarmeen oo ay isku dhaleen. Kaddibna waxay dib ugu laabteen dalkooda ayagoo aan wax la kahdo la imaan.

Burtuqiiska krishtaanka ah

Markay taariikhdu ahayd sanadka sagaal boqol iyo lix ayay krishtaanku waxay ku yimaadeen lix markab oo shiraac saaran yahay. Amiirkooda u taliyana waxaa la oran jiray Vasco de Gama. Markaasuu soo maray Zinjibaar (Cerulli wuxuu yiri: "Zanjibaar wuxuu soo maray markuu Hindiya kasoo noqday markay taariikhdu ahayd sideed iyo labaatanka bisha Fabraayo ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sagaal iyo sagaashanka. Wuxuuna Mumbaasah maray markuu Hindiya usii socday toddobada ilaa laba iyo tobanka Abriile ee kun afar boqol sideed iyo sagaashanka miilaadiga), ayna dadka deggani si fiican usoo dhoweeyeen. Kaddibna wuxuu yimid Busaasah, kuwaanoo iska ilaalay lana xarbiyay. Markaasuu isaguna la xarbiyay. Waxaana ka burburay hal markab, waxaana u hartay shan. Markaasuu wuxuu yimid Maluudi, kuwaanoo si fiican usoo dhoweeyey, isaguna uu taas ku farxay. Wuxuuna siiyay boqorka iyo kuwa hareerhiisa degganba maal badan, wuuna u badiyay ku shukrintiisa. Markaasuu Vasco de Gama ku degay tuulada Maluudi, uuna fiiriyay daaraha cad cad iyo nadaafadda dadkeeda. Markaasuu weydiyay magaca magaaladooda, ayna u sheegeen in la yiraahdo Maluudi. Markaasuu Vasco de Gama ka codsaday inay magaca magaaladooda beddelaan ayna hawentiisa ku sammiyaan oo magaceedu uusan ka fogayn magaca magaalada , magaceeduna ahaa Linda. Markaasay ka yeeleen oo ay miimka magaca magaaladu ka bilawdo sidiisa u daayeen oo ay magaalada u bixiyeen Malindi, taasoo ilaa maanta la yiraahdo. Kaddibna wuxuu u gudbay Patee iyo Manda iyo Muqdisho iyo Baraawe, mana uusan gaarin Ozi. Kaddibna wuxuu u gudbay barriga Hindiga, intaasna ay qaadatay laba sano. Kaddibna wuxuu usoo noqday beledka zinjiga, wuxuuna xarbi la galay Mumbaasah oo uu ka adkaaday, kuna galay awoodda Ilaahay Tacaalaa. Markaasuu halkaas wuxuu ka dhisay qalcad. Qalcaddaanu waxay markeeda hore ahayd buur leh hogag badan, markaasuu godadka awooday, kuwooda gudaha ku yaalla iyo kuwa dibadda ku yaallaba. Markaasuu darbi u dhisayoo ku wareejiyay, albaabna u yeelay, kuna dhisay dhagax afar gees ah. Hawshaasna waxay ka qaadatay saddex sano. Markaasay halkaas degeen, ayna keeneen madaafic dheerdheer iyo silsilado. Suldaanka Busaasah waxaa la oran jiray Xusayn. Markaasey krishtaanku xabiseen uuna u waday oo geeyey Hindiya, halkaasoo ay saddex sano ugu dhamaatay. Waxaana Busaasah madax u noqday nin ka tirsan dadka Maluudi ama Maliindi, una dhashay dadka Buurii Al Maliindii Al Canzii. Buurii waxaa loo nisbeeyey tuulo Xadramuut ku taalla, waxaana la yiri waa tuulada Buurah oo ah midda u dhow Bandh Saciid. Labadoodaasna waxaa

wada dega Banuu Canzah bin Asad bin Rabiic bin Nizaar. Marka Al Buurii waxaa lo nisbeeyey tuuladaas aan soo sheegnay. Markaasuu markuu boqorka krishtaanka burtuqiiska ahi degay, Guddoomiyaha degmada xukuma wuxuu degay qalcada agteeda. Markaasaa meeshaas waxaa loo bixiyay xaafadda Ghvaanah, oo la yiri waa "xaafadda dawladda." Haddana waxay noqotay dekadda Yalvaani (ama Mta Yalvaani siduu Cerulli u fasiray). Guddoomiyaha magaciisu wuxuu ahaa Bumbaasah, waxaana kaloo la yiri Bumbiisaa. Markaasaa magaca magaalada oo ahaa Busaasah loo rogay Mumbaasah oo guddoomiyaha loogu magac daray. Macnaha eraygaasna ma naqaanno Ilaahay ayaana u cilmi leh. Waxay kaloo degeen Patee, taasoo boqortooyo ahaan jirtay. Waxay kaloo degeen Shiilah. Shiilah wuxuu ahaa mid ka mid ah wadaadada krishtaanka burtuqiiska oo halkaas kaniisad ka dhisan si u dekadda uga arko oo u fiiriyo. Waxaana la oran jiray Viilah. Markaasey markay yimaadeen dadka dega Manda iyo Taaqah iyo Kataa' halkaas ayay tuulo ka dhiseen waana midda ilaa maanta ku taalla waxaana loona bixiyay Shiilah. Amarka krishtaanku wuxuu socday muddoo dheer. Markaas kaddib ayaa waxaa yimid amiir arliga madax u noqday oo la yiraahdo Saalim Al Ssaarimii oo dhammaan krishtaanka Muqdisho iyo Marka iyo Baraawe iyo Patee iyo Aamu iyo Shiilah ku jira oo idil ka eryay oo ka saaray. Markaasuu amiirku isagoo faraxsan Cumaan dib ugu laabtay, uuna Imaamka warka krishtaanka u sheegay iyo inay fali jireen umuur la kahdo, hadana ay muslimiintu kuugu duceynayaan cumri dheeri, ayadoo dushooda laga qaaday dulliga iyo dhibka saarnaa, loogana qaaday amarka Midka ducada aqbala. Arrinkaasuna wuxuu ahaa sanadka kun iyo lix iyo toddobaatan Hijriga. Qalbiga imaamkuna warkaas wuu ku suubanaaday oo ku farxay.

Kicinta burtuqiiska

Imaam Sayf bin Suldhahan Al Yacrubii wuxuu lahaa doon la yiraahdo Fatxu Al Islaami, waxayna u safri jirtay xagga xeebaha, uuna goobi jiray warka dalalka muslimiinta iyo krishtaanka ku jira, iyo midka ku dhex kibraba iyo kan caddaaladda falaba. Arliga Mumbaasah waxaa joogay xaakim la yiraahdo Buumbaas, ahna midka magaciisa magaalada lagu sammiyay. Markaasuu maalin fisqi la yimid amarkiisuna uu dadka Mumbaasah u cadaaday. Burtuqiisku waxay ku xad gudbi jireen dadka Mumbaasah dega, kuna fali jireen waxay kahdaan. Markaasuu nin wuxuu u safray Masqat isagoo raacay doonta imaamka ee la yiraahdo Fatxu Al Islaami, oo uu imaamka u sheegay waxaa ka socda arliga Mumbaasah, kuna yimid ficilka Buumbiisaa oo halkaas xaakim ka ah. Markaasuu imaamku carooday. Markaasuu wuxuu amiirka Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii ku yiri: "Miyaad maqashay arrinka dadka Mumbaasah?" Markaasuu yiri: "Haa." Markaasuu imaamku wuxuu amiirkiisa ku yiri: "Waxaad gadataa dhar iyo badeecooyin iyo jawaanno, ulana safar Mumbaasah. Markaas badeecada degso, waxaadna ijaarataa daar, badeecadana hadba in yar ka sii iibi. Waxaadna fiirisaa dariiqyada tuulada laga galo, dadka tuulada degana qalbigooda noo soo jiid, una naxariiso oo u dul qaado, una tur turid la mid ah midda ka dhexeysa caruurta iyo

waalidkood." Markaasuu amiirku wuxuu yiri: "Samcan wa dhaacatan, oo ah waan yeelayaa oo adeecayaa Ilaahay Tacaalaa kaddibna adiga imaamyahow." Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii safarka Mumbaasah isku diyaariyay, wuxuuna qaatay badeecooyinka ugu fiican, wuxuuna Mumbaasah soo galay taariikhda kun iyo lix iyo sideetan Hijriga. Markaasuu ijaartay daar magaalada bartameheeda ku taalla, wuxuuna iibiyay badeecaduhuu sitay. Krishtaankana arrinkaas kama uusan war helin intaan laba nin ahayn oo reer Mumbaasah ah ahna kuwa Masqat u safray oo tagay. Amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii wuxuu iibinayay badeecadihiisa wuxuuna odayada siiyey hoos guntiyo iyo qamiisyo iyo timir, sidaas ayuuna ku socday ilaa ay dadka Mumbaasah jeclaadeen, ayna karaameeyeen, ayna xagga barriga ula safraan oo la soo noqdaan, ilaa uu amiirku ka bartay dariiqyada Mumbaasah taga oo idil. Markaasuu markay muusinkii ahayd ayuu wuxuu u safray Masqat uuna halkaas imaamka Sayf bin Suldhahan Al Yacrubii ugu sheegay waxa ka dhacay oo ka socda arliga Mumbaasah ee falalka xunxun oo xaakimkooda. Markaasuu imaamku wuxuu yiri: "Waxaa waajib nagu noqotay inaan dulmiga celinno, wa bi Allaahi al tawfiiq." Markaasuu wuxuu diyaariyay ciidan uuna taliye ugu dhigay. Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii, kanoo maraakiibta shiraaca leh iyo doonyahaba soo watay ayagoo wata naakhuude reer Mumbaasah ah. Markaasay markay Mumbaasah yimaadeen ay maraakiibtu gacanka kalindiini soo galeen. Halkaas ayay askarta imaamka ku dejiyeen, waxayna reer Mumbaasah isku waafaqeen inay xarbiga meel kasoo wada jeestaan oo ay ayaguna askarta imaamka ku biiraan. Markabka imaamkuna wuxuu ku xirtay albaabka kilindiini ayagoo ay madaafiicdiisu furan yihiin. Markaasey krishtaanku qalcadda galeen oo ay albaabka hoos kasoo xirteen, ayna kasoo rideen madaaficda qalcada. Laakiin madfacoodu kuma dhacayn markabka imaamka maxaa yeelay wuxuu ku xirnaa hoos qalcaduna waxay ku tiillay meel korreysa. Waagaas krishtaanku maraakiibtoodu waxay ahayd kuwa shiraaca ayagoo dalkooda uga yimaada Mumbaasah soona socda lix bilood iyo ka badanba. Soomana uusan gaarin xattaa hal markab oo u gargaara, ayaguna ay intaas gargaar dalbayaan, umana uusan gargaarin axadna muddoo afar bilood ah. Markaasey krishtaanku markay arkeen inay askarta imaamku ay beledka nabad gelyo ku haystaan ayna seexdaan ayagoo aan is ilaalinayn, ayay krishtaanku qalcada kasoo baxeen oo mar Carabta wada weerareen. Markaasaa la dagaallamay oo ay Carabta ka dhinteen laba boqol oo nin. Maalintaas amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii wuxuu saarnaa markabka, markuuna xabbadaha dhacaya maqlay ayuu ciidanka la soo degay oo uu dagaallamay. Markaasey krishtaanku qalcada dib ugu noqdeen, albaabkana ay hoos ka xirteen. Amiir Shahdaad markuu taas arkay ayuu wuxuu amray in jaranjarooyin la sameeyo. Markaasay Carabtu intay jaranjarooyinkaas taftay ayay qalcada ka fuuleen xagga galbeed oo ay burtuqiiska kadiyeen, ayadoo krishtaanku hurdaan oo sakhraansan yihiin. Markaasay laayeen, oo ay jabiyeen, inta hartayna ay Mumbaasah ka saareen ayagoo laga adkaaday. Sidaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii boqorka Mumbaasah ku noqday, taasoo ahayd shan sano kaddib markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo sagaashan Hijriga. Waxaa kaloo la

yiri sagaal sano kaddib markay ahayd sanadka kun iyo shan iyo sagaashan Hijriga, tanoo sax ah siday kuwii hore u yiraahdeen sida Faraj bin Axmad iyo Muxammad bin Axmad Al Ximyarii.

Mumbaasah oo canshuur lagu soo rogay

Kaddib amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii wuxuu Mumbaasah ku sugnaaday laba iyo toban sano. Markaasuu intuu sii haye u magacaabay nin wasiirradiisa ka mid ah oo la yiraahdo Naasir bin Saalim Al Caamirii, ayuu wuxuu aaday Cumaan inuu soo booqdo imaam Sayf bin Suldhaan. Markaasuu wuxuu Cumaan joogay laba sano. Markaasaa waxaa dhintay Naasir bin Saalim Al Caamirii. Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii wuxuu Mumbaasah kusoo laabtay, uuna hoggaankeeda hayay markaas dabadeed toddoba sano oo kale. Markaasaa waxaa dhintay imaam Sayf bin Suldhaan Al Yacubii markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo boqol iyo lix iyo toban ilaa raxmati Allaahi. Markaasaa waxaa dabadiis imaam noqday wiilkiisa Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan Al Yacubii aabihiis dabadiis, kana noqday arliga Cumaan. Markaasuu markuu Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan imaam noqday ayuu warqad u dhigay amiir Shahdaad iyo Mumbaasah wuxuuna ku yiri warqadda: "Intaas dabadeedna, Markaad warqaddaydaan akhrisatid soo safar si degdeg ah maxaa yeelay aabahay wuxuu kuu magacaabay la taliyahayga. Marka waxaan dooneynnaa inaad degdeg noogu timaadid. Wa Al Ssalaamu." Markaasuu markay marqaddu u timid amiir Shahdaad wuxuu dayn ka qaatay ganacsatada Mumbaasah iyo Zanjibaar, maalkana wuxuu uga soo tegay arliga Mumbaasah si askarta mushaar ahaan loogu siiyo. Wuxuuna xilka u dhiibay nin la yiraahdo Xumayd bin Saalim Al Saarimii ahna wiilka amiirka aan hore usoo sheegnay. Markaasuu amiir Shahdaad markuu Masqat yimid, uuna hor yimid imaam Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan wuxuu u sheegay inuu dayn qaatay uuna uga soo tegey Mumbaasah, taasna ay ku timid yaraanta waxa kasoo gala Mumbaasah iyo dhammaan arliga xeebaha oo idil. Markaasuu wuxuu yiri: "Muxuu hadaba yahay amarka dalalkaan aan bixinayn mushaarka askarta xeebaha u joogta oo mushaarkooda Cumaan laga keenayo?" Markaasuu wuxuu reer Mumbaasah kusoo rogay canshuur degdeg ah ama askarteenna ayaan Cumaan dib ugu soo celineynnaa, Mumbaasana aan ugu tegeynnaa siduu ahaa amarka Muqdisho oo kale iyo Baraawe iyo Markah iyo Pate oo ilaalintooda dadkooda ayagu u xilsaaran yihiin, ayadoo uu amiir Saalim Al Saarimii krishtaanka la dagaallamay oo uu dalalkana ka saaray, kaddib uu dadka deggan u xil saaray, kaddibna uu amiirkaasu Cumaan dib ugu soo noqday, isagoo aan axad askarteenna ka mid ah halkaas uga soo tegin (oo uu Cerulli yiri: "Taasna waxay ahayd sanadka kun lix boqol shan iyo lixdan iyo lix iyo lixdan Miilaadiga). Markaasay wasiirradiisu waxay yiraahdeen: "Odageennow, sidee baan Mumbaasah uga tagnaa ayadoo aan ku naqaanno qalcada daafacda iyo dekada si fiican u qodan?" Waxayna sidaas u yiraahdeen xoogga qalcada iyo fiicanaanta iyo quruxda dekaddeeda." Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii Mumbaasah kusoo laabtay. Markaasay reer Mumbaasah u dhiibi

jireen canshuurta ragga imaamku usoo dirsaday. Dayntii Amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii lagu lahaana waxaa guday Xumayd bin Saalim, kana dabbiray meel aan canshuurta ahayn wuuna oofiyay. Markaas dabadeed amiir Shahdaad sanooyin kale ayuu joogay. Imaamka Cumaan imaam Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan wuxuu ahaa jabbaar xadgudba oo faasiq ah, khamrada cabah tubaakadana cuna. Magaciisana waa laga baqi jiray marka la maqlo. Kuwa khunthaaga ah, waa labeebkee, ayuu haweenka wajiyada qurxoon ka wareysan jiray, markaasuu ruufyaannada u diri jiray inay haweenkaas quruxda loogu sheegay u keenaan. Markaasay markay reer Cumaan iyo odayadoodu ogaadeen ayna sidaas ku ogaadeen, sidaas ayay isaga laftiisa warqad intay ku dhigeen u siiyeen. Markaasu isaguna inkiray. Markaasuu imaamku wuxuu u yeeray amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii oo Mumbaasah jooga.

Al Mazruucii oo Mumbaasah ijaartay

Amiir Shahdaad wuxuu doonayayba inuu ciidanka Mumbaasah ka qaado oo uu kaba guuro markuu arkay in dakhliga canshuur ahaan kasoo gala uu dabooli waayey mushaarka askarta, arrinkaano asalkiisuba ahaa inuu u yeelayba adeeciddiisa imaam Suldhaan Sayf bin Suldhaan. Markaasuu ninka la yiraahdo Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii wuxuu ku yiri: "Amirow, askarta ha celin, aniguna waxaan karaa inaan bixiyo dhammaan mushaarka askarta." Sidaasuu Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii wuxuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii ka ijaartay Mumbaasah, ugana ijaartay lacag la magacaabay. Markaasuu askarta kala yareeyey oo uu qaarkoodna la haray oo uu mushaarkoodu sidaas ku yaraaday. Markaasuu amiir Shahdaad intuu xilka Mumbaasah u dhiibay Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii ayuu isaguna Cumaan dib ugu laabtay. Sidaasay Mumbaasah wuxuu ku hoos timid xukunka Al Mazruucii oo ijaartay sanadka kun iyo boqol iyo laba iyo konton. Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii wuxuu arliga Mumbaasah xukumay shan iyo toban sano, kaddibna wuu dhintay. Wuxuuna dabadiis magacaabay Mascuud bin Naasir Al Mazruucii oo shan iyo labaatan sano xukumay. Isaga dabadiisna Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Cuthmaan oo sideed sano xukumay. Kaddibna Axmad Muxammad bin Cuthmaan oo saddex iyo soddon sano xukumay. Dabadiisna Cabdu Allaahi bin Axmad oo labaatan sano xukunka hayey. Kaddibna Sulaymaan bin Calii oo laba sano xukumay. Dabadiisna Saalim bin Axmad oo labaatan sano xukumay. Kaddibna Khamiis bin Axmad bin Muxammad oo laba sano xukumay. Kaddibna Raashid bin Saalim oo laba sano xukumay.

Cazilidda imaamka Cumaan

Markay umuurta foosha xuni ku caddaatay imaamkooda Sayf bin Suldhaan bin Sayf Al Yacubii, ayay odayada Cumaan cazileen oo xilka ka xayuubiyeen. Waxayna meeshiisa imaam ahaan u magacaabeen imaam Axmad bin Saciid Albuu Saciidii, kanoo aan danaynba akhbaarta Zanjibaar iyo Mumbaasah toona, una jeestay hagaajinta umuurta Cumaan iyo Masqat.

Waxaa xilka loo dhiibay sanadka kun boqol saddex iyo sagaashan, wuxuuna dhintay sanadka kun laba boqol iyo lix. Isaga dabadiisna waxaa arliga Cumaan iyo Masqat imaam u noqday Suldhaan bin Axmad bin Saciid Albuu Saciidii. Markaasuu wuxuu Zanjibaar u diray ina adeerkiisa la yiraahdo Sacuud bin Calii Albuu Saciidii. Markaasuu markuu Sacuud bin Calii Albuu Saciidii Zanjibaar tegey, halkaasoo ay deggan yihiin in badan oo qabaa'il Carab ah oo halkaas waa hore tegey zamanka imaamka arliga hoggaamiyay Sayf bin Suldhaan bin Malik Al Yacubii. Zanjibaarna waxaa ku yaalla beero ay Carabtu deggan yihiin. Kaddib wuu dhintay Suldhaan bin Axmad, waxaana dabadiis xilka qaaday Sacuud bin Calii oo xilka u qabtay isaga wiilkiisa Saciid bin Suldhaan oo yaraa. Markaasuu markuu Saciid bin Suldhaan gaaray lix iyo toban sano ayuu Saciid bin Suldhaan wuxuu dilay Sacuud bin Calii (oo xilka si ku meel gaar ah u hayay). Markaasaa waxaa boqor noqday Saciid bin Suldhaan bin Axmad bin Al Imaam markay taariikhdu ahayd kun iyo laba boqol iyo sagaal iyo toban. Kaddibna wuxuu hagaajiyay umuuraha dawladda Cumaan iyo xeebahaba. Kaddibna wuxuu ergay usoo diray Mumbaasah la yiraahdo Hubuubu Al Ghabsh, ahna nin adkaysi badan oo geesi ah, haybaddiisana laga baqo, qofka arkana uu ku farxayo weynaanta abuuristiisa iyo dheeraantiisa. Markaasuu Mumbaasah ku yimid doon yar. Markaasuu soo degay isaga iyo ragga Carabta oo la socdayba, oo ilaa toban nin ah, ayagoo dhammaantood seefhooda wata. Markaasuu wuxuu aaday xagga qalcada Mumbaasah oo ay albaabkeeda yimaadeen. Markaasuu wuxuu ninka albaabka ilaalinaya ka qaatay ithan inuu galo. Markaasay galeen ka horba intuusan ilaaliyuhu usoo noqon, waxayna u yimaadeen xaakimka xukuma arliga Mumbaasah. Markaasaa waxaa ku qaylisay askarta, waxaase ka celiyay xaakimka. Markaasay iska horyimaadeen xaakimka iyo amiirka Saciid bin Suldhaan ahna Hubuubu Al Ghabsh waxaana la yiraahdaa Saalim bin Axmad. Markaasuu Hubuubu Al Ghabsh wuxuu xaakimka ku yiri: "Kumaad adigu tahay, arligaanna yaa leh?" Markaasuu xaakimku ka naxay oo ka cabsaday haybadda Hubuubu Al Ghabsh, uuna ugu jawaabay: "Arligaan waxaa iska leh Sayyidka Saciid bin Suldhaan, aniguna isagaan halkaan u joogaa." Markaasuu Hubuubu Al Ghabsh wuxuu yiri: "Dhig, warqaddii iyo khaddiina waa kuwanaa." Markaasuu xaakimku dhigay, waana Saalim bin Axmad Al Mazruucii inay qalcada Mumbaasah uu leeyahay Al Sayyid Saciid bin Suldhaan bin Xaamid Albuu Saciidii. Markaasuu qoraalkaas wuxuu siiyey Hubuubu Al Ghabsh oo intuu duubay qaatay oo markaas uu qalcada ka baxay. Markaasuu doontiisa fuulay oo shiraaca la saaray oo uu si degdegsiimo leh xagga Zanjibaar u aaday. Markaasay markuu warkaas iyo qisaduba shaaceen, ayay reer Al Mazruucii shireen oo ay is canaanteen, kana shallaayeen. Markaasay markuu muusinku soo galay ayuu Al Sayyid Saciid Zinjibaar yimid. Kaddibna waxaa yimid amiirka iyo jayshkiisa oo uu markaas Mazaariicda la dagaallamay. Wuuse ka adkaan waayey. Markaasuu ciidanku Cumaan ku noqday. Amiirka ciidankaas watayna waxaa la oran jiray Mascuud bin Saciid Albuu Saciidii. Markay taariikhdu ahayd sanadka kun laba boqol toddoba iyo labaatan ayuu dagaal dhex maray dadka dega Laamuuh iyo kuwa Mumbaasah dega oo ah Mazaariicda. Ayaamahaasna dadka Laamuuh waxay

ku keceen oo ay khilaafeen qoyska Al Nabhaanii oo dagaalkaas hortiis xukunka Laamuu gacanta ku hayay. Markaasay markay Mazaariicdu arkeen inay reer Laamuu ku kacdoomeen oo diiden Al Nabhaanii ayaa waxaa u tegey Cabdu Allaahi bin Axmad bin Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii oo u sheegay inuu doonayo inuu ka guursado. Ayaguna waxay ku yiraahdeen: "Annaguna guurkaas raalli ayaan ka nahay, waanna ognahay inaad dooneysid xukunka beledkaan. Marka, samcan wa dhaacatan li Allaahi Tacaalaa, kaddibna adigaan ku adeeceeaynaa." Kaddib wuxuu Cabdu Allaahi bin Xaamid wuxuu arliga Laamuu ka dhisay jaziirad. Markaasaa waxaa gudubtay sanad kaamil ah isagoo subax walba doontiisa kasoo degaya, habeenkiina fuulaya, dhexdeedana ku hoyana. Markaasuu amarkaasu ku adkaaday dadka Laamuu. Markaasay tashadeen, uuna midkood yiri, ahaana kooda ugu da' yar, lana yiraahdo Zaahid bin Maghuum Al Makhzuumii: "Anigaa amarkiisa saddex maalmood gudohooda ku caddaynaya." Markaasuu wuxuu soo gatay laba neef oo ari ah iyo laba dhiilood oo subag ah iyo laba jawaan oo bariis ah. Markaasuu wuxuu ku samaystay magaca suldaanka Patee warqad uu ku dhigay: "Intaas dabadeedna, waxaan kusoo gaaraya waa hadiyad aad adigu leedahay ee aqbal oo hadiyadu waxay leedahay qadarka qofka soo hadiyeeyey uu ku leeyahay kan loo soo hadiyeeyey. Aniguna waxaan u arkaa inaad ku sugan tahay warmoogi iyo dagmo, waxaana ku dagtay Maanah Mkuu gabadha Muusaa, oo ma aanan maqal aragtidaada ku saabsan reer Laamuu. Wa Al Ssalaamu. Waxaana soo dhigay Shiikh bin Muxammad Al Nabhaanii." Al Mazruucii wuxuu jawaabtiisa ku yiri: "Intaas dabadeedna, warqaddaad noo soo dhigtay way nasoo gaartay, waana garannay, deeqda aad noo soo dirtayna waan aqbalnay. Mar walbana waad noo roon tahay waana kaaga mahdinaynaa. Aniguna kuma dagni Maana bint Muusaa iyo mid kaleba. Waxaad waxaan sameeyo iyo xukunkaygaba aad maqli doontaa marka jaziiradda burburinno. Tan ku saabsanna Madd bin Shiikh Cumar Albuurii iyo amiir Muxammad bin Xaajji iyo ghayrkoodba waxay qalcada Mumbaasah ku noqonayaan cunno uu cunayo masayrowgu. Wa Al Ssalaamu kaaga timid walaalka Cabdu Allaahi bin Xaamid bin Muxammad Al Mazruucii." Markaasay reer Laamuu markuu soo gaaray qoraalka Al Mazruucii uuna gacanta ku sido ergaygay dirsadeen oo la yiraahdo Muusaa Khaadim Zaahid bin Maghuum, uuna akhriyay, uuna Zaahid Maghuum arkay waxa ku dhigan ayuu wuxuu ula tegey ninka madaxda u ah ahna Muxammad bin Shiikh Cumar Al Buurii. Markaasay markay reer Laamuu arkeen waxa ku dhigan warqadda ayay subixii shireen ayna Cabdu Allaahi bin Xaamid ku yiraahdeen: "Akhri warqaddaada, tanna waa jawaabtaad siisay Shiikh ibnu Muxammad al Nabhaanii. Ficiikaaga iyo qorshahaaguba way cad yihiin. Magaaladeenna nooga bax, oo adigu waxaad tahay nin khaa'in ah inshaa'a Allahu." Markaasuu xaakimku Cabdu Allaahi bin Xaamid usoo gaddoomay Mumbaasah, isagoo wareersan, kana tiiraan yeyesan siduu mashruuciisa ugu hungoobay. Markaasuu dekadda Mumbaasah soo galay habeenimo, soona degay sida isagoo jirran oo kale, wuxuuna amray addoommadiisa iyo asxaabtiisa la socotayba inay waxa dhacay dadkoo idil ka qariyaan. Markaasuu xaakimku Cabdu Allaahi wuxuu xarbi u diyaariyay ciidan weyn

oo le'eg lix kun oo nin, kana kooban addoommada Mazaariicda iyo baajuuni iyo dadka Siiwi dega iyo Patee iyo Fanj iyo Dhanj. Waxaa kaloo la yiri inay ahaayeen shan kun oo nin oo kuwaas la soo sheegay ka kooban. Ciidankaas wuxuu ku qaaday doonyo, oo maalintaas ma ayan harin doon ama huuri ama markab oo dhamaantood way joogeen oo askar laga buuxiyey. Markaasey waxay ka degeen Siila oo ay halkaas ku dagaallameen. Mazaariicda waa la jabiyay oo looga adkaaday xoogga Ilaahay. Dadka Laamuu ayaguna guusha ayay heleen. Markaasay tashadeen oo uu Muxammad bin Xaajji Al Sacsacii wuxuu u safray Masqat wuxuuna ilaalin iyo gargaar weydiistay Saciid bin Suldhaan oo ilaalin u fidiyay, wuxuuna siiyay laba boqol oo nin oo Carab ah iyo Nuubiyiin, taliyohoodana la yiraahdo Cuthmaan Al Nuubii. Shardiga lagu xiray wuxuu ahaa inuu mushaarka askarta iyo kharajka dib u dhisidda jaziiradda ay bixiyaan dadka Laamuu. Ayaguna way oggolaadeen. Markuu Muxammad ibnu Xaajji Al Sacsacii soo noqday oo uu Laamu yimid way kibreen quluubta dadka joogayna ay qaadeen. Ilaahay ayaase ka wayn. Markaasay ayagoo raalli ah degeen ayna ku dhaqaaqeen dhismaha jaziiradda iyo bixinta mushaarka askarta. Markaasuu markuu munsuunka waqooyi yimid oo uu markabku yimid uuna ku jiro Saciid bin Suldhaan Albuu Saciidii uuna u yimid dadka Laamuu, ayuu wuxuu Saciid bin Suldhaan yiri: "Keena dafaatirtinna, waana diiwaannada wax lagu dhigo, si aan ku ogaanno lacagtaad bixiseen oo aan idiin celinno." Markaasay waxay yiraahdeen: "Waad suubisay, annaguna waan ku maqalnay, ee hadda askartaada la wareeg iyo jaziiraddaada." Markaasuu Saciid bin Suldhaan wuxuu aaday Zanjibaar isagoo faraxsan. Markaasay markay sanooyin gudbeen, ayuu Saciid bin Suldhaan goostay inay Cumaan la xarbido Mumbaasah, taasoo ay isku waaqfaaqeen dadka Mumbaasah iyo Al Sayyid Saciid bin Suldhaan. Waxaa naakhuude u ahaa Mucallim Munye Shaafii Al Jalandaanii lana yiri waa Kalindaanii, oo ayadu waa qabiil ka tirsan Jalan ibnu Mascuud bin Karkarah ahna midka Cumaan boqorka u noqday Qays hortiiis, qisadiisuna waa mashuur laga wada yaqaanno arliga Cumaan ilaa hadda. Reer Laamu markay arkeen inuu Al Sayyid Saciid u yimid inuu la xarbiyo dadka Mumbaasah waxay isku raaceen ilaa lixdan nin, waxaana la yiri lix iyo lixdan nin, oo saaran laba doonyood oo qori ah, doon kastana ay saaran yihiin saddex iyo soddon nin. Markaasay waxay ka degeen gacanka Mdhaavah, waxayna dadka Mdhaavah weydiyeen: "Ma jiraa dariiq halkaan ka baxa oo Laamuu gala, ayadoo uu boqorku nagu khasbay inaan halkaan nimadno, annaguna aan dooneynno inaan dalkeenna dib ugu laabanno?" Waxay ugu jawaabeen: "Maxaadna sidaas u dooneysaan? Mazaariicdu waa cadawgiin, hortinnana waxaa ah dhufaysyo ay ku jiraan saad iyo qalabka dagaalka." Markaasay markay reer Laamuu taas maqleen ayay dhammaantood labada doonyood kasoo wada degeen intaan ahayn ragga waday. Markaasey mar si xoog leh oo ay u wada dhan yihiin waxay ku weerareen dhufaysyada ragga ku jira, oo ay uguba soo galeen. Markaasay kuwii dhufaystada ku jiray kasoo bexeen oo ay carareen. Markaasuu dadka Laamu waxay u tageen oo ay warka waxa dhacay gaarsiiyeen amiirka Mascuud bin Saciid oo ku farxay, soona diray boqol nin oo askarta Zanjibarr ka mid ah iyo kuwa Cumaan oo dhufayskaas gacanta ku

dhigay, kuna yiillay dhinaca Utanghi. Intaasna Mucallim Munye ibnu Shaafi al Julandaanii wuxuu galay gacanka Kilindiini isagoo wata laba boqol oo nin, isagoo uusan Al Mazruucii ka warqabin. Markasay waxay degdeg ku tageen jaziiradda Mkupa oo ay Mazaariicda la dagaallameen, kuwaanoo sidaas jaziiradda Mkupa looga saaray. Markaasay Mazaariicdu waxay isku xireen qalcada, ayagoo ay askarta Sayyid Saciid ibnu Suldhaan ay markaas magaalada Mumbaasah gelayaan. Mazruuciyiinta waxaa lagu hareereyey qalcada. Markaasay amni weydiisteen. Marka amni la siiyey ayay albaabka qalcada fureen, ayna markaas askarta sayyid Saciid ibnu Suldhaan qalcada galeen ayagoo adkaaday. Guryaha ay Mazruuciyiintu ku lahaayeen magaalada iyo qalcadaba waxaa degay askarta sayyid Saciid ibnu Suldhaan Albuu Saciidii.

Burburka dawladda Mazaariicda

Nin ah dadka dega Patee lana yiraahdo Cabdu Allaahi bin bin Naasir bin Cabdu Al Ssalaam ayaa wuxuu u safray Zanjibaar, wuxuuna soo maray Mumbaasah. Markaasuu markuu Zanjibaar yimid ayuu al sayyid Saciid bin Suldhaan weydiiyey: "Maxay kula tahay Cabdu Allaahi bin Naasirow?" Markaasuu Cabdu Allaahi bin Naasir wuxuu yiri: "Waxaan arkay Raashid bin Saalim bin Xamaad oo dhulka ku jeexaya afar gees iyo goobaabin kaddibna tirtiray. Waxaan kaloo arkay Khamiis bin Xaamid oo seeftiisa gacanta ku dhufanaya. Waxayna arrinkaas ula dan lahaayeen, oo Saalim wuxuu ula dan lahaa inay habboon tahay in dagaalka dhufays loo qodo. Khamiisna wuxuu ula dan lahaa: "Waxaa ku filan seefeheenna oo wata xoogga Ilaahay Tacaalaa. Taas ayuuna qalbigaygu gartay inay u dan leeyihiin iyo caqligayguba." Markaasay marka la gaaray muusinka uu al sayyid Cumaan aaday, dabadiisna uu xarbigu shidmay, oo ay dagaallameen Mazaariicda iyo askarta al sayyidu. Waxaana la dilay Khamiis ibn Munye Ghaaw ahna kan joogay jaziiradda Mkuupa maxaa yeelay askarta al sayyid halkaas ayay joogeen waxaana si xeelad ah uga saaray Mazruuciyiinta iyo xaakimka iyo dadka kale ee Mumbaasah sida ayagoo aan ogayn warka xarbiga ku saabsan. Markuu al sayyid Saciid taas arkay ayuu soo diray wiilkiisa sayyid Khaalid bin Saciid iyo wasiirka Sulaymaan bin Axmad Albuu Saciidii, oo markaas ugu yeeray nin nin. Kan ugu horreeya oo u yeerana wuxuu ahaa Raashid bin Xamaad, dhammaantoodna waa la wada xabbisay, waxayna ahaayeen shan iyo labaatan nin oo Mazruuciyiinta ka mid ah. Taasna waxay dhacday sanadka kun iyo laba boqol iyo afar iyo konton Hijriga. Dawladda Mazaariicduna waxay socotay boqol iyo toddoba sano wadar ahaan. Muxammad bin Cuthmaan wuxuu xukunka hayey shan iyo labaatan sano. Kaddibna Mascuud ibnu Naasir wuxuu dalka xukumay shan iyo labaatan sano. Kaddib Cabdu Allaahi ibnu Muxammad ibnu Cuthmaan sideed sano. Kaddibna Xaamid ibnu Muxammad saddex iyo soddon sano. Kaddibna Cabdu Allaahi ibnu Xaamid ibn Muxammad toban sano. Kaddibna Sulaymaan ibn Calii laba sano. Kaddibna Raashid ibn Saalim ibn Xaamid laba sano, waana la xabbisay lana xabbisay shan iyo labaatan nin oo uu isagu ka mid yahay. Kaddibna waxaa

dhammaantood la geeyey Makaraan, waxayna ku dhinteen Makaraan, oo laba nin oo keli ayaa arliga xeebta uga soo noqotay. Marka Makaraan lagu xabbisay Mazaaricda qaarkood waxay u caraareen oo u tageen ninka la yiraahdo Jaasii oo ah dhasha Muxammad bin Cuthmaan. Qaarna waxay u carareen Taaka Uugh oo ah dhasha Cabdu Allaahi bin Zaahir, madaxoodana la yiraahdo Raashid bin Saalim oo yiri: "Taas gadaasheeda waan noqonayaa, uuna ka wado Taaka Uugh, ahna Taaka Yanuumarii oo ah Taaka Uugh oo uu degay oo dhisay Raashid bin Saalim bin Khamiis markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo laba boqol iyo toddoba iyo afartan. Marka isagu waa awowaha Raashid bin Saalim bin Khamiis bin Saalim midka dhisay Taaka Uugh. Markaas kaddib ayuu al sayyid Saciid bin Suldhaan wuxuu go'aamiyay xarbiga Siiwi markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo laba boqol iyo sagaal iyo konton Hijriga, wuxuuna lahaa amiir la yiraahdo Xamaad bin Sammaar oo markuu Siiwi tegey -halkaasoo uu joogay Shiikh Mataka al Ghamaawii. Markaasay dagaal culus dagaallameen, uuna amiirku dagaalka ku dhintay oo waxaa dilay dadka Siiwi. Wuxuuna doonayey inuu madaafiicda kasoo dejiyo maraakiibta si uu darbiga magaalada ku wareegsan ugu jebiyo. Markaasaa dariiqa lagu dilay. Markaasay askartiisu markay maqleen in amiirkooda la dilay carareen ayna u noqdeen Faazah. Ciidankuna wuu laabtay, ayagoon muraadkooda helin. Markaas dabadeed ayuu al sayyidu Saciid bin Suldhaan mar kale yimid oo la dagaallamay. Markaasuusan sayyidkuna muraadkiisa helin. Al Sayyid Sacid bin Suldhaan waxaa la oofsaday markay taariikhdu ahayd kun iyo laba boqol iyo saddex iyo toddobaatan. Markuu Saciid bin Suldhaan dhintay waxaa xukunka la wareegay Maajid bin Saciid aabihiis dabadiis. Markaasaa waxaa isku dagaalay isaga iyo walaalkiis Barghash beerta ku tiillay Bvuu. Barghash bin Saciid waxaa la socday rag u dhashay Al Xawaarith iyo Al Masaakirah. Maajid bin Saciidna waxaa la jiray askar iyo krishtaanka ingiriiska ah wuxuuna la dagaallamay Barghash bin Saciid. Markaasaa Barghash laga adkaaday, waxaana adkaaday Maajid bin Saciid oo sidaas boqor ku noqday. Wuxuuna Barghash ku xabbisay daartiisa, aanna kasoo baxayn, uusanna ugu geyleyn axad aan addoommadiisa ahayn iyo qoyskiisa. Kaddib Barghash wuxuu doonay inuu Bumbay aadao si uu halkaas isugu soo daaweeyo, wuxuuna ku safray oggolaanshaha Maajid bin Saciid. Zamanku wuu u fiicnaaday Maajid bin Saciid, wuxuuna u degdegay xarbiga Siiwi, wuuna la dagaalay oo ka adkaaday. Markaasu Siiwi ayadana boqor u noqday. Wuxuuna qabtay Muxammad bin Mataak oo ah odayga iyo shiikha Siiwi wuxuuna ku xabbisay qalcada Mumbaasah kuna hayay ilaa uu Muxammad bin Mataka uga dhinto. Zamanku wuu u fiicnaaday Maaajid bin Saciid bin Suldhaan bin Al Imaam, suldaannada mid ka mid ahna ma diidin ee wuxuu ka noqday raalli oo wuu u hoggaansamay.

Taariikhda qisada Soomaalida iyo Oromada

Markay taariikhdu ahayd sanadka kun laba boqol laba iyo sideetan (oo uu Cerulli yiri inay ku beegneyd toddoba iyo labaatan bisha Maajo ee kun sideed boqol shan iyo lixdan ilaa shan iyo tobanka maajo kun sideed boqol lix iyo

lixdanka Miilaadiga) ayaa la xusaa waxa ku dhex maray soomaalida iyo oromada Kisimaayo iyo Baraawe. Oromadu waxay ahaayeen lo' iyo ari dhaqato. Soomaaliduna waxay ahaayeen sabool. Taasuna waxay saas ku ahayd arliga Kismaayuu. Oromaduna waxay daris la ahaayeen soomaalida oo degganayd Baraawe iyo Markah keli ah. Oromaduna waxay ahaayeen geesiyaal isla weyn, soomalidana way ka badnaayeen. Markaasay soomaalidu markay taas aragtay waxay goosteen oo aadeen arliga oroomada inay lo'da u raacaan. Oromaduna taas way ku faraxday. Markaasay oromadu waxay soomaalida siin jireen lo' inay u shaqeeyaan oo xoolaha u raacaan daraadeed. Oromadu waxayna soomaalida ka dhigteen addoommo u shaqeeya, xoolahana waa soo daajin jireen. Sidaasay ahayd ilaa ay soomalidu ka badatay, ayadoo ayana oromadu taas dhaagin. Soomaaliduna uma ayan sheegin inay muslimiin yihiin iyo inay gaalo yihiin toona (oromaduna waxay ahaayeen gaalo, waaba tan Galla la yiraahdo oo erayga gaalo halkaasuuba ka yimid). Markaasuu maalin ninka soomaalida odayga iyo madaxda u ahi wuxuu soomaalida ku yiri: "Dadka saboolka ahi waa cadawga kuwa hodanka ah. Marka sidee baad ugu raacaysaan lo'dooda iyo arigooda sida adinkoo addoommo u ah oo kale? Waxaase taas ka fiican inaan la dagaallanno oo aan intaan maalkooda ghaniimaysanno aan annagu qaybsanno, ghaniimo Ilaahay na siiyay, oo aan markaas annagu ayaga yeelanno oo xukunno fadliga Ilaahay." Markaasay soomaalidu go'aansadeen inay la xarbiyaan. Markaasay soomaalidu waxay diyaarsatay ciidan laba kun oo nin ka kooban markaasay si kadis ah subax oromada u weerareen, ayna la dagaallameen. Soomaalida waxaa ka dhintay laba boqol oo nin (oromadana laba boqol iyo konton). Markaasey odayo soomaali ah Baraawe ka yimaadeen oo ay ku heshiiyeen inay xiriirkooda u celiyaan siduu hore u ahaa. Markaasuu mid kasta oo soomaalida ka mid ahi saciisuu ku dhegaa oo ay sidii hore oo kale usoo daajiyaan. Taas ayay shardi ka dhigeen oo ay oromada iyo soomaaliduba ku heshiiyeen. Markaasay markay soomaalidu aragtay inay oromadu dagaalka ku xoog badan yihiin, ayna geesiyaal yihiin, ayay warqad u dhigeen odaga Barbara xukuma, ayna yiraahdeen: "Intaas kaddibna, waxaan doonayo inaan kuu sheego waxaa weeye in haddaad dooneysid inaad noolaatid adigoo aan gelin jihaad jidka Ilaahay noo sheeg. Haddaadse dooneysid nolol iyo jihaadba waxaa waajib kugu ah inaad rag noo soo dirtid ayagoo uusan cadawgeen ka war helin, si uu Ilaahay u badiyo ciidankeenna, aanna si kedis ah kula dagaallanno. Ilaahay ayaana gargaar bixiya oo aan la kaashaneynaa. Wa Al Ssalaamu." Waxay kaloo ku boorriyeen inay soomaalidu timaaddo Kisimaayo iyo Waamaa. Odagu markuu warqadda akhriyay ayuu wuxuu soomaalida u sheegay waxa dhex maray soomaalida iyo oromada, iyo inay tahay in rag loogu dooro oo markiiba dhawr nin loo diro ilaa ay ka gaaraan ciidan weyn oo fara badan. Markaasey soomaalidu waxay yiraahdeen "waan soo dhoweneyna oo yeeleynna, waxaanna raalli ku nahay inaan galno jihaad jidka Ilaahay Tacaalaa." Markaasay soomaalidu uga yimaadeen Barbarah iyo Xaafuun kooxo kooxo is daba jooga ayagoo doonyo soo raacaya una socda Kisimaayo. Sidaasay soomaalidu ku badatay. Markaasay oromadu waxay soomaalida ku tiri: "Waan idiin saamaxnay oo dhaafnay waxaad nagu samayseen, waxanna

dhigannay shuruud ah inaad hawlihiina dib ugu noqtaan, sidaad markii hore u hayseen, oo aad arigenna iyo lo'denna u raacdaan sidaad u raaci jirteen. Haddana kaddib markay shuruudahaasu na dhex mareen waxaa habboon inaad haweenkiina u ciddirsataan iyo gabdhihiina oo aad meeshaan keentaan, annaguna aan gabdhihiina guursano aan la qabin si ay qulubteennu uga xasisho waxa xun oo aad sameyseen." Markaasay soomaalidu waxay tiri: "Waan soo dhoweyneynnaa waxaas aad na weydiisateen, annaguna taas raalli ayaan ku nahay. Laakiin noo kaadiya intaan uga keeneynno gabdheheenna mid mid. Markaas kaddib sameeya waxaas aad rajayneysaan." Markaasey oromadu waxay tiri: "Mudadaas xumaani kuma jirto." Markaasay haweenku ka yimaadeen Barbara ayagoo saddex ah oo labana la qabo iyo mid aan la guursan oo uu halkaas joogo nin doonay. Markaasay soomaalidu arooska qabanqaabiyeen oo waliimo sameeyeen, uuna soomaaligu saaxiibbadiis martiqaaday, orommaduna ay u yeertay madaxda iyo halyeyda ku nool ilaa meel saddex maalmood loo socdo. Markaasaa waxaa halyeyda oromada ka yimid shan iyo toddobaatan nin oo waliimadaas soomaalida kasoo qayb galay. Markaasay cuneen oo cabbeen, ay habeenkaasna seexdeen. Markaasay soomaalidu oromada oo hurudda weerartay oo ay laayeen, kamana uusan fakan waxaan nin keli ah ahayn, oo isagoo dhaawac ah cararay, oo asxaabtiisa gaaray oo halkaas ku dhintay. Soomaaliduna xarbi ayay u istaagtay. Waxayna la dagaallameen dagaal xoog leh, waxaana adkaaday soomaalida. Markaasaa waxaa suuqa lagu gatay gabdhaha oromada oo lacag yar la kala siistay. Gabadha oromada ah waxay suuqa ka joogtay labaatan Riyaal ama ka yarba. Markaasey oromadu soomaalida ka carartay, ayna aadeen qabaa'ilka Pokomo iyo Wabooni, ahaana addoommada oromada. Oromadu markay Pokomada ku carareen waxay wateen haween badan. Markaasey Pokoomadu suuqa ku iibsadeen, horena looma arag addoommo kuwii lahaa iibinaya intaan ka ahayn Pokomo, ayagoo wata tiro badan oo haween ah. Markay oromadu u yimaadeen Pokomada ay usoo carareen way soo dhoweeyeen, waxay weydiisteen inay siiyaan waxay cunaan iyo waxay cabaan. Markaasaa la siiyey oo ay cuneen oo cabbeen. Markaasay Pokomadu waxay nin u dirsadeen Kaa waxayna Wabooni oo halkaas dega u sheegeen inay nin u diraan tuulada u dhow sida Mkuu iyo Mkaanuubi. Markaasay dadka u yeereen una sheegeen inay oromada uga imaanayaan intaas iyo intaas oo nin iyo haween. Marka raggana ha dilaan, haweenkana ha addoonsadaan oo intay qafaalaan suuqa ha ku gataan, kana gataan cidada dooneysa.

Soomaalidu waa Carab

Soomaalidu waa Carab khilaaf la'aan, siduu u yiri Sabaa'iku Al Th-thahabi, inay yihiin dhasha Burr ibnu Qaydaar bin Ismaaciil bin Ibraahiim Calayhihumussalaamu. Aqwaasha laga sheegayna waa badan yihiin. Waxaana ka mid ah mid leh inay yihiin dhasha Luqshaan ibnu Ibraahiim Calayhissalaamu.

Qisada Maajid bin Saciid

Waxaa dhintay Abuu Bakar bin Shiikh bin Maghuum Al Makhzuumii Al Llaamii. Wuxuuna joogay arliga Kapufaani oo Laamuu agteeda ah oo saddex saacadood looga socdo Laamuu, wuxuuna ka tegay hanti weyn iyo addoommo fara badan iyo maal badan. Markaasuu nin la yiraahdo Kuulu bin Fuumu Bukur bin Xaaji bin Maghuum sheegtay inuu caruurtiisa uga tegey wuxuu lahaa oo dhan. Ninka la yiraahdo Abuu Bakar bin Muxammad ibn Maghuum, isaguna uu yiri inuu isaga caruurtiisa uga tegey wuxu lahaa oo dhan. Markaasuu dadka kala qaybsamay oo qaybna la safatay Kuulu ibnu Fuumu Bukur, qaybta kalena Abuu Bakr ibn Muxammad ibnu Maghuum. Markaasay labada qaybood gacnaha isula tageen oo laba nin xabbaad lagu dilay. Labadaas qolana cidna iskuma dayin inay kala celiso ha ahaadeen kuwa Laamuu xukuma iyo cid odayada dalka ka mid ah toona, ayadoo uu qof walba labadaas qaybood middood la jiray, uuna rajo ka qabo inuu dhaxalkaas qayb ka helo. Markaasay labada qaybood waxay isula dacwoodeen Zanjibaar, halkaasoo ayan cidna ku kala xukumin, intaan ka ahayn wasirka Sulaymaan bin Xaamid, kanoo dhaxalka qayb ka qaatay inta soo hartayna labada qaybood u kala qaybiyay oo kala siiyey. Caruurtiisiina dhaxalka kama helin waxaan ahayn lacagta iyo adoommada duqoobay oo rag iyo haween leh. Maajid bin Saciidna cidna wax ma weydiisan aan ahayn odaga Sulaymaan ibn Xaamid Albuu Saciidii, Zanjibaar iyo beled kale toona. Wuxuuna ahaa caalin wax dhiga wuxuuna jeclaa cilmiga xisaabta iyo muusikada. Wuxuuna lahaa wasiir iyo kaatib wax u dhiga lana yiraahdo Sulaymaan bin Calii al Darmakii. Nin krishtaan ahna waxaa lagu dilay Kismaayuu. Markaasuu qunsulka ingiriisku wuxuu yiri: "Waxaan hadda dooneynna ninka dilay." Markaasuu Maajid bin Saciid wuxuu wasiirkiisa Sulaymaan bin Xaamid ku yiri: "Sideebey taas ku ahaaneysaa oo xaggee baa kan wax dilay laga helayaa?" Kaddibna wuxuu wasiirka Sulaymaan bin Xaamid ku yiri: "Adigu amarkan maaree ilaa aad kan wax dilay ka heshid oo aad Zinjibaar keentid." Markaasuu Sulaymaan bin Calii Al Darmakii wuxuu raacay markab la yiraahdo Sitaarah wuxuuna ku xirtay Bandar Laamuuh. Kaddibna wuxuu askarta u diray Kisimaayo. Askartu waxay khayaaneen addoon oo ay xargo ku xireen waxayna yiraahdeen: "Kanaa dilay." Addoonkuna maba oga sababta loo xiray. Taasna waxay ahayd sanadka kun laba boqol shan iyo sideetan Hijriga. Markaasuu Sulaymaan ibn Calii Zanjibaar kusoo laabtay. Markaasaa addoonkaas loo dilay krishtaankii la dilay, arrinkuna sidaasuuba ku dhammaaday. Maajid bin Saciid waxaa la oofsaday markay taariikhdu ahayd sanadka kun laba boqol lix iyo sideetan Hijriga. Sanadka kun laba boqol saddex iyo sideetan ayuu Maajid bin Saciid bin Suldhaan soo maray Kisimaayo kaddib markay soomaalidu laysay oromada ayna suuqa ku iibsadeen, ayna Kisimaayo degeen. Markaasuu al sayyid Maajid bin Saciid bin Suldhaan wuxuu dhisay jaziiradda si nabadeed oo qabow, oo xarbi la'aan ah, isagoo bixiyay maal badan oo odayada siiyey. Maajid bin Saciid bin Suldhaan wuxuu ahaa nin waji qurxoon, oo deeqsi ah, caalin ah, fiyow, dadkana jecel, cidna aan necbeyn, wuxuu qabana si toos oo loo jeedo u sheega.

Dabadiisna waxaa boqor noqday Barghash bin Saciid, oo ahaa caadil suuban, oo xaqqa jecel, baadhilkana neceb. Wuxuuna jeclaa cayaaraha aan fisiq u jirin. Wuxuuna lahaa wasiir la yiraahdo Muxammad bin Saalim Al Macuulii, cunana hadiyoonka uu boqorku racyadiisa siiyo, laaluushkana cuna. Markaasaa markuu dhintay waxaa Muxammad bin Saalim agtiisa laga helay hadiyoyinkuu Barghash bin Saciid bixin jiray. Markaasaa arrinkaas Barghash loo sheegay. Markaasuu Barghash qaatay waxaa guriga Muxammad bin Saalim laga helay wuxuuna yiri: "Al Macuulii hantidayda ayuu lumiyay. Haddii arrinkaan lagu heli lahaana oo uu ku caddaan lahaa gacnihiisaan goyn lahayn dhab ah."

Siduu ingiriisku Barghash gacanta ugu dhigay

Barghash ibn Saciid wuxuu safar ku tegay Masar isagoo doonaya inuu suldaanka turkigu ka ilaaliyo oo ka difaaco ingiriiska. Markaasuu Barghash ibn Saciid wuxuu ka codsaday taas suldaanka turkiga, waana la siiyey. Markaasuu wuxuu dalkiisa dib ugu soo noqday isagoo saaran markab dagaal oo uu leeyahay suldaanka turkigu. Markuu nus dariiqa marayo ayuu ingiriisku taas ka war helay, markaasay daba galeen oo ay markabkaas dagaal korkiisa ka heleen. Markaasuu ingiriisku Barghash ibn Saciid la kulamay uuna ku yiri: "Boqortooyadaada waad lumisay, waana lagu khayaanay, boqortooyadaadana laga xayuubsaday. Adiguna ma taqaanid siday turkigu u dhaqmaan." Sidaasay ku canaanteen. Markaasuu Barghash wuxuu ugu jawaabay: "Maxaan hadaba hadda falaa?" Markaasuu ingiriisku ku yiri: "Waxaad ku tiraahdaa: "Waad mahad san tihiin ee gargaarkiinna ma doonayo." Markaas kaddibna waxaad nala soo fuushaa markabkeenna. Sidaasaa heshiiskaad la gashay dibadda uga tahay oo ka baxday. Annaguna waan kuu adeegeynnaa, waxaad dooneysidna waad heleysaa." Markaasuu Barghash wuxuu yeelay siday ingiriisku ku yiraahdeen. Turkiguna wuu ka xumaaday. Markaasay ingiriisku waxay la yimaadeen maraakiib dagaal oo la xoojiyay, ayna saaran yihiin rag masaari ah oo sida turkiga u labbisan. Markaasay markay yimaadeen Marka iyo Baraawe iyo Laamuh, waxay doonayeen inay dagaallamaan, runse ma ahayn. Markaasuu qunsulka oo Zanjibaar fadhiyay, magaciisuna ahaa John Kirk, wuxuu yiri: "Bal arag siday turkigu u dhaqmaan, oo hadda waxay u yimaadeen inay kula dagaallamaan, adiguna ciidan ahaan iskama celin kartid, mana aqoonsanid inaan annagu dhibaataadaas kaa badbaadinay. Hadaba ma yeeleysaa waxaan kaa doonayo?" Barghash wuxuu yiri: "Haa." Markaasuu John Kirk wuxuu markabka u dhigay: "Dariiqiinna beddela oo dalkiinna dib ugu noqda. Midkaan waan kasabnay oo gacantaan ku dhignaye." Sidaasaa Barghash ingiriisku u kasbay oo uga adkaaday. Taasna waxay ahayd sanadka kun laba boqol laba iyo sagaashan Hijriga.

Barghash iyo suldaanimada Mumbaasah

Barghash ibn Saciid wuxuu tegey Mumbaasah isagoo saaran markab griiggu leeyahay. Markuu Mumbaasah tegeyna markabka kama soo degin, wuxuuse shirar ku qabtay markabka dushiisa. Wuxuu u yeeray xaakinka Sayf bin Sulaymaan, wuxuuna u yeeray Kashuurta iyo Wakaamba, kuwaanna wuxuu siiyey hadiyoyin lacag iyo dhar ah. Wuxuuna doonayey inuu suldaankooda noqdo. Markaasay dadka Mumbaasah arrimo badan isku qabteen oo ka murmeen. Markaasuu Barghash Ilaahay ku dhaariyay. Midkood oo been ku dhaartayna wuxuu dhintay saacad kaddibba, qaarna ay yiraahdeen wuxuu dhintay habeen kaddib. Magaciisuna wuxuu ahaa Saciid ibn Mubaarak. Shirarkaasoo idilna waxaa lagu qabtay markabka dushiisa oo jooga dekada Mumbaasah. Markuu sanadku ahaa kun saddex boqol iyo laba ayuu Saalim bin Khamiis Al Mazruucii wuxuu la xarbiyay Kashuurta Jiryama. Markaasuu Al Mazruucii jebiyay, uuna boqol nin ka dilay. Markaasay gudaha abaari ka dhacday. Markaasay Wanyika, ahna Kashuurta, waxay yimaadaan magaalooyinka oo ay halkaas gabdhohooda ku gadaan. Markay yimaadaan Mumbaasah iyo Taka Ugu rag iyo dumarba waa la qabtaa oo la gadaa. Saalim ibn Khamiis, isagoo fulinaya amarka madaxdiisa, markuu helo kashuur wuu qabtaa uuna suuqa ku gadaa. Markuu amarkaasu caddaaday oo la ogaaday ayuu Jamc ibn Rashiid al Shakiilii wuxuu Saalim ibn Khamiis Al Mazruucii uga dacwooday Barghash bin Saciid, inuu addoommadiisa iyo qaraabadiisa inay kashuurta Jaryaama iyo ghayrkoodba soo qabtaan. Markaasuu Barghash wuxuu u yeeray Saalim ibn Khamiis uuna arrinkaas ka wareystay. Markaasuu wuxuu ugu jawaabay: "Waa run, oo ayagu way ila xarbiyeen, annaguna waan la xarbinay, oo markaan qabannaba hadda waan gadannaa." Markaasuu Barghash bin Saciid sidaas uga carooday Saalim ibn Khamiis, oo uu markaas Saalim ibn Khamiis Al Mazruucii uu lix bilood xabbisay. Wuxuu kaloo xabbisay rag kale oo Mazaariicda ah sida Caziiz bin Cabdu Allaahi bin Xaamid oo ahaa wasirka Saalim bin Khamiis. Wuxuu kaloo xabbisay Rashiid iyo odaga Sulaymaan labadoodaba. Sayyid Barghash wuu la heshiiyay al kashuur. Sayyid Barghash bin Sacid bin Suldhaan waxaa la oofsaday markay taariikhdu ahayd sanadka kun saddex boqol iyo shan Hijriga. Dabadiisna waxaa xukunka qabtay walaalkiis Khaliifah bin Saciid bin Suldhaan.

Waa intaas kitaabka Kitaabu Al Zunuuji. Wa al xamdu liAllaahi wa laa ilaaha ghayruhu wa ashau anna Muxammadan CabduHu wa Rasuuluhu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Nasabka Gaallada

Carabtaan Qays Caylaan u dhashay waa dadka Gaalla la yiraahdo, hadan Oromo loo yaqaanno. Asalka Oromadu waa sidatan: awoowaha lix iyo tobnaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Mudar bin Nizaar wuxuu dhalay laba wiil oo kala ah Ilyaas bin Mudar oo ah awoowaha shan iyo tobnaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo

walaalkiisa la yiraahdo Caylaan bin Mudar. Labadooda hooyadooda dhashay, siduu Ibnu Hishaam u yiri, waxay u dhalatay qabiilka Carbeed ee Jurhum. Mudar wuxuu wiilkiisa Caylaan ugu magac daray faras uu lahaa oo Caylaan la oran jiray. Waxaa kaloo la yiri waa magaca ey uu lahaa. Caylaan wuxuu dhalay wiil la yiraahdo Qays bin Caylaan, oo uu qabiil wayn oo Carbeed ka farcamay, kaasoo ay Oromadu ka dhalatay.

Soomaalida oo gaallada kicisay

Cerulli wuxuu yiri: "sidaan kor ugu soo aragnayna, soomaalidu waxay kasoo duushay gobollada hadda la yiraahdo Waqooyi/Galbeed ilaa Bari iyo agagaarkeeda, ayna gaallada degganeyd Nugaal, Mudug iyo inta ka hooseysaba ka kiciyeen oo ka qabsadeen, ilaa ay Jubbada iyo ilaa wabiga Taana ka kiciyeen oo ay ayagu degeen. Tusaale ahaan magaaladaan aniguba ku dhashay Gaalkacyo, macneheedu waa barta gaallada laga kiciyey. Sidoo kale Caabud Waaq, Ceel Waaq iyo inta la midka ahba waa afka gaallada. Sidaan kor ugu soo aragnay, wuxuu Cerulli yiri: "Dhulkaan u dhexeya Gacanka Tajuura (oo ah gacan iyo magaalaba degmada Jabuuti waqooyigeeda ku taalla) ilaa Capo Guardafui (oo Bariga Soomaaliya ku taalla) oo ay degganaayeen, ayay qabaa'ilka soomaaliyeed kasoo duuleen, oo ay gaallada dhulka ka kiciyeen oo ka qabsadeen, waana arliga, sidaan usoo aragnay, ku yaalla gobollada dhexe iyo kuwa koofureed ee gobolka ogadeenya iyo Soomaaliyada uu talyaanigu gumaysto ee koofureed, iyo qaybta soomaalidu deggan tahay ee Kenya. Dadka soomaalida ah ee ugu horreeyey oo dooxada koofureed ee wabiga Shabeelle dega waxay ahaayeen qabiilka (Hawiye) ee la yiraahdo Jiiddo." Qabiilkaasna waxaa ku xigay qabiilka Ajuuraan, oo halkaas boqortooyo ka dhisatay. Cerulli wuxuu bogga laba boqol iyo toddoba iyo afartan Kitaabu Al Zunuuji ku wariyay: "Markay taariikhdu ahayd kun iyo laba boqol iyo labo iyo sideetan Hijriga ah (una dhiganta inta u dhexeysa toddoba iyo labaatanka maajo ee sanadka kun iyo sideed boqol iyo shan iyo lixdan ilaa shan iyo tobanka maajo ee sanadka kun iyo sideed boqol iyo lix iyo lixdanka Miilaadiga) waxaa dhacday qisada soomaalida iyo Qays Caylaan. Sidaas ayaa Qays Caylaan Jubbada looga saaray, kaddib markii laga adkaaday, oo ay markaas soomaalidu gabdhaha Qays Caylaan suuqyada addoonnimo lacag yar ku gataan oo ay siistaan." Sidaas ayaa Oromadu arliga xabashada dib ugu laabteen, oo ay xagga koofureed ka degeen, kaddibna ay dalkaas xoog iyo xarbi ay ku adkadeen ugu faafeen."

Eaa intaas kitaabka kitaabu Al Zunuuji.

Midaynta Dawladaha Geeska Afrika

Waxaa la yaab leh inay dawladaha maraykanka iyo ruushka iyo yurub ka taliyaan oo ayaguna ka tashadaan siyaasadda iyo midaynta dawlado kale oo

ayan isku qaaradba degganayn! Yaa u yeertay? Ma qaraabay yihiin iyo isku qabiil, mase isku diin? Mase waa "kaa heli karaa?"

Midaynta dhaqaale ee dawladaha geeska Afrika waxaa looga doodi jiray bilowga kun sagaal boqol iyo lixdan guddi ay maraykanka iyo ruushku ku lahaayeen oo ka koobnaa culumoo saynska iyo culuumta bulshada oo xaruntiisu ahayd Ururka Dawladaha Afrika oo xaruntiisa tahay Addis Ababa, lana oran jiray Pugwash Conference, ayna xubno ka ahaayeen dad afrikaan ah. Majallada la yiraahdo American Universities Field Staff, Reports Service, tirsigiisa (EAB-2-'66) Northeast Africa Series Vol. XIII No. 2 (Somalia), ayna leedahay American University Field Staff, Inc. 366 Madison Avenue, New York 17, N.Y., waxay daabacday maqaalo cinwaankiisu yahay The issue of greater Somalia, Part II; Ethiopian dialogue, waxaana dhigay E.A. Bayne, wuxuuna dhigay bisha febraayo kun sagaal boqol lix iyo lixdan. Wuxuu bogga sagaalaad ku yiri: "Autumn -oo ah xilliga u dhexeeya xilliga kulaylaha ee summer iyo midka qabow ee winter, koobayana saddexda bilood ee dhammaadka sebtambar ilaa dhammadka disambar- anigoo wareysi la yeelanaya Wasiirka koowaa ee markaas Dr. Abdirashiid Cali Sharmarke iyo madaxweyne Cusmaan (Aadan Cabdulle Cismaan) waxaan ku soo qaaday federation ama midayn dhaqaale ee dawladaha geeska Afrika, oo saldhig u ahaan kara xallinta qadiyada Ogaden iyo ilaa xad midda NFD. Madaxweynuhu wuxuu markaas yiri: "wax kasta oo sugaya nolosha iyo wanaagga dadka Ogaden waan taageerayaa." Dr. Sharmarke, oo hadda mucaarid ku ah dawladda wuxuu caddeeyey: "inuu diyaar u yahay inuu arrinkaas sidaasoo kale waanwaan uga galo." Waraysi aan Rooma kula yeeshay bisha agoosto kun sagaal boqol shan iyo lixdan ninka hadda ah wasiirka koowaad Abdirizaaq Xaaji Xuseen, wuxuu uga hadlay arrinkaas si oggolaansho ku jirto. Laakiin markuu hadda wasiirka koowaad noqday wuxuu uga hadlay si taxaddar ku jiro, isagoo yiri in federeeshin ay wada galaan dawladaha geeska afrika waxay keeneysaa oo ka mid ah in Soomaaliya lafteeda la googooyo, oo dib loogu noqdo kala go'naanta ay Soomaaliya hore ugu qaybsanayd dhulalka waqooyi oo uu ingiriisku hore u xukumi jiray iyo koofurta soomaaliya oo mustacmarad talyaani ah ahaan jirtay. Wuxuuna ka baqayay inay USA taageerto dadaalkay Ethiopiya ugu jirto geesinnimo gelinta waqooyiga Soomaaliya inay Soomaaliya ka go'do." Bogga tobnaad wuxuu ku yiri: "Waxaa warbixinnda gaarka ah ee uu kasoo dhigay Addis Ababa Edwin S. Munger (Professor of Geography, California Institute of Technology) ka muuqata inayan talada ah in geeska afrika laga sameeyo federeeshin xagga dhaqaalaha ayan ahayn mid aan la meel marin karin. Marka la waydiiyayna amiirka leh dhaxalka boqornimada Ethiopia wuxuu yiri: "why not, why not; we must all live together", oo macneheedu yahay: "oo maxaan loo samayn karin? Maxaan loo samayn karin? Waana inaan dhammanteen wada noolaannaa." Markase la waydiiyo wasiirrada waawayn ee dawladda Ethiopiase way af gaabnaayeen, ayadoo uu boqorku siyaasadda xukumo, aragtidoodana waxaa lagu soo koobi karaa afarta qodob oo hoos ku qoran: (Kow) waxay dareen san yihiin inay soo dhowaynta aragtidaas uu soo dhoweeyey madaxweyne Cismaan ay ku xiran tahay inuu siyaasiyan guulaysto oo doorashada ku

guulaysto, iyo in ninka beddeli doona aan la ogayn, oo aqlabiyad aad u yar ayaa lagu soo doortay, sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo lixdankana wuxuu usoo istaagi doonaa dib u doorasho. Waxaadse mooddaa in hubaal dib loo soo dooran doono. (Laba) amxaaradu waxay dareensan yihiin inay madax soomaali ah ay ku fogaadeen cayda boqorka, ayna raadiyaha sidaas uga hadleen iyo dagaalka probagaandada. (Saddex) Amxaaradu waxay ka baqaysaa inay midnimada dhaqaaluhu u horseeddo midnimo siyaasi ah, oo ay markaas aqalliyada krishtaanka ah ee ethiopia ay ku dhex lunto federeeshinkaan, oo ay sidaas dadka krishtaanka ahi waayaan xukunkii ilaalinayay. Siyaasadda saldhigga aragtidaas u ah waxaa weeyey inay amxaaradu didan tahay habka dimuqraadiyada, ayna dooneyso habka feudaalka ah oo ay krishtaanku xukunka hayaan. (Afar) amxaaradu waxay rumaysan yihiin inay soomaali midaysani oo ujeedadeeda qaran ku baraarugsan ay noqon karto "The Prussia of the Horn of Africa", (oo ah qabiilka jarmanka ah ee la yiraahdo Prussia oo caasimaddeedu ahaan jirtay Barliin, oo dawladda jarmanka ah mideeyey kaddib markay dawlado badan ahaayeen, uuna isku keenay Bismarck ninka la yiraahdo). Boqortooyadu way taag daran tahay, siday federeeshinka jarmanku u taag darraayeen qarniga sagaal iyo tobnaad, waxaana dhici karta inayan iska celin karin ciidammada xoogga leh ee soomaaliya, xattaa haddii midayntaas lagu koobo mid dhaqaale oo keli ah." Dr. Edwin S. Munger warqad dheer oo uu E.A. Bayne uga soo dhigay Addis Ababa lixda jannaayo kun sagaal boqol lix iyo lixdan wuxuu ku yiri waxaa ka mid ahaa: "aragtida aad madaxweyne Cismaan kala doodday oo ah midaynta dhaqaale ee geeska Afrika golaha wasiirrada ee dawladdaanna marar ayaa la isku soo qaaday oo lagu falanqeyey. Wasiirrada intooda badani waxay dhiibteen talo taxaddar ku jiro."

Sanadka kun iyo sagaal boqol iyo sagaal iyo sideetanka waxay dawladda maraykanku u keentay dawladda Soomaaliya warqad, anigana isoo martay, ayna ugu soo jeedinayso inay dawladda Soomaaliya, Jabuti, Suudaan, Ethiopia, Kenya iyo Ugaanda, waana dawladda IGADD, ay midoobaan, ayna yeeshaan dawlad dhexe oo keli ah oo federaali ah, sida tan mareykanka oo kale ah, wadaagana gaashaandhigga, siyaasadda arrimaha dibadda, maaliyada iyo waxa sidaas oo kale ah. Dawladda Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre waxay maraykanka u sheegaty inayan tasi caqli gal ahayn iyo meel mar midna, annagoo ah dadyow kala duwan, kala diin ah, kala afaf ah, kala dhaqan iyo kala taariikh ah. Waxaabaad mooddaa inay isbeddallada dhakhsiyaha badan oo gobolkaas geeska Afrika ka dhacaya waayaahaan dambe uu qorshahaas ku salaysan yahay, oo uu ka dambeeyo. Runtana Rabbi ayaa og. Warqadda dawladda mareykanka ee midayntaas ka talineysana waxaa noo keenay Danjiraha USA Trusten Frank Crigler. Haddaabad haddeer internetka gashid oo aad erayga HORN OF AFRICA ku raadisid waxaa kuu soo baxaysa khariidada dawladda geeska Africa ee lixdaas dal ayna la socoto waribixinno tifaftiran ee dhaqaalaha, biyaha, waddooyinka, beeraha iyo khayraadka Ilaahay siiyey oo tifaftiran. Kharidadaas waxaa dul suran calanka maraykanka, waxaana la socota khudbo uu Bill Clinton, Madaxweynihii hore ee maraykanku uu akhrinayo oo arrinkaas ku saabsan. Midaynta dalalkaas

kala dhul wayn, kalana xoog badan waxay keeneysaa in kuwooda waaweyn la kala googooyo oo la kuwa yaryar laga soo saaro, oo sidaas kaddib la isku dayo in dawlad federaali ah laga dhigo, sida jarmanka loo googooyey dagaalka labaad ee adduunka kaddib oo dawlad federaali ah la isugu keenay oo aan awood buuxda gobolladaas ku lahayn. Taas weeyena siday u doonayaan inay Soomaaliya, Talyaaniga iyo Ciraaq ugu sameeyaan dastuurro federaali ah. Taas daraadeed ayaana amxaarada Eritrea looga gooyey, waqooyiga Soomaaliya iyo gobolka waqooyi bari oo Puntland la baxay la doonayaa in inta kale looga gooyo, Sudaanna in koofurta dalkaas looga gooyo. Inay sidaas tahayna waxaa ayaguna ii sugay siyaasiyiin jarman ah oo ii sheegay inay qorshahaas kusoo arkeen Bruxelles xarunta yurubta midowday iyo xarunta NATO oo isla magaalo madaxdaas Beljiga ku taalla.

Dhul kala wareegid

Enrico Cerulli wuxuu yiri: "Ninka la yiraahdo Rivoli wuxuu kun sideed boqol laba iyo sideetan iyo saddex iyo sideetan arkay weerar ay soomaalida Kablax ku qaaday qalcada yar ee ku taalla Goobweyn ayna gacanta ku hayaan askarta suldaanka Zanjibaar, iyo weerarro ay xoolo uga soo dheceen isla soomaalidaas Kablaxa ahi tunnida Baraawe. Marka soomaalidu waxay hubaal markaas hanteen oo gacanta ugu jirta jinka midgta ah ee Jubbada Hoose. Dhacdooyinkaasna waxay waafaqsan yihiin kuwa ku dhigan Kitaabu Al Zunuuji. Warintase ku xusan kitaabka zunuuju intaas waa ka muhim san yahay, ayadoo uu na dul geynayo ayadoo si dhab ah oo nool u socota arrin ayan khubarada barta arrimaha Barigu ayan weli si dhab ah u dhaagin: waana dhaqdhaqaaqa ay qawmiyadi ugu tegeyso qawmiyad kale (ayadoo aan beddelid qawmiyad mid kale beddesha ayan dhici karin in laga hadlo) kuma ayan dhicin mar walba werarid xoog lagu weeraro ciidammu hubaysan, iyo dagaallo hubaysan oo lagu kala adkaado. Balse waa sida tusaalahaan hortenna yaalla oo kitaabkaan ku dhigan oo uu gobolka Jubbada Hoose kasoo wareegay Gaalada una soo wareegay Soomaalida, waxayna ku bilaaban karaan tillaabooyin nabadeed ee soo dhex gelid, laguna soo dhex galo qawmiyaddaan sababo kala duwan iyo marmarsiiyo kala duwan. Soo dhex geliddaan qawmiyadaha cusubna waxay socon karaan muddo dheer ama si aad ah u dheerba, ilaa intay qawmiyadaha cusub oo soo haajiray, ama marti ahaan ku yimid, ama la tabanniyay, ama adeeg ahaan ku yimid ay ka xoogeystaan, ayna xoogooda intay dareemaan ay kuwii marti geliyay xukunka kala wareegaan oo ay ayagaas xukumaan."

Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Ssaxaar wuxuu kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahi Calayhi Wasallam, wa allathiina macahu, ahna kitaabka laga sameeyey musalsalka Masar lagu sameeyey oo televisinka laga sii daayo bisha Ramadaan iyo ghayrkeedba, meelo badan ku xusay, gaar ahaan shanta mujallad oo ugu horreeya, waana labaan mujallad, siday jaziiradda Carabtu, gaar ahaan Yaman, u ahaayeen asalka Bani aadanka, kaddibna ay halkaas ayagoo xoolohooda wata ka guureen, una guureen ayagoo biyo iyo baad doon ah meelahay ku yaallaan wabiyada Niil, Furaat,

Dijlah, Urdun, geeska Afrika iyo guud ahaan Bariga Dhexe, ayagoo intay tarmeen ay jaziiraddu ayaga iyo xoolohoodaba qaadi weyday. Markaasey waxay degeen miyiga magaalooyinka waaweyn ee dalalkaas, ayagoo boqorrada dalalkaas ka idan qaatay oo ay halkaas xoolohooda ku raacan jireen. Markaasey markay tarmeen oo ay xoogeysteen, ayna arkeen inay boqorrada dalalkaas ay yimaadeen taag darraadeen, ayay ku boodeen oo xukunka dalalkaas fara marooqsadeen. Sidaasey fircoonnada Masar (oo uu dhalay Xaam bin Nuux, oo uusan asalkoodu Carab ahayn) zaman dhan waxay ahaayeen Carabtaas xoolo dhaqatada ah (oo ku abtirsada Saam bin Nuux), oo halkaas ka asaasay boqortooyada Haksuus. Fircoonka Nabi Ibraahiim waxaa la oran jiray Sinaanu bin Culwaana, Fircoonka Muuse waxaa la oran jiray Al Waliidu bin Muscab, Fircoonka Nabi Yuusufna waxaa la oran jiray Al Rrayyaanu bin Al Waliidu. Sidaasay Suuriyana uga asaaseen boqortooyin kale Maaraa iyo Jiraar, saddex kun iyo shan boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Ciise, Calayhissalaamu, Akaadiyuuna inta udhexeysa labada wabi ee Furaat iyo Dijlah xaggeeda koofureed, iyo Al Ashuuriyyiina xaggeeda waqooyi. Laba kun shan boqol oo sano Ciise hortisna Al Camuuriyyiina bartamaha Suuriya iyo waqooyigeeda, kaddibna labada wabi dhexdooda. Al Kancaaniyyuuna, ayna ka mid yihiina Al Feeniiqiyyuuna oo degay koofurta Suuriya iyo xeebteedaba. Kun iyo shan boqol oo sano Ciise hortisna Al Aaraamiyyuuna oo degay bartamagha Suuriya iyo waqooyigeeda. Shan boqol oo sano Ciise hortisna Al Anbaadh oo degay koofurta Suuriya, waadii Carabah iyo khaliiju Al Caqabah. Isla waqtigaas waxay qabaa'il Carab ahi u guureen qorrax kasoo baxa Suudaan. Boqol iyo konton sano Ciise hortisna Al Munaathirah waxay degeen Koofur/galbeed ee Ciraaq ilaa khaliijka. Al Ghasaasinah waxay degeen koofurta Suuriya ilaa Dimishiq. Sanadka lix boqol iyo konton miilaadiga ayay Carab muslimiin ah waxay degeen koofurta Ciraaq, iyo Suuriya iyo Masar, iyo waqooyiga Afrika, iyo Al Andalus -oo ah Spanya-, iyo arliga Furuus ee Iiraan, iyo Turkistaan iyo Hindiya. (Fiiri Atlas al Taariikh Al Carabii Al Islaamii, boggiisa afaraad iyo shanaad). Sidaasoo kale ayay Suuriya uga asaaseen boqortooyada Camuuriyiinta iyo Ashuuriyiinta. Ciraaqna waxay ka asaaseen boqortooyada Akad uuna boqor u yahay Sarjuun kan koowaad, kaddib markay ka adkaadeen boqortooyada Suumar. Wuxuu kaloo yiri: "Raydaan waxaa la oran jiray qasriga boqorrada Ximyar oo ku yiillay Thafaar -waana magaca hore ee Sancaa-. Markaasay halkaas ka duuleen dadka Saba' dhalashada Ciise horteed, oo ay qabsadeen inta wayn ee arliga xabashada iyo xeebaha Afrika ee dalalka Carabta kasoo horjeeda. Markaasay xabashadu ku kacday inay iska kiciso Carabta, wayna ku guulaysatay. Markaasay waxay asaaseen laba boqortooyo oo kala ah boqortooyada Aduulis iyo boqortooyada Aksuum. Si degdegsiimo lehna Aksuum waxay la wareegtay boqortooyada la tartamaysay ee Aduulis oo ay qabsatay. Dawladda Aksuum kuma ekaanin inay boqortooyada Saba' iska kicisay, balse way ka daba tageen oo ay sidaas xabashadu Yaman ku qabsadeen, oo uu sidaas carshiga Bilqiis ku fuulay Cayzaan, najaashiga xabashada." Sidoo kale qaaradda Ameerika waxaa degganaan jiray shucuub loo bixiyey "indians". Markaasay dadka yurub dega oo krishtaanka ahi ku

duuleen, oo ay waqooyiga qaaraddana oo ay gumaysteen ingiriisk iyo jarmanku ka dhammeeyeen oo ay xablad ku wada laayeen, waana labada dal ee maraykanka iyo kanada, koofurta qaaraddana oo ahaan jirtay mustacmarad spaanishka ay weli wax uga hareen. Sidaasaana shacbigii halkaas degganaan jiray dhulkiisa looga qaaday oo uu dad kale ku degay. Haddadaan aan joogno waxaa dalka soomaalida soo degaya dad amxaara ah, oo shaqaale ahaan ama ganacsato kusoo degaya. Sanadkaanna ciidammadooda oo NATO iyo yurub soo ijaarteen oo haweenkooda iyo caruurtooda wada ayaaba soo degay. Maxay ku dhammaan doonaan? Ilaahay oo keli ayaana u cilmi leh. Khibradduse waa taas aan soo sheegnay.

Sidaasaa dawladdaha krishtaanka ahi doonayaan inay amxaaro usoo dejiyaan arliga soomaalida oo ay muddoo gaaban dhulka kala wareegaan, uuna noqdo arli ay krishtaan amxaaro ah deggan yihiin, ayadoo soomaalida laga dhigayo wax la dilay, wax dalka ka qaxay oo aan loo oggolaanayn inay kusoo laabtaan, iyo ayadoo amxaaro rag iyo haween ah lasoo dejiyo oo ay halkaas ku tarmaan.

Weeraridda xaqdarro ee Qarammada Midoobay ee Soomaaliya

Dhasha Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi waxaa ka mid ahaa Calii Shiikh Cabdu Allaahi oo aan jeclaa, saaxiib iyo walaalabana ahayn. Calii wuxuu ka mid ahaa raggay dayuuradaha cirka heehaaba ee maraykanku Muqdisho ku dileen bilowga kun iyo sagaal boqol iyo sagaashanka, ayagoo guri dhexdiisa fadhiya oo ka tashanaya sida magaalada Muqdisho nabad looga dhalin lahaa. Markaasey dayuuradahaasi intay dul yimaadeen bambooyin iyo sawaarikh la dheceen oo ay gurigii oo idil iyo inta ku dhex jirtayba ciid ka dhigeen. Maalintaas waxay dayuuradaha mareykanku dileen, siduu u qoray wargeyska kasoo baxa Washington D.C. caasimadda dalka Mareykanka ee la yiraahdo Washington Post, ilaa toban kun oo qof oo muslin soomaali ah, una badan haween iyo caruur. Allow Calii Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi iyo ina aderkey iyo walaalkeyga aan jeclaa Cabdu Al Rraxmaan "Indha Guduud" oo isaguna raggaas gurigaas lagu dilay ka mid ahaa iyo dhammantoodba u naxariiso.

Dagaalkaas uu maraykanku ku qaaday Soomaaliya waxaa ka qayb galay qiyaas soddon kun oo askari oo ciidammada maraykanka ka mid ah oo hubka ugu casriyeysan sita, toddoba maraakiibta dagaalka oo qaarkood dayuuradaha qummaatiga u kaca iyo kuwo kaleba xambaarsan yihiin, hub culus iyo mid fududba. Maraakiibtaasu waxay madaaficda culculus iyo sawaariikhba ku garaaceen oo la dheceen Muqdisho, ayna si xaqdarro ah u laayeen dad guryohooda isaga dhex jira ama magaalada umuurohoda qunsanaya, ayagana aan wax u dhimin. Waxaa intaas wehliyey labaatan kun oo ciidammada dalal kale oo ay gaashaanbuur yihiin, ayna ka mid yihiin Ingiriiska, Talyaaniga, Jarmanka, Kanada, Austraaliya, Belgiga, huwanna magaca Qarammada Midoobay. Markaasey gobollada Soomaaliya qaybasadeen oo uu dalba walba gobolka ay qoondeysteen ciidammadiisa geeyey. Waxay kusoo duuleen, si gardarro ah, oo dadkiisa laayeen dal caafimaad qaba iyo dad guryohooda jooga, aan ayaga eed ka gelin, aan dhiiggooda daadin, maalkoodana aan

dhicin. Halkaasey dadkiina laayeen, meeshii wax laga kasbanayey iyo guryihiina burburiyeen iyo wadooyinka iyo isbitaallada iyo jaamacadaha iyo dugsiyada iyo warshadahaba. Waxay kaloo yeeleen inay dadkii gobolladaas degganaa, markii guryohooda madaafiic iyo hub lala dhacay, ay deegaankooda kasoo saareen, ayna si ay noloshooda ku badbaadiyaan ay qaxooti noqdeen, taasoo ahaydba qorshaha gaashaanbuurtaas gaalada ah. Sidaas ayaa qaxootiga loo abuuraa, oo sidaas ayaa dadka dalalkooda looga soo saaraa. Gaashaanbuurtu waxay dooneysaa inay dalka Soomaaliya dhaxasho, kaddib markay soomaalida kasoo saarto, waxayanse ogayn inuu Ilaahay dhulka iska leeyahay, ciddii uu doonana uu dhaxalsiiyo, siduu noogu sheegay Aayadda boqol iyo sideed labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi: **"Inna al arda liAllaahi yuurithuaha man yashaa'u min cibaadihi wa al caaqibatu lilmuttaqiina"**, oo macneheedu yahay: "Arliga Ilaahay ayaa iska leh, wuxuuna dhaxalsiiyaa ciddii uu doono oo addoommadiisa ka mid ah, ciribsamiduna, oo ah gargaarka Ilaahay Tacaalaa iyo libta, waxay u sugnaatay kuwa Ilaahay ka baqa." Markaasuu maraykanku intuu maraakiibtaas dayuurado kasoo kiciyey oo Muqdisho dul keenay ayay magaalada iska duqeeyeen oo ay hub culus iyo mid fududba ku rusheeyeen, oo ay maataadii laayeen una badnaa haween iyo caruur, dadayan eedi kala gaarin. Wargeyska Washington Post wuxuu soo qoray inay mareykanku maalinta dayuuradda laga soo riday ay ilaa toban kun oo soomaali ah dileen, una badan haween iyo caruur. Ninka dawladda mareykanka dagaalkaas wakiilka uga ahaa oo hoggaaminayey, lana yiraahdo Danjire Oakley, waxaan ka fiirsaday televisionka CNN isagoo la wareysanayo loona sheegay in maalintaas soomaalida ilaa toban kun oo qof laga dilay. Markaasuu ninkaasu wuxuu qiray in tirada dadka soomaalida laga dilay maalintaas ay ilaa toddoba kun oo qof ahaayeen. Markaasuu wariyaha wareysanayey wuxuu ku yiri: "Danjire, oo afhayeenka Wasaaradda Gaashaandhigga ee Pentagon ayaa wuxuu qiray in soomaalida ilaa sideed kun oo qof laga dilaye?"

Weerarka Soomaaliya waxaa bilaabay Madaxweyne George Bush, oo ah aabaha dhalay Madaxweynaha mareykana ee sanadkaan oo isagana la yiraahdo George W. Bush. Afhayeenka Aqalka Cad marka bilowga sagaashanaadka Soomaaliya la weeraray, waxaa ahaa ninka la yiraahdo Marlin Fitzwater. Qalabka warbaahintu waxay wariyeen inuu ninkaasu ciidammada dhallinyarada ee Adolf Hitler ka tirsanaan jiray, kaddibna markuu maraykanka yimid uu magaciisa jarmanka ahaa midkaan ingiriiska ku beddelay. Wariyayaalka Aqalka Cad warka kasoo tebiya ayay waxay afhayeenkaas weydiiyeen wuxuu yahay saldhigga sharciga ah ee ay dawladda maraykanu Soomaaliya ku weerartay, ayadoo uusan Barlamaanka maraykanku oggolaan in Soomaaliya la weeraro. Ninkaasu wuxuu ku jawaabay waxaa ka mid ah inuu yiri: "Waxaan Soomaaliya ku galnay si sharci darro ah, ayadoo ayan dawladdoodu na marti qaadin, Qarammada Midowbeyna ayan soo saarin go'aan noo oggolaanaya inaan galno, dagaalna aan si rasmi ah loogu dhawaaqin." Isagoo sidaas leh ayaan TV ga CNN ku arkay oo maqlay. Bush dabadiis dagaalka waxaa sii waday Madaweynihii ku xigay oo magaciisu yahay Bill Clinton. Dagaalladaas waxaa ku dhintay dhawr

boqol oo kun oo soomaali ah, oo xaqdarro loo dilay, in intaas ku laablaabantana waxay dalal kale ku noqdeen qaxooti, kaddib markii guryohooda xoog looga soo saaray. Hadana dagaalkaas waxaa wada Madaxweynaha hadda mansabkaas haya oo la yiraahdo George W. Bush, siduu isaga laftiisu afkiisa uga qirtay, addunkana uu u sheegay.

Xeryaha qaxootiga Qarammada Midoobay

Markay gaaladu dal islaan ah weerarto, raggu wuxuu u kacayaa la dagaallankooda. Inta dagaalku socdo ayaa waxaa imaanaya Hay'adaha Qarammada Midoobay, sida midda qaxootiga u qaabilsan iyo ururrada ayagu isku sheegay inay sama falaan sida Red Cross, Care, Save the Children Fund, World Vision iwm. Markaasey waxaa qaataan caruurta iyo haweenka oo ay xeryo xun intay u dhisaan halkaas ku silciyaan, kuna saxariiriyaan, sidaan ku aragnay Soomaaliya, Afganistaan, Bosniya, Kosovo, Chechniya, Falasdiin iyo kuwa la midka ahba. Ujeedada gaaladu waxaa weeye inuu qoysku dumo, ragga la laayo, inta noolna ayan haweenkooda la nooleyn, oo ayan sidaas caruur ku dhalin. Ujeedooyinka xeryaha qaxootiga waxaa ka mid ah hor istaagidda taranka muslimiinta, iyo silcinta intooda tabarta yar oo ay gaajo iyo cudurro u le'daan. Gaaladu caruur badan ma dhalaan, oo waa bakhiillo, oo waxay diidayaan inay cunnada la cunaan. Muslimiintuna si xoog ayay u tarmeysaa. Qorshohoodu waa taas ka hortegiddeeda. Xeryaha qaxootiga caruurta gaartana waxay u dhintaan, in badani, gaajo, cudur iyo silic. Qarammada Midoobey waxay sheegtay sanadka kun iyo sagaal boqol iyo labo iyo sagaashanka inay caruurta Soomaaliya oo shan shan sano aan gaarin ay ka dhinteen lixdiiiba mid ama shantiiba mid, taasoo dhacday marka horeba oo ay musiibadu ku habsatay. Waxaa sidaas ku le'day ayay Qarammada Midoobey yiraahdeen hal fac oo Soomaali ah. Caruurtuna waa mustaqbalka dal kasta. Dawladaha krishtaanka ahi waxay doonayaan inay dadka muslimiinta ah, sida Soomaalida, Falasdiiniyiinta, Bosniyiinta iyo kuwa la mid ahba inay dalkooda ka saaraan, ayaguna ay dalka ka dhaxlaan oo kala wareegaan. Sidoo kale waxayan oggolayn in qof cilmi leh ama oran karaba "anigaa arligaan iska leh" inuu kusoo noqon, hadduu kusoo noqdana waa la dilayaa, oo siday soomaalidu tiraahdo mas madaxa ayaa laga dilaa.

Taranka dadka ee dawladdaha krishtaanka ah

Muslinku way is guursadaan oo caruur dhalaan oo tarmaan, oo uu qoys walba ka kooban labada waalid iyo intaasoo caruur ah. Hay'adda ay dawladda maraykanku leedahay oo la yiraahdo National Center for Health Statistics waxay boggeeda internetka (www.CDC.gov) ku sheegtay oo tiri: "the crude birth rate in 2005 was 14.0 births per 1000 total population" oo macnihiisu yahay: "heerka dhaliddu wuxuu sandka laba kun iyo shan ahaa inay kunkii qofba afar iyo toban cunug dhaleen." Waxay kaloo yiraahdeen: "dhalmada haweenka aan la guursan oo la qabini waxay badatay sanadka laba kun iyo shan boqolkiiba lix iyo soddon iyo sideed, oo waxay sanadkaas dhaleen hal

malyan shan boqol shan iyo labataan kun saddex boqol shan iyo afartan cunug." Waana caruur wacallo ah oo aan guur ku dhalan.

TV-ga CBS (CBSnews.com) wuxuu toddoba iyo labaatanka bisha maarso ee sanadka laba kun iyo saddex Washington kasoo wariyay inay majallada la yiraahdo "Journal Science" inay haweenka yurubta midowday dhali doonaan ilaa sanadka laba kun iyo labataan hal cunug iyo nus haweenka.

Bogga internetka (www.overpopulation.com) wuxuu wariyay ina sanadka kun sagaal boqol sideed iyo sagaashanka yurubta midowday ay kunkii qofba kow iyo toban caruur ah dhaleen. Waxaana warbixintaas qoray Thomas M.: World population Profile, Washington DC: US Government Printing Office, 1999.

In badan oo ragga krishtaanka ahi ma kacsadaan oo haweenka uma tagaan! Wargayska maalin laha ah ee la kasoo baxa dalka maraykanka oo la yiraahdo US Today wuxuu bogga internetka (www.healthscout.com/news/601523.html) kasoo guuriyay oo yiri: boqolkiiba shan ragga afartan jirka ah ee maraykanu ma kacsadaan. Sidoo kale shan iyo toban ilaa shan iyo labataan ragga lixdan jirka ah. Boqolkiiba konton ragga afartan jirka ahina uma kacsadaan si ay haweenka ugu tegi karaan. Cudurka Erectile Dysfunction, oo ah inuusan thakarka ninku kicin oo adkaan wuxuu hayaa sideed iyo toban malyan oo ragga maraykanka ah (waana wargayska soo baxay 2/1/2007)." Warbixintaasna waxaa dhigay Steven Reinberg, HealthDay reporter.

"Maalinta Khamiis ee bisha Fabraayo tahay kow: in ka badan sideed iyo toban malyan ee ragga marakanka ah oo ku nool dalka maraykanka waxay qabaan cudurka Erectile Dysfunction, sidaasaa laga helay daraasad cusub." Darasaddaas waxaa samaysay Elisabeth Selvin a postdoctoral fellow at John Hopkins (oo ah isbitaalka jaamacadda caanka ah ee Baltimore, gobolka Maryland). Natijada daraasaddaasna waxaa lagu daabacay tirada bisha febraayo ee majallada The American Journal of Medicine.

Darasaad kalena waxay soo saartay inay boqolkiiba sideed iyo toban dhibic afar ee ragga maraykanka ahi ay cudurkaas Erectile Dysfunction qabaan. Dr. Hossein Sadeghi-Nejad, Agaasimaha The Center for Male Reproductive Medicine at Hackensack University Medical Center and an associate professor of urology at UMD New Jersey Medical School wuxuu yiri: "darasaddaanu waxay kusoo celisay oo sii adkaysay waxaan hore u ogayn oo ah inuu cudurka Erectile Dysfunction si aad u sarreysa United States ugu faafsan yahay."

Hay'adda ay dawladda maraykanku leedahay oo la yiraahdo Urban Institute qoralladeeda oo ah Urban Institute Publication oo laga helo bogga internetka (www.urban.org) ayna dhigeen David M. Smith iyo Garu Gates oo boggoodaas kor ku xusan lasoo geliyay bisha agoosto ee sanadka laba kun iyo kow waxay ku yiraahdeen: "waxaan ku qiyaasnay tirada guud khainiisiinta ragga iyo haweenkaba inay tahay boqolkiiba shan ee dadweynaha maraykanka oo da'doodu sideed iyo toban sano ka korreyso (kuwaasoo ah laba boqol iyo sagaal malyan boqol sideed iyo labataan kun afar iyo sagaashan qof). Taasu waxay keeneysaa inay khainiisiinta ragga iyo haweenkaba ah tiradoodu tahay toban malyan afar boqol lix iyo konton kun afar boqol iyo shan qof.

Boqolkiiba soddon oo tiradaan dambe ka mid ahna, ahna saddex malyan boqol lix iyo soddon kun sagaal bol kow iyo labaatan qof."

Wargayska la yiraahdo Christian Science Monitor oo ay leedahay kanisad wayn oo maraykan ah oo diinta krishtaanka adduunka ku faafisa, gaar ahaan dalalka islaanka, wuxuu tirsigiisa soo baxay maalinta isniinaad ee ay taariikhdu ahayd soddonka bisha luulyo ee sanadka laba kun iyo saddex daabacay maqaalad uu qoray ninka maraykan ah oo la yiraahdo Bruce Bawer, wuxuuna kasoo qoray magaalada Oslo, caasimadda dalka Norway. Ninkaasu wuxuu leeyahay inay dawlada yurub filayeen inay ragga muslinka ah oo ay dalalkooda soo gelinayaan bulshadooda ku milmi doonaan ayagoo gabdhaha reer yurub guursada. Markaasay waxay arkeen inuu raggaas muslinka ahi intuu gabdhohooda guursan lahaa ay ilmo adeerradooda ka keeneen dalalkay asligooda ka yimaadeen, ama gabdhaha muslinka ah oo yurub jooga guursadeen, oo ay sidaas gabdhohoodu ku waayeen rag guursada. Markaasuu wuxuu ku talinayaa inay dawlada yurub ku adkeeyaan, oo tusaale ahaan inuu ninku saxiixo inuu gabdhuu dibadda ka keenayo ay leedahay xaqqa inay iska furi karto markay doonto, sidaasuuna barlamaanka Norway sharci ahaan usoo saaray."

Khaa'innimada krishtaanka

Ilaahay, Cazza wa Jalla, Quraanka ayuu noogu sheegay inay gaaladu cadawga muslimiinta yihiin. Marka, nin cadawgiis jecel oo la saaxiib ah oo la tashanaya, oo madax ka dhiganaya oo u hoggaansamaya, isagoo doonaya dilkaaga iyo dilka wiilkaaga iyo fara xumaynta gabadhaada iyo hooyadaa, iyo inaad silic iyo saxariir ku noolaataan, ayagoo guryihii iyo dalkiinnaa idinka soo saaray, xeryo qaxooti ku takooran, kuna silicsan, waa daallin doqon ah, khilaafay amarka Ilaahay, iyo Quraanka iyo amarka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Aayadda boqol iyo kow ee Suuratu Al Nisaa'i ku yiri: **"Inna al kaafiriina kaanuu lakum caduwwan mubiinan."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Gaaladu waxay idiin yihiin cadaw cad."

Wuxuu Cazza wa Jalla Aayadaha shan iyo konton iyo lix iyo konton ee Suuratu Al Anfaali ku yiri: **"Inna sharra al ddawwaabi cinda Allaahi allathiina kafaruu fahum laa yu'minuuna(55)Allathiina caahadta minhum thumma yanquduuna cahdahum fii kulli marratin wa hum laa yattaquuna(56)."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Daabadaha dhulka ku kor socda waxaa ugu shar badan Ilaahay agtiisa kuwa gaaloobay. Kuwaasna ma ay rumeynayaan, oo iimaan la imaan mayaan(55)Kuwaasna waa kuwa haddaad cahdi iyo heshiis la gashid mar kasta burinaya, ayagoo aan Ilaahay uga baqayn burinta cahdigooda(56)."

Wuxuu Cazza wa Jalla Aayadaha labo iyo toban iyo labo iyo soddon iyo saddex iyo soddon ee Suuratu Tawbah ku yiri: **"Wa in nakathuu aymaanahum min bacdi cahdihim wa dhacanu fii Diinikum fa qaatiluu a'immata al kufri innahum laa aymaana lahum lacallahum**

yantahuuna(12)." Aayyadda macneheedu waxaa weeye: "Markayse buriyaan cahdiga iyo heshiiskooda, ayna duraaan Diintiinna, dila madaxda gaalada, kuwaasoo aan diin lahayn iyo cahdi midna. Markaas ayaa dhici karta inay xumaanta ka joogsadaane(12)."

Aayadaha laba iyo soddonaad iyo saddex iyo soddonaadna ee isla Suuratu Tawbah waxay leeyihiin: "**Yuriiduuna an yudhfi'uu nuura Allaahi bi afwaahihim wa ya'baa Allaahu illaa an yutimma nuuraHu wa law kariha al kaafiruuna(32)Huwa Allathii arsala Rasuulahu bi al hudaa wa Diini al Xaqqi li yuth-hirahu calaa al ddiini kullihi wa law kariha al kaafiruuna(33).**" Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Gaaladu waxay doonayaan inay ku damiyaan Nuurka Ilaahay (oo ah Quraanka, oo intay beeniyaan ay doonayaan in la iska tuuro) afalkooda, Ilaahayna waa diiday waxaan ahayn inuu Nuurkiisa dhammaystiro mooyee, taas gaaladu haba necbaadaane(32)Ilaahay waa Midka soo diray Rasuulkiisa, hanuunna la soo diray iyo Diinta runta ah, (oo ah Islaamka) si uu uga kormariyo diimaha kale dhammaantood, gaaladu taas haba kahdaane(33)."

**. Khayaanada Krishtaanka, dagaalka wayn ee muslimiinta iyo
krishtaanka
iyo
furashada Al Qisdhandhiiniyyah oo ah Istanbuul**

Wuxuu Imaam Axmad wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**Tusaalixuuna al rruuma sulxan aaminan, wa taghaaruuna antum wa hum caduwwan min waraa'ihim, fa taslimuuna wa taghnimuuna. Thumma tanziluuna bi marajin thii tuluulin. Fa yaquumu al rrajulu mina al ruumi, fa yarfacu al ssaliiba wa yaquulu: "Al aghlabu al ssaliibu". Fa yaquumu ilayhi rajulun mina al muslimiina fa yaqtuluhu. Fa cinda thaalika taghduru al ruumu wa takuunu al malaaximu. Fa yajmacuuna lakum fa ya'tuunakum fii thamaaniina ghaayatan, maca kulli ghaayatin cashratu aalaafin.**" Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaad sulux iyo heshiis la geleysaan rumka (oo ah dadka Yurub, Ameerika, Australia iyo New Zealand degah oo gaalada ah, oo dhammaantood asalkooda ay ka yimaadeen Yurub tahay), ahna heshiis nabadeed. Markaasaad waxaad qahreysaan (oo intaad la dagaallantaan wadajirkiinnu aad ka adkaaneysaan) ayaga cadaawgooda, oo gadaashooda ah. Markaasaad nabad geleysaan, aadna ghaniimeysaneysaan. Kaddib waxaad degeysaan dhul ballaaran oo waasac oo caws iyo dhir miiran ah (oo ay ciidanka fardaha iyo daabadaha kale u daaqo), taagaag iyo buuro badanna leh. Markaasaa waxaa istaagaya nin rumka ka mid ah, markaasuu krishto kor u qaadayaa, wuxuuna leeyahay: "Krishtada ayaa xoog badan, cid walbana ka adkaaneysa, oo aan laga adkaan karin." Markaasaa waxaa u kacay nin muslimiinta ka mid ah, oo dilaya. Markay taasi dhacdo, ayay rumku heshiiskii khayaanayaan oo jebinayaan. Markaasaa waxaa dhacaya al malaaximu, oo ah dagaal aad u wayn oo dad aad u fara badani ku le'daan (oo

al malaaximu waa jamcu malxamah, oo ah kawaanka xoolaha lagu gawraco). Markaasey isu kiin aruursanayaan (waa dawladaha gaalada ah, oo ay isku kiin gaashaanbuursanayaan). Markaasey waxay idiin imaanayaan ayagoo sita sideetan calan, oo calan walba ay la socoto toban kun (oo askari)." Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Bukhaarii oo lafthigiisa inta dambe ee Xadiithku yahay: **"Fa ya'tuunakum taxta thamaaniina ghaayatan, kullu ghaayatin ithnaa cashara alfan."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markaasey idiin imaanayaan ayagoo hoos socda sideetan calan, waana calan dagaal, calan kastana uu ka kooban yahay laba iyo toban kun (oo askari)" . Al Bukhaarii wuxuu kitaabka Al Jizyati wa Al Muwaadacati, ahna Xadiithkiisa saddex kun boqol iyo lix iyo toddobaatan ku wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam yiri isagoo tilmaamaya calaamadaha Saacadda: **"Wa al ssaadisatu hudnatun takuunu baynakum wa bayna Banii Al Asfari, fa yusiiruuna ilaykum fii thamaaniina ghaayatan, taxta kulla ghaayatin ithnaa cashara alfan. Wa fudhaadhu al muslimiina yawma'ithin fii ardin yuqaalo lahaa Al Ghuudhatu fii madiinatun yuqaalu lahaa Dimashqu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Calaamadda lixaadna waa heshiis nabadeed oo ahaan doona adinka iyo reer Banuu Al Asfari (Waxaa Banuu Al Afar la yiraahdaa roomaanka oo ah dadka Yurub dega, meelo iyo qaarado kaleba ha uga haajiraane, looguna bixiyay magacaas oo macnihiisu yahay qabiilka uu dhalay oo ku abtirsada midka midabkiisu hurdiga yahay, ama qabiilka hurdiga ah. Aabaha ay dadkaasi ku abtirsadaan waa Cays bin Isxaaq, uuna dhalay Nabi Isxaaq bin Ibrahiim Al Khaliilu, Calayhimussalaamu, ahaana mataanka Nabi Yacquub, Yacquub hortiiisna soo axay oo dhashay, Yacuuqbna uu ciribtiisa ku joogo, oo Yacquub wuxuu ka yimid caqab oo ah ciribta, midabkiisuna hurdi ahaa, lana oran jiray Al Asfaru, midka hurdiga ah, siduu imaamka Al Maawardii ugu wariyay kitaabkiisa Aclaamu Al Nubuwwati, bogga shan iyo lixdan. Caysuu wuxuu guursaday ina adeertiis Nasmah, oo uu dhalay Nabi Ismaaciil, Calayhissalaamu, waxayna u dhashay laba wiil oo midkoodna la yiraahdo Ruum, oo ay roomaanku ku abtirsadaan, kan kalena Faaris, oo ah aabaha ay iiraaniyiintu ku abtirsadaan, oo sidaasba Faaris loo yiri. Dadka gaalada ah ee Yurub degah ma cadcadda ee waa hurdi, oo waxaa cad caanaha: ma caano ayay u egyihiin? Waa maya, waxaase midabka caanaha leh Carabta. Marku Nabigu, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, wuxuu ka hadlayo caddaan ku tilmaamayo, sida biyaha xawdkiiisa maalinta qiyaame, wuxuu yiraahdaa **"abyada mina al llabani"** oo macnihiisu yahay: "oo caanaha ka cad." Yaase Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, uga aqoon roon? wuxuuna ku magacaabay Banuu Al Asfar. Runtana Rabbi ayaa og). Markaasey dagaal idiinku imaanayaan ayagoo sideetan calan sita, calan kastana ay hoostiisa ku sugan yihiin labo iyo toban kun (oo askari). Maalintaas xarunta ay ciidammada muslimiintu deggan yihiin waxay ku taalla arli la yiraahdo Al Ghuudhatu, kuna dhex jirta degmada la yiraahdo Dimashqu (oo ah magaalo madaxda dalka Siiriya)." Xadiithka waxaa kaloo wariyay Axmad (2/174 iyo 6/25), Abuu Daauud iyo ibnu Maajah. Heshiiskaasi wuxuu ahaan karaa midka Ururka Qarammada Midoobay, oo ay

Dawladaha muslinka iyo kuwa Carabta ah iyo kuwa arligoo idil xubin ka yihiin, ayna wada saxiixeen heshiis inaan dagaal la isku qaadin oo nabad lagu wada noolaado. Sidoo kale heshiisyada ay Jaamacadda Dawladaha Carabtu Qarammada Midoobay iyo ururrada Yurub iyo gaashaanbuurta Commonwealth iyo kuwa la midka ah la saxiixatay. Sidoo kale heshiisyada uu ururka Dawladaha Islaamka ahi la saxiixday ururradaas oo idil. Ama heshiisyo mustaqbalkaba la kala dhigan doono. Tan suubanna Allaha na waafajiyo.

Ilaahay waa naga reebay gargaarsiga krishtaanka

Ilaahay, Cazza wa Jalla, wuxuu muslimiinta ka reebay inay gaalada wali ka dhigtaan, oo ay gargaar weydiistaan, ay saaxiibbo la noqdaan, ay sirta muslimiinta u sheegaan, ay madax ka dhigtaan ay u hoggaansan yihiin. Qofka taas yeelana Diinta Islaamka dibadda ayuu ka yahay, oo muslin ma ah ee waa gaal. Wuxuu Ilaahay Cazza wa Jalla Aayadda sideed iyo labaatnaad ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: "**Laa yattakhithi al mu'minuuna al kaafiriina awliyaa'a min duuni al mu'miniina. Wa man yafcal thaalika fa lays a mina Allaahi fii shay'in(28).**" Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Yeeyan mu'miniintu ka yeelan (oo yeeyan warka muslimiinta siin iyo sida looga adkaan karaba) gaalada sokeeyey, mu'miniinta ka sokow. Qofka taas falana Ilaahay Diintiisa dhexdeeda waxba kama ah(28)." Wuxuu Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, Aayadda kow iyo afartanaad ee Suuratu Al Maa'idah ku yiri: "**Yaa ayyuhaa Al Rrasuulu laa yaxzunka allathiina yusaaricuuna fii al kufri mina allathiina qaaluu aamannaa bi afwaahihim, wa lam t'umin quluubuhum, wa mina allathiina haaduu sammaacuuna lit kathibi, sammaacuuna li qawmin aakhariina, lam ya'tuuka yuxarrifuuna al Kalima min bacdi mawaadicihi, yaquuluuna in uutiitum haathaa fa khuthuuhu, wa in lam tu'tawhu fa axtharuu. Wa man yuridi Allaahu fitnatahu fa lan tamlika lahu mina Allaahi shay'an. Ulaa'ika allathiina lam yuridi Allaahu an yudhahhira quluubahum. Lahum fii al ddunyaa khizyun wa lahum fii Al Aakhirati cathaabun cathiimun(41).**" Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rasuulkaanow, yeeyan ku tiiraanyenin kuwa ku degdegaya gaalnimada iyo u hogaansanaanta gaalada, ahna kuwa afafkooda ka leh waan rumaynnay, quluubtooduse ayan rumayn, kuwaasoo ah munaafaqiinta, iyo kuwa yuhuudoobay, beentana maqlaya, hadalkaagana u dhegeysanaya inay u geeyaan rag aan adiga kuu imaan, waana jawaasiis., waxayna ka leexinayaan kalimooyinka meeshooda dhabta ah, waxayna leeyihiin: "hadduu Muxammad, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, idiinku fatwodo sidaad dooneysaan ka qaata. Hadduuse , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, taas idin siin waayo, ka digtoonaada. Qofkuu Ilaahay doonayo inuu gaaleeyo, adigu waxba uma hanan kartid oo amarka Ilaahay kama aad celin kartid. Kuwaasi waa kuwo uusan Ilaahay doonayn inuu quluubtooda daahiriyo, waxayna leeyihiin adduunka dhexdiisana dulli, Aakhirana cathaab wayn(41)."

Kuwa krishtaanka iyo yuhuudda wali ka dhigtah, Diinta Islaamka way ka

bexeen, siduu Ilaahay, Cazza wa Jalla, ugu yiri Aayadaha konton iyo kow iyo sideetan iyo kow ee Suuratu Al Maa'idah: **"Yaa ayyuhaa allathiina aamanuu laa tattakhithuu al yahuuda wa al nasaaraa awliyyaa'a. Bacduhum awliyyaa'u bacdin. Wa man yatawallahum minkum fa innahu minhum. Inaa Allaaha laa yahdii al qawma al thaalimiina(51).** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Kuwiinna iimaanka la helayow, waana muslimiinta, ha ka yeelanina yuhuudda iyo krishtaanka gargaarayaal iyo sokeeye. Ayaga ayaa isku ah sokeeye, oo isku gargaara colaadda muslimiinta. Markaas midkiinna sokeeye ka dhigta, oo taladooda ku waafaqa uguna gargaara, ayaguu ka mid yahay, (oo sidaas ayuu Diinta Islaamka uga baxay, laguna qaadayaa xukunka krishtaanka iyo yuhuudda, siduu Al Qurduhubii u yiri: "Tacaalaa wuxuu caddeeyey in qofkaas xukunkiisu yahay xukunka krishtaanka iyo yuhuudda, xukunkaasoo ka reebaya inuu qof murtadka ah oo diinta ka noqday uu qof muslin ah dhaxlo, xukunkaanna waa jirayaa ilaa yawmu al qiyaamah." Wuxuu kaloo yiri: "kuwa gaalada krishtaanka ah iyo yuhuudda wali ka dhigta waxay Ilaahay u khilaafeen iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siday ayaguba u khilaafeen. Sidaas ayuu uga mid noqday. Qofka gaalada jecel wuxuu jecelyahay oo uu u bogay waxay ku taagan yihiin, oo ah caqiidadooda, hadduu caqiidadooda jecelyahayna waa gaal muruxsan, waana in markaas la colaadiyaa siday waajib u tahay in ayaga la colaadiyo. Waxaana waajib u noqonaysa oo uu gelayaa naarta siday ayagaba waajib ugu noqotay. Sidaasuu ayaga uga mid noqday." Qofkaas waxaa laga furaya haweentiisa, caruurtana waa laga qaadanayaa, markuu dhintana la dhaxli mayo, salaadda janaazada lagu tukan mayo, qubuuraha muslimiintana lagu aasi mayo). Aayadda kow iyo sideetanaadna ee Suuratu Al Maa'idah waxay leedahay:

"Wa law kaanuu yu'minuuna bi Allaahi wa AI Nabiyyi wa maa unzila ilayhi maa ittakhathuum awliyyaa'a, wa laakinna kathiiran minhum faasiquna(81)." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Hadday yihiin kuwa rumaysan Ilaahay iyo Nabiga iyo waxa Nabiga lasgu soo dejiyay, oo ah Quraanka" kama ayan yeesheen yuhuudda iyo krishtaanka sokeeye. Laakiin in badan oo ayaga ka mid ahi waa faasiqiin, Diinta Islaamka uga baxay rumayn la'aantoodaas.(81)"

Wuxuu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Aayadda boqol iyo saddex iyo tobnaad ee Suuratu Huud ku yiri: **"Wa laa tarkanuu ilaa allathiina thalamuu fa tamassakumu AI Nnaaru(113).**" Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Hana u iilanina xagga kuwa thaalimiinta ah, waana gaaladee, oo aad markaas Naari idin haleeshaaye(113)."

Wuxuu kaloo Ilaahay, Cazza wa Jalla, Aayadda boqol iyo sideed iyo toban ee Suuratu Aali Cimraan ku yiri: **"Ya ayyuhaa allathiina aamanu laa tattakhithuu bidhaanatan min duunikum(118).**" Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Kuwiinna rumeeyeyow, ha ka yeelanina saaxiib kuwa adinka idinka soo hara, oo ah gaalada(118)."

Wuxuu Ilaahay Tacaalaa Aayadda sagaalaad ee Suuratu Al Mumtaxinah ku yiri: **"Innamaa yanhaakumu Allaahu cani allathiina qaataluukum fii al Ddiini wa akhrajuum min diyaarikum wa thaaharuu calaa**

ikhraajikum an tawallawhum, wa man yatawallahum fa ulaa'ika humu al th-thaaluuna(9)." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu idinka reebayaa kuwa Diinta Islaamka daraadeed idinkula dagaallamay oo dalkiinnana idinka soo saaray iyo kuwa gacan ku siiyay oo ugu gargaaray in dalkiinna la idinka soo saaro inaad gargaarayaal iyo sokeeyey ka dhigataan oo aad xiriirisaan. Kuwa kuwaas sokeeye iyo gargaarayaal ka dhigtana waa daallimiin(9)."

Inta goor oo ay gaaladu Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, heshiis nabadeed la dhigteen, kaddibna ay buriyeen oo ay soo weerareenna way badan yihiin, kutubbada ayaana laga helayaa.

Sayyid Mammad Cabdulle Xasan iyo kuwa amxaarada iyo gaalada kale keenay keenay

Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan kuwa Amxaarada iyo gaalada Soomiliyada muslinka ah usoo gelisay, oo Soomaalida waxay ku faleen ku falay, wuxuu ka yiri waxaa ka mid ahaa, gabayga **Afbakayle** la yiraahdo. Afbakayle waa meel degmada Laas Caanood afartan mayl dhinaca Galbeed ka xigta, waana goobtii ugu horreysey oo ay darawiishta iyo ingiriis dagaal hubaysan isaga hor yimaadeen saddexda bisha Maajo ee kun iyo sagaal boqol iyo kow.

Xuseenow caqligu kaama baxo (Afbakayle)

Xussenow caqligu kaama baxo, idam Ilaahaye
Ha lagu aq balo duca san baan, kuu akhriyaaye
Ifkana waaya noo joog, nimaan aaminaad tahaye

Haddaad umaaddo waan kuu hubaa, ina uduu khayre
Asaxaabihii baad u tegi, udugga weynaaye
Irdihii jannada inaad ka geli, waa ogsoonahaye

Hawl kalana waa eray yaraan, kuu erganayaaye
Alla igama qaadow adaan, kala ilaaweynee
Eedaanka maqal waa Salaad, loo addimayaaye

Ilaahii abuurayba kuwii diiday, amarkiisa
Ambiyaalihii iyo kuwii, owliyada caayay
Asxaabtii dariiqada kuwii, awlaxa u qaaday

Ikhyaarkooda nimankii kufriiga, ugu adeegaayey
Aan lagu igraahine kalgacal, ugu abraaraayey
Kuwii ubad nasaaraad noqdee, ferenji aaneystay

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
oo Aw Cabbaas diley, dadkaan eedi kala gaarin

oo uunka kala fiijiyee, kala irdheysiyyey

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
oo Mililikh aabe u yehee, u arrin qaadaayo
oo Xabashi eegi u noqdee, u ololaynaayey

Ingiriiska nimankii wadee, nagu aseebaayey
Afbakayle nimankii kufriga, uraya noo keenay
Ee Oodagooyoiyo na dhigay, aydii Daratoole

Nimankii ikhwaankii jaree, aabiga u laayey
Ragga ehelukhayrkaa warmaha, kala ajoon waayey
Oo umal daraadiis gurliga, ugu afuufaayey

Idilkoodba nimankii dagaal, iigu imanaayey
Nimankaan inkaaree madfaca, ololi ii haystay
Ee ubaxcaddaydii hartiga, oofta kaga joojay

Nimankii iniinaha ka dhigay, Ilig wixii joogay
Ee Eeraago iyo Batalo, igu uquumeeyey
Ee omoska Beerdhiga tukaha, igu ormaysiiyay

Nimankii ayaantii Gumburo, oboda ii dhiibay
Ardaashii Jidbaale i heshee, igu unuun goyse
Nimankii uluuf iyo uluuf, igu agoomeeyey

Nimankii adduunkaygii dhacay, ariyo geeliiba
Anigoo islaamaba, ii arxami waayay
Nimankaan Ilaahow lahaa, eyda iga doono

Abaalkayga nimankii ba'shee, ii istixayn waayey
Ahabtiyo ergeyntii kuwii, lagala ayn waayey
Nimankii ijaabada ka tegey, aakhiru sabanka

Nimankii iblays nagu diree, naga ajoon waayay
Nimankii arlada Eebahay, naga ugaareeyey
Nimankii awaaraha buska leh, nagu eryoonaayay

Nimankii abaartii Caleed, Bari na aadsiiyey
Argalkiyo rasaastii kuwii, nagu igbaaraayey
Ee urugadaan qabiyo ciil, igu abaadsiiyey

Nimankii ilmada iga qubee, oohin iiga keenay
Nimankaan ku alaaladay markii, uunku wada jiifay
Nimankii ajuurada cunee, iibka ii bixiyay

Nimankii intaas nagu falaan, na asaraareynin
 Waxba yey addoomada Ilaah, nooga aargudine
 Waxba yaan aduun layga siin, ilintidaydiye

Utuntayda waa heli haddaan, iilka lay dhigine
 Araraha intaan marahayey, igu arkaayaane
 Maruun baan sidii aar libaax, oodda soo jebinne

Ashtakooda'aa iyo warqado, ku andacoodaaba
 Mar haddaan shareecadu aqoon, nimanka lidoora
 Ashahaadadooiyo ma rabo, ina wallayntooda

Mar haddaan wadaad aayad diin, ila ekeynaynin
 Amaan aniga lay oran karayn, tanu ahaan mayso
 Allow yaa af lama daaliyee, iga asluubeysta.

Sayyid Maxammad Cabdille Xasan wuxuu kaloo gabayga **Dardaaran** la yiraahdo ku yiri, kaddib markii uu Ingiriis 1919 (waa kun iyo sagaal boqol iyo sagaal iyo toban) markii ugu horreysey taarikhda Afrika uu dayuurado dagaal kusoo kiciyay Xaruntii Darwaawiishta ee Taleex tiillay oo uu duqeeyey, dhulkana kasoo weeraray, Sayyid Mammad Cabdille Xasanna uu Koofur u guuray, ayuu gabaygaan tiriyay, wuxuuna yiri:

Dardaaran

Min daroofle aqal daahya weyn, dadab la heedaamay
 Dermo iyo firaash lagu gam'iyo, daalam iyo googgo'
 Aniga oo waxaan doonayaba, derajaday haysta

Iyo duni wixii nagaga lumay, dararkii Ceeldheero
 Dab wax gubi dayuurado kufrigu, nagu dul gawdiidshey
 Dumbuq subuca degalkaan ka kacay, dahab wixii yiillay

Dhakhhal jabay wixii daar burburay, ama bukaar duugmay
 Didibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifay
 Diric iyo waxay shiikh dileen, ama duq waayeela

Maxajabad daboollayd wixii, gaal u dhukhuulaayey
 Dabatoobka lidoor wuxuu, darayey caarkiisa

Lo' durdura wixii deebila geel, nala ka sii daayey
 Dullihii shareerraa wixii, daal na caga gooyey
 Dirrowgii qabsaday reerkayga, dalankicii gaaray

Dulkuneeffe kaan soo ag maro, duullaan ka hor geyska

Dan la'aan waxay nagu faleen, darab nijaaseedku

Doonyaha shammalka ah haddii, dakhalka loo laalo
Maruun baa dabaylahaa sidaa, kor u dandaanshaane
Oo doofaarradii ku jiray, daraxu caynshaaye

Dabro cudura duumo iyo furuq, waxa dadkii xaaqqay
Annagu diidi maynoo mar baa, Daayin non wacaye

Ninkiiise tiisa loo deynayaa, haygu diirsado e
Kolna haddaan cid laga deynahayn, mowdka dabaqdiisa
Ninkii haatan nagu diganayow, dan iyo xeeshaa

Dangaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiisa
Inkastoo daleel nala dhigaan, docna nagu cayman
Duuflaalladii naga harow, dan iyo xeeshinna

Doodna waxaan u leeyahay dadkeer, hadalka deyn waayey
Nimanyahow damiinnimada waa, lagu dulloobaaye
Dadku wuxuu jeclaystaa waxaan, duxi ka raacayne

Dagaalkii nasaarada anaa, daalib ku ahaayee
Dalka ma lihid anigaa ku iri, doora weynaha e
Daliilkii Rasuulkii anaa, doonayoo helaye

Anaa diiday maantuu lahaa, deeqan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan, dabaqi naareede
Aanaan labada daarood tan hore, derejo moodayne

Markay duushay gaaladu aanan, daabbaddu rarine
Goortay dareereen aanan, diiradduu qabane
Anigaan dariiqiyo waddada, dowga sii marine

Aanaan doora weynow kufriga, daacadnuu geline
Ferenjiga dirayska leh aanan, diiradduu qabane
Sida doxorka Iidoora aanan, duudxammaal noqone

Doofaarka eyga ah aanan, daarihiis geline
Anigaan dillaalkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqada Alliyoo, Diinta caasiyine

Daarood Ismaaciil ma oga, dowga loo qodiye
Waa wixii durbaan tumay markaan, dowga sii maraye
Waa wixii dayoy yiri intuu, soo dabbaaldegayee

Dadow maqal dabuubtaan ku iri, ama dan haw yeelan

Ama dhaha darooryiba jiryaye, doxorku yeelkiisa
Nin ragey dardaaran u tahaye, doqon ha moogaado

Daw lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Waa idin dagaayaa kufriga, aad u debcaysaane
Dirhankuu idiin qubahayaad, dib u go'aysaane

Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiye
Marka xigana daabaqadda yuu, idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idinku oran, duunya dhaafsada e

Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Mar haddaan dushii Adari iyo, Iimey dacal dhaafay
Maxaad igaga digataan berruu, siin la soo degiye.

Gabaygaan soo socdana, oo la yiraahdo Maqashiiya Uunka, wuxuu u dhiibay
labada nin oo la kala oran jiray Cabdalla Shixiri iyo Xirsi Afdiir, oo aqoon
dheer u lahaa afafka qalaad ee reer galbeedka, ummadaha shisheeyaha dhex
markooda iyo Diinta Islaamkaba, wuxuuna yiri:

Maqashiiya uunka

Cabdalla maan qaboobiyo, Xirsi maakib laawow
Mid yar waxaad tiraahdaan, murtadiinta reer Hagar
Habaryoonis madasheeda, mariya weedha aan iri
Toljeclaha muraadkaygiyo, masaafadayda ula taga
Maqashiiya uunkaba, miyir inuu ku soo galo
Mid mid waxow tiraahdaan, nimanka mooradii furay
Mawaacidada Diinkii, ma wax leysku maagaa?!
Jahaadka moosinkii galay, ma wax laga maqnaadaa?!
Mushaarada beenihi, ma wax lagu mannaagaa?!
Loxodkii madoobaa, ma lays moogadeeyaa?!
Muufada cadaabeed, maw adkaysanaysaan?!
Gaal nin u midiidimay, maqaan naara inuu tegi
Kutubtaa u maragee, ma wax lagu murmaa baa?!
Mushrik inaad jeclaataan, amaad mudan ku sheegtaan
Haddaydaan mujrim ahayn, masala maad u haysaan?!
Masala-gaabyadiinnaa, meel daran idiin dhigay
Muftiga waanadiisii, idinkaa ka maagtoo
Macbuudkii Rabbi ahaa, idinkaaba moogoo
Maxsharkiyo qiyaamaha, idinkaa munkirayoo
Muqfiradii Ilaahay, idinkaa ka maarmoo
Macaankii Firdowsana, idinkaa muraystoo
Muuminnimada laabtaa, idinkaa mantagayoo
Minadiinna gaalowday, idinkaa muquunshoo
Kufriga i mahoobbiyey, idinkow miciiinoo

Makaankii shareecada, idinkaa matamiyoo
 Muslinkiyo qusuusidda, idinkaa makalaayoo
 Maalkii agoomeed, idinkaa malhabayoo
 Masxafkiyo Quraankii, idinkaa maljadayoo
 Waxse mowtigiin galay , ama meleg idiin yimi
 Markaad Maxammadkiinnii, malcuun uri ka raacdeen!
 Mariyoo macneeeyaye, mid kaleeto wuxuu yahay
 Waxaan maqallay ferenjigu, inuu miiri idin qoray!
 Waxaan maqallay maalkii, inuu idinka meersaday!
 Waxaan maqallay ooryaha, mid san inaad ka weydeen!
 Waxaan maqallay madaxdiinna, in midiidin laga dhigay!
 Aan miis yar mooyee, Maydho geel la siinayn!
 Waxaan maqallay maahyahow, magaciin inuu ba'ay
 Intaasoo masiibaa, waxa igala maad badan
 Maska iyo abeesada, magta aad ka bixiseen!
 Aanad midigta fidinayn, aar hadduu ku micinayn!

Gabayyadaan waxaa kasoo qaadannay kitaabka Diiwaanka Gabayadii Sayyid
 Maxamad Cabdulle Xasan, ayna daabacday Wasaaradda Hiddaha iyo
 Tacliinta Sare ee Soomaaliya, ururuntii koowaad, uuna uruuriyey Sheekh
 Jaamac Cumar Ciise.

Dadka maanta Amxaaro la yiraahdo waa dad Carab reer Yaman ah, una
 dhashay qabiilka la yiraahdo Ximyar, taariikhda ay tirsatana waa taariikhda
 Ximyar, oo amxaaro waa Ximyar oo la is daba mariyay. Dadka Tigriinya la
 yiraahdo ayaguna waa Carab.

Khayaanidda krishtaanka ee Falasdhiin

Waxa ka socda Falasdhiin, oo ay ka mid tahay in afar ama ka badan malyuun
 oo falasdhiiniyiinna ah loogu diiday inay dalkooda dib ugu noqdaan, kuwa
 degganna looga soo saarayo si xoog ah, ama guryohooda oo lacag badan
 looga gadanayo, ujeedooyinka ay dawlada krishtaanku ka leeyihiin waxaa
 ka mid ah inayan Carabta Muslimiinta ahi tarmin iyo inay ayagu qabsadaan
 magaalada Muqaddaska ah ee Quddus, ayagoo aan dagaal toos ah u gelin oo
 aan ciidammo gayn. Waxay rabaan inay ku galaan ayagoo is huwinaya
 magaca heshiisiinta yuhuudda iyo Carabta, ama xiranba dharka Qarammada
 Midoobay. Miisaaniyadda. Waxay doonayaa inay Quddus ku galaan ayagoo
 labbisan dharka ciidammada heshiisiinta, ayagoo leh waxaan kala dhex
 geleynnaa yuhuudda iyo Carabta, oo ay sidaas ciidammadooda ku geliyaan,
 ayagoo uusan ninna uga dhiman, kaddibna ayba fara maroorsadaan. Waxay
 kaloo doonayaa inay Masjidu Al Aqsa kaniisad ka dhigaan oo ay krishto
 suraan, halkaasna, markay ku xoogeystaan, ay Makkah Al Mukarramah iyo Al
 Madiinah Al Munawwarah uga duulaan, Kacbadana ay dumiyaan, siday
 hadda ka horba isugu dayeen, ayse ku khasaareen. Madaxda Carabtuna ma
 mooga waxay dawlada krishtaanka ahi abaabulayaan, ayaguna qorshe la'aan
 ma aha, Ilaahayna, Tabaaraka wa Tacaalaa, muslimiinta ayuu la jiraa. Tan

Ilaahay ayayna noqoneysaa!

Caqiidada diinta krishtaanka ee dagaallada Bariga Dhexe

Kitaabka ay krishtaanku haystaan ee afka ingiriiska lagu yiraahdo Bible, wuu ka hadlay dagaallada lagu hoobanayo ee Bariga Dhexe, laguna laynayo Carabta Muslinka ah. Siduu uga hadlayse way ka duwan tahay sidaan annagu aaminsannahay oo Diinteenna ka mid ah.

Kitaabka la yiraahdo Yawmu Al Ghadabi (maalinta carada) waxaa daabacday Daaru Ghaaru Xiraa'u ee dalka Suuriya iyo Daaru Al Albaabi (Suuriya dibaddeeda), waxaana dhigay Safar Cabdu Al Rraxmaan Al Xawaalii, waxaana faallo ku daray Muxammad Raacii Albalhaa oo taariikh yaqaan ah. Qoraagu wuxuu bogga shan iyo labaatan ku yiri inay: "krishtaanku taariikhda adduunka labay u qaybiyeen oo kala ah: (Qaybta koowaad) (Kow) Abuuridda iyo bilowga adduunka. (Laba) Abuuridda Aadan ee jannada dhexdeeda. (Saddex) Dambiyada dadka oo sababtay dhuufaanta (Nabi Nuux). (Afar) Zamanka Tawraadda, shareecada Muuse. (Shan) Dhalashada Ciise, oo ku beegan bartamaha taariikhda. (Qaybta labaad) (Lix) Zamanka kaniisadda oo ay socoto shareecada Al Masiixu. (Toddoba) Dambiyada ayaa sababaya fitnada. (Sideed) Soo noqoshada Al Masiixu: Kunka sano ee Ciise dadkuna uu ku nool yahay janno arliga ku taalla. (Sagaal) Abuuridda Caalan cusub."

Wuxuu kaloo bogga lix iyo labaatan ku yiri: "Aragtida krishtaanka ee kunka sano iyo soo degidda Ciise (uuna kasoo qaatay David Regan: The Master Plan: Harvest House, Eugene, OR PP bogagga boqol afar iyo konton ilaa toddoba iyo konton). Siday Shuyuukhda horreeyey ee kaniisaddu u arkayeen soo degidda Ciise oo ka horreysa kunka sano:

(Kow) Kaddib marka Al Masiixu kor loo qaaday waxaa bilowday casriga kaniisadda. (Laba) Casrigaas dhammaatkiisa waxaa ahaan doona toddoba sano oo fitno ah. (Saddex) Toddobadaas sano dabadood waxaa soo degaya Al Masiixu waxaana kor loo qaadayaa wadaadada (krishtaanka) oo uga hortegaya Samada, oo ayagoo la socda ay arliga usoo wada degayaan. (Afar) Markaasaa waxaa bilaabanaysa kun sano oo barwaaqo iyo nolol fiican ah oo lagu hoos jiro xukunka Al Masiixu. (Shan) Kunkaas kaddib adduunkaan waa dhammaanayaa waxaana ahaan doonta arli cusub (oo krishtaanku waxay aamin sanyihiin in arliga la beddelay marar badan, oo arliga casriga Aadan uusan ahayn arliga casrigaan....iyo sidaaso kale)."

Aragtidaas waa sidatan: "Casriga kaniisadda waqti xadidan ma laha, waxaana ku xiga toddobada sano oo fitnada ah, waxaana ku xiga soo degidda Ciise, oo ay markaas kun sano oo cusubi bilaabnayaan."

Kitaabka Manual of Christian Doctrine (kitaabka caqiidada krishtaanka) waxaa dhigay Louis Berkhof, waxaana laga helayaa internetka (books.google.com iyo www.Bible.com). Baabka General Eschatology, The Second Coming of Christ (marka labaad ee imaatinka Ciise) wuxuu ku sheegay oo yiri: "Waxaa jira arrimo waawayn oo ka horreeya imaatinka

labaad, oo dhawr arrimood oo muhim ah waa in la arkaa intuusan rabbigu soo laaban, waxayna yihiin:

(Kow) "The calling of the Gentiles": warka suuban ee boqortooyada (waana kitaabkooda iyo boqortooyaduu Ciise kun sano madax u ahaan doono siday ayagu leeyihiin) waa in ummadohoo idil la wada gaarsiiyaa oo lagu dhex faafiyaa, sida ku xusan (Matt. 24:14) iyo (Mark 13:10) iyo (Rom. 11:25). (Laba) Yuhuuddu waa inay wada krishtaan noqdaan oo diintooda ka wada baxaan, sida ku xusan (Zech. 12:10, 13::1) iyo (Cor. 3:15, 16) iyo (Rom. 11:25-29).

(Saddex) Imaatinka Antichrist (oo la yiri inay ka wadaan Al Dajjaalu, Allaha lacnada), sida ku xusan (John 2:18) iyo (Matt. 24:24) iyo Thess. 2:3-10) iyo (John 2:22).

(Afar) Aayado iyo mucjizaat sida (b) dagaallo, abaar, dhul gariir ka wada dhaca meelo kala duwan oo ay markaas ku xigto dib u dhalashada adduunka. (t) Fitnooyin waawayn ay dadka suuban qaarkiis dhibaato ku gaarayso oo la dhibayo lana dilayo oo ay shahiidiin noqonayaan Christ (Ciise) daraadiis. (j) Imaatinka Nabiiyo been ah iyo Christs (Ciiseyaal) been ah oo dad badan baadiyayna. (kh) In Samada lagu arko calaamadu laga baqo markay awoodda Samadu gilgilato, sida ku xusan (Matt. 24:29, 30) iyo (Mark 13:24, 25) iyo (Luke 21: 25, 26)."

Wuxuu kaloo yiri: "Addunkaan tan iyo inta Aadan la buuray wuxuu jiraa lix kun oo sano oo dambi lagu noolaa. Lixdaas kun oo sano kaddibna waxaa soo deganaya Ciise oo kun sanoo kale oo nabad ah adduunka xukumaya."

Bogga internetka (true gospel.org iyo Bibletools.org) waxaa iska leh Worldwide Church of God, P.O. Box 471846 Charlotte, NC 28247-1846 U.S.A. Boggaas wuxuu Richard T. Reitenbaugh ee Ambassador College Correspondence Course Number 28 ku yiri: "khudbadiisa buurta Ciise wuxuu ardadiisa daboolka uga qaaday siday isugu xigaan arrimaha dhici doona oo adduunka u hoggaaminaya imaatinkiisa labaad. Aan bal dhaagno wuxuu ka sheegay Feast of the Trumpets (oo ah iidda buunanka) iyo dagaallada adduunka ka dhici doona oo soo socda." Wuxuu yiri: "yeerinta buunka toddobaad waxaa sheegeysa imaatinka Ciise, siduu u xusay (Revelation 11:14-15, waana Old Testament)." Faalladu ku daray wuxuuna yiri: "Jesus Christ, xaakinka cusub ee adduunka, ummadaha dagaallamayaa oo idil uma aqoonsan doonaan boqorka adduunka. Qarammada Midoobay ayagoo gaashaanbuursanaya "The Beast" oo ah "Bahalka" iyo Dawladaha Sovyeetika ee bari waxay ciidammadooda isugu keenayaan Arliga Muqaddaska ah si ay Christ ula dagallamaan. Waxayna u arkayaan inuu yahay cadawgooda ka dhexeeya waxayna uga caroonayaan inuu la wareegay xukunka dawladaha adduunka. Waxay ogyihiin inayan Ciisoo adduunka xukuma ayan gaarin danohooda adduun."

Dagaalkaan oo lagu kala baxayo, waana dagaalka The Battle of the Great Day of God Almighty, wuxuu goynayana wuxuu ku dhammaanayo xarbiga saddexaad ee adduunka iyo cidda adduunka xukumaysa." Waana dagaalka Armageddon, kana dhici doono arliga Falasdhiin.

Wuxuu kaloo yiri: "Dagaalka ugu dambeeya Dagaalka saddexaad ee Adduunka, marka la yeeriyo buunka toddobaad iyo tiiraanyada saddexaad dabadeed, Ilaahay ayaa arrimaha soo dhex gelaya si uu banii Aadanka jirrid go'id uga badbaadiyo kuu doortay daraadiis, sida ku xusan (Matt. 24:22)."

Wuxuu yiri: "Bahalku waa nin xarbiga jecel, waayihii horena waxaa lagu kala sheegay rag kala duwan oo ay ka mid ahaayeen Napoleone Bonaparte iyo Alexander The Great of Macedonia."

Wuxuu yiri: "maxay tahay calaamadda tusaysa inuu Ciise soo noqonayo? Ma buunka oo xoog loo yeeriyaybaa, sida ku xusan (Matt. 24:30-31)?"

David C. Grabbe wuxuu bogga internetka (Cgg.org) ku xusay baabka kitaabkooda ee la yiraahdo The Book of Revelation, wuxuuna yiri: "u fiirso inuu (Thessalonians 1:8) Ilaahay ku sheegay inuu ka aar goosan doono kuwa diida kitaabka Jesus Christ (Ciise). Adduunkaanu wuxuu dhammaanayaa markay kuwa maqlay warka suuban ee Ciise iyo risaaladiisa, ayadoo uu markaas qof walba adduunkaan ku kor nool yahay, ayse diideen inay tawbad keenaan ayna isu dhiibaan xukunka Ilaahay ee arligaan."

Wuxuu yiri: "Yaa ka badbaadaya weerarka ciidanka Bahalka, sida ku xusan (Rev. 9:4)?" (waana cawska dhulka, iyo wax kastoo cagaaran iyo geedba iyo dadka uusan foolkooda ku oollin calaamadda Ilaahay). Wuxuu yiri: "markuu weerarka xoogga leh ee Bahalku uu haleelo cadawgooda bariga ka xiga, kuway foolashooda ku taallo calaamadda Ilaahay waa la badbaadinayaa. Laakiin malaayiin kale oo maanta nool oo ah dhasha Tobanka Qabiil ee Qoyska, Israa'iil ayna ka mid yihiin maraykanka iyo ingiriiska iyo dawlad kale oo ku yaalla waqooyiga galbeed ee yurub, waxaa lagu qabsanayaa weerar kedis ah markaas ka hor, waxayna noqonayaan kuwo jirkooda iyo ruuxoodaba la addoonsado. Dadkaan oo ay hadda addoommada Ilaahay ka digaan adoonsiga soo socda, ma laha cid ka badbaadisa xanuunka iyo dhibaataada dagaalka adduun oo soo socda. Inay dambiyadaooda ka tawbad keenaan mooyee, oo ay sidaas ku helaan khaatamka Ruuxa Ilaahay."

Bogga internetka oo la yiraahdo (armageddononline.tripod.com/bible) wuxuu kitaabka krishtaanka ka wariyay oo yiri:

"Siday wax u dhacayaan: "sanadka laba kun iyo toddoba Al Dajjaalu wuxuu imaanayaa Macbadka yuhuudda ee Qudus wuxuuna caddaynayaa inuu isagu Ilaahay yahay. Bible-kuna wuxuu ku tilmaamay inuu yahay "abomination of desolation." In yar markaas dabadeed, dawladaha Carabtu waxay isu gaashaanbuursanayaan Israa'iil. Masar waxay hoggaaminaysaa Siiriya, Lubnaan, Ciraaq iyo Urdun. Dawlad kasta oo Israa'iil xad la leh dagaal ayay kusoo qaadaysaa. Markaasay Ruushka iyo gaashaanbuurtodo waxay la safanayaan oo la dhinac noqonayaan Carabta. Intuu dagaalku socdo Ruushka iyo Maraykaynku waxay isla dhacayaan hubka nuklearka. Dagaalka waxaa ku dhimanaya laba miliyaardi oo qof, siduu xusay (Mark 13: 14-28)."

(Daniel 11:40) wuxuu xusay: "aakhiru zamanka boqorka koofureed wuxuu la dagaallamayaa Israa'iil. Markaasuu boqorka waqooyigu kusoo weerarayaa isagoo wata gaari ay fardo jiidayaan, iyo rag fardooley ah, iyo maraakiib badan. Markaasuu boqorka waqooyigu dalal badan qabsanayaa uuna kasii gudbayaa. Dawladaha dagaalkaas ka qayb gelayana waxaa lagu xusay (Ezekiel 38:5-7), waana iiraan, ethiopia iyo Libiya."

Boqorka waqooyiga waxay waagii hore ku sheegeen inay ahayd boqortooyada roomaanka, hadase waa kee?

Wuxuu kaloo yiri: "Maajuuj waa ruushka."

Heshiis nabadeed oo ka dhaca Falasdhiin wuxuu kasoo horjeedaa caqiidada krishtaanka

Intaas aan kasoo sheegnay caqiidada krishtaanka iyo inay dhawrayaan soo degidda Ciise waxay noo caddeeyeen inay aamin san yihiin in si uu Ciise usoo dego oo uu adduunkaan boqor u noqdo inay lagama maarmaan u tahay inay dagaallo waawayn arliga Carabta ka dhacaan oo soo degiddiisa u calaamad ah. Qoraaga Yawmu Al Ghadabi wuxuu sheegay inayan dhici karin inuu heshiis nabadeed arliga Falasdhiin iyo Carabta kaleba ka dhaco, maxaa yeelay taas waxayba hor istaageysaa caqiidadooda ah inay dagaallada iyo mucjizaadka iyo calaamdaha wayni hordhac u yihiinba soo degidda Ciise, oo haddayan dhicin uusan sooba degeyn.

Maantadaan aan warkaan dhigayo, oo ah maalinta sabtida ah oo ay bisha Muxarram tahay afar ee sanadka kun afar boqol sagaal iyo laabatan Hijriga ah, una dhiganta maalinta laba iyo tobnaad ee bisha janaayo ee sanadka laba kun iyo sideed, Madaxweynaha maraykanka George Bush wuxuu ku sugan yahay dalka Kuwayt, saddexdii maalmood oo ka horreysana wuxuu joogay arliga Falasdhiin, oo wuxuu tegay Tel Aviv iyo Quddus iyo RaamaAllah ee daanta galbeed ee wabiga Urdun, halkaasoo uu kula kulmay Abuu Maazin, Madaxweynaha dalka Falasdhiin, mana uusan tegin Ghazzah. Intuu arliga Falasdhiin joogay wuxuu Madaxweyne Bush sheegay in sanadkaan laba kun iyo sideed dhexdeeda ay Falasdhiin iyo yuhuuddu kala saxiixan doonaan heshiis nabadeed, lana dhisi doono dawlad Falasdhiin.

Waxaan ka fiirsaday TV-iiga talyaaniga ee RAI News 24 Live oo internetka laga helo (www.rai.tv) oo warka afar iyo labaatanka saacadoodba laga fiirsan karo maalinta jimce ee kow iyo tobanka Jannaayo laba kun iyo sideed isagoo uu Madaxweyne Bush weli arliga Falasdhiin joogo uuna ku hadlayo nabadda dhalan doonta sanadkaan, ayadoo la waraysanayo ninka la yiraahdo Lucio Caracciolo (oo ah Agaasimaha LIMES) wuxuuna yiri: "ma jiro nin madax ah oo Falasdhiini ah oo heshiis nabadeed saxiixi kara lala galo Israa'iil, maxaa yeelay ma jiro hoggaan siyaasadeed oo Falasdhiini ah oo ka wakiil ah shacbiga Falasdhiin oo idil, ayadoo uu Abuu Maazin, (ahna Maxmuud Cabbaas, madaxweynaha dawladda Falasdhiin) oo markuu ugu bato in yar ka badan isaga laftiisa wakiil ka yahay, Ghazzahna ay ka go'antahay oo go'doon

tahay, ayna maraykanka iyo yurub ku magacaabeen Xamaas, oo halkaas u badan, inuu yahay "urur argagixiso" (Xamaasna waxaa soo doortay shacbiga Falasdhiin oo markaas laga dhex magacaabay Wasiirka Koowaad Ismaaciil Hani'ah, oo ay dawladda krishtaanku aqoonsan waayeen, ayna saareen xisaar dhaqaale oo maanta ku sugan gaajo, biyo la'aan, koronto la'aan, daawo la'aan iyo dar xumo inta Ghazzah deggan)."

Waxaan Danjirayaalka Carabta hore uga maqlay ayadoo qoranna aan arkay inuu Xamaas yahay urur ay abuurtay CIA ee dawladda maraykanka, si ay dhaqdhaqaaqa falasdhiin u wiiqdo oo kala dhanbasho. Hadduu warkaasu run yahay maraykanku way ka gaareen dantay u abuureen ururkaas oo ahaa kala dhanbalidda xoogga iyo dhulka Falasdhiin, oo maanta waxaa jirta dawlad falasdhiin ah oo ka dhisan daanta galbeed oo ay dawladda krishtaanku aqoonsan yihiin, iyo dawlad falasdhiin oo ka dhisan Ghazzah oo uu madax u yahay Ismaaciil Hani'ah ee Xamaas oo ayan aqoonsanayn.

Madaxweyne Bush markuu warkaas kor ku sheegan ku dhawaaqayay wuxuu yiri inay dawladda falasdhiin ka dhalanaysa ayan noqonayn sida "Swiss cheese", ama jubnada dalka switzerland oo daldaloosha. Daanta Galbeed iyo Ghazzah Israa'iil ayaa u dhexeysa, ayna ka kala jiraan galbeed iyo bari. Sida keli ah oo lagu xiriirin karo waa ayadoo dhulka Israa'iil waqooyi iyo koofur loo kala gooyaa oo ay Falasdhiin u dhexeysaa!!! Ma dhici kartaa??!!

Krishtaanku muslinka iyo yuhuudda toona Qudus uma oggola

Magaalada Quddus ama Baytu Al Maqdis ee arliga Falasdhiin ku yaalla waa Xaramka saddexaad ee muslimiinta oo ah Masjidu Al Aqsaa oo ku xusan Aayadda koowaad ee Suuratu Al Israa'i, masjidkaasoo Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, laga dheelmiyay habeenka Laylatu Al Micraaji, Makkah Al Mukarramah iyo Madiinah Al Munawwarah dabadood. Salaad fardi ah oo Masjidu Al Aqsaa lagu tukado waxay u dhigantaa shan boqol oo salaadood oo meel kale lagu tukaday, waana masjidka saddexaad oo ay bannaan tahay in loo safro si loogu tukado, labada kalena waa Masjidka Xaramka Makkah iyo Masjidka Xaramka Nabiga, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, ee Al Madiinah Al Munawwarah.

Sidaan kor ugu soo aragnay caqiidada krishtaanku ay aaminsan yihiin waxaa ka mid ah inuu Ciise markuu Samada kasoo degto uu kun sano adduunkaan boqor u ahaanayo oo xukumayo. Waxaa caasimad u ah ayay leeyihiin kunkaas sano magaalada Qudus ee Barakaysan, sida ku xusan (Revelation 3:12, 21:2, 10) oo uu John yiri "inuu saddex goor tilmaamay "Magaalada Quddus" oo Samada kasoo degnaysa. Qudusta cusub oo la daahiriya waxaa la dejinayaa arli cusub oo daahir ah, halkaas ayuuna Ilaahay laftiisu la degayaa oo kula noolaanayaa dadka."

Bogga (trugospel.org) wuxuu yiri isagoo ka hadlaya (Revelation 19:18-20): "iidda Ilaahay ee buunka loo yeerinayo markaan waa dagaalka adduunka lagu kala baxayo iyo dhisidda Boqortooyada Ilaahay ee arligaan korkiisa. Markuu Ilaahay dagaalka soo dhex galo, wuxuuna soo dhex gelayaa intuu facaani jiro, addoommadiisa u hoggaansan way ku farxayaan imaatinka labaad ee Ciise,

waxayna garanayaan waxa socda ee umuuraha adduunkaan maxaa yeelay ayagu waxay ku dhegganaayeen iidda buunka -Maalinta Qaddisan ee Qorshaha Wayn ee Ilaahay (the Holy Day in God's Master Plan) ee badbaadinta oo ku imaanaysa soo laabashada Ciise ee arligaan si uu dalalka iyo umadaha oo idil uga xukumo Qudus."

Marka macquul ma aha inay dawlada krishtaanku Qudus oo ay caqiidadooda ka mid tahay inay caasimaddooda ahaan doonto uu Ciise adduunkaan kun sano oo ka dambeysa soo degiddiisa ka xukumi doono ay hadda muslimiinta gacanta u geliyaan. Sidoo kalena yuhuud gacanta u gelin mayaan, ayagoo aaminsan inay yuhuuduna diinta krishtaanka wada geli doonaan oo ay Qudus sidaas gacantooda u geleysa.

Taas ayaana u sabab ahayd inay Yaasir Carafaat iyo Wasiirka Koowaad ee yuhuudda Rabin ku heshiin waayeen Camp David ee dalkaan maraykanka markuu madaxweyne Clinton wada marti qaaday. Yaasir Carafaat wuxuu yiri: "waxaa la rabaa inaan saxiixo inay Qudus tahay caasimadda yuhuudda oo ayan Falasdhiin ka mid ahayn. Haddaan yeelana shacbigaygaaba i dilaya, uuna ugu horreeyo midka i ilaalinaya." Sidaasuu TV-ga marakaynka ka yiri anigoo fiirsanaya oo maqlaya! Saddexda maalmood oo aan hadda soo dhaafnayna, uuna Madaxweyne Bush Falasdhiin joogay wuxuu ku hadlay isla erayada uu Clinton waagaas ku hadlay oo ahaa "waxaa hor yaalla Cabbaas iyo Olmert oo ay tahay inay gaaraan go'aan qaadashadiisu adagtahay! ("hard decisions" ama "difficult decisions")." Mana jiro nin Muslim ah, gaar ahaan Carab Falasdhiin ah oo taas saxiixi kara, maxaa yeelay isagu Quddus ma laha oo waxay ka dhexeysa muslinka oo idil, waxayna u dhigantaa ilaa heer ayadoo krishtaanka Makkah iyo Al Madiinah loo saxiixay si ay caasimad uga dhigtaan. Keebaa taas saxiixi kara?

Waxaa intaas ka duwanba waa been iyo waqti lumis.

Diinta Krishtaanka

Diinta Krishtaanka la yiraahdo waxaa hindisay Iblis iyo nin yuhuudi ah oo la oran jiray Shawl, kaddibna la bixi doona Paul, kuna dhashay magaalada arliga Falasdhiin ku taalla oo la yiraahdo Dharsuus, oo aan Nabi Ciise aragba. Wuxuu ahaa nin xaasid ah, Nabi Ciisena ku xasday Nabinnimada, dadka muslimiinta ah oo Nabiga rumeeyana Roomaanka ku dacweyn jiray si loo dilo ama loo xabbiso. Shawl haweenka uma tegi jirin, oo sidaas ayuu ragga raacay kula dardaarmay inayan guursan, halkaas ayayna ka bilaabatay inayan wadaadada krishtaanka qaarkood, waana kuwa katoolikada ah, guursan. Muslimiinta Ciise raacsanaa, waxay kow iyo sideetan sano Sama u qaadidda Ciise kaddib ku taagnaayeen Diinta Islaamka, ayna Qiblada xaggeeda u tukanayaan bisha Ramadaanna ay soomayeen. Kaddibna waxaa ayaga iyo yuhuudda dhexmaray dagaallo. Yuhuudana waxaa ku jiray nin geesi ah, lana yiraahdo Buuluus, oo asxaabta Nabi Ciise rag badan ka dilay, kaddibna uu yuhuudda ku yiri: "Hadduu Xaqqu Ciise la jiro, annagu waan ku gaalownay, Naarta ayaanna geleyntaa, ayagana waan baadiyeynayaa si ay Naarta ku galaan." Markaas ayuu faras uu lahaa oo la oran jiray Al Cuqaab, intuu

faylaha gooyey, oo uu madaxa ciid isaga shubay, ayuu iska dhigay nin shallaayey, si uu kalsoonida Muslimiinta ku kasbo. Waana qiso dheer oo aan qaybtaan dambe kasoo qaadannay Tafsiirka Al Imaamu Al Baghawii, markuu sharxayo Aayadda soddonaad ee Suuratu Tawbah. Runtana Rabbi ayaa og.

Ninkaas Paul la yiraahdo ayaa diinta krishtaanka aasaasay iyo kaniisaddeedaba. Kaddib markuu sanadka miilaadigu ahaa saddex boqol shan iyo labaatan ayaa waxaa magaalada Nicea (waana xarafka c oo ku xiga a iyo b ee ma aha cayn soomaali) kukulmay saddex boqol oo wadaadada madaxda kaniisadaha krishtaanka ah iyo boqorka Roma ee magaciisu ahaa Constantine, waxayna dejiyeen oo ay ku heshiyeen oo ay dhaliyeen caqiidada diinta krishtaanka ee oranaysa inay saddex ilaah jiraan, oo kala ah ilaaha aabaha ah iyo ilaaha wiilkiisa ah iyo ilaaha ruuxu al quduska ah. Waxaa saddex ilaah ku sheeg ayaguna caabudi jiray masaaridii hore waxayna kala ahaayeen: (Kow) Osiris oo ay ku magacaabeen ilaaha aabaha ah iyo (Laba) Isis oo ay yiraahdeen waa ilaaha hooyada ah iyo (Saddex) Xuuris oo ay yiraahdeen waa ilaaha ah wiilka ilaahay oo ay labadaasu dhaleen. Waxaa ayaguna saddex ilaah caabudi jiray reer Baabil, sidaan kusoo aragnay markaan qisada Nabi Ibraahiim kasoo warrannay. Paul intuu Al Iskandariyyah yimid ee arliga Masar ayuu caqiidadaas kasoo qaatay. Wuxuu majuusta dabka caabudda ee iiraan ka soo qaatay caqiidada ilaah inta dhinta saddex maalmood kaddib soo noolaanaya, oo waaba ayada krishtaanku yiraahdaan in Ciise ina Maryama marka la dilay oo uu dhintay saddex maalmood kaddib uu hadana soo noolaaday, tanoo ah ubad dhexaadka caqiidadooda iyo ciiddooda ugu waynba oo la yiraahdo Resurrection (dib usoo noolaashaha) iyo Eastern ama Pasqua. Waxay kaloo majuusta kasoo qaateen khamrada marka la cabbo oo uu wadaadkoodu siiyo ahna qayb ka mid ah diinta krishtaanka, ay yiraahdaan waxay noqoneysaa dhiigga Ciise, iyo rootiga markuu intuu wadaadkoodu siiyo ay cunaan ay yiraahdaan wuxuu noqonayaa hilibka Ciise, labadaan damboo la isku yiraahdo comunione ama comunione. Marka diinta krishtaanku ma ah diin Samada Ilaahay kasoo dejiyay ee waa khuraafaat laga soo uruuriyay dalalka asnaamta laga caabudi jiray oo uu isku keenay ninkaas yuhuudiga ah ee la yiraahdo Paul si uu dadka u baadiyeeyo. Paul wuxuu tegay Roma halkaaso lagu xabbisay, sababtuna ay tahay oinay roomaanku boqorkooda ilaah ahaan u caabudi jireen, isaguna uu halkaas geeyey ilaah boqorka la tartama. Intuu xabbiska ku jiray waraaquhu dalalkuu soo maray u dhigi jray dadka iska barten waxay ka mid yihiin maanta kitaabkay krishtaanku haystaan oo la yiraahdo Bible ama Bibbia, waxaana la yiraahdaa baabkay ku jiraan Waraqaha ama The epistles ama the Letters.

Kitaabka krishtaanka

Waxaa Imaam Ibn Kathiir uu Kitaabkiisa Qisasu Al Anbiyaa'i noogu warinayaa inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Unzilati Al Ttawraatu calaa Muusaa fii sitti layaalin khalawna min**

shahri Ramadaana. Wa Nazala Al Zzabuuru calaa Daa'uuda fii ithnatay casharata laylatin khalat min shahri Ramadaana, wa thaalika bacda Al Tawraati bi arbaca mi'atin sanatn wa ithnayni wa thamaaniina sanatn. Wa unzila Al Injiilu calaa Ciisaa ibnu Maryama fii thamaaniya casharatin khalat min shahri Ramadaana, bacda Al Zzabuuri bi alfi caamin wa khamsiina caaman. Wa unzila Al Furqaanu calaa Muxammadin, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallama, fii arbaci wa cishriina min shahri Ramadaana. "Xadiith Macnihiisu waxaa weeye: "Tawraadda waxaa Nabi Muuse lagu soo dejiyay markay lix iyo labataan habeen ka gudbeen bisha Ramadaan; Kitaabka Zabuur waxaa lagu soo dejiyay Nabi Daa'uud markay bisha Ramadaan labo iyo toban habeen ka gudbeen, afar boqol iyo labo iyo sideetan sano Tawraad ka bacdi; Nabi Ciisana waxaa Injiilka lagu soo dejiyay markay sideed iyo toban habeen ka gudbeen bisha Ramadaan, kun iyo konton sano soo dejinta Zabuur ka bacdi. Quraankana waxaa lagu soo dejiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhim wa Sallam, afar iyo labaatanka bisha Ramadaan"

Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda boqol iyo toban ee Suuratu Al Maa'idah noogu sheegay inuu Nabi Ciise Kitaabka injiil baray, kaddib markii uu ku soo dejiyay, wuxuuna yiri: "**Wa ith callamtuka Al Kitaaba wa al xikmata wa Al Tawraata wa Al Injiila**(110)." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Iyo markaan ku baray Kitaabka iyo Xigmada iyo Tawreedda iyo Injiilka(110)." Injiilkii Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Nabigiise Ciise ina Maryama ku soo dejiyay, namuunad lagama hayo, mana ah kitaabka la yiraahdo Bible ee dadka krishtaanka ah ay haystaan. Kitaabkaas waxaa ka haray, inta la hubo, inta Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Quraanka noogu sheegay inuu Kitaabkaas ku qornaa. Sababta ayan namuunad uga harin waxaa weeye in culummadii yuhuudda iyo krishtaanku xukunkii ku dhignaa Injiilka oo ayan ku dhaqankiisa dooneyn, way beddeli jireen, ayagoo eraygaasba kitaabka ka tirtiraya, ama intay tirtiraan mid ay doonayaan ku beddelah, ama si ujeedadii loo soo dejiyay mid ka duwan ku fasirah. Kitaabka Bible-ka waxaa dhigay dad magacdoodu boggiisa koowaad ku dhiganyihiin. Inay sidaas tahay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ayaa Aayado badan oo Quraanka ka mid ah noogu sheegay, ayna ka mid tahay Aayadda kow iyo afartan ee Suuratu Al Maa'idah, oo tiri: "**Yuxarrifuuna Al Kalima min bacdi mawaadicihi**(41)." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxayna ka leexiyaan Kalimooyinka meelaheeda (dhabta ah)(41)."

Lifaaqa saddexaad ee ku qoran bogga saddex boqol saddex iyo soddon ee Kitaabka The Holy Qur-'an ee lagu daabacay Boqortooyada Sucuudiga ahna macnaha Quraanka oo afka ingiriiska lagu tarjumay, waxaan ka akhrynaynaa: "inuusan Bible-ka hadda ay krishtaanku kitaab ahaan u haystaan uusan ahayn Injiilkii Nabi Ciise lagu soo dejiyay. Kitaabkaan ay hadda haystaan, oo la kala yiraahdo Cahdiga Jadiidka ah (New Testament) iyo Cahdiga Qadiimka ah (Old Testament) midkoodna Ijiilkii ma aha. Cahdiga Jadiidka ah wuxuu ka kooban yahay afar qaybood oo ay kala qoreen afar nin, mid walbana uu qoray hadallo uu ka warinayo Nabi Ciise. Goortey dhigeen lama yaqaan, waxaa uun la helay markay ka soo wareegatay qiyaas laba boqol oo sano marka Nabi

Ciise samada loo qaaday. Afartaas nin waxaa la kala oran jiray Mathew, Mark, Luke iyo John. Waxaa afartaas qaybood raaca, oo uu cahdiga Jadiidka ahi ka kooban yahay waraako, loo maleynayo inuu dhigay Luke, kuna saabsab hormarka kaniisadda, kow iyo labatan warqadood oo uu dhigay St.Paul kaniisado iyo dad kala duwan iyo qayb loo maleynayo inuu dhigay St. John, lana yiraahdo Kitaabkii Waxyiga."

Nabi Ciise, sida Anbiyadii Nabi Muuse ka dambaysay ee reer Bani Israa'iil oo idil, wuxuu ku taagnaa Shareecada Kitaabka Tawraadda. Kitaabka Injiil wuxuu ka koobnaa inta badan wachti iyo waano, iyo in yar oo sharciyo wax looga beddelay middi adkayd ee reer Bani Israa'iil. Tusaale ahaan: Shareecada reer Bani Israa'iil qofkii qof dilah xukunkiisu wuxuu ahaa qisaas oo ah in loo dilo, diyana lagama oggolayn. Shareecada Nabi Ciise qofkii qof dila, qisaas ma lahayn oo waxaa laga qaadayay diyo. Taas ayaa u sabab ah in dad badan oo krishtaan ah ay xukunka qisaasta uga soo horjeedaan. Shareecada Islaamka, oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu soo dejiyay, dadka waa loogu naxariistay, oo waxaa la kala doorsiiyay qisaas, diyo qaadashadeed iyo cafin buuxda, oo labada laga cafiyo.

Kasoo degidda Samada ee Nabi Ciise Calayhissalaamu

Adduunkaan dhammaatkiisa, ka hor intaan la gaddin, oo uusan qiyaamuhu dhicin, Nabi Ciise, Calayhissalaamu, Samada ayuu ka soo deganayaa, adduunkaan ayuu hawl ka qabanayaa, kaddibna waa dhimanayaa. Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda boqol sagaal iyo kontan ee Suuratu Al Nisaa'i noogu sheegay, inuu Ciise soo degan doono, markaas ay dadkoo idil Nabinnimadiisa rumayn doonan, wuxuuna yiri: **"Wa in min ahli Al Kitaabi illaa la yu'minanna bihi qabla mawtihi wa Yawma Al Qiyaamati yakuunu calayhim shahiidan(159)."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ehelu Kitaab kasta wuu rumayn Ciise, geeridiisa ka hor, Maalinta Qiyaamane wuxuu ku noqon korkooda Markhaati(159)." Nabi Ciise, Calayhissalaamu, wuxuu ku soo degayaa minaaradda bari oo cad ee Masjidka maanta la yiraahdo Al Masjid Al Amawii, ee ku yaal magaalada Dimishiq, caasimadda dalka Suuriya. Miinaaraddas waxaa magaceeda maanta la yiraahdaa "Minaaraddii Ciise". Minaaraddu waa meesha korreysa oo uu istaago qofga aathaamaya, oo Salaadda dad ugu yeeraya.

Wuxuu ibnu Kathiir Kitaabkiisa Al Nihaayatu fi al Fitani wal Malaaximi, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay, waana Xadiithka Al Nuwaasu bin Simcaan, inuu yiri: **"ith bacatha Allaahu Al Masiixa ibna Maryama, fa yanzilu cinda al minaarati al baydaa'i sharqiyyi Dimashqa fii mahruuthatayni, waadican kaffayhi calaa ajnixati Malakayni, ithaa dha'adha'a ra'sahu qadhara, wa ithaa rafacahu taxaddara minhu jummaanun ka al lu'lu'i, wa laa yaxillu li kaafirin yajidu riixa nafsii illaa maata, wa nafasuhu yantahii xaythu yantahii dharfuhu."** Xadiithkaan oo uu wariyay Imaam Muslim, kuna wariyay Kitaabu al fitani, baabka thikru al dajjaali, ahna Xadiithka toddoba kun iyo labo boqol iyo sagaal iyo

sagaashanka, macnihiisu waxaa weeye: "Wuxuu ku soo degi doonaa minaaradda cad ee Bariga xigtah ee Dimishiq isagoo xiran labo maro oo lagu guduudiyay dhiinka dhirta la yiraahdo waras, gacnihiisuna ku tiirsanyihiin garbaha laba Malag, oo markuu madaxiisa foorariyo biyo ayaa ka tifqaya, hadduu kor u qaadana biyuhu ka da'ayaan sida xabbado luul ah. Gaal kasta oo ay carafta neeftiisu gaartana waa dhimanayaa, neeftiisuna waxay gaartaa meesha araggiisu gaaro." Wuxuu Ciise, Calayhissalaamu, Masaajidkaas kusoo deganayaa ayadoo Iqaamada Salaadda lagu dhawaaqay, markaas ayaa waxaa lagu leeyahay: "Imaamkii muslimiintow, Ruuxii Ilaahayow, hormar." (oo imaam noqo oo dadka Salaadda tuji). Markaas ayuu wuxuu Ciise imaamka masjidka ku leeyahay: "Adigu hormar, maxaa yeelay adigaa Salaadda lagu aqiimay".

Waxaa xusid mudan in Minaaraddaas lagu dhisay lacag laga qaaday krishtaankii degganaa magaaladdas Dimishiq, kaddib markay minaaraddi ka horreysey ay gubeen, ayagoo dab qabadsiiyay. Minaaradda cusub waxaa laga dhisay dhagax cad, markuu sanadka Hijradu ahaa toddoba boqol kow iyo afartan. Markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, asxaabtiisa, iyo annagaba, noo sheegayo inuu Ciise ku soo degan doono minaaradda cad ee Masjidka Dimishiq ku yaal, masjidkaasba ma jiro oo lamaba dhisin, islaamkuna maba gaarin Shaam, oo ka tirsanayd boqortooyada Rooma. Nabi Ciise, Calayhissalaam, markuu soo dego ilaa uu ka dhinto, isagaa Imaam u ahaanaya, oo tujinaya Ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ciise markuu soo degao wuxuu jejebinayaa krishtada, wuxuu dilayaa doofaarka. Markaas uu soo degto, Ciise Nabi ma aha ee waa nin muslin ah oo ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ka tirsan, oo shareecadiisana raacsan, oo waaba isaga Imaamka Masjidkaas gadaashiisa ku tukanaya, oo imaam loo yahay, Nabina nin caadi ah imaam uma noqdo. Tan kalena, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla, isagaa ah midka Anbiyada iyo Rusushaba lagu gunaanaday, oo Nabi kale kamaba dambeeyo. Markaas kaddib ayaa adduunkaan dhammaanayaa.

Waxaa Muslim Cabdu Allaahi bin Camr ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Yakhruju al Dajjaalu fii ummatii fa yamkuthu arbaciina yawman aw arbaciina shahran aw arbaciina caaman. Fa yabcathu Allaahu Ciisaa bin Maryama, ka annahu Curwatu binu Mascuudin. Fa yadhlubuhu fa yuhlikuhu. Thummaa yamkuthu al nnaasu sabca siniina laysa bayna ithnayni cadaawatun. Thumma yursilu riixan baaridatan min qibali al Sh-shaami, fa laa yabqaa calaa wajhi al ardi axadun fii qalbihi mithqaalu tharratin min khayrin aw iimaanin illaa qabadathu, xattaa law anna axadakum dakhala fii kabadi jabalin la dakhalathu calayhi xattaa taqbidahu."** Qaala: samicnaa min Rasuuli Allaahi, Sallallaahu Calayhi Wasallama qaala: **"Fa yabqaa shiraaru al nnaasi fii khiffafi al dhayri wa axlaami al sibaaci, laa yacrifuuna macruufan wa laa yunkiruuna munkaran. Fa yamath-thaluhum al shaydhaanu fa yaquulu: "Alaa tastaxyuuna?" Fa yaquuluuna: "Famaa ta'murunaa?" Fa ya'muruhum bi cibaadati al awthaani, wa hum fii thaalika daarrun**

rizquhum, xasanun cayshuhum. Thumma yunfakhu fii Al Ssuuri, falaa yabqaa axadun illaa asghaa liitan wa rafaca liitan." Qaala: "Wa awwalu man yasmacahu rajulun yaluudhu xawda ibilihi." Qaala: "Fa yuscaqu, wa yuscaqu al nnaasu. Thumma yursilu Allaahu" -aw qaala- " yunzilu Allaahu madharan ka annahu al dhallu aw al thillu" - Nucmaanu al shaakku- "Fa yanbatu minhu ajsaadu al nnaasi. Thumma yunfakhu fiihi marratan ukhraa, fa ithaa hum qiyaamun yanthuruuna. Thumma yuqaalu: "Yaa ayyuhaa al nnaasu halummu ilaa Rabbikum "Wa qifuuhum innahum mas'uuluuna". Thumma yuqaalu: "akhrijuu mina Al Nnaari . " Fa yuqaalu: "Min kam?" Fa yuqaalu: "Min kulli alfin tiscuma'atin wa tiscun wa tiscuuna." Qaala: "Wa thaalika yawmu "Yajcalu al wildanu shiiban", wa "Yawma yukshafo can saaqin". Xadiithkaan oo ah midka toddoba kun iyo saddex boqol iyo toddoba ee saxiix Muslim, macnihiisu waxaa weeye: "Waxaa soo bixi doona Dajaalka, kaasoo Ummaddeyda ku dhex jiri doona afartan (maalmood, ama afartan bilood, ama afartan sano). Markaas ayaa Ilaahay Ciise ina Maryama soo dirayaa, isagoo aad mooddo (oo u eg) Curwah bin Mascuud. Markaas ayuu inta raadiyo dilayaa. Markaas kaddib dadku waxay ahaanayaan toddoba sano ayadoo aan laba ka mid ahna colaadi dhex marin. Markaas ayaa Ilaahay wuxuu soo dirayaa dabayl qabaw oo xagga Shaam ka timid. Markaas ayuusan adduunka korkiisa ku harayn qof uurkiisa dhibic khayr ah ama iimaan ah ku jirtoh, oo dabayshaas ayaa dilaysa, oo haddii uu midkiin galo buur uurkeeda, way uga soo dab a geleysaa oo ay nafta ka qabaneynsaa". Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo oranaya: "Waxaa markaas soo haraya dadka intiisa xumayd, oo leh fudaydkii shimbiraha iyo sabir darrada iyo turid la'aanta dugaagga, samaantana aan aqoonsanayn, xumaantana aan diidayn. Markaas ayaa shaydhaan taliye u noqonayaa, wuxuuna ku leeyahay: "Miyeydaan xishooneyn?" Markaas ayay leeyihiin: "Maxaad na fareysaa?" Markaas ayuu farayaa inay asnaam caabudaan, ayagoo inta waxaas socdaan oo idil rizqigu waasac u yahay, nolol fiicanna ku nool. Markaas ayaa buunka la afuufayaa. Markaas ayaa la wada dhimanayaa. Cid maqasha (buunka) waxaa ugu horreeya nin dhoobo ka dhisanaya darka (barkad) uu geeliisa ka waraabin lahaa. Markaas ayuu dhimanayaa oo dadka kalena ay dhimanayaan. Markaas ayaa Ilaahay soo dejinayaa roob ama shux (waa roob khafiif ah sida xagaayada oo kale), ama sida harka oo kale ah (halkaas wariyaha Xadiithka ayaa shakiyay midkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, roobkaas ku tilmnaamay). Roobkaas ayaa waxaa ku soo dhalanaya dadka jirkooda (waa dadka dhintay oo idil). Markaas ayaa buunka mar kale la afuufayaa. Markaas ayaa dadku soo wada istaagayaa oo ay wax fiirinayaan. Markaas ayaa waxaa la leeyahay: "Dadow, soo baxa, Rabbigeen ayaan aadeynnaa. "Wa qifuuhum innahum mas'uuluuna" (oo ah Aayadda afar iyo labaatanaad ee Suuratu Al Saafaat) macneheeduna yahay: "Joojiyana, waxbaa la weydiine", iyo "Yawma yukshafo can saaqin", oo ah Aayadda labo iyo afartanaad ee Suuratu Al Qalami, macneheeduna uu yahay: "Maalinta dhudhunka la faydi doono".

Guursashada, dhalidda, dhimashada iyo qabriga Nabi Ciise Calayhissalaamu

Nabi Ciise, Calayhissalaamu, markuu samada kasoo degto wuxuu guursanayaa haweeney u dhalatay qabiilka Carbeed ee la yiraahdo Juthaam (waa tha dhibic kor ku leh oo cayn ka horreysa), caruurna wuu dhalayaa. Kaddib wuu dhimanayaa, waxaan lagu duugayaa, siduu Imaam Al Nawawii Tahthiibu Al Asmaa'i wa al lughaati ugu wariyay, iyo ghayrkiisba, qolka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Al Madiinah Al Munawwarah. Labada caalin oo sharxay kitaabka fiqiga ee Al Imaamu Al Ghazaalii ee cinwaankiisu yahay Al Wajiizu fii fiqhi Al Imaami Al Sh-shaaficii ayna daabacday Shirkatu Daar Al Arqam bin Abii Al Arqam ee Bayruut dalka Lubnaan, wuxuu mujalladka labaad Kitaabka Nikaaxa bogga shanaad ku yiraahdeen: "waxaa dhab ahaan la yiri inay sababtuu Ciise Calayhissalaamu u guursan waayey ay ahayd fasaadka ku dhacay haweenka reer Bani Israa'iil ee zamankiisa, oo uu markaas ka dhex heli waayay haweeney suuban oo la noolaanshihiisa u qalanta, ayadoo Ciise la so diray waqti uu reer Bani Israa'iil burbur ku dhacay."

Diinta islaamka: intuu Ciise noolaanayo soo degidda kaddib

Al Bayhaqii wuxuu kitaabka Al Bacthu wa Al Nushuuru ku wariyay Xadiithkaan, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Inna Ciisaa yamkuthu fii al ardi arbaciina sanatan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ciise wuxuu arliga joogayaa afartan sano." Waxaa jira Axaadiith badan, oo dariiqyo kala duwan lagu wariyay, uuna Xadiithkaani ka mid yahay, uuna wariyay Abuu Daa'uud, inuu Ciise afartan sano arligaan joogayo. Waxaa Axaadiithtaas ka mid ah midkuu Al Dhabraanii Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Yanzilu Ciisaa ibnu Maryama fa yamkuthu fii al naasi arbaciina sanatan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Wuu soo degayaa Ciise ina Maryama, markaasuu wuxuu dadka dhex joogayaa afartan sano." Wuxuu Axmad kitaabka Al Zuhdu Abuu Hurayrah uga wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: "Yalbathu Ciisaa ibnu Maryama fii al ardi arbaciina sanatin, law yaquulu lil Badhxaa'i sili casalan la saat." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Wuxuu Ciise ina Maryama arliga joogayaa afartan sano, oo hadduu ku yiraahdo Al Badhxaa'a (00 ah waadiga Makkah Al Mukarramah) malab socda keen (meeshay waadiyadu markuu roob da'o ay biyo ka keenaan) uu keeni lahaa." Wuxuu kaloo Axmad Musnadkiisa Caa'ishah uga wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Xadiithka Dajjaalka ku yiri: "Fa yanzilu Ciisaa ibnu Maryama fa yaqtuluhu. Thumma yamkuthu Ciisaa fii al ardi arbaciina sanatan, imaaman cadlan wa xakaman muqsidhan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markaasaa waxaa soo degaya Ciise ina Maryama, markaasuu dilayaa (Dajjaalka, wuxuuna ku dilayaa albaabka magaalada ku taalla Falasdiin ee la yiraahdo Ludd). Kaddib

wuxuu Ciise arliga dhexdiisa ku nagaanayaa afartan sano, isagoo ah imaam caadil ah iyo xaakim garsoore ah."

kharaabidda hubka, is gaarsiinta, teknikada iyo qalabka zamankaan

Zamankaas uu Ciise Samada kasoo degayo oo uu Dajjaalka dilayo, sida Axaadiithta aan soo aragnay iyo kuwa kaloo badanba na tusayaan, waxay wada tilmaamayaan inuu hubka zamankaan aan joogno, sida qoriga ama buntukha, bastooladda, madfaca, gantaallada, tankiyada, bambooyinka caadiga ah iyo kuwa atoomikadaba, dayuuradaha wax duqeeya, maraakiibta dagaalka iyo wixii la mid ahba, uu faadayo oo uu wada kharaabay. Taas ayaana u sabab ah inay ciidammada zamankaas, sidaan Axaadiithta kusoo aragna, ay seefo ku dagaalayaan, Ciisena uu Daijaalka waran ku dilayo, uu isha u fiyow ka gelinayo .. Runtana Rabbi ayaa og. Tawfiiqdana Allaha na waafajiyo. Sidoo kale, waxaa isaguna kharaabaya oo aan la adeegsan doonin gaadiidka zamankaan, sidaa baabuurta, dayuuradaha, treennada, iyo waxa la midka ahba, ayadoo ay Axaadiithtaas saxiixeynka ku sugan ay sheegayaan in waagaas gaadiid ahaan fardo iyo daabbado kale oo xoolo ah la fuuli doono. Sidoo kale waxaa u kharaabaya oo aan la isticmaali doonin qalabka is gaarsiinta, sida taleefoonka, taarka, fax, radiyo, televisioonka kompiuutar iyo wixii la mid ahba, oo sidaan son aragnay markuu shaydhaan kala dhex qeyliyay ayagoo Istanbul jooga inuu Daijaalku caruurtooda u daba maray, taasoonaa been ah, taleefoon uma ay an son dirin Al Madiinah Al Munawwarah, ee intay fardhooda fuuleen ayay xaggeeda usoo kicitimeen. Sidaas ayuu kitaabka Ciise ina Maryama ku dhammaaday wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina, wa Sallaa Allaahu calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin wa calaa Aalihi wa saxbihi ajmaciina wa man tabicahum bi ixsaanin ilaa Yawmi Al Diini wa sallim tasliiman kathiiran. Al Qasdhaalani wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Ciisana kusoo degay toban goor."

Dagaalka Ciraaq

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dagaalka Ciraaq wuu ka hadlay, oo Axaadiith badan ayaa kusoo aroortay, ayna wariyeen Al Bukhaarii iyo Muslim. Waxaan halkaan kusoo qaadanaynaa laba Xadiith. Xadiithka Muslim waxaa wariyey Ubayyah bin Kacb, oo yiri: "Cabdu Allaahi bin Al Xaarith bin Nawfal wuxuu yiri: "Waxaan la taagnaa Ubayya bin Kacb, markaasuu wuxuu yiri: "Madaxdu way isku khilaafayaan siday adduun ku heli lahaayeen (waana siday Madaxweynaha fransiiska Chirac iyo Madaxweynaha ruushka Putin iyo Wasiirka koowaad ee jarmanka Shroeder iyo midka Kanada ugu khilaafeen Madaxweynaha mareykanka George W. Bush iyo wasiirka koowaad ee ingiriiska John Blair sida batroolka Ciraaq gacanta loogu dhigi lahaa, ayna u diideen inay ciidammo qalab sida oo dagaalkaas ka qayb gala Ciraaq u diraan. Ingiriisku waa asalka aabaha dhalay maraykanka intiisa

xukunka iyo maalka leh qaarkood, oo kuwaas faracooda ah. Markaasaa faracii iyo dhashii ka fara badatay oo ka xoog badatay asalkii, markaasey khaadimiin u noqdeen iyo la taliyayaal, marna ku adeegtaan markay cudud u baahdaan. Sagaashanka bilwgiisa intaan Vienna, caasimadda Austria, Jaamacadda Dawladaha Carabta Danjiraheeda Qaramada Midoobay uga ahaa waxaan ka akhriya wargayska Washington Post maqaalo sheegeysa inay boqolka sano oo la soo dhaafay ay dawladda maraykanu xooggeeda militari iyo siyaasadeed iyo dibloomaasi iyo dhaqaaleba ay geliyeen si ay ingiriiska ugu sugaan boqortooyaduu adduunka ku lahaa iyo dawladdaha ay isticmaarsan jireen!

Dabaqada maraykanka xukunta, maalkana leh waxay ka mid yihiin kuwa la yiraahdo **W.A.S.P.**, oo macneheedu yahay **White** oo ah midabka caddaanka ah, **Anglo** oo ah inuu ingiriis u dhashay, **Saxon**, oo ah inuu jarman u dhashay, **Protestant**, oo ah inay diintiisu tahay midda la yiraahdo protestant oo ah qayb ka mid ah diinta krishtaan oo dalalka ingiriiska iyo jarmanka laga diin yeesho. Sidas ayay dawladda maraykanu waxay ku dhisantahay qabiil, qaraabo kiil, musuq maasuq, midab takoor gaaray ilaa heer ay krishtaankooda caddaanka ah iyo kuwooda madow ayan isku kaniisad ku tukan, balse ay caddaankuna kaniisaddooda leeyihiin, madawguna kaniisaddooda ayaga u gaarka ah, oo ayan is dhex gelin, iska guursan, meel wada degin, caruurtoodu ayan isku dugsi dhigan, is neceb yihiin, uusan dadkoo idilna xukunka u sinnayn). Markaasaan waxaan aniguna ku iri: "Wa sidaas." Markaasuu Ubayyah wuxuu yiri: "Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, oo leh: **Yuushiku al Furaatu an yaxsira can jabalin min thahabin, fa ithaa samica bihi al nnaasu saaruu ilayhi. Fa yaquulu man cindahu: 'La'in taraknaa al nnaasa ya'khuthuuna minhu la yath-habanna bihi kullihi.**" Qaala: **"Fa yaqtatiluuna calayhi. Fa yuqtalu min kulli mi'atin tiscun wa tiscuuna."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaa soo dhowaaday waqtiga wabiga Furaat (oo dalka Ciraaq mara) hoostiisa laga heli lahaa buur dahab ah (patroolkana waa isaga lagu magacaabo dahabka madow, ama dahab ayaaba lagu gadan karaa oo lacagtu waa dahab). Markaasey markay dadku maqlaan dahabkaas la helay ayay xaggiisa soo wada aadayaan, si ay wax uga qaataan. Markaasey kuwa dalkaas deggan oo dahabku agtooda yahay waxay leeyihiin: "Haddaan dadka u oggolaanno inay dahabkaas wax ka qaataan, isagoo idil ayay qaadanayaan oo la tegayaan." Wuxuu yiri: "Markaasey dahabkaas daraadiis iyo qaadashadiisa ku dagaallamayaan. Markaasaa boqolkii ninba waxaa laga dilayaa sagaal iyo sagaashan." Waana Xadiithka laba kun iyo sideed boqol iyo shan iyo sagaashan ee Muslim ee ku xusan Kitaabu Al Fitani. Riwaayada Abuu Hurayrah waxay warisay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laa taquumu al ssaacatu xattaa yaxsira al Furaatu can jabalin min thahabin, yaqtatilu al nnaasu calayhi. Fa yuqtalu min kulli mi'atin tiscatun wa tiscuuna, wa yaquulu kullu rajulin minhum lacallii akuunu anaa allathii anjuu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Saacaddu dhici mayso, oo adduunkaanu dhammaan mayo, jeer wabiga al Furaat hoostiisa laga helo buur dahab ah. Markaasey dadku ku dagaallamayaan. Markaasaa boqolkiiba waxaa laga dilayaa sagaal iyo sagaashan. Nin walbana wuxuu leeyahay: "Waxaa dhici

karta inaan anigu noqdo midka badbaada." Waana Xadiithka laba kun iyo sideed boqol iyo afar iyo sagaashan ee Muslim ee ku xusan Kitaabu Al Fitani. In yar ka hor bilaabashada dagaalka Ciraaq, iyo markuu maraykanku Ciraaq guulguulayey, ayuu Dhaariq Caziiz, Madaxweyne ku xigeenka Ciraaq ee krishtaanka ahi wuxuu yiri: "Batroolkeennay rabaan." Lafdiga Xadiithkaas ee Bukhaarina wuxuu ku wariyay Xadiithkiisa toddoba kun iyo boqol iyo sagaal iyo toban, uuna ka wariyay Abuu Hurayrah inuu Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Yuushiku al Furaatu an yaxsira can kanzin min thahabin. Fa man xadarahu falaa ya'khuth minhu sha'an."** Xadiithka macnihiisu waxaa weey: "Waxaa soo dhowaaday in wabiga Furaat hoostiisa laga helo buur dahab ah. Marka kiinna goobjoogga ahi waqtigaas yuusan waxba ka qaadan." Sababtuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka uga reebay qaadashadaas, siduu ibnu Xajar Fatxu Al Baarii ugu sharxay, waa ayadoo qofka qaata ay fitnadaasi iyo dagaalkaasu gaarayo. Dagaalka Ciraaq, oo hadda in afar sano ka badan socda, waxaa lagu dilay boqollaalo kun oo Carab muslimiin ah, walina waa socdaa.

Kacdoonka iyo burburka Kenya

Markay Qarammada Midoobay, NATO iyo Yurubta Midowday Soomaliya weerareen sandaka kun sagaal boqol iyo sagaashanka, oo ay ciidammada u shaqeeya arliga amxaarada kasoo galeen, iyo intii ka dambaysayba, soomaali badan ayaa dalka Kenya u qaxday oo degay, kuna biiray soomaalida hore halkaas u degganayd. Soomaalida Kenya u qaxday oo degtay waa boqollaalo kun ama ka badanba. Marka waxaa dalka Kenya ka dhacaya waan danaynynnaa, u kuur geleynnaa aanna la soconeynnaa.

Bisha disembar ee sanadka lasoo dhaafay ee laba kun iyo toddoba waxaa Kenya ka dhacay doorashooyin guud ee siyaasadeed oo lagu soo dooranayay Madaxweynaha iyo barlaamankaba, waxaana isaga soo hor jeeday laba nin oo kala ah M. Kibaaki oo markaas madaxweyne ah, una dhashay qabiilka kikuuyu iyo nin kale. Waxaa Kibaaki darjadaas kula tartamay Raila Odinga oo u dhashay qabiilka Luwo. Dadka raacsan Odinga waxay wada xiran yihiin shaarar hurdi ah sida liinta burtuqaalka oo kale, waxayna leeyihiin maarayn heer sare ah oo waxay ku wada fidsan yihiin dalkaas oo idil. Doorashooyinkii waxaa la sheegay inuu ku guulaystay madaxweyne Kibaaki. Markaasay Odinga iyo dadkiisu kacdoomeen oo qabiilka kikuuyada ay weerareen, guryohooda gubeen ilaa lix boqol oo qofna ay tan iyo hadda ka dileen sida la sheegay. Dadka kikuuyada ah way qaxeen, oo la sheegay inay ilaa shan boqol oo kun arliga dhexdiisa qaxooti ku yihiin. Qaar kalena waxay u qaxeen Uganda iyo Tanzania. Dhexdexaadinta guddoomiyaha Ururka Midaynta Afrika oo ah madaxweynaha Ghana iyo Bishop Tutu ee Koofurta Afrika oo Nairobi tegey waxay ku dhammaatay fashilaad, oo nabad way ka dhex dhalin waayeen labada qolo oo xukunka isku haysata. Odinga barnaamijkuu doorashada ku galay waxaa ka mid ah inay Kenya dal federaali ah noqoto. Halkaas ayay arrimuhu marayaan maantadaan aan kitaabkaan dhigayo.

Maxay tahay ahamiyada Kenya ay adduunka u leedahay, gaar ahaan dawladaha krishtaanka ah ee galbeed? Kenya waxay ku taalla meel straateji ah oo dhan waxay ka saaran tahay Badwaynta Hindiya oo waxay sidaas xuduud kula leedahay Jaziiradda Carabta iyo batroolkeeda. Dhanka kalena waxay xuduud la leedahay Soomaaliya oo batrool ka buuxo iyo khayraad kaleba, oo taas daraadeedba soomaalida looga soo saaray. Dhan kalena waxaa Kenya ka mid ah Badda Wayn oo Lake Victoria iyo kuwa ka yaryarba oo xuduud la leh Ethiopia iyo Suudaan, gaar ahaan gobolka batroolku ku jiro ee koofureed oo ay Jubba caasimadda u tahay. Kenya Baddeedaas Lake Victoria waxay ka mid tahay ilaha uu ka dhaso wabiga Niil oo Masar ku dhammaada, gaar ahaan waxaa kasoo dhasha Niilka Cad oo Niilka Blugga ah kula darma Khardhuum, oo dawladda isha wabigaas gacanta ku haysa ayaa Suudaan iyo Masar u talinaysa. Marka Kenya waxay leedahay ahamiyad straateji ah oo aad u wayn, gaar ahaan dawladaha krishtaanka ah ee galbeed muhim iyo lagama maarmaan u ah.

Maxaa iyo yaa kacdoonkaan hadda ka socda ka dambeeya? Dhaqdhaqaaqaan uu Odinga madaxda ka yahay wuxuu u egyahay kuwa aan hore ugu aragnay dalal kala duwan, gaar ahaan Somalia iyo yurubta bari ee Ukrain iyo Georgia oo doonayay inay ka mid noqdaan Yurubta Midowday iyo NATO ayagoo ruushka xuduud la leh, iyo Lubnaan, iyo Miyanmar ama Burma, oo ayaguna shaatiyo isku eg xirnaa oo isla midabkaas leh. Dhaqdhaqaaqyadaas oo idil, oo isku wada barnaamij ah waxaa ka dambeysa dawladda maraykanka oo sidaas adduunka khalkhal ku gelinaysa.

Inay ingiriiska iyo maraykanku dalka Kenya ugu istaacmaalaan danohooda siyaasadeed ee gobolkaas Afrika, hadda ma bilaaban ee muddo dheer ayay soo socotay. Waxaan doonayaa inaan hal tusaale idinka siiyo.

Markuu sanadku ahaa kun sagaal boqol laba iyo sideetanka waxaan ahaa Danjiraha Soomaaliya ee Jamhuuriyada Federaaliga ah ee Jarmanka ee caasimaddeedu magaalada Bonn ahayd. Sanadkaas waxaa Wasiirka koowaad ama Kanzler siday ayagu yiraahdaan ahaa ninka la yiraahdo Helmut Schmidt ee madax u ahaa xizbiga SPD. Schmidt wuxuu ahaa nin wadankiisa jecel daacadna u ah, oo anigu waaban la kulmay in badan oo aan wada hadalnay. Dalka jarmanka waxaa markaas ku sugan oo deggan in ka badan shan boqol oo kun oo askarta maraykanka ka tirsan iyo shan ilaa lix kun oo gantaal oo ay ku rakiban yihiin hubka halista ah ee nuklearka oo ku fiiqan dalka Midowga Soovyeeti. Intaas oo kalena waxay uga soo fiiqan tahay dalka jarman xagga ruushka. Schmidt wuxuu jeclaa inuu jarman midoobo, dalkiisana laga qaado ciidammada shisheeye oo joogay tan iyo dagaalka adduunka ee labaada oo dhammaaday kun sagaal boqol shan iyo afartan, jarmanna looga adkaaday. Dawladaha galbeed, gaar ahaan maraykanka, ingiriiska iyo fransiisku ma ayan jeclaysan siyaasaddiisa. Schmidt waxaa dawladda la dhisay oo uu sidaas aghlabiyad baarlamaanka dhexdiisa ku haystaa xizbi yar oo la yiraahdo FDP, uuna madax u yahay ninka la yiraahdo D. Gensher oo ahaa muddoo dheer wasiirka arrimaha dibadda ee Schmidt, oo ahaa nin been badan oo khaa'in ah. Markasay dawladda maraykanku, siday wargeysyada jarmanku usoo qoreen aanna siyaasiyiintooda laftaydu ka maqlay, waxay amartay Gensher inuu

xilfiga uga baxo, taasoo uu yeelay kaddibna ay dawladda Helmut Schmidt duntay. Xizbiga mucaaridka ah ee jarmanka waxaa la oran jiray CDU oo macnihiisu yahay Ururka Krishtaanka Dimuqraadiga ah, waxaana madax u ahaa ninka la yiraahdo Rainer Barzel. Markay Dawladda Schmidt dhacday waxaa la doortay baarlamaan cusub oo markaas Kanzler cusub dooranaya. Hadduu markaas xizbiga CDU doorashada ku adkaado waxaa Wasiirka Koowaad noqonaya Rainer Barzel maadaama uu guddoomiyaha xizbiga yahay. Barzel wuxuu isaguna ahaa nin wadani ah oo danta jarmanka ka hor marinaya tan maraykanka. Markaasaa waxaa loo tegey ninka madaxda ka ah shirkadda wayn oo jarmanka oo la yiraahdo Flick, waana Friedrich Karl Flick. Flick wuxuu garyaqaannadiisa u diray Rainer Barzel waxayna ku yiraahdeen: "haddaad kanzler noqotid inta sano oo aad ahaaneysid mushaar kaagu meequu noqonayaa?" Wuxuu yiri intaas iyo intaas. Waxay ku yiraahdeen: "waa tana intaas oo caddaan ah ee mansabkaaga guddoomiyannimada CDU iska cazil, taageerna in Helmut Kohl loo doorto." Barzel lacagta ayuu qaatay, wuu is cazilay, waxaana la doortay Helmut Kohl oo intuu doorashada guud xizbigiisa CDU ku guuleystay isaga Wasiirka Koowaad loo doortay, isagoo waxay dawladda maraykanu doonayso meel marin jiray, kana hormarin jiray waxa jarmanka u dan ah. Sidaasuu Helmut Kohl Kanzler ku noqday, aniguna goob joog ayaan ka ahaa. Dawladda Schmidt waxay dhacday oo Helmut Kohl madaxa dawladda loo doortay maalintay ahayd kowda Oktoobar ee 1982.

Markaasuu qorshahaas Schmidt/Flick/Barzel/Kohl adduunka ku faafay oo jarman lagu ceebeeyey inay Kohl mansabka u gadeen. Arrinkaasu wuxuu ku caan baxay Fadeexada Flick ama "Flick Affair". Arrinka Barzel ka fiiri bogga internetka (en.wikipedia.org/wiki/Rainer_Barzel).

Barzel kaddib wuxuu noqday Guddoomiyaha Bundestag ee baarlamaanka federaaliga ah ee jarmanka, xafiiskiisana waan ugu tegay isagoo mansabkaas haya, wuxuuna dhintay laba kun iyo lix. Wuxuu qaatay lix malyan oo Mark.

Markaasuu wargayska magaalada Hamburg kasoo baxa oo toddobaadlaha ah lana yiraahdo "Der Spiegel" wuxuu raadiyay oo soo daabacay, sanadkaas ama kan ku xigay, fadeexooyinka dalalka kale ee adduunka ka dhacay. Wuxuu soo qorayna waxaa ka mid ahayd is khilaaf ayaantaas ka dhex socday maraykanka iyo Kenya. Waxay kasoo qortay iyo dokumentigay soo daabacday waxaa ka mid ahaa intaan soo socota. Waxaa ayaamahaas Nairobi tegay nin xubin ka ha baarlamaanka maraykanka, markaasuu madaxweyne Arab Moy diiday inuu qaabilo. Markaasay wargaysyada maraykanku waxay soo qoreen inuu Moi diktator keligiis taliye ah yahay. Der Spiegel waxay tiri: "sababta Moi waa diktator loo yiri iyo inayan Kenya dimiiraadiya oollin waxay tahay inuu wasiir ka mid dawladda kenya isagoo aan cidda iska leh hubsan xiray laba googo dayuuradeed oo meel hebla iyo hebla ku kala yaalla. Gegadaas dayuuradaha waxaa iska leh CIA, hay'dda wardoonka maraykanka. Gegadaas waxaa yaalla dayuurado ay CIA leedahay, waxaana dalbada oo maamula laba nin oo kala Idi Amiin madaxweynaha Uganda iyo John Garang guddoomiyaha ururka mucaaradka ah ee koofurta Suudaan. Markay amraan ayay dayuuradahaasu u garaacaan oo duqeeyaan meeshay ku amraan oo dalkooda ka mid ah. Idi Amiin wuxuu ku amraa inay duqeeyaan tuulooyinka ay deggan

yihiin qabaa'ilka xukunkiisa mucaaradka ku ah oo ay guban. Garang waxay u garaacaan koofurta Suudaan. Marka dawladda maraykanu Idi Amiin waxay tiraahdaa waa diktatoor dhiigyo cab ah, ayadaana si qarsoodi ah ugu adeegta oo dadka Uganda u laysa. John Garangna (oo dalkaan maraykanka wax kusoo bartay) waxay u adeegsataa inay dawladda dhexe ee Suudan khalkhaliso oo ay koofurta batroolku ku jiro ka go'do dalkaas. Kaddibna gegooyinkaas dib ayaa CIA loogu furay oo ay sidoodii hore u adeegsadaan. Markaasay dawladda maraykanu sheegtay inay Kenya dimoqradhiyadii soo celisay. Marka maraykanku ceebta jarmanka yeeyan fiirinni tooda ha fiiriso." Intaas ayaan maqaaladaas ka soo qaatay oo aan xusuustayda ka qoray.

Kenya soomalidana muhim ayay u tahay, oo waxaaba kaloo dhici karta, hadduu Odinga xukunka la wareego, inuu dalkaasu federaali noqdo oo kala goo'go'o oo ay markaas soomaalidu intay hore u degganayd ka sokow dhulal kale yeeshaan, xoog ha qabsadaan oo dadka deggan ha kala wareegaan ama dhulka laga cararay haba degaan, ama dhul lala deggan yahay ha fara maroorsadaane, siday fircoonnadii Masar oo Carabta ahaa xukunka ugala wareegeen qibdhigii dalka hore u degganaa, iyo siday Carabta qabiilka Camaaliqda u dhalatay oo uu Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, ka dhashay arliga Ciraaq intay dadka hore u degganaa oo uu boqorka Namruud bin Kushka dhashay la degeen kaddibna xukunka ka fara maroorsadeen oo ay boqortooyada caanka ah ee Kaldaaniyiinta halkaas ka aasaaseen., ama si la mid ahba sida Carabta Camaaliqda ahi Shaam ula wareegeen oo kale.

(Rainews24.it.) waxay maanta warisay inuu Danjiraha maraykanka ee Nairobi uu maalinta oo ah arbaco ee lix iyo tobanka bishaan jannaayo laba kun iyo sideed war uu siiyay wargayska Nairobi kasoo baxa ee la yiraahdo "Daily Nation" ku yiri: "run ahaantii waa mustaxiil oo ma suurtoowdo in la ogaado qofka ku adkaaday doorashada madaxweynennimada maxaa yeelay habka doorashadu u dhacay ma ahayn mid "transparent" ah oo ah mid muuqda loo jeedo." Hadalkaasu dabka kacdoonka iyo burburka Kenya ayuu sii shidayaa oo danjiruhu dabkuu afuufayaa!"

Ujeedada dagaalka Kenya ka socda ma aha mid qabaa'ilka Kenya ka dhexeeya ee wuxuu ku saabsan yahay dhulka Kenya oo ay dawladdaha NATO iyo Yurub, intaan ruushka ahayn, ay doonayaan inay dadka deggan kala wareegaan, siday u doonayaan inay Falasdhiiin dhulka kala wareegaan, Soomaaliya ay soomaalida kala wareegaan, Ciraaq aya ciraaqiyaanta kala wareegaan oo kale. Iyo dalal kaleba. Dagaalka Kenya wuxuu hadda ka socdaa galbeedka dalkaas gobollada Badda Viktooriya saran oo ay magaalo madax u tahay Kisumu. Gobolkaas wuxuu xad la leeyahay Uganda, iyo Tanania. Haddii dhagax xagga waqooyi loo tuurana wuxuu ku dhacayaa Ethiopia iyo gobolka batroolka laga qodo ee Juba ee Suudaan, haddii xagga galbeed loo tuurana wuxuu ku dhacayaa macaadinta Congo, haddii xagga koofur galbeed loo tuurana wuxuu ku dhacayaa Ruwanda iyo Burundi. Gobolkaas ayaa la doonayaa in dadka Kenya laga saaro oo lagala wareego. Inay malaayiin banii aadan gumaadaan gaaladu dan kama laha oo waxayba ku magacaabaan markaasoo kale "collateral damage", oo ah "khasaaro ka dhinac dhalatay

ujeedada la lahaa”, oo waxay dhinac dhalatay ujeedada la lahaa oo ah in dhulkaas lagala wareego. Nafta dadkuba qiimo lama laha intaan tooda ahayn. Labad iyo tobanka bisha Luulyo labakun iyo toban afar saac iyo shan iyo soddon barqannimo waxay TV-ga CNN sheegay inay bad yarada Victoria oo ay ku hareereysan yihiin Keniya, Uganda iyo kuwa kaleba uu hoosteeda batrool ka buuxo, qodidana la bilaabi doono laba kun iyo laba iyo toban.

"Amxaarada Muqdisho siiya"

Bilowga kun iyo sagaal boqol iyo sideetanka, intaan Danjiraha Soomaalida ee Bonn ee arliga Jarmanka Federaaliga ahaa, ayaa waxaa gurigiisa , oo barlamaanka agtiisa ahaa, quraac noogu marti qaaday xildhibaan Dr. Hans Stercken oo ahaa guddoomiyaha guddiga siyaasadda arrimaha dibadda ee baarlamaanka federaaliga ah ee Bundestag. Ninkaasu wuxuu marti qaaday Danjirayaalka lix dal oo geeska Afrika, ee kala ah Jabuuti, oo uu Danjireheedu baabuur uga yimid Paris oo xaruntiisu ahayd, kaddibna noqday, sidan u maqlay Wasiirka Shaqada ee Jabuuti; Suudaan, Kenya, Uganda Ethiopia iyo aniga. Wuxuu kaloo marti qaaday Danjiraha Tansaniya, uuse u sheegay inuusan hadalkiisu dalkiisa saameyn. Xildhibaanakaasu wuxuu nagula hadlay waxaa ka mid ahaa inuu yiri: "Waxaan idinkula hadlayaa afka dawladda **NATO** (oo ah gaashaanbuurta North Atlantic Treaty Organization, oo ah Ururka Gaashaanbuurta Waqooyiga Badweynta Atlantika, lana aasaasay dagaalka adduunka ee labaad kaddib, kano soo horjeeday **WARSAW** pact ee Midowga Soviyeeti la xiriiray), oo ayan dawladda Turkigu ku jirin, iyo afka dawladda Midnimada Yurubta ku bahoobay. Waqtigaan hadda ah oo inaan idinla hadlayo madaxweynaha maraykanu waa la socdaa. Waxaan idiinku yeeray laba arrimood, oo kala ah: (Kow) inaad samaysataan urur la yiraahdo IGADD (oo ah Inter Governmental Authority on Drought and Development, macneheeduna yahay Ururka Dawladuhu Wadaagaan ee Abaarta iyo Hormarinta, ama sidaas oo kale ah, lana asaasay kun iyo sagaal boqol iyo lix iyo sideetan). Haddaad ururkaas sameysataan annaguna waxbaan idinkala qabaneynaa. (Labo) Waxaan dooneynna inay Soomaaliya dhul siiso Ethiopia, kana mid ah gobolka Muqdisho, ama Kismaayo ama Barbara. Gaar ahaan Muqdisho iyo Kismaayo, kuwaasoo u dhow koofurta Ethiopia oo badaha ka fog. Dhulkaasu waa ka go'ayaa Soomaaliya, wuxuuna noqonayaa dhul arliga Ethiopia ka tirsan oo uu calankeedu suran yahay. Markaasaan annaguna wadooyiinka dhulkaas iyo Ethiopia isku xiri lahaa dhiseynnaa oo aan maal gelineynnaa." Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya wuxuu ii sheegay in markuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre warbixinteydu gaartay uu yiri waxay ka mid ahaayeen: "War maxay leeyihiin wuxu? Oo kani waa warkii Menelik oo oran jiray Hobyo Ethiopia ayaa iska leh!" Dawladda Soomaaliya codsigaas umaba ayan arag inuu jawaab mudan yahay, wayna ka aamustay. Dr. Hans Stercken wuxuu kaloo ahaa guddoomiyaha Ururka Baarlamaannada Adduunka. Muddo gaaban kaddib markuu warkaas noo sheegay ayaa waxaa dalka Senegal e galbeedka Afrika lagu qabtay magaalo madaxdeeda shirka baarlamaannada addunka, isaguna uu shir guddoomiye ka

yahay. Waxaa baarlamaanka Soomaaliya shirkaas uga qayb galay wafdi uu hoggaaminayo jananka Habargidir, aanna u malaynayo inuu Cayr u dhashay, Jeneraal Muxammad Nuur Galaal oo guddoomiyaha guddiga xiriirka baarlamaannada adduunka ee Golaha Shacbiga Qaranka Soomaaliyeed ahaa. Ina Nuur Galaal wuxuu sidaas kula kulmay Dakar Dr. Hans Stercken, oo intuu annaga Danjirayaalka ahaa noo sheegay oo kale ayuu isagana u sheegay, kana codsaday inuu dawladda Soomaaliya gaarsiiyo. Jeneraal Galaal warbixintuu Madaxweye Maxammad Siyaad Barre arrinkaas uga dhigay ayuu anigana nuqul iga soo siiyey. Sidaas ayaan ku ogaaday kulaankaas dhex maray isaga iyo Dr. Hans Stercken iyo waxay ku wada hadleen. Marka, sidaas ayay IGADD waxay u tahay hay'ad ay NATO iyo yurub leedahay, siyaasaddoodana ay u fulisaa. NATO waxay dooneysaa inay deegaanka geeska Afrika beddesho oo ay dawladda krishtaanka ah ee amxaarada dhulkeeda ku ballaarisoo, soomaalida muslinka ah meesha laga saaro. NATO iyo yurub waxay doonayaan waa saddex waxyaalood, kaddib wiiqidida cududda lixdaas dawladdood oo aan soo sheegnay. Saddexdaas waxyaalood waxay kala yihiin: (Kow) Khayraadka dalalkaas ku jira inay la wareegto, khayraadka Jaziirada Carabtana ay si buuxda gacanta ugu wada dhigto, ayanna cid kale u hanqal taagin, ayna ku hareereyso dawlado itaal daran, xasillooni iyo midnimo midna aan lahayn, oo naftooda iyo siday caruurta caano ugu heli lahaayen ku mashquulsan. (labo) La dagaallanka Diinta Islaamka. (Saddex) Waxaa labadaas saddexa inayan Badda Cas noqon bad Carab Muslim ah, ayadoo laba albaad oo laga galo ay gacanta Carb Muslim ah ku jiraan, kuwaasoo kala ah Baabu Al Mandab oo gacanta Jabuuti iyo Yaman ku jira iyo biyo mareenka Suweez oo gacanta Masar ku jira, halkaasoo batroolka yurub loo wado la mariyo. Marka qofka IGADD siyaasad midda NATO iyo tan yurub ka duwan ka raadiya iyo siyaasad Soomaaliya u dan ah, waa ku dagmayaa, kuna hungoobayaa. Waxaa NATO iyo yurubta krishtaanka ah siyaasaddoodaas ugu midiidin ah oo ugu adeega dawladdaha krishtaanka ah ee Ethiopia, Kenya, Tansaaniya iyo Uganda. Waxaa ayaduna ku tageertay xag militari iyo xag siyaasadeedba dawladda Xusni Mubaarak ee Masar oo burburinta Soomaaliya dawr wayn oo faccaal ah ka qaadatay, isagoo labada dhinac oo soomaaliyeed oo Muqdisho ku dagaallamayey mid walboo ka mid ahba dayuurado hub ugu keeni jiray oo siin jiray si ay isku laayaan oo dabku usii shidmo, colaadduna ayan u dhammaan. Inuu Xusni Mubaarak sidaas yeelayna waxaa ii sheegay Wasiir ka tirsan dawladda dhexe ee amxaarada oo kasoo qayb galay shir Qarammada Midoobay, aniguna aan Danjiraha Jaamacadda Dawladaha Carabta ee Qarammada Midoobay ahay oo aan kursigeeda fadhiyo, oo aan shirkaas ku kulannay. Inay Masar hubka usoo dejin jirtay labada dhinac oo Muqdisho isku haysteyna iyo gegida dayuuradaha ay uga soo dejin jirtayba waa sir la wada ogsoon yahay oo aan cidna ka qaarsooneyn. Xusni Mubaarak ciidammadiisa uu Soomaaliya keenayna guryaha soomaalida ee Muqdisho ayay bililiqeysteen oo mataaca guryahaas yiillay ayay Qaahira u rarteen; maalinta qiyaamane ayagoo tunka ku sida oo loo wada jeedo ayay keeni doonaan, inshaa'a Allaahu. Maxaa ku xambaaray inuu ka qayb qaato laynta dad Carab ah oo muslim ah? Wasiirkiisa krishtaanka gaalka ahna oo noqday

Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay Butrus Butrus Qaali, oo aabihiis iyo awoowihisba khaa'inno dalkooda ahaayeen ayagoo dawladda ingiriiska jawaasiis u ahaa (caan weeyey dhacdada "xaadithatu Dinshaawaa ee saddex iyo tobanka juunyo kun sagaal boqol iyo lix ee Butrus Ghaali, kaddibna uu dilay Naasif Al Wardaani labaatanka fabraayo kun sagaal boqol iyo toban) wuxuu soo diray ciidammada Qarammada Midoobay oo Soomaaliya burburiyay. Xusni Mubaarak wuxuu aad ugu dadaalay, Dawladdii Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre, inuu arrimaha gudaha oo Soomaaliya soo fara geliyo, kuna doodayey inuu dawladdaha maraykanka iyo talyaaniga wakiil ka yahay, wuxuuna soo jeediyay inuu Butrus Butrus Qaali Muqdisho usoo diro oo uu dawladdenna la xajoodo. Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre kama yeelin, kamana uusan hoos qaadin. Markaasuu Butrus Butrus Qaali wuxuu Soomaaliya yimid isagoo kunton kun oo ciidammo ah wata, markaasuu dalka burburiyay. Ilaahay Xusni Mubaarak ha kula dhaqmo caddaaladdiisa, abaalkiisana ha mariyo. Ciidammadaas gaalada ah oo Soomaaliya kusoo duulay oo burburiyay waxaa lacagta ku baxday oo idil bixiyey, sida mushaarka askarta, qalabka, hubka iyo saanadda, shidaalka, saadka sida cunno, biyo iyo daawo iyo dhururuq kasta oo ku baxay oo idil lixda dawladdood oo khaliijka oo kala ah boqortooyada Sucuudiga, Kuwayt, Imaaraatka Midoobay, Qadhar, Cummaan, Baxrayn. Lacagtaasna waxaa laga bixiyey sanduuqii lacagta loogu kaydiyey dagaalka Ciraaq ee sagaashanka socday "Desert Storm" oo ay dawladdahaasu maal geliyeen. Maxaa ku xambaaray dawlado muslim ah oo Carab ah inay maalkuu Ilaahay Tacaalaa siiyey ku bixiyaan inay dawlado gaalo ah laayaan shacbi muslim ah oo Carab ah oo ayagana ayan eedi kala gaarin, ayna guryohooda ku burburiyaan, dalkoodana uga saaraan oo qaxooti sabool ah ka dhigaan? Ilaahay dhammaantood caddaaladdiisa ha kula dhaqmo mudankoodana mariyo. Waxaa Soomaaliya lasoo dul dhigay ciidan ayan u beer dhigi karin oo cadad iyo cududba ka fara badan, inta laga dilayna waa shuhado inshaa'a Allaahu. Amxaarada Muqdisho, ama Kismaayo ama Barbara siiya waa dhulka Soomaaliya oo idil siiya.

Weeraridda NATO iyo EU ee Soomaaliya

Laga bilaabo bisha janaayo kun sagaal boqol kow iyo sagaashan ilaa laba kun iyo lix waxaa Soomaaliya ka socday dagaallo aan kala go'in, oo ay bilawday Qarammada Midoobay, kaddibna maraykanka, kaddibna kooxo ayagaas u shaqeeya. Lix iyo tobankaas sano waxaa Soomaalida ka dhimatay malyuun iyo dheeri, ay dheer yihiin inta xeryaha qaxootiga uga dhintay. Waxaana Soomaaliya ka qaxay, siday toban sano ka hor Qarammada Midoobay sheegeen laba malyan oo qof, ayadoo uu qaxu intaas sano sii socday. Markay dadka soomaalidu tabar dhigeen, oo lix iyo toban sano oo gaw ah la garaacayay oo la saxariirinayay, oo ay wiiqday, hubkii iyo saanaddiina laga dhigay, xisaar militari ahna la saaray oo maraakiibta dagaalka dawladdaha galbeed ee krishtaanka ahi xeebaha ciddii soo geleysa fatashayso, ayay bisha Thuu Al Xajjah ee sanadka la soo dhaafay ee kun afar boqol toddoba iyo

labaatanka, una dhiganta bisha disambar laba kun iyo lix, ayay ciidammo maraykanka iyo amxaaro ay soo ijaarteen isugu jira soomaaliya cirka iyo dhulka iyo baddaba kasoo weerareen, oo ay Soomaaliya qabsadeen. Waxaa gaar ahaan ilaa maanta caasimadda Muqdisho ka socdo dagaallo kumannaano soomaali ah lagu dilay, kumannaano lagu dhaawacay markay ciidammada amxaaradu cirka iyo dhulkaba ka duqeeyeen xaafadaha aad loo deggan yahay, inta u dhexeysay sagaal iyo labaatanka bisha maarso ilaa kowda abriile ee sanadka laba kun iyo toddoba, degmooyinkana madaafiic lala dhacay dad badanna lagu xasuuqay, khasaarooyin badanna la geestay. Raadiyayaalka Muqdisho ka hadlay waxay sheegeen inay hal malyan iyo afar boqol oo kun oo reer Muqdisho ah magaalada ka qaxeen oo ay duurka geedaha hoostooda ku dayacan yihiin. Qorshaha dawlada galbeed oo ahaa in soomaalida dhulkooda laga saaro oo amxaaro krishtaan ah lasoo dejiyo, kuwaanoo yimid ayagoo haweenkooda iyo caruurtoodaba wata, wali waa sii socdaa. Qorshaha meel marayana waa qorshaha Ilaahay Tacaalaa, oo gaalada qahra, tuu doonana fala. Sidoo kale waxaa Muqdisho la keenay ciidammo ka socda Uganda oo dagaalka ayaguna dhinacooda ka galay oo soomaalida xasuuqay. Sidasay NATO waxay amxaarada gacanta u gelisay labada dekadood oo ay weligoo ku riyoonayeen, ayse tan iyo hadda hanan waayeen ee Muqdisho iyo Kismaayo. Amxaarada Soomaaliya soo gashay awoodooda kuma soo gelin oo tabarna ma laha waana fulayo, sidaan dagaallada soomaalida iyo ayaga dhex maray hore ugu soo aragnay, waxayse NATO iyo yurub usoo wateen una soo ijaarteen inayan ayago rabin in askartooda la dilo, oo ay amxaaradu ahaadaan kuway soomaalidu disho markay dhulkooda galaan. Sidoo kale askarta Uganda waa lasoo ijaartay, isagoo uu madaxweynohoodu Museveni NATO iyo yurub madiidin u yahay iyo daba dhilif. Hadday taariikhdu duruus bixiso, oo waxa lasoo dhaafay lagu cibro qaato, dawladihii dagaalka labaad ee adduunka looga adkaaday kun sagaal boqol iyo shan iyo afartanka, waana kow iyolixdan sano ka hor, oo kala ah jarmanka, talyaaniga iyo jabaan, ciidammadii dawlada reer galbeed oo ka adkaaday oo arligooda galay weli sidoodii ayay u fadhiyaan, oo saddexdaas dawladdood waxay noqdeen mustacmaradooda, waxaana maamula dannjirayaalka dawlada ka adkaaday oo caasimaahooda fadhiya ee maraykanka, ingiriiska iyo fransiiska. Anigu saddexdoodaba shaqaan ku tegay waana sidaas. Dalalkaasna tan iyo waagaas dariiqyaday ku mudaaharaadayeen inay askartaasu dalkooda ka baxdo, umase ahaan.

Carl Bildt, oo hadda wasiirka arrimaha dibadda ee Sweden ah, maantana waa saddexda janaayo 2007, oo aan TV ku arkay isagoo ka qayb gelaya guddiga EU oo xaaladda Somaalia ka shiraya, intaasoo kun oo amxaaro askarteedu ay Muqdisho joogaan, maraakiibta dagalka ee USA badda fadhiyaan uuna afhayeenka State Department sheegay inay maraakiibtaasu u joogaan halkaas inayan Al Qaacida Somalia gelin ama ayan ka bixin (do not transit here). Carl Bildt awoowihis, oo janan militariga ahaa magaciisuna Carl Bildt ahaa, wuxuu ka qayb galay qaybinta Afrika 1884 ee Berlin, halkaasoo Somalia shan loogu qaybiyay. Carl Bildt wuxuu hore u ahaa wasiirko koowaad ee Sweden. Sidoo kale wasiirka arrimaha dibadda ee Norway oo shir Qaahira lagu qabtay

ka qayb galay wuxuu ku dhawaaqay inayan amxaaradu ka bixin Soomaaliya oo ay sii joogto, ilaa ay ciidammo kale, siduu yiri, ka yimaadaan!

Fiiro gaar ah

Maanta waa maalin talaado ah taariikhduna tahay afar iyo labaatan bisha Thuu Al Qacdah ee sanadka Hijriga ah ee kun afar boqol sideed iyo labaatan, una dhiganta afarta bisha disembar ee laba kun iyo toddoba. Waxaan maanta televisioonka "Al Jaziirah" oo laga soo daayo magaalada Dooxa ee dalka Qadhar warkeeda bartamaha maalinta ku sheegtay inuu wasiirka gaashaandhigga ee maraykanku Jabuuti jooga sheegay in (wuxuu isagu ku magacaabay) mucaawinada uu maraykanku Soomaaliya siiyo ka joojiyo oo uu mucaawinadaas siiyo dalka isagu la baxay "Somaliland", ayadoo uu Soomaaliya ka socdo dagaal aan dhammaanayn. Warkaasna waxaa soo qortay "Washington Post" wargayska la yiraahdo ee kasoo baxa Washington D.C. caasimadda maraykanaka, oo sheegtay inay dawladda maraykanku arrinkaas ka dooddayso."

Washington Post wuxuu cadadkiisa soo baxay maalinta talaadada ah ee bisha Desember afar, laba kun iyo toddoba oo ku beegan labataan iyo afar bisha Thuu Al Qacdah ee sanadka Hijriga ah ee kun afar boqol sideed iyo labaatan, boggeeda A17 ku tiri waxay ka mid yihiin: "sarkaal sare ee Wasaaradda Gaashaandiggu wuxuu yiri: "Somaliland waa wax jira "entity" oo (dawladnimadeedu) shaqaynayso. Annaguna waxaan ku dhex jirnaa dhagax iyo meel adag, sababtuna ay tahay inaan dawladda ahaan loo aqoon sanayn." Wasaaradda Ghaashaandhigga ee Pentagon waxay tiri: "Somaliland should be an independent state" oo ah "Somaliland waa inay ahaataa dal madax bannaan." Wuxuu kaloo yiri: "mawqifka rasmiga ah ee Dawladda maraykanku waa inay USA aqoonsiga Somaliland dib u dhigto, ayadoo ayan ururka midnimada afrika weli aqoonsan. Kaaliyaha Wasiirka Arrimaha Dibadda Jendayi E. Frazer waxay tiri: "ma doonayno inaan aqoonsiga ururka qaaradda uga hormarno arrin muhimmadaas leh", ayadoo ka jawaabaysa su'aal e-mail loogu diray."

Waxaaba halkaas ka cad inay dawladda maraykanu goosatay kala googoynta Somaaliya iyo inay gobolkaas waqooyi qalbeed dawladda ahaan u aqoonsato siday amxaaradu in badan u dooneysay. Taasna waa siyaasadda isticmaarka, magac kasta ha lahaato dawladda wax isticmaarsanaysee, oo markaan ah marakaynka, oo ah "kala qaybi si ay u wiiqaan oo markaas xukun." Amxaarada dawrkeeduna waa inay u ilaalisaa ceelasha batroolka iyo meelaha laga qodayo Soomaaliya.

Waxay kaloo idaacaddaasu warisay oo na tustay shirka lagu qabtay Dooxa ee ay isugu yimaadeen boqorrada lixda dawladdood oo khaliijka ayna goosteen inay lixdaas dawladdood yihiin suuq mushtarak ah oo dadka deggani ha u dhasheen ama ku noolaadaane ay midkay doonaan tegi karaan oo ay isugu mid yihiin. Nin ka mid ah madaxda dawladda Qadhar oo wariyaha u warramayay wuxuu sheegay inuu go'aankaasu meel marayo kowda bisha koowaad ee sanadka laba kun iyo sideed. Wuxuu kaloo sheegay inay

dawadahaasu u yihiin saaxiib dawladda maraykanka oo ay xiriirkoodaas u arkaan mid muhim u ah.

TV-iiga talyaaniga RAI waxay ku warisay oo aad ka heleysa boggeeda internetka (www.rainews24.it/Somalia page 5 iyo inta ka dambeysa) wararkaan soo socda:

2 disembar 2001: Wargayska Sunday Telegraph wuxuu qoray inay USA iyo ingiriisku isu diyaarinayaa weeraridda Somalia.

12 disembar 2001: USA iyo gaashaanbuurtoodu waxay Kenya weydiisteen saldhigyo militari ayago isku diyaarinaya weeraridda Somalia.

3 jannaayo 2002 US, waa maraykankee waxay isu diyaarinayaan inay Soomaaliya weerararaan oo duqeeyaan, waxaa warkaasna sheegay wargayska Washington Times.. Maraykanka iyo dawladdaha kale ee galbeed waxay waayahaan dambe badiyeen duullimaatka dayuuradhooda sahanka ah oo diyaarinaya weeraridda Somalia.

24 disembar 2006: Wasiirka koowaad ee Etoopiya waxaa ku dhawaaqay inuu dalkiisu dagaal kula jiro Somalia oo uu weerarayo.

9 jannaayo 2007: USA waxay duqeysay xerooyin Al Qaacidah ee koofurta Somalia. Waxaa ka qayb galay maraakiibta dagaalka oo uu ka mid yahay markabka dagaal oo dayuuradaha xambaarsan Eisenhower iyo dayuuradaha AC-130. Wasaaradda gashaandhigga USA way sugtay si rasmi ah weerarkaas ay Somalia weerartay.

10 jannaayo 2007: USA mar kale ayay koofurta Soomaaliya weerartay, gaar ahaan degmooyinka Hayo, Garer, Bankajiro, Badmadowe.

10 jannaayo 2007: Wasiirka koowaad ee ingiriiska Blair wuxuu daafacay weeraridda USA ee Soomaaliya. D'Alema, oo ah wasiirka arrimaha dibadda ee talyaaniga wuxuu yiri: "mawqifkaan annagu arrinkaas ka qabno wuxuu la mid yahay mawqifkay EU ka qabto, siday u sheegeen wasiirka arrimaha dibadda ee Norway oo guddoomiye u ah contact group ee EU Somalia u qaabilsan, iyo commissario Louis Michel oo EU Afrika u qaabilsan."

24 jannaayo 2007: weerar kale oo cirka ah ayay USA ku qaadday Soomaaliya. Ciidammadeeduna dhulkana way ka weerareen.

3 juunyo 2007: USA waxay weerartay oo duqaysay Soomaaliya.

2 juunyo 2007: maraakiibta dagaal ee USA waxay duqeeyeen Soomaaliya.

Daws, boqorrada roomaanka, Masar iyo amxaarada

Markay dhacday inuu boqorka yuhuudiga ah ee Yaman magaciisuna ahaa Yuusuf Thuu Nuwaas inuu muslimiintii Ciise raacsanayd uu godadka u qoday oo intuu dab ka buuxiyay ku dhex tuuray markay diideen inay diinta islaamka ka baxaan (oo ay Doktooraah Samiyah bogga kow iyo labaatan ku warisay in laga dilay labaatan kun oo qof), siday nooga warrantay Suuratu Al Buruuji, ayaa waxaa fursadaas ka faaiidaystay dawladaha krishtaanka ah ee Rooma iyo Masar iyo amxaarada oo inta ku soo duulay amxaarada Yaman kacanta u geliyay, oo ay sidaas ku noqotay mustacmarada amxaaro. Kaddibna amxaaradu waxay ku duushay Makkah, ayadoo dooneysa inay Kacbada dumiso. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa ciidankooda maroodiga watay baabi'iyay, siday noo sheegtay Suuratu Al Fili. Ujeedada boqorradaas krishtaanka ah, oo kala ahaa Justiiyaanus oo ahaa boqorka Rooma iyo Kaalib oo ahaa boqorka amxaarada iyo kan masarba waxay ahayd inay Kacbada krishto suraan, Carab gumaystaan, boqortooyada Iiraan ay xagga koofur iyo xagga waqooyi/galbeed iska mar uga wada yimaadaan oo isu qabtaan, inay khayraadka jaziiradda Carabtana gacanta ku dhigaan, iyo inay wadada u fariistaan badeecadaha ka yimaada geeska afrika iyo hindiya oo Cadan soo mara. Qisada Daws oo faahfaahsanna waa tan soo socota.

Boqorka Roomaanka ee Justiiyaanus

Konton iyo labo sano dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka hor markuu sanadka miilaadigu ahaa shan boqol toddoba iyo labaatan, waxaa Boqortooyada Roomaanka ee Bari, caasimaddeeduna ahayd Istanbul ee dalka Turkiga, Boqor u noqday ninka la yiraahdo Justiiyaanus. Boqorkaas haweentiisana waxaa la oran jiray Theodora, taasoo intayan Boqorad noqon jilaa ahaan jirtay oo riwaayadaha dhigi jirtay oo ka shaqayn jirtay, waxayna ahayd haweeney caqli suuban leh, geesiyadna ah. Sidaas ayay ninkeeda gargaar iyo cududba ugu ahaan jirtay, ilaa ay isagiiba ka itaal iyo awood badatayba. Boqorku wuxuu ahaa krishtaan aaminsan ilaahnimada Ciise, Calayhissalaamu, in kastoo uu basharnimadiisa iyo inuu dad yahay uu hadana aaminsanaa. Boqorku wuxuu damcay inuu diintiisaas u dhiso kaniisad wayn oo waarta oo ka sarreysa Haykalka Sulaymaan, Calayhissalaamu, oo Quddus ku yaalla. Markaasuu wuxuu dhisay kaniisadda la yiraahdo Ayaa Suufiyaa Kaniisadda Xikmada Muqaddaska ah, oo Istanbul ku taalla, kaddibna Masjid laga dhigay. Dhismaha kaniisaddaas kaddib ayuu Boqorku wuxuu ogaaday inay haweentiisu caqiido middiisa Ciise ka duwan leedahay, ayna aaminsantahay inuu Ciise bashar ahaa oo uusan Ilaah ahayn, siday aaminsanaayeen dariiqada la oran jiray Nasdhuuriyiinta, oo isaga cadawgiisa ahaa. Wuxuu kaloo ogaaday inay haweentiisu caqiidadeedaas ay rumaynsantahay oo marka isaga caqiidadiisa loo fiiriyo gaalnimada ah, ay faafiso. Halkaas ayaa waxaa ka bilawday wada hadal dhex mara Boqorka iyo Boqoradda oo caqiidadooda ku saabsan, ayaduna ay isku dayeyso inay ku qanciso in hadduu caqiidadaas ku sii taagnaado ay Masar iyo Suuriya oo

markaas Boqortooyadiisa ka tirsan ay ka go' doonaan, isaguna uu ka baqayo in hadduu caqiidadeeda ku raaco inay Dawladaha Galbeed ka caroonayaan oo ay u dhammeynayaan, oo ay xukunka kala wareegi doonaan. Sidaas ayuu wuxuu ku raadiyay si uu labadaas aragtiyood isku waafajiyo oo aragtida cusub ay uga soo baxdo oo sidaas ku dhalatah uuna ku xambaaro inay qaataan Dawladaha krishtaanka ah oo idil. Sidaas ayay isaga iyo haweeniisa Theodora waxay isku waafaqeen inay qof walba oo uu Paapaha Roma fadhiya ka mid yahay, ay waajib ku tahay inuu raaco caqiidada Boqorka oo oranaysa inuu Ciise, Calayhissalaamu, Ilaah ahaa. Sidaas ayuu Justiiniyaanus wuxuu ku bilaabay aragtida diktaatooriga ah oo keligiis tashiga ah oo ah inuu Boqorku diinta u madax yahay. Sidaas ayuu shirar ku qabtay, go'aannada uu doono ay kasoo baxaan, qofkii mucaarad ku noqdana, ayna madaxda kaniisaduhu ka mid yihiin, xabsiyada ayuu ku habsadaa. Markaasaa waxaa Istanbuul (oo waagaas Qisdhandhiiniyyah la oran jiray, oo Boqorka Roomaanka ee Qhisdhandhiinus loogu magac daray) soo gaaray inuu Thuu Nuwaas, Boqorka Yaman, diinta yuhuuddana galay, Yuusuf-na uu la baxay, uu dariiqa ka gooyey ganacsatadii roomaanka krishtaanka ah ahayd, ayagiina uu laayay, xoolohoodiina uu dhacay, isagoo sidaas ugu aar goynaya walaalihiisa yuhuudda ah oo Boqortooyada Roomaanka lagu cathaabo, ayagoo ay krishtaanku aaminsanyihiin inay yuhuuddu dishay Ciise, Calayhissalaamu, oo ay ayagu Ilaah ahaan u caabudaan. Boqorku arrinkaas ma uusan danayn, isagoo mashquul ku ahaa xarbiyo waawayn oo Boqortooyadiisa ku foorarey, sida la dagaallanka boqortooyada Furuus ee Iraan. Markaasuu Justiiniyaanus wuxuu ergooyin u kala diray boqorka xabashada oo krishtaan ahaa, magaciisuna Kaalib ahaa iyo hoggaamiyaha nasaarada Yaman degganayd, uuna uga codsanayo inay dagaal ku qaadaan Boqortooyada Iraan, xiriirka ganacsi iyo dhaqaaalena ay u gooyaan, ayagoo ay saddexdoodu isku diin yihiin, oo ay sidaas waajib ku tahay inay u gurmadaan oo ay u hiilliyaan walaalohooda ay isku diinta yihiin oo Roomaanka ah. Gaar ahaan wuxuu ergayguu Justiiniyaanus Boqorka Ximyar ee Yaman uu Boqorka Yamaneed ka codsaday inuu ninka la yiraahdo Qays u magacaabo odayga hoggaamiyah qabiilka Macadd, uuna diyaariyo ciidan wayn oo ka kooban qabiillada Macadd iyo Ximyar, kuna duula Boqortooyada Iraan.

Thuu Nawaas iyo Muslimiinta

Qays wuxuu ahaa nin geesi ah waxtarna ah, ayna dhaleen madaxda qabiilkiisu. Boqorka Ximyar wuxuu ergayga Boqorka Roomaanka ka ballan qaaday wax suuban inuu yeeli doono, ballankuu galayse ma uusan oofin. Boqorka Ximyar ee Thuu Nawaas wuxuu u arkay inay Boqortooyadiisa ay Dawladdo iyo dad krishtaan ahi hareereeyeen, doonayaanna inay xukunka kala wareegaan, oo xagga Koofureedna waxaa ka xigah boqortooyada xabashada ee Al Najaashiyyi, caasimadeeduna Aksuum tahay, xagga Waqooyina waaba ayada uu Boqorka Roomaanku ka codsaday inuu Qays madax uga dhigo qabiilka wayn ee Macadd. Wadnaha Boqortooyadiisana, ee Gobolka Najraan, waaba ayaday ku sugan tahay xarun ka mid ah kuwa ugu xoog badan ee

nasaarada. Markaasuu wuxuu is tusay in hadduu krishtaanimada dalkiisa ka tirtiro, uu ciidammada Boqorradaas krishtaanka ah ka ammaan helayo markay dhuullaankiisa usoo dhaqaaqaan, oo ay dalkiisa soo weeraraan. Markaasuu Thuu Nawaas wuxuu nasaarada muslimiinta ahaa ee gobolka Najraan ee dalkiisa degganayd, kuna taagnayd Diinta islaamka ee Nabi Ciise, Calayhissalaamu, usoo jeediyay inay Diintooda ka baxaan oo ay diintiisa yuhuudda soo galaan. Markaasey ka diideen. Markaasaa waxaa kacdoomay muslimiinta degganayd magaalada Thafaar (waa tha korka dhibic ku leh oo caynka ka horreysa), oo mar caasimadda Yaman ahaan jirtayba, oo axbaashta ahaa oo hub qaatay. Markaasuu Thuu Nawaas farriin u diray uu ku leeyahay: "Haddaad is dhiibtaan oo aad Thafaar gacanta ii soo gelisaan, wax dhibaato ah idiin geysan maynno, bal waxaan idinku celineynaa arliga al xabashah adinkoo nabad qabah." Markaasey hadalkiisaas rumaysteen, oo ay usoo bexeen, waxayna ahaayeen saddex boqol oo nin oo dagaalyahan ah. Markaasuu inta qabqabtay wuxuu u dhiibay yuhuudda oo wada dishay. Markaasey intay yuhuuddu Thafaar gashay ayay masjidyadooda gubtay oo ay dab qabadiisay, ayada iyo intii dhexdeeda ku jirtayba. Markaas kaddib Thuu Nawaas wuxuu warqad u dhigay ninka la yiraahdo Al Xaarith oo madaxda degmada Najraan ka mid ahaa, uuna ku waydiisanayo inuu u yimaado isago wada inta raggooda hub qaadka ah. Al Xaarith wuxuu ahaa Nasaara. Markuu warqadda Boqorka Thuu Nawaas helay ayuu Al Xaarith raggiisa soo aruuriyay oo uu isku keenay, wuxuuna aaday Thafaar oo ahayd caasimadda Dawladda. Intuu halkaas u sii socday ayuu wuxuu maqlay siduu Thuu Nawaas muslimiinta Thafaar u khayaanay, markaasuu gaddoomay oo uu Najraan dib ugu laabtay, halkaasoo uu isku ilaalay, isaga iyo walaalihiisa muslimiinta ahba. Markaasuu Thuu Nawaas Najraan ku duulay, markuu tegeyna uu hareereeyey oo uu muddo dul fadihiyay, ilaa ay gacantiisa kasoo gashay. Markaasuu dadkii muslimiinta ahaa wuxuu usoo jeediyay inay Diintooda ka baxaan oo ay diinta yuhuudda galaan, ayaguna way ka diideen. Markaasuu dhufaysyo dhulka ka qoday oo uu jeexay, uuna qoryo ku guray, dabna uu ku shiday. Markaasuu muslimiinta wuxuu ka dhigay qaar uu seef ku laayo iyo wuxuu dabkaas ku dhex rido. Waxaa sidaas ku shahiiday Al Xaarith, oo noqday mid kaniisadaha looga heeso, loogana duceeyo. Waxaa la dilay in ka badan labaan kun oo muslim oo dabka lagu riday.

Daws iyo Boqorka Roomaanka Justiiyaanus

Waxaa dilkaas ka baxsaday ninka la yiraahdo Daws thaa Thaclabaan bin Xasaan bin Tubbaan Ascadu Abii Kariba, oo uu dhalay Boqorkii Yamaneed oo uu dilay walaalkiis Camr, kaddib markay reer Yamani sidaas kula talisay. Sababta ay reer Yamani Boqorkaas dilkiisa ugu talisay, oo ay walaalkiis kula taliyeenna inuu dilo waxay ahayd isago Xasaan ahaa Boqor xarbiyo badan oo dalal badan oo Carab iyo cajam ahba ku duulay. Markaasuu mar uu duullaan qaaday, markuu joogo arliga Ciraaq ayay ragga Yamaneed oo ciidankiisa ahaa isagii iyo dagaalkaba naceen, waxayna dooneen inay ehelkooda iyo dalkooda dib ugu noqdaan. Markaasey waxay la hadleen walaalkiis, oo isaguna

ciidankiisa ka mid ahaa, waxayna ku yiraahdeen: "Walaalkaa Xasaan dil, annaguna Boqor ahaan ayaan kuu caleemo saareynnaa, dalkeennana dib noogu celi." Markaasuu ka yeelay.

Marka Xasaan, Boqorkaas la dilay wiilkiisii oo magaciisu ahaa Daws Thaa Thaclabaan, ayaa dilkaas Thuu Nawaas kasoo baxsaday, oo saxrada kusoo cararay, socdayna ilaa uu Istanbuul ka tago, taasoo caasimadda Boqortooyada Roomaanka ahayd. Markaasuu Boqorka Roomaanka oo krishtaanka ah u tegey, wuxuuna uga warramay wixii dhacay iyo wixii Nasaarada lagu falay, wuxuuna tusay Kitaab Injiil ah oo uu watay oo qaarkiis gubtay, wuxuuna waydiistay inuu Thuu Nawaas uga hiilliyo. Justiiniyaanus, Boqorka Roomaanku arrinkaas wuu ka fakaray, oo lama uusan laab kicin, wuxuuna is tusay inuusan khayr iyo dani ugu jirin u hiillinta Nasaarada Najraan, kuwaasoo aaminsanaa inuu Ciise, Calayhissalaamu, bashar ahaa iyo Nabi iyo Rasuul Ilaahay soo diray, caqiidadaasoo ka duwan middiisa uu isagu rumaysan yahay oo oraneyna inuu Ciise Ilaah ahaa. Wuxuu kaloo is tusay inay Najraani dalkiisa ka fogtahay: marka yaa og waxay Boqortooyada Iiraan suubin doonto hadduu ciidankiisa Najraan u diro oo uu xarbigaas dhex galo. Markaasuu wuxuu Daws ku yiri: "Beledkaagu waa ka fog yahay beledkeenna, gacanteenuna ma gaarto, oo ma awoodno inaan ciidankeenna ku qabanno, waxaanse warqad u dhigayaa boqorka xabashada oo isaguna diintaan ku taagan, beledkiisuna uu beledkiinna midkeenna uga dhawyahay. Marka isagaa ku taageeraya oo kuu hiillinaya oo kuu gargaaraya, kuna daafacaya, kii ku gardarreystana kaaga aar goynaya, adiga iyo dadka diintaada ku jirana ka xalaaleystay wuxuu ka xalaaleystay."

Markaasuu Justiiniyaanus wuxuu warqad u dhigay walaalkiisa xagga diinta Kaalib boqorka xabashada, uuna ugu sheegayo xaqqa uu ku leeyahay iyo waxa kasoo gaaray dadkay isku diinta yihiin, uuna ku amrayo inuu Daws u hiilliyo, ugana aar gooyo midka isaga iyo dadkay isku diinta yihiin kusoo xadgudbay. Warqaddiina wuxuu ugu dhiibay Daws laftiisa, kaasoo Istanbuul kasoo baxay, soona aaday Aksuum, caasimadda dawladda al xabashah. Waxaa ayaguna boqorkaas xabashada u yimid dad reer Najraan ah oo waydiistay inuu ku taageero la dagaallanka Thuu Nawaas. Markaasuu Al Najaashiyuu wuxuu raggaas ku yiri: "Anigu rag iyo ciidan dagaallama waan hayaa, mase hayo doonyo aan raggaas saaro (oo Badda Cas ka tillaabiya). Marka waxaan warqad u dhigayaa Justiiniyaanus, oo aan waydiisanayaa inuu maraakiib ii soo diro." Markaasuu boqorka xabashadu wuxuu warqad u dhigay walaalkiis Justiiniyaanus, uuna ku waydiisanayo doonyo uu kula dagaallamo Yaman, uguna hiilliyo diinta Al Masiixu. Sidaas ayay labadaas Boqor ugu heshiiyeen la dagaallanka Yaman. Markay maraakiibtii soo gaareenna Al Najaashiyuu wuxuu saaray ciidan toddobaatan kun oo nin ka kooban, wuxuuna taliye uga dhigay ninka la yiraahdo Aryaadh, kaasoo uu amrkaan siiyay: "Haddaad ka adkaatid dalool raggooda dil (waa marka saddex meelood loo qaybiyo meel), dalool arligoodana kharaabi oo burburi, dalool haweenkooda iyo caruurtooda addoonnimo u qaado." Ciidankaas uu Aryaadh taliyaha u ahaa waxaa ka mid ahaa Abraha, oo isaguna qorshihiisa u gaarka ah watay. Ciidankii Badda Cas ayuu ka tillaabay, uuna xeebta Yaman ku degay. Thuu Nawaas markuu

maqlay khabarkooda, ayuu odayadii qabaa'ilka Yamaneed u ciddiray inay ku soo biiraan oo ay dalkooda wadajir u daafacaan. Wayse ka diideen oo waxay yiraahdeen: "Qabiil walba dhulkiisa ha daafacdo." Sidaas ayay talada iyo cududda Yamani ku kala dhanbalantay, oo ay u kala firdheen. Kaddib waxaa iska horyimid ciidankii xabashada oo uu Aryaadh hoggaaminayo iyo ciidanka qabiilka Ximyar oo uu Thuu Nawaas hoggaaminayo. Ciidanka Ximyar waa laga adkaaday, goobtaas ayaana Thuu Nawaas isagoo dagaallamaya lagu dilay. Markaasaa nin la yiraahdo Calqamatu Thuu Jadan, oo Thuu Nawaas geeridiisa u booyaya wuxuu tiriyay gabay ay tixdaani ka mid tahay:

"Awa maa samicat bi qatli Ximyaru Yuusufan

Akala al thacaalibu laxmahu lam yuqbar."

Tixda macneheedu waxaa weeye:

"Ximyar miyeeyan maqlin dilka Yuusuf

Hilibkiisa dawacooyinka ayaa cunay, lamana duugin."

Soo ma aha geeri la mid ah tii lagu dilay Koofil (waa Richard Corfield, oo gaal ingiriis u dhashay oo madaxda ciidammada ingiriiska dalka Soomalida u fadhiday ka mid ahaa, madaxna u ahaa Rukuubleys - Camel Corps- laguna dilay dagaalkii Ruuga -Dulmadoobe- oo Daraawiishta iyo Ingiriiska dhex maray sagaalka bisha Oktoobar ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo toban) askarigii ingiriiska ahaa oo uu Sayyid Maxammad Cabdille Xasan dilay, kaddibna uu yiri:

Koofil

"Aada Koofilow jiiayaan, dunida joogayne
Adigaa jidkii lagugu wadi, jimic la'aaneede
Jahannama la geeyow haddaad, aakhiruu jahato

Nimankii jannow kacay war bay, jirin inshaalleeye
Jameecooyinkii iyo haddaad, jowhartii aragto
Sida Eebahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda

Daraawiish jikaar nagama deyn, tan iyo jeerkii dheh
Ingiriis jabyoo waxaa ku dhacay, jac iyo baaruud dheh
Waxay noo janjuunteenba waa, jibashadiinnii dheh

Jigta weerar bay goor barqaa, nagu jiteeyeen dheh
Anigana Jikrey ila heleen, shalay jihaadkii dheh
Jeeniga hortisey rasaas, igaga joojeen dheh

Jiraayadey ila dhaceen, jilic afkoodii dheh
Siday kuugu jeexeen magliga, jararacdi sheegoo
Billaawuhu siduu kuu jarjaray, jirarka u muuji

Nafjeclaysigii baan u iri, jaallow iga daa dheh

Jaljalleecadii baa wadnaha, jeeb ka soo ruqay dheh
Jeedaaladii baa indhuhu, kor u jillaadmeen dheh

Jimic kagama helin tuugmadaan, jiriyeey ruuxii dheh
Markaan juuq iraadaba afkey, iga jifeeyeen dheh
Dhaaxaan jalaacaye dheg baan , jalaq la ii siin dheh

Goortaan jarreerana gefoo, nolol ka jaanqaaday
Sida jananadii hore tashigu, igu jaguugnaa dheh
Taladii jinnigu ii hormaray, jaasadeed helay dheh

Jiidaha xanuunka leh markii, la igu jeeraarshay
Jibaadka iga soo baxay dadkii, jiiifka qaban waa dheh
Markay rubaddu jaw tiri or bay, iga ag jiibsheen dheh

Jirkaygii bahal baa cunoo, jiiitay hilibkii dheh
Jurmidiyo baruurtii dhrwaa, jugux ka siiyaa dheh
Jiljilladiyo seedaha tukay, igaga jaadeen dheh

Haddaan lays jikaareyn tolkey, laga jil roonaa dheh
Weligood waxaa lagu jaraa, jilibdhig duullaan dheh
Daraawiishi waa jibindhowga iyo, jowga soo bixi dheh.

Kaddib ayaa waxaa Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan soo gaartay inay
koofil walaashiis weer madow xiratay, ingiriisna ay waydiisatay inuu siiyo
ciidan ay Daraawiish kula dagaallanto oo ay walaalkeed u aargoysa.
Markaasuu wuxuu Sayyidku tiriyay gabay magaciisu yahay Koofil walaashiis,
wuxuuna ku yiri:

Koofil Walaashiis

Casayrow adaa muudayoo, meel xilluu kiciye
Adigaaa magaalooyinkii, mari ishaaleeye
Warka lagama maarmee haddii, madal lagu yeesho

Mid yar baan ku sii farahayaa minka ka higaadi
Inkastey majaha kaa xiraan, muuji hadalkeyga
Gabaygaa ha lagu maadsadee, uunka maqashiiya

Waa mahad Ilaahay haddii, Koofil mowd yahaye
Ingiriisba meeshii ka maray, maara waayuhuye
Maantana midkii soo baxaa, mowtigiis galay dheh

Midgaantii walaashiis ahayd, waa tan murugoone
Intay calal madow qaadatay, oohin mirataa dheh
Waa wax maanka laga dhoofiye, ha iska mowleyso.

Aryaadh markuu Thuu Nawaas ka adkaaday, wuxuu meel mariyay amarkii Boqorkiisa, oo dalool raggii Yamanna wuu laayey, dalool arligaasna wuu burburiyay, dalool haweenkii iyo caruurtiina wuxuu addoon ahaan ugu diray Al Najaashiyyi ee Boqorka arliga Xabashada, oo suuqa lagu kala gatay.

Markaasey Yamani maahmaah ka dhigatay wuxuu dhibaato Daws Thaa Thaclabaan usoo hoggaamiyay, oo xabashada ah, oo Yaman waxay ku fashay ku fashay. Maahmaahdaasna wa sidatan: "**Laa ka Dawsin wa laa ka aclaaqi raxlihi**", oo ah "Maya oo ma dooneynno wuxuu Daws falay oo kale iyo wuxuu watay," oo amxaaradu keenay ah. Gabayo badan oo dheerdheer ayay reer Yaman ka tiriyeen hoogga iyo ba'da ay amxaaradu dadkooda iyo dalkooda ku faleen, siday dalkii iyo daarihii u burburiyeen iyo waxay kuwa madow haweenkooda ku faleen. Gabayaagaas waxaa kuwa ugu af dheer ka mid ahaa Thuu Jadan Al Ximyariyyi. Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan kuwa amxaarada iyo gaalada Soomilida Muslinka ah ssoo gelisay, oo Soomaalida waxay ku faleen ku falay, wuxuu ka yiri waxaa ka mid ahaa, gabayga **Afbakayle** la yiraahdo.

Jaasuus

Jaasuus waxaa la yiraahdo qofka baara sirta qof kale, sirtaas uu helayna u geynaya qof kale si qofkaas uu kasoo qaaday wax loogu yeelleeyo, oo lagu dhibaateeyo. Taxassus-na waxaa la yiraahdaa markuu sirta qofkaas kale uu raadinayo inuu isagu ogaado, uusanse cid kale u geyneyn. Jaasuusnimadu ma bannaana, qofka ku kacana wuxuu diiday amarka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, wuxuu Aayadda labo iyo tobnaad ee Suuratu Al Xujuraati ku yiri: "**Wa laa tajassasuu**(12)". Oo macneheedu yahay: "Hana is jaasuusina". Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la wariyay inuu yiri: "**Wa laa tajassasuu**", oo ah: "Hana is jaasuusina." Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu u tabaabusheysanayey inuu Makkah ku duulo markay ahayd sanadka sideedaad ee Hijrada, wuxuu Ilaahay Tacaalaa ka baryay inuu reer Makkah ka indha tiro kana dhega tiro khabarkiisa, si uu si kedis ah beledkooda ugu dul tago, wuxuuna yiri: "**Allaahumma khuthi al cuyuuna wa al akhbaara can Qurayshin xattaa nabghattuhaa fii bilaadihaa.**" Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahayow, Quraysh indhohooda iyo akhbaartaba ka qaad inaan usoo soconno si aan beledkooda si kedis ah ugu dul tagno." Ilaahayna waa ka yeelay. Markaasaa nin asxaabtiisa ka mid ah, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa wuxuu warqad u dhigay reer Makkah, isagoo u sheegaya inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo hayo, ayaguna ayan awood u lahayn inay iska celiyaan ciidankiisa. Ninkaasu wuxuu warqadda ugu dhiibay haweeney Makkah u socta, wuxuuna ku siiyay lacag ijaarkeeda ah. Markaasuu Sayyidinaa Jibriil, Calayhissalaamu, arrinkaas Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ka daba diray rag asxaabtiisa ka mid ah inay warqaddaas kasoo qaadaan, ayna ku gaari doonaan meesha la yiraahdo al Khulayqah. Nabigu, Sallaa Allaahu

Calayhi Wasallam, wuxuu asxaabtiisaas ku amray in hadday haweentaasu warqadda u dhiibto ay ka qaataan, ayadan iska daayaan, ayna ka horwareegaan inay meeshay u socotay aado, hadday u diidana ay dilaan, kaddibna ay warqadda kasoo qaataan. Markay meeshuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u magacaabay uga daba tageen, ayay inkirtay inay warqad sidde, markaasuu Calii bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo raggaas ka mid ahaa, wuxuu ku yiri: "Ilaahay ayaan ku dhaartay inaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, been loo sheegin, annagana aan been naloo sheegin, ee ama warqadda ayaad soo bixineysaa ama dharka ayaan kaa dhigaynaa." Markay aragtay siday uga dhab tahay, ayay waxay tiri: "iga sii jeeso." Markaasuu kasii jeestay. Markaasey intay timaha madexeeda furfurtay ay dhexdooda warqaddii kasoo bixisay. Markay warqadda ka qaateenna jidkeeda ayay ka wareegeen. Markii warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo keenay, wuxuu u yeeray ninkii dhigay oo intuu warqadda tusay ayuu wuxuu weydiiyay inuu isagu dhigay iyo waxa ku xambaaray. Markuu ninku qirtay, sheegeyna waxa ku xambaaray, ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sheegay inuu ninkaasi runta sheegay. Markaasu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, i daa aan qoorta ka gooyee, isagoo uu ninku munaafaq noqday." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Innahu qad shahida Badran"**, oo macneheedu yahay: "Maya, maxaa yeelay wuxuu goob joog ka ahaa oo ka qayb galay duullaanka Badr." Culummadu, ayna ka mid yihiin Maalik iyo Axmad, waxay yiraahdeen inay sababtuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cumar ugu diiday inuu dilo ay ahayd inuu ninkaasi Badr ka qayb galay, ayanna ahayn muslinnimadiisa. Sidaas ayay waxay yiraahdeen in waxa jaasuuska dilidda ka ka reebi kara ay tahay inuu Badr ka qayb galay, sidaas daraaheedna qofkii aan Badr ka qayb gellin ay tahay in la dilo. Zamankaanna ma noola qof Badr ka qayb galay. Ninkaas ayuu Ilaahay Tacaalaa kusoo dejiyay Aayadaha kow ilaa saddex ee Suuratu Al Mumtaxinah, kana bilaabanaya: **"Yaa ayyuhaa allathiina aamanuu laa tattakhithuu caduwwii wa caduwwakum awliyyaa'a(1)"**, oo macneheedu yahay: "Kuwa xaqqa rumeeyow, ha ka dhigannina cadawgeyga iyo cadawgiinnaba - oo ah gaalada- sokeeye(1)." Taasi waa markuu jaasuusku muslin yahay. Hadduuse jaasuusku gaal yahay labo iskuma khilaafsana inay diliddiisu waajib tahay, ayadoo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jaasuus gaal ah dilay. Wuxuu Al Bukhaarii Xadiithkiisa saddex kun iyo kow iyo konton Salamah bin Al Akwac ka wariyay inuu aabihiis yiri: "Waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo safar ku jira -waana duullaanka Hawaazin ee kan Makkah ku xigay- u yimid nin gaal ah. Markaasuu asxaabtiisa la fariistay oo uu la sheekeystay, kaddibna uu baxsaday. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Adhluuuu wa aqtuluuuu"**, oo macnehiisu yahay: "Raadiya oo ka daba taga, kaddibna dila." Markaasaan dilay, wuxuu sitayna la i siiyay -waana faraskiisa, iyo wuxuu wataybay." Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Muslim, Abuu Daaud iyo ghayrkoodba. Al Bukhaarii wuxuu kaloo Nabiga, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay inuu yiri: **"Iyyaakum wa al thanna, fa inna al thanna akthabu al xadiithi, wa laa taxassasuu, wa laa tajassasuu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "iska ilaaliya malada, maxaa yeelay maladu waa warka ugu xun, hana is baarina, hana is jaasuusina." Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu caddeeyey inuusan jaasuusku mu'min ahayn, wuxuuna yiri: **"Yaa macshara man aslama bi lisaanihi wa lam yafid al iimaanu ilaa qalbihi! Laa tu'thuu al muslimiina, wa laa tattabicuu cawraatihim. Fa innahu man yattabic cawrata akhihi al muslimi, yattabici Allaahu cawratuhu. Wa man yattabici Allaahu cawratuhu yafdaxuhu wa law fii jawfi raxlihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Dadkiinna carrabkooda ka islaamayow, iimaankuna uusan qalbigooda gelinow! Muslimiinta ha dhibina, sirtoodana ha raadraacina oo goobina, oo kan sirta walaalkiisa muslinka ah raad raaca, si uu u kashifo si dhibaato loogu gaarsiiyo, Ilaahay ayaa iasguna sirtiisa raad raaca. Qofkuu Ilaahay sirtiisa raad raacana, wuu fadeexeynaa, xattaa gurigiisa dhexdiisa." Waxaa wariyay Al Tarmathii iyo Ibnu Maajah.

Abuu Al Farj bin Al Jawziyi wuxuu kitaabkiisa Bustaanu Al Waacithiina wa Riyyaadu Al Ssaamiciina, laguna daabacay Daaru Al Manaari ee Al Qaahirah bogga laba boqol afar iyo saddon ku wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man mashaa fii ifshaa'i caybin aw kashfi cawratin li muslimin kaana awwalu khudhwatin yakhdhuuhaa yadacuhaa Allaahu fii al nnaari, wa kashafa Allaahu cawratuhu yawma al qiyaamati calaa ru'uusi al ash-haadi thumma yu'maru bihi ilaa al nnaari."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qofka u dhaqaaqa inuu faafiyo ceebta ama kashafo oo muujiyo cawrada iyo wuxuu qarsanyo qof muslin ah, tillaabada ugu horreysa oo uu ku tillaabsado maalinta qiyaame wuxuu Ilaahay ku gelinayaa naarta, Ilaahayna wuxuu u kashifayaa oo daboolka ka qaadayaa cawraadkiisa iyo wuxuu qarsanayay maalinta qiyaame inta dad oo maalintaas maxsharka goob joogga ka ah, kaddibna waxaa la amrayaa in naarta la geliyo."

U magaabidda amxaarada Bishop Makkah iyo Zaylac

Kitaabka la yiraahdo "The Prester John of the Indies wuxuu yiri: "Boqorka amxaaradu wuxuu nin burtuqiis u dhashay u magacaabay inuu noqdo Wadaadka sare ee Bishop diinta krishtaanka ah ee Makkah Al Mukarramah iyo Zaylac, uuna boqorka burtiqiiska warqad ugu dhigay, uuna weydiistay inuu ku waafaqo. Umayse ahaanin oo labadaas midna waa geli waayey."

Xadiithka Asmaa'u bintu Cumays ee Amxaarada

Al Bukhaarii wuxuu ka wariyay saxaabiyada wayn Asmaa'u bintu Cumays haweenta Abuu Bakr Al Siddiiq oo u dhashay Muxammad bin Abii Bakr Al Siddiiq, ka mid ahaydna asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee arliga amxaarda u haajiray inay tiri ayadoo Cumar ay wada

hadlayaan: "Maya oo wa Allaahi inayan sidaas ahayn. Adinku waxaad la joogteen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo kiinna gaajeysan cunno siinayay, kiinna jaahilka ahna waaninayay oo wax barayay, annaguna waxaan ku sugnayn arliga nacaybka ee amxaarada, halkaasoo aan u tagnay Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, daraadood." Al Bayhaqiina wuxuu kitaabkiisa Dalaa'ilu Al Nubuwwah ku wariyay Xadiithkeeda iyo inay tiri: "Ardu al bucadaa'i al bughadaa'i" oo al doktorah Saamiyah Cabdu Al Caziiz Munaysii ay kitaabkeeda Islaamu Najaashii Al Xabashah ku tiri: "Culummadu waxay yiraahdeen: al bucadaa'u waa kuwa xagga nasabka ku fog, al bughadaa'u-na waa kuwa xagga diinta ku fog, ayagoo ay amxaaraday u tageen gaalo ahaayeen intaan ahayn Al Najaashiyyu oo islaanimadiisa dadkiisa ka qaridayay." Sidaas ayay ku tiri bogagga labo iyo sideetan iyo boqol iyo afar iyo toban.

Amxaaro arli soomaaliyeed hore uma soo gelin

Kitaabka la yiraahdo "The Prester John of the Indies" waxaa qoray nin wadaad krishtaan ahaa una dhashay burtuqiis oo la socday Danjiraha burtuqiiska yimid arliga amxaarada sanadka kun iyo shan boqol iyo labaatanka, joogayna ilaa kun iyo shan boqol iyo lix iyo labaatanka. Kitaabkaas waxaa daabacday ururka ingiriiska ah oo la yiraahdo The Hakluyt Society kuna daabacday The University Press, Cambridge kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo lixdanka. Raggaas faallada ku daray waxay bogga afar boqol iyo shan iyo soddon ku yiraahdeen: "Nor did any king of Ethiopia manage to penetrate very far into the Somali country", oo macneheedu yahay: "Marna uma ayan suurtoobin inuu boqor amxaaro (Waa askartiise) ahi gudaha dalka Soomaaliya galo."

Amxaar ayaa dilay Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib, adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam

Waxshiyyu wuxuu ahaa addoon amxaaro ah oo uu leeyahay Jubayr bin Mudhcim oo adeerkiis Maalinta Badar lagu dilay. Waxshiyyu wuxuu yiri: "markaasuu markay Qurayshi Uxud soo aaday ayuu Jubayr wuxuu igu yiri: "Haddaad disho Xamzah, Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiis, xor ayaad tahay." Markaasaan ciidanka soo raacay. Waxaanna ahaa nin amxaar ah warankana u tuura siday amxaaradu u tuurto. Wayna yar tahay inaan la gafo waxaan ku tuuro. Markaasey markay labada ciidan iska hor yimaadeen ayaan waxaan raadiyay Xamzah, una kuur galay, ilaa aan ka arko isagoo ciidanka dhexdiisa dagaallamaya oo aad moodid awr boor leh, raggana seeftiisa ku laynaya, ayanna jirin cid iska celin karta. Markaasaan wa Allaahi anigoo isku diyaarinaya oo daba jooga, geedna isaga qariyay ama dhagax weyn gadaashiis si uu iigu soo dhowaado, ayaa waxaa iiga hormaray Sibaac bin Cabdu Al Cuzzaa. Markaasuu markuu arkay ayuu Xamzah wuxuu ku yiri: "Aniga ii kaalay wiilka haweenta kintarrada goysow!" oo ninkaas hooyadiis ayaa gabdhaha Makkah ku gudi jirtay. Markaasuu mar seefta ku dhufatay, oo

uusan madaxiisa la gafin oo dilay. Markaasaan warankayga gilgilay oo markaan raalli ka noqday aan isaga ku tuuray. Markaasuu wuxuu ka galay xuddunta hoosteeda, waa xudunta ilaa gumaarka inta u dhexeysa, oo uu kaddibna labadiisa lugood dhexdooda kasii baxay. Markaasuu wuxuu damcay inuu xaggayga soo aado, wuuse kari waayey. Warankana waan u daayey ilaa uu ka dhintay. Markaasaan u imid oo aan warankayga qaatay, aanna xeradeenna u laabtay oo aan dhexdeeda fariistay, anigoo aan muraad kale lahayn. Waxaanna u dilay in la igu xoreeyo. Markaasaan markaan Makkah imid la i xoreeyey."

Duminta Kacbada ee amxaarada

Amxaaro ayaa Kacbada duminaysa, siduu ibnu Cabbaas wariyay, Allaha isaga iyo aabihiisba raalli ka noqdee, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**Ka annii bihi aswada afxaja yaqlacuhaa xajaran xajaran.**" Waa Xadiithka kun iyo shan boqol iyo shan iyo sagaashan ee Al Bukhaarii oo macnihiisu yahay: "Waaba sida anigoo u jeedaba, isagoo madow, oo hogfoh leh (lugihiisu ay kala fogyihiin) oo fufjiinaya isagoo dhagax dgagax u qaadaya."

Abuu Hurayrana, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**Yukharribu Al Kacbata thuu al suwayqatayni mina al xabashahti.**" Waa Xadiithka kun iyo shan boqol iyo lix iyo sagaashan ee Al Bukhaarii, oo macnihiisu yahay: "Kacbada waxaa duminaya midka labada lugood oo aad dhuudhuubaan (lafo yaryar, hilibna aan lahayn) leh oo Al Xabashah u dhashay."

Markaas Kacbada la duminayo waa mar weynaanteeda iyo jecelkeeda iyo haybaddeedaba iyo sharaftedaba Samada kor loo qaaday, uusanna adduunkaanba joogin qof muslin ah, adduunkana aan lagaba aqoon oo la illoobay waxay tahay laa ilaaha illaa Allaahu, oo dadku waa wada gaalo, waana iska guri ka samaysan dhagax la is dul saaray, oo cid dan ka leh ayan jirin.

Faca Hargeysa

Ninka ingiriiska u dhashay oo la yiraahdo **Ralph E. Drake-Brockman**, wuxuu ka tirsanaa shaqaalaha caafimaadka ee dawladda gumaysatada ahayd ee ingiriiska ee waqooyiga Soomaaliya, qarnigii lasoo dhaafay bilowgiisa, wuxuuna dhigay kitaabka la yiraahdo **British Somaliland** oo sanadka **kun iyo sagaal boqol iyo labo iyo tobanka** lagu daabacay London, Hurst&Blackett, Ltd, Paternoster House, E.C. Ninkaasu wuxuu bogga laba boqol iyo sagaal iyo toban ku yiri: "Sheikh or Au Barkhadle is said to have died about 385 years ago." Warkaas macnihiisu waxaa weeye: "Shiikh ama Aw Barkhadle waxaa la sheegay inuu dhintay qiyaas saddex boqol iyo shan iyo sideetan sano mar hadda laga joogo." Aw Barkhadle waa ninka hindisay alif la kordhebey alif la hoos dhebey alif la goday iyo sida Quraanka dhigiddiisa loo barto. Kutubbo kale waxaan ka akhriyay inuu ahaa Xasani, oo uu yahay dhashay Al Xasan bin

Faadhimaha gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Claayhi Wasallam. Aw Barkhadle ama magaciisa kale oo ah Yuusuf Al Kawnayn gabadhiisa ayaa waxaa guursaday Fiqi Cumar, oo ah Bakri, isagoo ku abtirsada Abuu Bakar Al Siddiiqu Allaha raalli ka noqdee, markaasay waxay u dhashay Looboge Qudhub iyo Calii oo ah dadka maanta shikhaasha la yiraahdo. Siduu gabadhiisa u siiyayna riwaayadaha la wariyay waxaa ka mid ah middaan soo socota.

Walaalkay Al Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu igu yiri: "Xaaji Naasir Cali Maslax oo Yamani u dhashay wuxuu ka mid ahaa xildhibaannada soo galay oo ka mid ah kun sagaal boqol lix iyo kontonka baarlamaanka daakhilga (Assemblea Costituzionale della Somalia) ah ee Soomaaliya intay walaayada talyaaniga ku jirtay. Waana isla ninka lahaa basaska la raaco ee Muqdisho. Markay taariikhdu ahayd kun sagaal boqol afar iyo toddobaatan miilaadiga ayaa anigoo jooga magaalada Xudaydah ee dalka Yaman wuxuu Xaaji Naasir igu yiri: "Yuusuf Al Kawnayn oo ah dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, (waana Xasanii oo wuxuu ku abtirsadaa Al Xasanu bin Faadhimah, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) wuxuu hal sano ama muddo fadihiyay magaalada Zaylac si uu diinta u fidiyo oo looga qaato. Markaasaa loo imaan waayay. Markaasuu khalwo galay oo lagu yiri: "Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa diinta la fidiyay oo u gargaaray Abuu Bakr Al Siddiiqu ee soo wado fariciisa si ay diinta kuula fidiyaan. Markaasuu wuxuu yimid Xudaydah oo uu markaas magaalada la yiraahdo Beledu Al Faqiih , o macneheedu yahay beledka ninka faqiiha ah oo fiqiga yaqaanna, oo Xudaydah afartan kiiloomitir xagga Tacis ka xigta kasoo watay Fiqi Cumar, oo ah Looboge aabihiis, uuna ku daray gabadhiisa inuu Zaylac usoo raaco. Markaasuu Zaylac la yimid, gabadhuna ay u dhashay Looboge oo magaciisu Axmad yahay iyo Qudhub oo magaciisu Cumar yahay. Cali ayay u dhashayna waa la yiri. Cali hooyo kale ayaa dhashayna waa la yiri. Markaasuu Fiqi Cumar wiilashiisa diinta baray oo u Axmad ku yiri: "xagga bari aad oo diinta faafi", Cumarna ku yiri: "xagga galbeed aad ee diinta faafi". Wa Allaahu aclamu. Waa intaas warka Al Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan.

Riwaayado kalena waa la wariyay, waxaanna ku wariyay kitaabkayga kale ee ah midka afar iyo tobnaad ee Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee cinwaankiisu yahay "Dhibkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tolkiis kala kulmay."

Taasu waxay ku beegan tahay sanadka kun iyo shan boqol iyo toddoba iyo labaatanka Miilaadiga ah, taasoo waafaqsan sanadkuu Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh sheegay inuu Shiikh Abaadir Fiqi Cumar noolaa, sidaan kor kusoo aragnay. Maadaama uu Fiqi Cumar guursaday inanta Shariif Aw Barkhadle, oo ah Yuusuf Kawnayn, waxay u badan tahay inuu ka da' yaraa, oo uu sidaas nolol uga dambeeyey. Hadday xisaabtaasu sax tahayna, Fiqi Cumar wuxuu noolaa qiyaas afar boqol oo sano iyo xoogaa. Runtana Rabbi ayaa og.

Ralph E. Drake-Brockman wuxuu bogga toddoba iyo lixdanaad ee kitaabkiisa ku yiri: "Hargeysa waa beel culummo degtay, ninka degiddeeda bilaabayna

waa **Shiikh Madhar** oo weli nool. Sawayne wuxuu qabaa inuu beeshaan bilaabay **lix iyo soddon sano mar laga joogo** shiikha oo da' wayn oo Harar ka yimid, halkaasoo uu hore labaatan sano ku noolaa." Sidaas ayay Hargeysa waxay ku ahayd "Mullah settlement" oo ah "Beel dariiqo", ayuu yiri, "magaceeda ay soomaalidu u taqiinnay uu ahaa "Harrar, ayadoo uu shiikhu asalkiisa magaalada Harrar ka yimid.". Marka, hadduu warkaasu sax yahay, Hargeysa waa degmo fac yar oo aan qadiim ahayn, oo hadday kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo toban jirtay lix iyo soddon waxaa la asaasay kun iyo sideed boqol iyo toddoba iyo sideetan, ahna sanadka Dawladda Harar inta la weeraray lagu daray boqortooyada Shoa.

Ninka talyaaniga ah ee la yiraahdo Enrico Cerulli wuxuu kitaabkiisa Studi Etiopici Vol. I La lingua e la storia di Harar bogga saddex iyo afartan ku dhigay inuu: "Isla sanadkaas ayuu Amiir Cabdu Allaahi ku laayay si waxashnimo ah Harti, oo u dhow Garasley, dariiqa Galdessa, ergada juqraafiga talyaaniga ee uu hoggaaminayo conte Porro. Markaasuu Menelik, boqorka Shoa, isagoo taas marmarsiiyo ka dhiganaya, ahaana gaashaanbuurka talyaaniga, ayuu imaarada weeraray. Kaddibna iska horimaad gaaban oo fudud dabadeed kana dhacay Callanqo lixda jannaayo kun iyo sideed boqol iyo toddoba iyo sideetan ayuu Harar galay, uuna magaalada iyo dawladda hararba dawladda Showa oa kusoo daray. Waxaana la socday ciidan iyo saraakiil talyaani ah."

Marka waxaa halkaas ka muuqata in Hargeysa la asaasay isla sanadkaas Harar dawladda Shoa lagu daray, oo ay markaas culummo reer Harar ah, uuna ka mid yahay Shiikh Madar, ay Harar kasoo guureen oo ah Hargeysa aasaaseen, una bixiyeen Harar.

Fiicnaanta soomaalida

Soomaalidu waa dad fiican oo duntoodu fiican tahay, caqiidadooduna fiican tahay, caqli badanna. Markaad u kuur gashid sideed iyo toban sano oo dagaalka NATO iyo EU Soomaaliya ka socday intay soomalidu ayaga dhexdooda iska dileen waa kooban tahay. Intay soomaalidu ayadu rag iska dishay dhawr iyo tobanka sano oo lasoo dhaafay waaba la tirin karaa, oo dadka waxaa dilay dayuuradaha gaalada oo cirka ka rusheeyey iyo maraakiibta gaalada oo madaafiic la dhacday, gaar ahaan kow iyo sagaashanka ilaa saddex iyo sagaashanka. Dadka intiisa badanna wuxuu ku dhintay qaxa, gaar ahaan marka laga qaxay Muqidsho, Baydhabo iyo Kismaayo, oo waxay u dhinteen gaajo, harraad, itaal darro iyo cudurro iyo xeryaha qaxootiga Kenya oo lagu xereeyey oo lagu dandarreeyey. In yar oo mujrimiin ah ayaana dhibaato geystay. Dhammaantoodna way og yihiin inuusan waxa Soomaaliya ka socda ahayn dagaal qabiil loo dagaallamayo, oo hadday sidaas ahaan lahayd iskama guursadeen waana la isku baani'i lahaa. Hadana Soomaaliya dhexdeeda iyo dibaddeedaba sidooda ayay weli maalin walba iskaga guursadaan oo shirkoobaan oo wada dhaqmaan oo is jecel yihiin oo ay xidid iyo qaraabo iyo walaalo wada yihiin. Soomaalida oo idil waxay isku yihiin ilmo abti iyo ilmo eeddo. Waxaana taas u sabab ah inay isku tol

wada yihiin iyo inay muslimiin suuban wada yihiin. Caqiidadooda toosan oo sunniga ah ayaa u sabab ah inay sidaas u fiican yihiin. Waxaan Ilaahay uga baryaynaa inuu hanuuniyo oo ilaaliyo cadawga weerarka ku ahna iyo uu ka waabo. Aamiin.

Amxaaro ka foogaada

Kitaabka “Jaamicu Al Usuuli fii Axaadiithi Al Rrasuuli” ee ibnu Al Athiir wuxuu wariyay labadaan Xadiith:

6810 - () عبد الله بن عباس - رضي الله عنهما - قال : قيل : «يا رسول الله ما يمنع الحبشة أن يأتوك إلا مخافة أن تردّهم ، قال : لا خير في الحبشة ، إن جاعوا سرقوا ، وإن شبعوا زَنَوْا ، وإن فيهم - مع ذلك - خَلَّتَيْنِ حسنتين : إطعام الطعام ، وشدة عند البأس» أخرجه...

[قال أيمن صالح شعبان]

في المطبوع أخرجه رزين. قلت : ذكره الهيثمي في مجمع الزوائد (235/4) وقال : رواه الطبراني والبخاري ورجال البزار ثقاة وعوسجة المكي فيه خلاف لا يضر ، ووثقه غير واحد.

Xadiithka oo ay wariyeen Al Dhabraanii iyo Al Bazaar, iyo Raziin. Waxaana isaguna wariyay Al Haythamii kuna wariyay “Majmacu Al Zawaa’idi wa Manbacu Al Fawaa’idi (mujalladka afaraad bogga laba boqol shan iyo soddon) macnihiisu waxaa weeye: “Cabdu Allaahi bin Cabbaas, labadoodaba Allaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: “waxaa la yiri: “Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uma diidayo amxaarada inay kuu yimaadaan waxaan ahayn cabsi ay ka qabaan inaad diidid oo aad (islaanimada) ka yeeli waydid.” Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri: “amxaaradu khayr ma laha oo markay gaajoodaan waxbay xadaan oo tuugo ayay noqdaan, markay dhergaanna way zinaystaan. Sidaasoo ay tahayna waxay leeyihiin laba tilmaamood oo fiican: dadkay cunnada siiyaan, xarbigana xoog ayay u dagaallamaan.”

6811 - (د) أبو سكينه - رجل من المحرّرين - عن رجل من أصحاب رسول الله - صلى الله عليه وسلم - عن رسول الله - صلى الله عليه وسلم - قال : «دَعُوا الحَبْشَةَ ما ودَعَوْكُمْ ، واتركوا الترك ما تركوكم» أخرجه أبو داود.

بنو حنيفة ، وبنو أمية

[قال أيمن صالح شعبان]

أخرجه أبو داود (4302) قال : حدثنا عيسى بن محمد الرملي. والنسائي مطولا (43/6) قال : أخبرنا عيسى بن يونس .

كلاهما - عيسى بن محمد ، وعيسى بن يونس - قالوا : حدثنا ضمرة عن أبي زرعة السيباني ، عن أبي سكينه ، رجل من المحررين ، فذكره.

Xadiithaan labaad oo ay wariyeen Abuu Daauud (4302) iyo Al Nasaa’ii (6/43) macnihiisu waxaa weeye: “iska daaya oo ka fogaada oo waxba ha ku

darsannina amxaarada intay ayaguna iska kiin daynayaan, turkigana iska daaya oo ka fogaada oo waxba ha ku darsannina intay ayaguna iska kiin daynayaan.”

Sidaasuu ku dhammaaday kitaabka "Amxaaro", Waxaan ku gunaanadeynnaa annago leh wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina, wa bi abii anta wa ummii yaa Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayka, oo aabahay iyo hooyaday ayaa fidyadaada ah Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayka, wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaana Muxammadin wa Calaa Aalihi wa Saxbihi wa man tabicahum bi ixsaanin ilaa Yawi Al Diini wa Sallam Tasliiman kathiiran.

Fiiro Gaar ah: Burburka Soomaaliya: Batrollka Soomaaliya

Ninka la yiraahdo Stewart Orr waa ninka ka warbixinaya oo ku hadlaya filimka la yiraahdo Somalia A Paradise Destroyed oo uu soo saaray (Executive Producer) Cabdullaahi Dool, uuna soo saaray (Produced and directed by) Alan Heath, ayna samaysay shirkadda London ku taalla, arliga ingiriiska, oo la yiraahdo Peak Productions London, DHM Television Productions MCMXCII (kun sagaal boqol saddex iyo sagaashan). Filimkaan waxaa ku qaybiya USA iyo Kanada shirkadda ,la yiraahdo Lilian B arber Press, Inc. Box 232 Grand Central Station, New York, New York 10163 (LBP). Waxyaaluhu Stewart Orr filimka ku yiri isagoo ka faalloonaya xiriirka Somaliya iyo sucuudiga waxaa ka mid ah: “.the Saudis, the biggest importers of the Somali livestock to a tone had started their ranches in Australia and (the Somali exports of livestock to Saudi Arabia) plummeted. Saudi Arabia helped out with two years of free oil. But there might have been an ulterior motive: Somalia was sitting on oil fields that would have been cheaper to exploit than the middle eastern..”. hadalkaas macnihiisu waxaa weeye: “sucuudigu waa dawladda soo gadata qaybta ugu weyn ee xoolaha Somaliya. Markaasay sucuudigu waxa arliga Australia ka samaysteen beero aya ayagu leeyihiin oo xoolaha lagu dhaqo oo ay halkaas ka keensadaan. Markaasuu dhaqaalaha Soomaaliya hoos u dhacay oo uu dhulka galay. Dhibaataadaas Sucuudigu way ka caawineen ayagoo siiyay laba sano batroolka lacag la’aan ah. Waxaase dhici karta inay jirto sabab kale oo ay u caawineen oo ah inay Soomaaliya ku fadhido beero batrool ah oo soo saarkeedu ka raqiisisan yahay qiimaha batroolka looga soo saaro Bariga Dhexe.”

Filimku wuxuu na tusayaa, intuu ninkaasu hadlayo, khariidooyin Soomaliya oo ay ku suran yihiin masawirrada cedelashada batroolka laga qodo, anigana ay iila ekeed, ayadoo aan magacdo akhrin kari waayay gobolka Mudug iyo Bari. Filimkaasu wuxuu kaloo sheegay inay maraykanka ahaa midka amxaarada arliga soomaalida galbeed siiyay ayadoo beddelkeed ku doonaysay inay amxaaradu fariisin militari ka hesho Eritrea, taasoo ay yeeshay oo siisay.

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay salibiyyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabshadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiyeen. Markaasey xabshadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmada dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabshada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasoo waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmada ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmada ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawladda Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladda Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High

School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyaada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh.

